Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH
الرسمية الجريدة
OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 13aad **Muqdisho, 05 APRIL 2026** **Lr.1**

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD
TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

BILAHA

JAN-FEB

2026

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH
الرسمية الجريدة
OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 13aad **Muqdisho, 05 APRIL 2026** **Lr.1**

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD
TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

BILAHA

JAN-FEB

2026

TUSMO

SHARCI LR. 45 Taariikh: 10/01/2026

SHARCIGA WAX-KA-BADDELKA HAY'ADDA XISAABIYAASHA SOOMAALIYEED Bog 1

SHARCI LR. 46 Taariikh: 10/01/2025

SHARCIGA DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA XAALADAHA MADANIGA Bog 27

SHARCI LR. 47 Taariikh: : 15/01/2025

SHARCIGA KAALMADA-SHARCIYEEDKA FEDERAALKA Bog 57

SHARCI LR. 48 Taariikh: 19/01/2026

SHARCI CADAALADDA DA'YARTA SOOMAALIYEED Bog 82

SHARCI LR. 47 Taariikh: 22/02/2026

SHARCIGA HANNAANKA LACAG BIXINTA QARANKA Bog 100

XEER MADAXWEYNE LR. 635 Taariikh: 14/01/2026

MAGACAABIS GARSOORE Bog 158

XEER MADAXWEYNE LR. 636 Taariikh: 15/01/2026

MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 159

XEER MADAXWEYNE LR. 637 Taariikh: 15/01/2026

MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 160

XEER MADAXWEYNE LR. 641 Taariikh: 03/01/2026

MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 161

XEER MADAXWEYNE LR. 658 Taariikh: 29/01/2026

XILKA-QAADIS TALIYIHII HORE EE TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED IYO MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED Bog 162

XEER MADAXWEYNE LR. 659 Taariikh: 29/01/2026

MAGACAABISTA GUDOOMIYE XU-XIGEENADA JAAMACADA UMADDA SOOMAALIYEED Bog 163

XEER MADAXWEYNE LR. 696 Taariikh: 28/02/2026

XIL-KA-QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA CIRKA EE C.X.D.X & MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA CIRKA EE C.X.D.S Bog 164

XEER MADAXWEYNE LR. 697 Taariikh: 28/02/2026

XIL-KA-QAADIS TALIYIHII HORE EE CIIDANKA GAARKA EE C.X.D.S & MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA GAARKA AH EE C.X.D.S Bog 165

XEER RA'ISUL WASAARE LR. 189 Taariikh: 27/12/2025

XEER: SIYAASADDA SANDUUQA QARAN EE HORUMARINTA WAXBARASHADA (NEDF) Bog 166

XEER RA'ISUL WASAARE LR. 190 Taariikh: 21/01/2026

XEER: XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCI Bog 181

XEER RA'ISUL WASAARE LR. 191 Taariikh: 27/12/2025

XEER: XEER-NIDAAMIYAHA BUUGGA-BADMAAXA SOOMAALIYEED Bog 196

XEER RA'ISUL WASAARE LR. 192 Taariikh: 11/01/2026

XEER: XEERKA DHISMAHA MACHADKA SOOMAALIYEED EE BADAHA Bog 210

XEER RA'ISUL WASAARE LR. 193 Taariikh: 11/01/2026

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA Bog 220

XEER RA'ISUL WASAARE LR. 544 Taariikh: 11/01/2026

XEER: SIYAASADDA QARAN EE NAAFADA SOOMAALIYEED Bog 239

SHARCI LR.45 **TAARIIKH: 10-KA JANAAYO 2026**

SHARCIGA WAX-KA-BADDELKA HAY'ADDA XISAABIYEYAASHA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0810/B11/26**, ku taariikheysan **07/01/2026**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta ku Waafaqidda Wax-Ka-Baddelka Hindise-Sharciyeedka Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Wax-Ka-Baddelka Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.


Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
04 FEB 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-009-2026
TAARIIKH 05-02-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE-SHARCIYEEDKA
HAY'ADDA XISAABIYEYAASHA SOOMAALIYEED

Wasaaradda Maaliyadda XFS

CUTUBKA 1AAD
MAGACA, UJEEDDO, ERAY BIXIN, BAAXADDA IYO AWOODDA SHARCIGA

Qodobka 1aad
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed"

Qodobka 2aad
Ujeeddada Sharciga

Ujeeddooyinka loo aasaasay Hay'adda waxaa kamid ah:

1. In ay nidaamiso qaab-hawleedka mihnadda xirfadleyaasha Xisaabiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
2. In ay dhoowrto danaha caamka ah ayadoo la xaqiijinayo raacista hab-dhaqanka sarreeya ee waafaqsan sharcigan, xeerarka lagu dhaqan-gelinayo iyo anshaxa wanaagsan ee dhammaan xirfadleyaasha xisaabaadka.
3. In ay dajiso, hagaajiso halbeegyada xisaabaadka Soomaaliya.
4. In ay kormeerto, lana socoto anshaxa xisaabiyeyaasha iyo shirkadaha xisaabaadka dalka, si loo gaarsiiyo hal-beegyada waafaqsan xirfadleyaasha xisaabaadka caalamiga ah.
5. In ay bixiso shatiyada shaqada xirfadleyaasha iyo shirkadaha xisaabaadka dalka.
6. In ay u raadiso aqoonsi/aqbalaad xirfadleyaasha xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
7. In ay hubiso in xisaabiyeyaasha iyo shirkadaha xaasaabaadku ay raaceen sharcigan, xeerarka lagu dhaqan-gelinayo sharciga Hanti-dhawrka Guud ee JFS iyo Sharciyada kale ee khuseeya.
8. In ay horumariso xirfadda xisaabaadka, ayada oo la sameynayo cilmi baaris natiijadeeda la baahinayo.
9. In wixii talo ku saabsan arrimaha la xariira xisaabaadka iyo xisaabiyeyaasha ay siiso hay'adda sharci dejinta iyo hay'adaha kale ee dalka.
10. In ay ka qayb-qaadato dejinta halbeegyada iyo qaab-dhismeedka xisaabaadka dalka.
11. In ay kala-taliso Dawladda arrimaha la xiriira xirfadda xisaabaadka.
12. In ay dejiso imtixaanka xirfadleyaasha xisaabaadka (CPAs) ee Dalka.
13. In ay tallaabo anshax marin marsiiso xubin kasta oo kamid ah xirfadleyaasha xisaabaadka oo lagu helo fal anshax xumo oo lid ku ah sharcigan iyo habraacyadiisa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

1

Qodobka 3aad
Eray Bixin

Erayada halkan ku xusan haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan dhexdiisa, waxaa loo micnaynayaa sida soo socota:

1. **"Xisaabiye"** waa qof khirbrad u leh takhasuska xisaabaadka oo soo qaatay tababar iyo waxbarasho rasmi ah ee xirfadda xisaabaadka oo la aqoonsanyahay, kuna soo shaqeeyay, awood iyo xirfadna u leh in uu qabto shaqo xisaabaad iyo hanti-dhawris tayo sare leh una dhiganta heerka (Standard) caalamiga ah.
2. **"Xirfadleyda Xisaabaadku"** waa qof ka gudbay imtaxaannadii looga baahnaa isla markaana helay khibrad shaqo sida ku cad sharcigan.
3. **"SICPA"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed (Somali Institute of Certified Public Accountants).
4. **"Hanti-dhawr"** waxaa loola jeedaa baaris iyo xaqiijin lagu sameeyo diiwaanka maaliyadda iyo xisaabaadka hay'adeed iyo dukumiintiyada xaqiijinaya diiwaankaas oo uu hubiyo xirfadle madaxbannaan isaga oo waafajinaya shuruudo horey loo dajiyay.
5. **"Hanti-dhawre"** waa qof ama shirkad uu sharcigaani u oggolaanayo in uu qabto shaqooyin hanti-dhawr.
6. **"Sharci"** waxaa loola jeedaa Sharciga Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
7. **"Xeer-hoosaad"** waa xeer sharaxaad ka bixinaya laguna dhaqan-gelinayo sharcigan.
8. **"Golaha Maamulka Sare"** waa Golaha u xilsaaran maamulka hoggaaminta Hay'adda sida ku qeexan Qodobka 17aad ee sharcigan.
9. **"CPA (S)"** waa Xisaabiyeyaasha Guud ee la aqoonsanyahay (Certified Public Accountants of Somalia).
10. **"CAT (S)"** waa Xirfadlaha Xisaabaadka la aqoonsanyahay ee Soomaaliya (Certified Accounting Technician of Somalia).
11. **"IASB"** Guddiga Caalamiga ah ee Hal-beegyada Xisaabaadka (International Accounting Standards Board).
12. **"IFRS"** Warbixinta Caalamiga ah ee Hal-beegyada Maaliyadeed (International Financial Reporting Standards).
13. **"ISA"** Halbeegyada Caalamiga ah ee Hanti-dhawrka (International Standards on Auditing).
14. **"IFAC"** Xiriirka Caalamiga ah ee Xisaabiyeyaasha (International Federation of Accountants).

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2

15. **"Xubin"** waxaa loola jeedaa qof xubin ahaan looga diiwaangaliyay Hay'adda si waafaqsan sharcigan.
16. **"Xisaabiye Sharciyeysan"** waa xisaabiye haysta ruqsad shaqo si waafaqsan sharcigan.
17. **"FCPA (S)"** waa Xisaabiye Sare ee Soomaaliya (Fellow Certified Public Accountant of Somalia).
18. **"Hay'adda Xirfadleyaasha Xisaabaadka"** waa Hay'adda ay ku mideysan yihiin Xirfadleyaasha Xisaabaadka ee Dalka.
19. **"Dib-u-eegista Hubinta Tayada"** dib-u-eegis lagu xaqiijinayo in shirkad hanti-dhawr (b) ay leedahay hanaan buuxa ee tayo-hubin oo ku aadan habka baarista xisaabaadka iyo shaqooyinkeeda kale, (t) in ay u hoggaansanaato nidaamka hubinta tayada, iyo (j) in ay raacdo xeerarka xisaabaadka iyo shuruudaha sharciga ah ee la xiriira fulinta baarista xisaabaadka iyo hawlaha kale ee shirkaddu fuliso.
20. **"Xeerarka Dib-u-eegista Hubinta Tayada"** habraacyo gudaha ah oo loo qaabeeyey in ay shirkadda hanti-dhawr siiyaan xaqiijin macquul ah (b) in shirkadda iyo shaqaalaheedu ay ugu hoggaansamaan xeerarka xisaabaadka iyo sharciyada; (t) in warbixinnada shirkaddu soo saarto ay noqdaan kuwa ku haboon xaaladaha qofka la-baarayo; (j) in habraacyada muhiimka u ah fulinta iyo kor-joogteynta u hoggaansanaanta siyaasadaha shirkadda ay jiraan.
21. **"Diiwaan"** waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu qoro Xubnaha Hay'adda oo loo diyaariyey hab waafaqsan sharcigan.
22. **"ACCA"** waxaa loola jeedaa shahaadooyin ay bixiyaan Ururka xirfadlayaasha xisaabaadka ee Caalamiga ah (Association Chartered Certified Accountant).
23. **"CIPFA"** waxaa loola jeedaa Shahaadada Machadka Maaliyadda guud ee Xisaabaadka (Chartered Institute of Public Finance and Accountancy).
24. **"ISQC"** waxaa loola jeedaa heerarka Caalmiga ah ee hubinta tayada (International Standard on Quality Control).

Qodobka 4aad
Ku Dhaqanka Sharciga

Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan hawlaha xirfadleyaasha xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.



CUTUBKA 2AAD
AASAASIDDA HAY'ADDA

Qodobka 5aad
Dhismaha Hay'adda

1. Si loo gaaro ujeeddooyinka ku xusan Qodobka 2aad ee Sharcigan, waxaa sharcigan lagu dhisay "Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed" (Somali Institute of Certified Public Accountants), taasoo masuul ka noqonaysa maamulka iyo nidaaminta mihnadda xirfadda xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.

2. Waxay fulin kartaa dhammaan falalka lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadka ku xusan sharcigan.

Qodobka 6aad
Xarunta Hay'adda

Xarunta dhexe ee Hay'addu waa Caasimadda Dalka ee Muqdishu, waxayna laamo ku yeelanayaan dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

Qodobka 7aad
Madax-bannaanida Hay'adda

1. Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed waa hay'ad madax-bannaan marka ay gudaneyso waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan sharcigan, waxayna leedahay shaqsiyad qaanuuneed.

2. Hay'addu waa in ay la wadaagtaa Wasaaradda Maaliyadda warbixinta sanadlaha ah ee Hay'adda oo tilmaamaysa waxqabadka iyo hadafyada hiigsiga Hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

4

CUTUBKA 3AAD
QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA

Qodobka 8aad
Qaab-dhismeedka Hay'adda

Qaab-dhismeedka Hay'adda wuxuu noqonayaa sida soo socota:

1. Golaha Guud (GENERAL ASSEMBLY).
2. Golaha Maamulka Sare (GOVERNING COUNCIL).
3. Maamulka Hay'adda.

Qodobka 9aad
Shuruudaha Xubinnimada Golaha Guud

Shuruudaha Xubinnimada Golaha Guud waa in uu:

1. haysto Shahaado xisaabeed oo la aqoonsan yahay una dhiganta shahaadooyinka xisaabaadka caalamiga ah sida *Certified Public Accountant* ama *Chartered Accountant.*
2. uu leeyahay khibrad shaqo ugu yaraan Saddex (3) sano.
3. uu leeyahay sumcad iyo asluub wanaagsan.
4. maxkamadi ku ridin xukun shanti (5) sanno ee ugu dambeysay si kama dambays ah.

Qodobka 10aad
Golaha Guud

Xubnaha Golaha Guud waa golaha ugu sarreeya Hay'adda, waxa uuna ka kooban yahay dhammaan Xubnaha buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 9aad ee sharcigan.

Qodobka 11aad
Guddiyadda iyo Habraaca Doorashada

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa guddiyadda soo socda oo ay soo magacaabeen Golaha Maamulka Sare, waxaana ansixinaya Golaha Guud;
   a) Guddiga Doorashada,
   b) Gudiga Imtixaanka CPAs,



5

c) Gudiga Hubinta Tayada,
d) Gudiga Farsamada, iyo
e) Gudiga Adeega Xisaabiyeyaasha.

2. Habraaca Doorashada Golaha Maamulka Sare waa sida soo socota:
   a) Musharaxa u tartamaya Golaha Maamulka Sare waa in uu xubin ka yahay Golaha Guud.
   b) Codeynta doorashada waa mid qarsoodi ah.
   c) Xubin kasta oo Golaha Guud waxay leedahay hal cod.
   d) Musharaxa hela (50%+1) ayaa ku guulaysan doona doorashada haddii ay musharixiintu labo yihiin, haddii ay ka badan yihiin waxaa loo gudbayaa wareega labaad waxaana la tar-tansiinayaa musharixiinta ugu codka sarreeyo.
   e) Wareegga labaad musharixii hela codadka uga badan ayaa ku guuleysanaya Xubinnimada Golaha Maamulka Sare.
   f) Muddo xileedka xubinta la doortay waa laba (2) sano, waxaana dib loo dooran karaa laba (2) sano kale oo kaliya.

Qodobka 12aad
Waajibaadka Golaha Guud

Waajibaadka Golaha Guud waxaa kamid ah:

1. In uu doorto ama xilka ka qaado Golaha Maamulka Sare.
2. In uu ansixiyo Wax-ka-bedelka Xeer-hoosaadka Hay'adda.
3. Inuu magacaabo, shaqada u cusbooneysiiyo ama ka qaado hanti-dhawraha madaxa bannaan ee hay'adda.
4. In uu la xisaabtamo Golaha Maamulka Sare, markii la gaaro shirka sanadlaha ah ee Hay'adda.

Qodobka 13aad
Kulamada Golaha Guud

1. Golaha Guud ee xubnaha Hay'adda waxa uu kulmi doonaa sanad kasta hal mar, kaas oo lagu faah-faahin doono Xeer-hoosaadka Hay'adda.



2. Golaha Guud waxa uu qabsan karaa shir aan caadi ahayn, marka ay soo jeediyaan saddex meelood hal meel ee Golaha Guud.

Qodobka 14aad
Shir Guddoonka Golaha Guud

1. Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Guud waxaa shir guddoominya qofka ugu da'da weyn.

2. Wixii fadhiga 1aad ka dambeeya, Kulamada Golaha Guud waxaa shir guddoominaya, Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare, haddii uu maqan yahay waxaa shir guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka.

Qodobka 15aad
Go'aan Ka Gaarista Arrimaha Lidka Ku Ah Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenkiisa

Marka ay jirto eedeyn ama baaris la xiriirta Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare, waxaa shir guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka, haddii eedeyntu ama baaristu ay la xiriirto Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenkiisaba, waxaa shir guddoominaya qofka ugu da'da weyn Golaha Guud, si lamid ah Qodobka 14aad ee sharcigan.

Qodobka 16aad
Guntanka (Quorum) Golaha Guud

1. Aqlabiyadda tirada guud ee Xubnaha Golaha Guud (50%+ 1) ayaa noqonaysa guntanka (Quorum). Go'aannada ka soo baxa shirarka waa dhaqangal haddiii guntan uu jiray xilligii codka la qaadayay.

2. Haddii guntanka (Quorum) uu buuxsami waayo waxaa dib loo dhigayaa kulanka.

Qodobka 17aad
Golaha Maamulka Sare (Governing Council)

1. Golaha Maamulka Sare waxa ay ka kooban yihiin kow iyo toban (11) xubnood, waana sida soo socota:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

7

a) Toddobo (7) xubnood oo ka imaanaya Golaha Guud oo ay ku jiraan Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Maamulka Sare waxaa laga dhex dooranayaa xubnaha la doortay ee golahan todobada (7) ah, si waafaqsan sharcigan.
b) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
c) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Hanti-dhawraha Guud.
d) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo
e) 1 (hal) xubin oo uu soo magacaabayo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.

2. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Maamulka Sare waxaa laga dhex dooran karaa oo kaliya xubnaha todobada (7) ah ee ka imaanaya Golaha Guud.

Qodobka 18aad
Shuruudaha Xubinnimada Golaha Maamulka Sare

Shuruudaha Xubnaha ka imaanaya Xafiisyada Dowladda ee ku xusan Qodobka 17aad, farqadaha (b,c, d iyo e) waa:

1. In uu yahay muwaadin Soomaali ah.
2. In uu leeyahay sumcad fiican.
3. In uu ugu yaraan jaamacad la aqoonsan yahay ka haysto shahaadada koowaad ee Dhaqaalaha, Xisaabaadka ama waxyabaha (takhasusyada) la xiriira.
4. In uu yahay qof ka haya/jooga hay'addiisa jago sare go'aanna gaari kara.
5. In uu yahay qof diyaar u ah ku shaqaynta mihnadda xisaabaadka.
6. In uu yahay qof ay ka go'antahay xaqiijinta daah furnaanta iyo isla xisaabtanka.

Qodobka 19aad
Waayidda Xubinnimada

Xubinnimada Golaha Maamulka Sare waxa lagu waayi karaa sababaha soo socda midkood:

1. In ay ku timaado geeri.
2. In uu xilka iska casilo.
3. In Maxkamadi ku hesho dembi.



4. Caafimaad darro keeni karto in uu gudan waayo xilka, taas oo Dhakhtar khibrad u leh caddeeyey.
5. Sababo xil gudasho la'aan marka ay soo jeediyaan (2/3) xubnaha hay'adda.

Qodobka 20aad
Waajibaadka Golaha Maamulka Sare

Golahu wuxuu dejinayaa xeer-nidaamyeyaal (regulation), qorshayaasha iyo istiraatiijiyadda soo socda.

1. In ay diyaariyaan halbeegyo (standards) iyo hab-raacyo lagu horumarinayo mihnadda xirfadleyaasha xisaabiyeyaasha soomaaliyeed.
2. In ay qeyb ka noqoto habraaca sharci siinta shirkadaha xisaabaadka ee ka howl-gala JFS.
3. Asaasidda iyo joogteynta nidaam lagu diiwaan-gelinayo dhammaan xirfadleyda xisaabiyeyaasha soomaaliyeed.
4. In ay bixiyaan shahaadooyinka, ruqsadaha, diiwaan-gelinta iyo oggolaashaha ay ku shaqeynayaan shirkadaha iyo shaqsiyaadka ku shaqeeya xisaabaadka.
5. Tababaridda iyo horumarinta mihnadda xirfedlayaasha xisaabiyeyaasha soomaaliyeed.
6. Hirgelinta xarun cilmi baaris.
7. Talo siinta Xukuumadda Soomaaliya arrimaha ku saabsan xisaabaadka.

Qodobka 21aad
Shuruudaha Laga Doonayo Guddoomiyaha Maamulka Sare

Qof walba oo u taagan qabashada Xilka Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waxaa laga doonayaa shuruudaha soo socda:

1. In uu yahay muwaadin Soomaaliyeed.
2. Waa in uu yahay Xubin Buuxda oo ka tirsan Hay'adda.
3. Waa inuu yahay xubin lasoo doortay kana tirsan Golaha Maamulka Sare ee hay'adda.
4. Waa in uu yahay Caadil, aamin, ilaallin kara Midnimada iyo Midowga hay'adda.
5. Waa in uu sumcad ku dhex leeyahay Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.
6. Waa in uu yahay qof awood u leh shaqada guddoominta.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 22aad
Waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare

Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Guddoomiyaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waa:

1. In uu shir guddoomiyo Kulamada Golaha Maamulka Sare ee hay'adda.
2. Qof diyaar u ah in ay la xisaabtamaan Golaha Maamulka Sare iyo Golaha Guud ee Hay'adda.
3. In uu ku hoggaamiyo, isla markaana ugu adeeggo danaha Hay'adda.
4. In uu abuuro horumar iyo astaan masuuliyadeed ee ku aaddan macaamilka xubnihiisa, dadweynaha iyo bulshada uu u adeego.
5. In uu ku hoggaamiyo isla markaana ku hagi karo siyaasadaha ujeedooyinka fog ee Hay'adda.
6. In Hay'adda ku matalaa xiriirka daneeyayaasha gudaha iyo dibadaba.
7. In uu matalo Hay'adda, isaga oo kaashanaya Mareeyaha Guud.

Qodobka 23aad
Waajibaadka Guddoomiye Ku-xigeenka

1. Guddoomiye ku-xigeenka wuxuu la shaqeynaa Guddoomiyaha Maamulka Sare, waxa uuna fulinaya wixii hawl uu u xilsaaro Guddoomiyaha.

2. In uu shir guddoomiyo Golaha Maamulka Sare marka uu maqan yahay Guddoomiyaha.

Qodobka 24aad
Kulamada Golaha Maamulka

1. Xubnaha Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda waxa uu kulmi karaa Saddexdii (3) Bilood mar, kaas oo lagu faah-faahin doono Xeer-hoosaadka Hay'adda.

2. Xubnaha Golaha Maamulka Sare waxa ay qabsan karaan shir aan caadi aheyn marka ay codsadaan afar meelood hal meel ee Xubnaha Golaha Maamulka Sare.



Qodobka 25aad
Muddo Xileedka Golaha Maamulka Sare

Muddada xil-haynta Golaha Maamulka Sare waa Labo (2) Sano ah oo la cusboonaysiin karo halmar kaliya.

CUTUBKA 4AAD
GUDDIGA MAAMULKA FULINTA

Qodobka 26aad
Maamulka Hay'adda

Waajibaadka Shaqo ee Maamulka Fulinta waa:

1. Maamulida hantida iyo hawlaha hay'adda, isagoo warbixinta si bille iyo sanadle ula wadaagaya Golaha Maamulka Sare.
2. Maamulka iyo maareynta xafiiska keydinta xog sax ah oo dhammeystiran ee xubnaha ururka ardayda iyadoo loo adeegsanayo aaladaha casriga ah ah ee teknoolojiyada.
3. Abaabulka Shirarka Golaha Maamulka, guddi-hoosaadyada, soo saarista ajendayaasha iyo natiijooyinka shirarkaas.
4. Abaabulka xubnaha golaha, guddi-hoosaadyada iyo maamulista adeegyada xubnaha iyo xiriirada ururku la yeelanayo dalka iyo dibadda.
5. Maamulista arrimaha ardayda, imtixaannada iyo diiwaannada tababarrada.
6. Maamulista iyo hagidda horumarinta joogtada ah iyo takhasus u diyaarinta xubnaha adeegyo farsamo.
7. Abuurista Maktabad.
8. Ka shaqaynta hawlaha sharciga la xiriira, arrimaha farsamo iyo mashaariicda.
9. Fulinta arrimaha xiriirka dadweynaha, warbaahinta iyo sidoo kale horumarinta (tusaale tababarada iyo shirarka).
10. Sameynta iyo maamulista xiriirka Hay'addu la leeyahay hay'adaha xirfadleyda ah ee kale, Dowladda, wakiillada horumarinta iyo danneeyayaasha.
11. Turjumaadda xeerarka caalamiga ee xisaabaadka, hanti-dhawrista iyo xeerarka anshaxa.
12. Baaritaanka/dabagalista iyo anshax-marinta xubnaha Hay'adda.



Qodobka 27aad
Magacaabista Maareeyaha Guud iyo Xoghayaha

1. Golaha Maamulka Sare ayaa magacaabaya Maareeyaha Guud iyo Xoghaynta si ay u maareeyaan shaqooyinka Hay'adda.

2. Qofka noqonaya Maareeyaha Guud waa inuu yahay qof haysta Shahaadada CPA, ACCA, ama CIPFA, IWM.

3. Haddii uu xafiiska ka maqanyahay Maareeyaha Guud, Goluha Maamulka Sare waxay u idmi karaan in Xoghayuhu (Maareeye Ku-xigeen) ama cid kale oo karti u leh shaqada oo xafiiska maamulka ka tirsan in ay shaqada sii wadi karto.

Qodobka 28aad
Waajibaadka Maareeyaha Guud ee Hay'adda

Maareeyaha Guud waajibaadkiisa shaqo waxay noqonayaan:

1. Diyaarinta iyo soo saaridda Hiigsiga fog ee Hay'adda iyo qorshe-hawleedyo taariikhaysan.
2. Hagidda iyo horumarinta shaqaalaha iyo la shaqaynta guddiyada kale ee khuseeya.
3. La talinta Guddoomiyaha, Golaha Maamulka Sare iyo isxil-qaamayaasha Hay'adda.
4. Sameynta xiriir wadashaqeyn wanaagsan oo u dhexeeya Hay'adda iyo Dowladda, ganacsatada, iyo xirfadleyda kale, Hay'adaha waxbarashada iyo wakiillada deeq-bixiyayaasha.
5. Xaqiijinta in shati bixinta iyo hannaanka anshax-marintu ay yihiin kuwa xaq-soor ah oo ku salaysan nidaamka Hay'addu u dhigtay.
6. Xaqiijinta in Xubnaha Golaha Maamulka iyo dadka kale ee muhiimka ah ay ka war-hayaan waxyaabaha saameynaya mihnadda xisaabaadka, ee ka dhacaysa dalka iyo dibadaba, dhacdooyin kaas oo ay ka mid tahay shaqada (IFAC).
7. U maamulista shaqaalaha iyo hantida Hay'adda si waafaqsan miisaanniyada iyo siyaasadaha ay ansixiyeen Golaha Hay'adda.
8. Uga warbixinta Guddoomiyaha iyo Guddiga tilaaboyinka loo qaaday dhanka horumarinta hiigsiga Hay'adda iyo magacaabida farsamo yaqaannada iyo shaqaale caawiya hawlaha kala duwan ee hay'adaha xirfadleyda iyo go'aaminta shuruudaha shaqada iyo shaqaalaha.



12

Qodobka 29aad
Waajibaadka Xoghayaha

Waajibaadka Xoghayaha waxaa ka mid ah:

1. Abaabulka iyo soo xaadiridda Shirarka Golaha Maamulka iyo Guddiyada.
2. Diyaarinta ajendaha iyo qorsheyaasha kulamada golaha iyo guddi-hoosaadyada kale.
3. Hagidda hawlaha la xiriira shirka sannadlaha ee Xubnaha Golaha Guud.
4. Keydinta qoraallada iyo dukumintiyada rasmiga ah ee Hay'adda.
5. Keydinta xogaha iyo diiwaanka xubnaha Hay'adda.

CUTUBKA 5AAD
XUBINNIMADA HAY'ADDA

Qodobka 30aad
Xubnaha Hay'adda

Xubinnimada Hay'addu waxaa kamid ah:

1. Xubinnimo Shaqsi ah, waa kuwa soo socda:
   a) Xubno haysta shahaadada sare ee xisaabaadka iyo khibradda shaqo muddo 5 sano ah, uga soo shaqeeyey Hay'adda SICPA iyo Hay'adaha kale ee Caalamiga ah.
   b) In uu yahay xubin sare oo joogta ah u buuxiyey shuruudaha iyo khibradda looga baahan yahay.
   c) In uu uga mid noqdo xubinnimo kaaliye-sare ee xisaabaadka iyo hanti-dhawrista.
   d) In uu uga mid noqdo xubinnimada khibradda xirfaddiisa xisaabaadka.
   e) In uu uga mid noqdo xubin sharafeed.

2. Xubinnimo shirkadeed, taas oo micneheedu yahay sida shirkadaha mihanadda /xirfadda xisaabaadka, ama hanti-dhawrka ee ka shaqeeya Soomaaliya.

3. Xubinnimada shirkadeed waa in ay ahaataa sida soo socota:
   a) In ay haystaa xubno haysta shahaado sare oo xisaabaadka ah iyo khibradda shaqo muddo 5 sano ah, uga soo shaqeeyey Hay'adda SICPA iyo Hay'adaha kale ee Caalamiga ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 31aad
Muddada Ku Meel Gaar ah

Inta lagu guda jiro muddada ku meel gaar ka ah:

1. Oggolanshaha xubin ka noqoshada Hay'addan ee xubin sare, xubin buuxda, xubin aan helin khibraddii (Associate) iyo kuwa shahaadada hoose haysta (CAT) welina waxbarashada ku guda jira kana tirsan ururo qalaad wuxuu wakhtigoodu ku egyahay muddo soddon iyo lix (36) bilood ah oo ka bilaabanaysa taariikhda uu ansixiyo Baarlamaanku sharcigan, Madaxweynuhuna uu saxiixo. Laga bilaabo taariikhdaas ma jiri doonto xubin cusub oo laga aqbalayo in ay Hay'addan xubin uga noqoto shahaado qalaad sababtoo ah saddex sano kadib Hay'addan waxay yeellan doontaa nidaam aqoonsi shaqaynaya.

2. Saddex (3) sano oo ka bilaabanaysa taariikhda sharcigaan la ansixiyo, xubin kasta oo ku diiwangashan xubin khibrad lahayn ee Hay'adda waa in uu isku dayo in uu dhammaystiro shuruudaha khibradda ee Hay'adda xisaabaadka qalaad uga baahan tahay. Saddex (3) ka dib xubinnimada ardaynimadu waxay u joogsan doontaa si iskeed ah.

Qodobka 32aad
Aqoonsi laba dhinac ah

Maadaama loo baahan doono in la aqoonsado shahaadooyinka qalaad, Hay'addu waxa ay aqbali doontaa mabaadi'da is aqoonsiga ka dhexeeya hay'addan iyo kuwa dalal kale iyadoo loo hoggaansamayo maamuuska aqoonsi ee hay'addan. Waxaa fiiro gaar ah loo yeelanayaa sumcadda xirfadeed ee hay'adda shahaadooyinkiisa la aqoonsanayo leedahay iyo aqoonta qofku u leeyahay Xeerarka Canshuuraha iyo Sharciga Shirkadaha ee Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

14

CUTUBKA 6AAD
XEERKA XISAABIYEYAASHA IYO KU DHAQANKIISA

Qodobka 33aad
Ku Shaqeynta Xisaabaadka

1. Qofka waxaa loo aqoonsanayaa in uu ku shaqeeyo xisaabaadka marka uu is-kiis ugu shaqaysto ama cid kale faa'iido uga qaato arrimaha soo socda:
   a) Qabashada adeegyo baaris, xaqiijin iyo ansixinta dhaq-dhaqaaqyada maaliyadeed ama warbixinnada la xiriira; ama
   b) Bixinta adeegyo waafaqsan Sharciga Hay'addan, ahna mid ku shaqaysta xisaabaadka.

2. Dhammaan madaxda hawlaha xisaabaadka, maaliyadda iyo Hanti-dhawraha Gudaha ee Dowladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay ee danta guud la xiriira waxay xubno ka noqonayaan Hay'addan si waafaqsan Qodobka 9aad ee sharcigan.

3. Sarkaal dowladeed ama qofka lagu sheegay Farqadda 2aad oo ay cid kale shaqaalaysiisay si uu u qabto shaqo xisaabeed looma aqoonsan doono qof ku shaqaysta mihnadda xisaabaadka.

Qodobka 34aad
Shuruudaha Shahaadooyinka Shaqada iyo Shatiyada

1. Qofna looma aqoonsanayo shaqo xisaabeed, haddii aysan ka haysan shahaado ama shati shaqo Hay'addan.

2. Qof kasta oo khilaafa arrimaha lagu sheegay Farqadda 1aad ee Qodobkan, waxa uu galay fal aan sharci ahayn, waxaana la horgeyn doonaa hay'adaha awoodda u leh.

3. Shirkad kasta kama shaqayn karto shaqo xisaabeed, haddii aysan shati ama ogolaansho ka haysan Hay'addan.

4. Shirkad kasta oo ku kacda arrimo khilaafsan Farqadda 3aad ee qodobkan waxaa loo aqoonsanayaa in ay gashay fal aan waafaqsaneyn sharcigan, waxaana la horgeyn doonaa hay'adaha awoodda u leh, sida uu sharcigu tilmaamay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 35aad
Codsiyada iyo Soo Saaridda Shahaadada

1. Codsiga shahaadada shaqada waxaa lagu hagaajinayaa Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda.

2. Codsiga shahaadada shaqada waxa ay noqonaysaa arji qoran oo ay la socoto kharashka diiwaan-galinta.

3. Qofkii la yimaada codsi si waafaqsan Faqradda 2aad ee Qodobkan, Goluhu waxa uu siinayaa shahaado shaqo, haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha soo socda:
   a) In uu Hay'adda uga diiwaan-gashan yahay xubin buuxda;
   b) In aysan maxkamadi ku xukumin dambi ciqaabeed nooc kasta uu yahay;
   c) In uu degganyahay Soomaaliya, canshuur bixiyena yahay;
   d) In uu bixiyo kharashka diiwaangalinta;

4. Shahaadada shaqadu waxay ka bilaabanaysaa taariikhda la soo saaray waxayna ku egtahay 31ka December ee isla sannadka la soo saaray balse waa la cusbooneysiin karaa markii qofka iska leh uu codsado.

5. Goluhu waxa uu xaq u leeyahay in uu diido codsi shahaado shaqo haddii ayna ku qancin xubinta codsiga soo gudbisatay.

6. Haddii Goluhu diido bixinta shahaado shaqo ee xubinnimo buuxda si waafaqsan Farqadda 5aad ee Qodobkan, Guddigu waxa uu soddon (30) maalmood gudahood ku wargaliyaan xubinta go'aanka diidmada codsiga shahaadada iyo asbaabta loo cuskaday.

7. Haddii uu qofku u arko in uu xad-gudub ku yahay go'aanka, waxa uu cabasho u gudbisan karaa maxamkamadda awoodda u leh, muddo kow iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku qofka gaaray.

8. Golaha Maamulka Sare waxay hakin karaan ama la noqon karaan shahaadada lagu bixiyay si waafaqsan Faqradda 3aad ee qodobkan, haddii xubinta la siiyay ay ku kacdo fal xad-gudub ku ah Xeerka Anshaxa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 36aad
Cusbooneysiinta Shahaadda Shaqada

1. Xisaabiye kasta ee loo cusbooneysiinayo shahaado shaqo waxa uu codsi qoraal ah u soo gudbinayaa Golaha, ugu yaraan labo bilood ka hor xilliga dhicitaanka shahaadada.

2. Haddii codsiga cusbooneysiinta lagu sheegay faqrada hore lagu soo gudbin wakhtiga la tilmaamay, xoghayuhu waxa uu la socodsiinayaa Golaha, kadib Goluhuna waxa uu farayaa in diiwaanka shaqada laga saaro ama la hakiyo magaca xisaabiyahaas la cayimay.

3. Goluhu wuxuu diidi karaa cusboneysiinta shahaado shaqo, waana in ay diidmada ku war-geliyaan xubintii soo codsatay shahaadada muddo soddon (30) bari gudahood ah, ayaga oo u caddeynaya go'aanka diidmada codsiga shahaadada iyo sababta loogu cuskaday; iyo

4. Haddii uu qofku u arko in uu xad-gudub ku yahay go'aanka, waxa uu cabasho u gudbisan karaa maxamkamadda awoodda u leh, muddo kow iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku qofka gaaray.

Qodobka 37aad
Adeegsiga Magaca Hay'adda

1. Xisaabiyaha haysta shahaadada xisaabaadka waxa uu xaq u leeyahay adeegsiga magaca "Xisaabiye laga aqoonsanyahay Waddanka Soomaliya" CPA (S) ama cinwaanka kale oo uu bixiyo Goluhu.

2. Xisaabiye kasta oo H ay'addu u aqoonsan tahay xirfadle xisaabiye, waxa uu xaq u leeyahay in uu isticmaalo magaca Xisaabiye CPA (S) ee "Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed" ama magac kasta oo kale oo ay oggolaadaan Golaha Maamulka Hay'addu.



17

Qodobka 38aad
Codsi iyo Soo Saaridda Shatiga Sanadlaha ah

1. Haddii qof haysta aqoonsiga xirfadle xisaabiye la aqoonsan yahay uu samaysanayo shirkad xisaabaad iyo hanti-dhawr, ha ahaato mid uu keli u leeyahay ama lala leeyahay, waxa uu Golaha Maamulka ee Hay'adda ka codsanayaa shati sannadle ah, isaga oo maraya habraaca loo dejiyey, lana wadaagayo Golaha dhammaan xogta ay uga baahan yihiin.

2. Marka uu soo gaaro Golaha Maamulka codsi shati oo waafaqsan Farqadda 1aad ee Qodobkan, waxa uu siinaya codsaha shatiga uu soo codsaday, marka uu buuxiyo dhammaan shuruudaha hoos ku xusan:
   a) Waa in qofka ama qayb ka mid ah dadka leh shirkadda ay haysto/haystaan ogolaanshaha shaqada xisaabaadka ee Hay'adda.
   b) Waa in ay xafiis ku leeyihiin waddanka gudihiisa.
   c) Waa in haystaan ruqsad ganacsi oo aan dhacsanayn.
   d) Waa in ay shirkaddu bixisay dhammaan kharashaadka ku waajibay.
   e) Waa in aan magaca shirkaddu abuurayn jaah-wareer ama dhibaato u keenayn danaha dadka kale, sidoo kalena ahayn ama shabahayn magac ay leedahay shirkad horay loo aqoonsaday.
   f) Waa in ay shirkaddu buuxiso dhammaan wixii shuruudo iyo habraacyo kale ah ee ay dejiyaan Golaha Maamulku Hay'adda.

3. Haddii shirkaddu tahay Ajnebi, waa in ugu yaraan xirfadleyaasha xisaabeed ee shirkadda leh midkood uu noqdaa mawaadin Soomaaliyeed.

4. Golaha Maamulka Sare waxa uu awood u leeyahay in uu shatiga u diido shirkadda haddii uu ku qanci waayo codsigeeda.

5. Haddii Golaha Maamulka Sare ay diidaan aqbalidda codisga shatiga ee shirkadda, si waafaqsan Farqadda (c) ee Qodobkan, waa in Goluhu soddon (30) maalmood gudahood la wadaagayaa shirkadda go'aanka diidmada codsiga shatiga shirkadda iyo asbaabta loo cuskaday.

6. Haddii shirkaddu u aragto in go'aanka uu ku yahay xad-gudub, waxay cabasho uga qaadan kartaa go'aanka golaha maxakamadda awoodda u leh, muddo kow

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku shirkadda gaaray.

7. Shatiga lagu soo saaray hab waafqsan qodobkan wuxuu shaqaynayaa laga bilaabo maalinta la soo saaray illaa 31[ka] December ee sannadkaas.

8. Golaha Maamulku Sare waxa ay hakin karaan ama la noqon karaan shatiga shaqada ee kusoo baxay habka waafaqsan qodobkaan, haddii shirkaddu ku xad gudubtay Xeerka Anshaxa ee Xirfadda.

Qodobka 39[aad]
Cusbooneysiinta Shatiga Sanadlaha Shahaadada ah

1. Marka Shirkad loo cusbooneysiinayo shatiga shaqada, waxaa ay codsi qoraal ah u soo gudbinaysaa Golaha maamulka, ugu yaraan labo bilood ka hor taariikhda dhicitaanka shatiga la bixiyey.

2. Haddii shirkaddu aysan soo codsan cusbooneysiinta shatiga wakhtiga loo qabtay, xoghayuhu waxa uu la socodsiinayaa Golaha Maamulka Sare arrintaas, Goluhuna waxa ay amrayaa in shirkaddaas laga saaro liiska shirkadaha loo ogol yahay in ay ka shaqeeyaan shaqada xisaabaadka iyo hanti-dhawrka.

3. Golaha Maamulka Sare waxa uu diidi karaa shirkadda cusboonaysiinta shatiga, goluhu oo muddo dhan soddon maalmood (30) gudohood ku wargeliyaa shirkadda ay khuseyso, una caddeynayaa diidmadiisa ku aadan cusboonaysiinta shatiga shirkadda iyo sababaha diidmadiisa; iyo

4. Haddii shirkaddu u aragto in go'aanka uu ku yahay xad-gudub, waxay cabasho uga qaadan kartaa go'aanka Golaha maxakamadda awoodda u leh, muddo kow iyo labaatan (21) maalmood ah, laga bilaabo maalinta uu go'aanku shirkadda gaaray.

Qodobka 40[aad]
Oggolaashiyaha Shatiyada Shaqada ee Sanadlaha

Ogolaanshaha ama shati shaqo ee la siiyay qof ama shirkad waxa ay ahaanayaan hanti uu leeyahay Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaaliyeed.



19

Qodobka 41aad
Baaritaanka Shirkadaha Xisaabaadka

1. Shirkad kasta oo soo codsanaysa shati shaqo oo cusub, waa in ay buuxisaa shuruudaha iyo habraac baariseedka uu dejiyay Golaha Maamulka Sare, si waafaqsan Qodobbada 34aad iyo 35aad ee sharcigan.

2. Codsiga cusboonaysiinta shati horay u jiray waxaa loo marayaa habraaca ku xusan Qodobka 39aad ee sharcigan.

CUTUBKA 7AAD
HUBINTA TAYADA & XEERKA ANSHAXA EE XIRFADDA

Qodobka 42aad
Nidaamka Dib-u-eegista Hubinta Tayada

1. Hay'addu waxa ay sameynaysaa nidaam dib-u-eegis iyo tayo hubin shaqooyinka sida hanti-dhawrista ama adeegyada kale ay qabtaan ee la xiriira shaqada xubnaha Hay'adda iyo shirkadaha xubnaha ka ah Hay'adda.

2. Ujeeddada dib-u-eegistani waa sidii loo hubin lahaa in xubnaha ama shirkadaha xubnaha ka ah Hay'adda in ay shaqooyinkooda u guteyn hab waafaqsan xeeraraka anshaxa iyo heerarka tayo ee Hay'adda, iyo Xeerarka anshaxa iyo kuwa xisaabaadka caalamiga ah ee ay soo kala saareen Golaha Caalamiga ee Xeerarka Anshaxa iyo Golaha Caalamiga ah ee soo Xeerarka Hanti-dhawrka iyo shaqooyinka la xiriira.

3. Golaha Maamulka ee Hay'addu waa in uu abuuraa hab-raacyo faahfaasan ee loo maro ee hubinta tayada shaqo oo waafaqsan Xeerarka Caalmiga ah ee hubinta tayada ee loo soo gaabiyo ISQCI iyo habraaca waajibaadka xubinnimo ee ay soo saartay Hay'adda Xisaabaadka Caalamiga ah ee (IFAC).

Qodobka 43aad
Xeerka Anshaxa Xirfadda

1. Sharcigan wuxuu yeelan doonaa xeer-hoosaadyo iyo xeer-nidaarniyayaal lagu hago fulinta waajibaadka Hay'adda iyo habraacyada anshaxa xirfadeed, kuwaas oo

waafaqsan Xeerarka IFAC.

2. Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda waxa uu u hoggaansamayaa Xeer-hoosaadyada Anshaxa Xirfadda.

3. Xubintii ku xad-gudubta Xeerarka Anshaxa waxa loo gudbinayaa Guddiga Dabagalka iyo Anshax-marinta ee Hay'adda.

CUTUBKA 8AAD
TILLAABOOYINKA ANSHAX-MARINTA

Qodobka 44aad
Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta

1. Hay'addu waxa uu yeelanayaa Guddi Baaris iyo Anshax-marin, si waafaqsan Xeer-hoosaadka Hay'adda.

2. Golaha Maamulka Sare ayaa dejinaya habraaca Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta ee Hay'adda.

3. Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta waxa ay awood u leeyihiin in ay ganaaxaan Xubnaha Hay'adda kuwaas oo lagu helay fal anshax-xumo oo khilaafsan xeerkan.

Qodobka 45aad
Fulinta Tillaaboyinka Anshax-marinta

1. Golaha Maamulka Sare ayaa ka mas'uul ah fulinta go'aannada Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta ee Hay'adda.

2. Marka Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta uu hakiyo ogolaanshaha uu qof ama shirkad u haysto shaqooyinka xisaabaadka iyo hanti-dhawrka ama kala noqdaan xubinnimadiisa Hay'adda, Golaha Maamulka Sare waxa uu xubintaas magaceeda ka saarayaa ama ka hakinayaa liiska Xubnaha Hay'adda.

3. Xubin ama shirkad kasta oo Guddiga Baarista iyo Anshax-marintu uu ka joojiyo ogolaanshaha shaqo ama kala noqdo xubinnimada Hay'adda, waxa ay sidaas ku luminaysaa ogolaanshaha shaqo ama xubinnimadeeda waana in Golaha Maamulku

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

ka dalbadaan in ay xubintaasi ku soo celiso shahaadada ogolaansho ee Hay'adda muddo todoba (7) maalmood ah gudahood.

Qodobka 46aad
Cabashada

Xubintii u aragta in go'aanka uu gaaray Guddiga Baarista iyo Anshax-marinta uu xad gudub ku yahay, waxa ay xaq u leedahay in ay cabasho u qaadato maxkamadda awoodda u leh muddo saddex bilood gudahood ah laga bilaabo maalintii uu go'aanka guddigu soo gaaray xubinta.

CUTUBKA 9AAD
BAAHIYAHA DHAQAALAHA

Qodobka 47aad
Dhaqaalaha Hay'adda

1. Dhaqaalaha Hay'adda waxaa uu ka koobnaan karaa:
   a) Lacagta xubinnimada ka soo uruurta, lacagta codsiga iyo diiwaangalinta iyo lacagta kasoo uruurta rukumasho kale hadba sidii ay go'aamiyaan Golaha Hay'adda.
   b) Kabka laga helo Dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah deeqaha, hadiyadaha iyo kaalmooyinka kuwaas oo Golaha Maamulku go'aansado in la aqbalo.
   c) Faa'iidada maalgashiga lacagta Hay'adda iyo dakhliga laga helo daabacaadaha iyo gadista shaqooyinka cilmi baarista, waxbarashada iyo daabacadaha kale iyo dakhliga adeegyada hay'adda ku fuliyo.
   d) Lacagta Hay'adda u deynsanayso si ay u fuliso hawlaheeda.

2. Dhaqaalaha Hay'adda waxaa maamuli doona Golaha Maamulka Sare si waafaqsan Siyaasadda Maaliyadda ee Hay'adda iyo Shuruucda Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya.

3. Hay'addu waxa ay koontooyin xisaabeed bangi ku yeelanaysaa bangiyada uu Golaha Hay'adda ansixiyey iyadoo la marayo hab uu goluhu ansixiyey.

4. Dhaqaalaha Hay'adda waxaa loo isticmaali karaa oo kaliya hawlaha iyo ujeedooyinka Hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE HOUSE

5. Bixinta kharashaadka iyo isticmaalka lacagaha yaryar waa in ay waafaqsan yihiin Siyaasadda Bixinta Lacagaha iyo Habka Maamulka Maaliyadda ee uu Golaha Maamulku Sare ansixiyey.

Qodobka 48aad
Awoodda Amaahashada

Hay'adda waxaa au amaahan kartaa lacag, iyada oo uu ku dhaqmayo shuruudo Golaha Maamulku ku heshiiyay si lacagtaas loogu fuliyo shaqooyinka Hay'adda.

Qodobka 49aad
Maalgashiga

Hay'addu waxaa ay ku maalgashan karaa lacagtaas hababka maalgashi ee uu Golaha Maamulka Sare ansixiyey.

Qodobka 50aad
Sannad Xisaabeedka iyo Xisaab-xirka

1. Sannad-xisaabeedka ururku waxaa uu ka bilaabanayaa 1da Janaayo waxaana uu ku dhammaanayaa 31ka Diseembar sannad kasta.

2. Xisaab-xirka sanadlaha waxa uu noqonayaa bisha 12aad ee Diseember.

Qodobka 51aad
Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1. Hay'addu waxaa uu joogteynayaa diiwaan-xisaabeed oo munaasib ah iyadoo uu diyaarinayo warbixin-maaliyadeedka sannadlaha ah ugu dambeyn 31da Maarso ee sannadka xiga, Warbixin-maaliyadeedka waxaa mareysaa baaris hanti-dhawre madaxbannaan, taas oo micneheedu yahay:
   a) Xisaabiye u idman qabashada shaqada xisaabaadka oo aan xubin ka hayn Golaha Maamulka Sare ee Hay'adda;
   b) Shirkad xisaabaadka ka shaqaysa oo aan xubin ku lahayn Golaha Maamulka Sare;



2. Xisaabiyaha/Hanti-dhawraha ama shirkadda xisaabaadka ee baarista ku sameynaysa Hay'adda waxaa lagu magacaabayaa shirka sannadlaha ah ee Golaha Guud.

3. Xisaabiyaha/Hanti-dhawraha ama shirkadda xisaabaadka oo lagu magacaabay Farqadda 1aad (b) ee Qodobkan waxaa khidmadda la siin doono ansixinaya Golaha Guud ee Hay'adda.

4. Golaha Maamulku waxaa ay sannad kasta la wadaagayaan xubin kasta oo Hay'adda ka tirsan warbixin-maaliyadeedka sannadkii tagay oo ay la socoto warbixintii hanti madaxbannaan uu sameeyay, ugu danbayn 31ka May ee sannadka xiga.

Qodobka 52aad
Dhaqan-Galka Sharcigan

Sharcigaan waxuu dhaqan-galayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, uuna saxiixo Madaxwaynaha Jumhuuriyada Federaalka Soomaaliya isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

GOLAHA SARE
THE UPPER HOUSE
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SHARCI LR.46 **TAARIIKH: 10-KA JANAAYO 2026**

SHARCIGA DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA XAALADAHA MADANIGA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0801/B11/25**, ku taariikheysan **08/12/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Hindise-Sharciyeedka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga.
MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
04 FEB 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Hon-006 2026
TAARIIKH 05-02-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Guuleh
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



HINDISE-SHARCIYEEDKA DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA XAALADAHA MADANIGA

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA XFS

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD
Qodobka 1aad
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad
Qeexid

Haddii aanu nuxurku macne kale u yeelin, erayada soo socda waxay yeelanayaan Sharcigan gudihiisa mid waliba macnaha ku hor qoran:

1. "**Tirakoobka Xaaladaha Madaniga**" Waxaa loola jeedaa uruurinta iyo isu-duwidda dadka, fallanqaynta iyo faafinta xogaha ku saabsan xaaladaha madaniga si waafaqsan Sharcigan.

2. "**Xog-bixiye**" Waxaa loola jeeda qofka bixinaya xogta iyo xaaladda uu waajibinaya Sharcigan in la diiwaan-geliyo.

3. "**Dan-dhawre/Mas'uulka Sharciga ah**" Waxaa loola jeedaa qofka ay maxkamad awood u leh u magacowdo maareynta nolosha, hantida iyo danaha qof kale si waafaqsan shuruucda dhaqan-galka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4. "**Diiwaan**" Waxaa loola jeedaa xogta xaaladaha madaniga iyo kuwa qoyska ee la diiwaan-geliyay si waafaqsan Sharcigan.

5. "**Diiwaan-haye Guud**" Waxaa loola jeedaa mas'uulka ugu sarreeya Agaasinka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah kaasi oo lagu magacaabo si waafaqsan Qodobka 12aad ee Sharcigan.

6. "**Dad-dhigis**" Waxaa loola jeedaa diiwaan-gelin waareysa oo waajib ah si joogta ahna loo diiwaan-gelinayo dhammaan xaaladaha madaniga ah ee dadweynaha iyadoo la raacayo shuruudaha iyo hab-raacyada Sharcigan.

7. "**Diiwaan-haye Dawladda Hoose**" Waxaa loola jeedaa mas'uulka ugu xilsaaran dawladda hoose dad-dhigista Sharcigan.



1

8. "**Diiwaan-haye**" Waxaa loola jeedaa sarkaal kasta ee qaabilsan hawl dad-dhigis si waafaqsan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaalkiisa.

9. "**Diiwaan-gashane**" Waxaa loola jeedaa qof kasta oo xogtiisa la xiriirta dad-dhigista ay diiwaan-gashan tahay kuna kaydsan tahay diiwaanka dad-dhigista.

10. "**Xaaladaha Madaniga ah**" Waxaa loolaa jeedaa dhacdada dhalashada, dhimashada, guurka, furiinka, ilmo-korsashada ee lagu diiwaan-geliyo si waafaqsan Sharcigan.

11. "**Dhalasho**" Waxaa loola jeedaa marka ubad ka soo baxo uurka hooyadiis isagoo nool.

12. "**Dilan**" Waxaa loolaa jeedaa marka ubad uu ka soo baxo uurka hooyadii isagoo aan noolayn.

13. "**Dhimasho**" Waxaa loola jeedaa marka qof nool uu si dhammeystiran u waayo astaamaha nolosha oo dhan

14. "**Furriin**" Waxaa loola jeedaa dhammaadka heshiis guur ee u dhexeeyay nin iyo naag si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo Shuruucda kale ee Dalka.

15. "**Ilmo la helay**" Waxaa loola jeedaa ilmo la waayay labadiisa waalid iyo cid mas'uulkiisa sharciga ah oo laga helay meel cidlo ah oo ka tirsan dhulka JFS aan wax diiwaan ah ka oolin hay'adaha u xilsaaran dad-dhigista si waafaqsan sharcigan.

16. "**Guddiga**" Waxaa loola jeedaa Guddiga ku xusan Qodobka 6^{aad} ee Sharcigan.

17. "**Guur**" Waxaa loola jeedaa heshiis dhex mara nin iyo naag kala leh xuquuq iyo waajibaad, waxaana saldhig u ah Shareecada Islaamka.

18. "**Agaasinka**" Waxaa loola jeedaa Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ee ku xusan Qodobka 9^{aad} ee Sharcigan.

19. "**Waalid**" Waxaa loola jeedaa hooyada iyo/ama aabbaha ilmaha dhalay.

20. "**Wakiil Diiwaan-haye**" Waxaa loola jeedaa sarkaalka ugu xilsaaran, wakiilna uga ah Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose hawlaha dad-dhigista ee tuulooyinka iyo miyiga.

21. "**Wargeliye**" Waxaa loola jeeda qofka uu Sharcigaani iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa ku waajibayaan wargelinta Diiwaan-hayaha ay khusayso xogaha la xiriira dad-dhigista.



22. "**Wasaaradda**" Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Xukuumadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

23. "**Wasiirka**" Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

24. "**JFS**" Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qodobka 3aad
Ujeeddada Sharcigan

Ujeeddada Sharcigan waa;

1. Dhisidda iyo hirgelinta adeeg dad-dhigis oo midaysan, casri ah, tayadiisu sarreyso, si fududna loo heli karo kuna baahsan dalka oo idil.

2. Nidaaminta iyo daadejinta hawlaha dad-dhigista iyo bixinta shahaadooyinkooda.

3. Adkaynta kaalinta dawladaha hoose ay ku leeyihiin bixinta adeegyada dad-dhigista.

4. Yagleelidda xog-dhigga/kaydka qaran ee dhammaan diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska.

5. Soo-saarista warbixinnada tirakoobka xaaladaha madaniga ah oo tayadoodu sarrayso.

6. Dhisidda heykal maamul oo u xilsaaran fulinta adeegyada dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah iyo qeexidda doorarka ay kala leeyihiin.

7. Hirgelinta xarumo diiwaan-gelin oo lagu fulinayo hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah.

8. Joogtaynta tababaridda diiwaan-hayeyaalka, hawl-wadeennada iyo xirfadleyaasha fuliya hawlaha dad-dhigidda ee heer qaran, dawlad-goboleed, degmo, tuulo iyo miyiga, iyo

9. Xoojinta wada-shaqeynta hey'addaha qeybta ka ah hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah.



3

Qodobka 4aad
Kaalinta Hoggaamineed ee Wasaaradda

Wasaaradda ayaa u xilsaaran siyaasad ahaan hirgelinta hawlaha dad-dhigista iyo ku baahinta dhammaan degmooyinka, tuulooyinka iyo miyiga dalka, iyadoo kaashanayso Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

Qodobka 5aad
Awoodaha Wasiirka

Wasiirku wuxuu yeelanayaa awoodaha soo socda:

1. Soo saarista xeer-nidaamiyeyaal ku saabsan bixinta adeegyada dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah kadib markuu la tashado Guddiga;
2. Magacaabidda, xil-ka-qaadista iyo shaqo ka joojinta Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah si waafaqsan Sharcigan iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka.
3. Jihaynta iyo hagidda siyaaasadeed ee arrimaha dad-dhigista iyo tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah;
4. Ansixinta hab-raacyada iyo hageyaashaa lagu fulinayo dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah marka uu soo-jeediyo Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista.

Qodobka 6aad
Guddiga Qaran ee Hagidda Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga

1. Sharcigani wuxuu dhisayaa Guddiga Qaran ee Hagidda Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah oo ka koobnaanaya:

a) Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka; Guddoomiyaha Guddiga
b) Wasaaradda Caddaaladda ee heer federaal; Xubin
c) Wasaaradda Arr. Diinta iyo Awqaafta ee heer federaal; Xubin
d) Wasaaradda Arrimaha Dibadda; Xubin
e) Wasaaradda Caafimaadka ee heer federaal; Xubin
f) Wasaaradda Waxbarashada ee heer federaal; Xubin

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

g) Wasaaradda Qoyska iyo Arrimaha Xuquuqul Insaanka ee heer federaal; Xubin

h) Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda heer Federaal; Xubin

i) Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Federaalka; Xubin

j) Hay'adda Aqoonsiga & D/gelinta Dadweynaha; Xubin

k) Hay'adda Istaatiistikada Qaranka; Xubin

l) Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadda; Xubin

m) Wasaaradaha Arr. Gudaha ee Dowlad Goboleedyada; Xubin

n) Gobolka Banaadir; Xubin

o) Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista; Xubin

Qodobka 7aad

Waajibaadka Guddiga Qaran ee Hagidda Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah

1. Guddigu wuxuu uu xilsaaran yahay:-
   a. Jiheynta iyo ka talobixinta siyaasadaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee Soomaaliya;
   b. Ka talo-bixinta qorsheyaasha, xeerarka iyo hab-raacyada dhaqan-gelineed ee dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah;
   c. U-qareemidda in la helo dhaqaale ku filan fulinta iyo maamulka hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah;
   d. Xaqiijinta in dhammaan hawlaha la xiriira dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee dalka loo maareeyo si waafaqsan Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo hab-raacydiisa fulineed;
   e. Ka-doodista warbixinnada waxqabad ee Agaasinka iyo bixinta tallooyin lagu hormarinayo nidaamka dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah.

2. Guddigu wuxuu kulmaa ugu yaraan sanadkiiba hal mar, wuxuuse kulmi karaa mar kasta oo ay jirto baahi waa haddii uu sidaasi go'aamiyo guddoomiyaha Guddiga iskiis ama isagoo ku dhisaya codsiga ugu yaraan saddex meelood meel xubnaha Guddiga.



5

3. Iyadoo uusan ka hor imaanayn qodobbada Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa, Guddigu wuxuu degsanayaa xeer-hoosaad nidaamiya habka shaqo ee kulamadiisa iyo gudashada xilalkiisa.

CUTUBKA LABAAD
QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA XAALADAHA MADANIGA AH

Qodobka 8aad
Qaab-dhismeedka Maamul ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka

1. Sharcigani wuxuu dhisayaa qaab-dhismeedka maamul ee nidaamka dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee Qaranka Soomaaliyeed oo noqonaya sida hoose;
   a) Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah;
   b) Diiwaan-hayeyaasha Guud ee dawlad-goboleedyada;
   c) Diiwaan-hayaha Maamulka Gobolka Banaadir;
   d) Diiwaan-hayeyaasha dowladaha hoose; iyo
   e) Safaaradaha iyo qunsuliyadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 9aad
Qaab-dhismeedka Agaasinka

1. Qaab-dhismeedka Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ee JFS, waxaa uu ka kooban yahay:
   a) Diiwaan-hayaha Guud oo ah mnasuulka ugu sarreeya maamul ahaan hirgelinta iyo fulinta adeegga Dad-dhigista iyo tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ee JFS ; iyo
   b) Waaxyo, hawl-wadeenno iyo la-taliyayaal lagama maarmaan u ah xil- gudashadiisa.

2. Iyadoo la tixgelinayo qodobbada Sharcigan, arrimaha khuseeya qaadashada, mushaarka, anshax-marinta iyo eryidda shaqaalaha waxaa lagu dhaqayaa sharciyada iyo xeerarka khuseeya ee heerka dawladeed ee ay ka shaqeeyaan.

Qodobka 10aad
Shaqada Agaasinka

1. Agaasinku wuxuu u xilsaaran yahay hawlaha soo socda;
a. Yegleelidda nidaamka dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee dalka;



b. Hagidda iyo isu-duwidda hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha Madaniga ah ee muwaadiniinta si waafaqsan Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo hab-raacyadiisa fulineed;
c. Diyaarinta diiwaannada loo adeegsanayo dad-dhigista iyo u qaybintooda dhammaan goobaha, xarumaha iyo xafiisyada fulinaya hawlaha dad-dhigista;
d. Diyaarinta iyo dhaqan-gelinta qorsheyaasha lagu hormarinayo dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah;
e. Diyaarinta barnaamijyo tababar oo kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadda diiwaan-hayeyaashaa iyo hawl-wadeennada u xilsaaran fulinta dad-dhigista;
f. Diyaarinta iyo fulinta barnaamijyo wacyi-gelineed oo ku saabsan dad-dhigista;
g. Kor-joogtaynta iyo hubinta in adeegyada dad-dhigista loo fuliyo si waafaqsan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa;
h. Ururinta, keydinta iyo ilaalinta diiwaannada xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska;
i. Assaasidda, horumarinta, maamulidda iyo dhawridda kaydka dhexe ee diiwaannada;
j. Hirgelinta nidaam diiwaan-gelin oo danabaysan (digital);
k. Ka gacan-siinta diiwaan-hayayaasha heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir gudashada waajibaadkooda;
l. Isku xirka iyo xiriirinta diiwaan-hayeyaasha dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir;
m. Siinta dowladdaha hoose taageerada lagama maarmaanka u ah fulinta dad-dhigista oo ay ka mid yihiin, xafiisyo diiwaan-gelin oo agabkoodu u dhan yahay iyo goobo lagu kaydiyo diiwaannada;
n. Kormeeridda hawl-fulinta farsamo ee diiwaan-hayeyaasha dawladda hoose, dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir; iyo
o. Xaqiijinta ilaalinta diiwaanka qaranka.

Qodobka 11aad
Awoodaha Agaasinka

1. Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah wuxuu yeelanayaa shaabad iyo astaan u gaar ah oo lagu asteeyo warqadaha rasmiga ah ee Agaasinka.

2. Agaasinku wuxuu abuurayaa oo hirgelinayaa nidaam diiwaan-gelin danabaysan kaasi oo;
   a. Waafaqsan una hoggaasan Sharcigaan;



7

b. Leh jiritaan waara;
c. Amaankiisa iyo sir ahaanshihiisa suggan yahay;
d. Leh halbeegyo looga hortagi karo ama lagu yarayn karo halis sababi karta khasaaro xogeed ama diiwaaneed;
e. Oggolaanaya xog-dhigga ama kaydka dhexe (database) in lagu diiwaangeliyo qofka, isla markaana ku xiro xaaladaha iyo dadka kale ee xiriirka la leh dhacdada la diiwaangelinayo;
f. Leh astaamo oggolaanaya in xogaha lala wadaagi karo hay'adaha kala duwan ee sharcigu u oggol yahay;
g. Ku habboon awoodda iyo karaanka Dalka oo aan u baahnayn xirfad ka sarraysa ama karti aan laga heli karin Dalka;
h. Fududeeya helidda xogta;
i. Sugaa lahaanshaha qaran ee dhammaan xogaha la diiwaangeliya, xogmaamulkiisuna u uku kooban yahay Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah oo keliya, iyo
j. Xilalka iyo awoodaha kale ee Sharcigan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa ay siiyaan.

Qodobka 12aad
Magacaabista Diiwaan-hayaha Guud

Wasiirka ayaa magacaabaya xilkana ka qaadi kara Diiwaanhayaha Guud ee Federaalka ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah.

Qodobka 13aad
Shuruudaha Diiwaan-hayaha Guud

1. Xilka Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah waxaa loo magacaabayaa qofkii buuxiya shuruudaha soo socda:
   a) In uu yahay muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, muslimna ah,
   b) In da'diisu aysan ka yareyn soddon (30) sano
   c) In uu dhimirkiisu dhanyahay;
   d) Inuu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsanyahay;
   e) Lahaadaa ugu yaraan shan sano waayo-aragnimo maamul ee khuseysa hawlaha dad-dhigista iyo xirfad u sahlaysa gudashada waajibaadkiisa;

8

f) Waa in aysan maxkamad si kama dambeys ah xukun ugu ridin shantii (5) sano ee ugu dambeysay;
g) Inuu ka bedqabo cillad caafimaad darro oo u diidi karta gudashada waajibaadkiisa.

Qodobka 14aad
Xil-waayidda Diiwaan-hayaha Guud

1. Xilka Diiwaan-hayaha Guud wuxuu ku bannaanaan ama waayi karaa sababaha soo socda:
   a) Xil ka tegid;
   b) Geeri;
   c) Xil ka qaadis waafaqsan Sharcigan;
   d) Xaalad caafimaad oo sababta xilgudasho la'aan;
   e) Karti la'aan iyo shaqo-xumo ku saabsan xilgudashadiisa; ama
   f) Been ka sheeggid shuruudaha u qalmidda magacaabista si waafaqsan Qodobka 13aad ee sharcigan.

Qodobka 15aad
Xilka iyo Awoodaha Diiwaan-hayaha Guud

1. Diiwaan-hayaha Guud waa sarkaalka maamul ahaan ugu sarreeya Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah, wuxuuna u xilsaaran yahay;
   a) Hagidda iyo isku-duwidda hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ee uu Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah u xilsaaran yahay;
   b) Maamulidda hawl-wadeenada iyo shaqaalaha si waafaqsan sharuucda khuseeya;
   c) Diinwaanhayaha guud ee Federalka wuxuu diinwaangelinayaa diinwaangeliyaasha Dowladda Goboleedyada, Gobolka Banaadir iyo dowladaha hoose;
   d) Metelaadda Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah;
   e) Diyaarinta warbixinnada Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah iyo u gudbintooda Wasaaradda iyo Guddiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 16aad
Diiwaan-hayaha Dawlad-goboleedyada iyo Gobolka Banaadir

1. Wasiirka Arrimaha Gudaha ee heer dawlad-goboleed ayaa magacaabaya, xilkana ka qaadaya, kuna samayn kara shaqo ka joojin Diiwaan-hayaha heer dawlad-goboleed iyadoo lagu salaynayo shuruudaha magacaabista, sababaha xilka qaadista iyo shaqo ka joojinta ee ku xusan Qodobada 12aad, 13aad iyo 14aad ee Sharcigan.

2. Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ayaa magacaabaya, xilkana ka qaadaya, kuna samaynaya shaqo ka joojin Diiwaan-hayaha Gobolka Banaadir iyadoo lagu salaynayo shuruudaha magacaabista, sababaha xilka qaadista iyo shaqo ka joojinta ee ku xusan Qodobada 12aad, 13aad iyo 14aad ee Sharcigan.

3. Diiwaanhayaha dawlad-goboleedka iyo Gobolka Banaadir waxay u xilsaaran yihiin:
   a) Hagidda iyo isku-duwidda hawlaha dad-dhigista ee heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir;
   b) Maamulidda shaqaalaha si waafaqsan sharuucda khuseeya;
   c) Iskuxirka xarumaha diiwaan-gelinta ee heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee hoos yimaada;
   d) Fududeynta tababarrada iyo barnaamijyada kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadaha diiwaan-hayayaasha heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee hoos yimaada; iyo
   e) In uu xaqiijiyo in dad-dhigista heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ay u dhacdo si waafaqsan Sharcigaan iyo xeerarka kale ee khuseeya.

Qodobka 17aad
Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose

1. Guddoomiye degmada ayaa magacaabaya, xilkana ka qaadaya, kuna samayn kara shaqo ka joojin Diiwaan-hayaha dawladda hoose iyadoo lagu salaynayo shuruudaha magacaabista, sababaha xil-ka-qaadista iyo shaqo ka joojinta ee ku xusan Qodobada 12aad, 13aad iyo 14aad ee Sharcigan.

2. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose ee la magacaabay wuxuu hawlgalayaa marka uu Diiwaanhayaha Dowlad Goboleedyada ama Diiwaanhayaha Gobolka Banaadir uu usoo gudbiyo Diiwaanhayaha Guud si uu u diiwaan-geliyo saxiixa iyo shaabadda dowladda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

10

hoose ee lagu suntayo diiwaanka xaaladaha madaniga ah iyo shahaadooyinkooda si waafaqsan Sharcigan.

3. Diiwaan-hayaha dawladd a hoose wuxuu u xilsaaran yahay: -
   a) Qabashada codsiyada iyo xaqiijinta xogaha iyo cadeymaha ku qoran shaxda (foomamka) dad-dhigista sida sharcigani farayo.
   b) Diiwaan-gelinta xogaha la xiriira xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska;
   c) Bixinta shahaadooyinka, caddaymaha ama xaanshiyaha aqoonsiga ee xogaha laga diiwaan-geliyay Xaaladaha kala ah:
      i. dhalashada;
      ii. dhimashada,
      iii. guurka;
      iv. furiinka;
      v. ilmo-korsiga; iyo
      vi. diiwaanka qoyska;
   d) Xaqiijinta in dhammaan dadku leeyihiin xuquuq siman ee diiwaan-gelinta si ay u helaan waraaqaha aqoonsi gaarka ah ee ay xaqa u leeyihiin; iyo
   e) Siinta diiwaan-gashanaha nuqul diiwaankiisa haddii uu codsado.

Qodobka 18aad
Awoodaha Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose

1. Diiwaan-hayaha dawladda hoose wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:
   a) Xaqiijinta iyo sugidda sax ahaanshiyaha xaaladda la diiwaan-gelinayo;
   b) Sixidda xogaha la diiwaan-geliyay, shahaadooyinka iyo caddaymaha la bixiyay si waafaqsan Sharcigaan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa;
   c) Wax-ka-bedelidda diiwaannada si waafaqsan Sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaalkiisa iyo habraacyadiisa.

2. Diiwaan-hayaha dawladda hoose wuxuu magacaabi karaa, xilkana ka qaadi karaa Wakiil Diiwaan-hayaha Dowladda Hoose oo fulinayaa hawlaha uu u igmado ee la xiriira xilkiisa iyo awoodihiisa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

11

Qodobka 19aad
Diiwaan-hayayaasha Dawladda Hoose ee Gobolka Banaadir

Degmo kasta ee Gobolka Banaadir waxa ay yeelanaysaa diiwaanhaye la awood ah Diiwaanhayaha dawladaha hoose ee degmooyinka kale ee Dalka, kuna yimaada hab la mid sida ku cad Faqradda 1aad ee Qodobka 17aad ee Sharcigan, wuxuuna leeyahay awoodaha ku xusan Qodobka 18aad ee Sharcigan.

CUTUBKA SADDEXAAD
HABRAACA GUUD EE DAD-DHIGISTA
Qodobka 20aad
Habraaca Guud ee Dad-dhigista

1. Xog-bixiye kasta waxaa waajib ku ah inuu bixiyo xogaha la xiriira dad-dhigidda ee la diiwaan-gelinayo si waafaqsan Sharcigan.

2. Xogta xaaladaha madaniga ah waa in lagu dhigaa shaxda (form) loo asteeyay in lagu diiwaan-geliyo, xog-bixiyuhuna uu saxiixaa ama muunadda suulkiisa ku suntaa shaxda la buuxiyay.

3. Xaaladaha madaniga ah waxaa lagu diiwaan-gelinayaa muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood oo ka billaabmaysa taariikhda ay dhacday marka laga reebo dhacdada dhalashada oo ay tahay in lagu diiwaangeliyo muddo sanad gudihiisa ah.

4. Dhacdo kasta oo aan lagu diiwaan-gelin muddada uu Sharcigaan u asteeyay waxaa loo tixgelinayaa diiwaan-gelin daahday, waxaana ku waajibaya qofka ay khuseyso ama xog-bixiyaha inuu la yimaado cudur-daar maan-gal ah ama uu bixiyo ganaax maaliyadeed oo uu Wasiirku ku soo saaro xeer-nidaamiye.

5. Diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah ee ka dhex dhaca maraakiibta iyo diyaaradaha ay leedahay ama ka diiwaan-gashan JFS, waxaa loo raacayaa habraaca uu Wasiirku ku soo saaro xeer-nidaamiye.

6. Diiwaan kasta oo aan la isticmaalin cillad darteed ama la saxay xogta ku qoran oo markii hore si qalad loo geliyay si waafaqsan Qodobka 21aad ee Sharcigan, Diiwaan-hayaha waxaa waajib ku ah in uu dusha dambe uga sunto labo xariiq oo is dhaafsan kuna dhufto shaabbad ay ku qoran tahay "ANSAX MA AHA".

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

12

7. Diiwaan-gelinta xaaladda madaniga ahi waa mid lacag la'aan ah.

8. Shahaadooyinka lagu bixiyo caddaynta dhacdo muhiim ah iyo qoyska waa abadi aanan lahayn dhamaad ama dhicid.

9. Dhammaan khidmadaha ama lacag bixinta shahaadooyinka iyo ca ddaymaha ku sheeggan Sharcigan waxaa lagu jaan-goynayaa xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka ka dib marka uu wada-tashi la sameeyo Guddiga.

10. Diiwaan-hayaha ayaa mas'uul ka ah sugnaanshiyaha xogaha la diiwaan-gelinayo.

Qodobka 21aad
Habraaca Sixidda iyo Bedelidda Diiwaannada

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose isagoo ku salaynaya codsiga cidda ay khuseyso, wuxuu sixi karaa qaladaadka qoraal ee yaryar ee ku jira Diiwaanka haddii aysan sixiddaasi saamayn ku yeelanayn nuxurka xogaha ku dhigan diiwaanka ama shahaadada.


2. Marka laga reebo sixidda qaladaadka qoraal ee yaryar, diiwaanhayuhu ma samayn karo sixitaan saamayn ku yeelanaya nuxurka xogaha la diiwaan-geliyay isaga oo aanan helin amar garsoor oo ka soo baxay maxkamad awood u leh.

3. Codsiga ku saabsan sixidda ama beddelid Diiwaan waxaa maxkamadda ka codsan kara Diiwaan-gashanaha ay khusayso ama Dan-dhawrihiisa.

4. Maxkamaddu, marka ay ka baaran-degto codsiga loo soo gudbiyay, waxay go'aamin kartaa in Diiwaanka lagu sameeyo sixid ama mid cusub uu sameeyo Diiwaan-hayaha.

5. Diiwaan-hayuhu wuxuu la wadaagayaa sixitaanka ama bedelaadda la sameeyay iyo amarka maxkamadda ee lagu saleeyay dhammaan hay'adaha horay u haystay nuqulka Diiwaanka ee lagu sameeyay sixitaan ama beddelaad.

6. Marka la saxo ama la beddelo Diiwaanka, Diiwaan-hayuhu wuxuu siinayaa Diiwaan-gashanaha shahaado cusub.



13

Qodobka 22aad
Reebbid

1. Si waafaqsan Sharcigan, dhammaan hay'adaha dawladeed ee heer federaal, heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee aan Sharcigaan loogu xilsaarin ururinta, diiwaan-gelinta iyo kaydinta xogaha la xiriira xaaladaha madaniga, waxaa ka reebban in ay sameeyaan ururin, diiwaan-gelin ama kaydin kasta oo khusaysa xaaladaha madaniga ah.

2. Sugnaanshiyaha dhacdo muhiim ah iyo diiwaanka qoyska waxaa lagu caddayn karaa oo keliya shahaado lagu bixiyay si waafaqsan Sharcigaan.

CUTUBKA AFARAAD
DIIWAAN-GELINTA XAALADAHA MADANIGA AH IYO QOYSKA

Qodobka 23aad
Diiwaan-gelinta Dhalashada

1. Diiwaan-gelinta ubad kasta oo ku dhasha JFS waa mid waajib ah oo lacag la'aan ah.

2. Ubad kasta waxaa dhalashadiisa laga diiwaan-gelinayaa degmada ama goobta ugu dhow ee xarunta dad-dhigista ay ku taallo.

3. Diiwaan-hayaha waxaa waajib ku ah inuu siiyo waalidka ama dan-dhawraha ubadka shahaado dhalasho marka laga codsado.

Qodobka 24aad
Waajibka Wargelinta Dhalashada Ubadka

1. Dhalashada ubadka waa in lagu wargeliyaa Diiwaan-hayaha sida ugu dhaqsiyaha badan si loo diiwaangeliyo

2. Waajibka wargelinta Diiwaan-hayaha iyo sugidda dhacdada dhalashada waxay saaran yihiin:
   a) Waalidka ilmaha;
   b) Maamulka xarunta caafimaad ee ubadku ku dhashay;
   c) Umuliso diiwaan-gashan;



d) Hawl-wadeennada caafimaad ee fuliya hawlaha talaalka ubadka haddii ay xaqiijiyaan in dhalashada ubadka aanan la diiwaan-gelinin; ama
e) Cid kasta oo kale haddii uusan ubadku ku dhalanin xarun caafimaad si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajib wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-hayaha dhacdada dhalashada waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

Qodobka 25aad
Xogta Dhalashada ee La Diiwaan-gelinayo

1. Qof kasta oo ku dhashay dhulka JFS, oo diiwaan-hayuhu diiwaanka dhalashada uu geliyay waa in ugu yaraan laga diiwaan-geliyaa xogaha hoose:
   a) Ubadka magaciisa, nooca jinsigiisa ee lab ama dheddig, goobta iyo taariikhda dhalashadiisa;
   b) Magacyada (nationality); waalidkiisa oo dhammaystiran iyo dhalashadooda
   c) Cinwaanka deegaanka ee Waalidka;
   d) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay; iyo
   e) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaan-gelinta dhalashada kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

2. Diiwaan-hayaha waxaa ka reebban inuu xog-bixiyaha waydiiyo ama diiwaan-geliyo xog aan lagu sheeggin Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaalkiisa ama hab-raacyadiisa.

3. Diiwaan-hayuhu waa in uu siiyaa waalidka ama dan-dhawraha shahaadada dhalashada ilmaha muddo toban (10) maalin shaqo gudahood marka laga codsado.

4. Shahaadada dhalashada laguma qori karo arrimo muujinaya hayb-sooc ama takoor.

5. Haddii waalidnimada ubadka muran ku jiro; Diiwaan-hayaha waxaa ka reebban inuu diiwaan-geliyo dhalashada ubadka illaa uu helo xukun maxkamadeed oo kama dambaysa ah oo lagu suggay waalidka ubadka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

15

Qodobka 26aad
Waqtiga Diiwaan-gelinta Dhalashada

1. Dhalashada ubadka waa in lagu diiwaan-geliyo muddo sanad gudihiisa oo ka bilaabata taariikhda dhalashada ubadka.

2. Muddada diiwaan-gelinta dhalashada ubadka ee uu muran ku jiro waalidkiisa, waxay ka billaabmaysaa taariikhda uu soo baxo xukunka kama dambaysta ah ee maxkamadda kaasi oo lagu caddeeyay waalidkiisa dhalay ubadka.

3. Ubadka leh hooyo keliya kaasi ee aan la garanayn ama aan la caddayn aabbihiis waxaa loo diiwaan-gelinayaa magaca dhammaystiran oo ay hooyadii siiso.

Qodobka 27aad
Diiwaan-gelinta Daahda ee Dhalashada Ubadka

1. Ubadka dhalashadiisa ay ka soo wareegatay muddo ka badan sanad isagoo oo aanan la diiwangelin, waxaa loo qaadanayaa in diiwaan-gelinta dhalashadiisu daahday.

2. Diiwaan-gelinta dhalashada ubadka ee daahday waa in la diiwaangeliyaa marka uu xog-bixiyuhu ama wargeliyuhu siiyo Diiwaan-hayaha xogo ku filan iyo caddaymo ku saabsan dhalashadiisa si waafaqsan Sharcigan.

3. Diiwaan-hayuhu waa inuu siiyaa waalidka ama Mas'uulka Sharciga shahaadada dhalashada ilmaha muddo toban (10) maalin shaqo gudahood marka laga codsado.

Qodobka 28aad
Diiwaan-gelinta Ilmo La Helo

1. Qofka ama hay'adda hesha ilmo waa in ay ku wargelisaa kuna wareejisaa ilmaha la helay, dharkiisa iyo allaab kasta oo lala helay hay'adda dawladeed ay khuseyso ama saldhigga booliska ee ugu dhow ugu badnaan 24 saac gudahood oo ka billaabanaysa marka la helay.

2. Maamulka hay'adda dowladeed ama taliska saldhigga booliska waa inuu ka qoraa qofka ilmaha helay caddayn dhammaystiran kana saxiixaa kadibna u gudbiyaa warbixintaasi, cidda heshay ilmaha iyo ilmaha qudhooda maxkamadda awoodda u leh.



3. Maxkamaddu waa in ay qaado tallaab kasta oo maangal ah oo lagu aqoonsan karo ubadka la helay laguna ogaan karo waalidka iyo da'da ilmaha le helay.

4. Maxkamaddu markay dhagaysto arrinka ilmaha ku saabsan kuna qanacdo in ilmaha la helay uusan lahayn waalid ama cid mas'uul sharci ka ah waxay soo saaraysaa amar maxkamad oo lagu caddaynayo arrimaha soo socda:
   a) Magaca ay maxkamadu siiso ilmaha la helay;
   b) Labnimadiisa ama dhedignimadiisa;
   c) Inta lagu qiyaasay da'diisa;
   d) Goobta iyo taariikhda la helay;
   e) Goobta iyo taariikhda la diiwaangeliyay; iyo
   f) Cidda heshay

5. Maxkamaddu waxay amarkeeda u gudbinaysaa Diiwaan-hayaha ay khusayso si uu u diiwaan-geliyo isagoo raacaya shaxda loo diyaariyay diiwaan-gelinta ilmaha la helay ee Wasiirku ku soo saaro xeer-nidaamiye.

Qodobka 29aad
Diiwaan-gelinta Ilmo-korsashada

1. Ilmo kasta oo lagu korsado si waafaqsan sharciga JFS, waa in la diiwaan-galiyo.

2. Maxkamada awoodda u lihi waa in ay u gudbisaa Diiwaan-hayaha nuqulka go'aanka ansixinta korsashada ubad muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood ah marka ay ansixiso ilmo-korsashada

3. Diiwaan-hayaha waa inuu diiwaangeliyaa ugu yaraan xogaha soo socda si loo diiwaangeliyo dhacdada ilmo-korsashada:
   a) Ubadka magaciisa, nooca jinsigiisa ee lab ama dheddig, goobta iyo taariikhda dhalashadiisa;
   b) Magacyada cidda korsanaysa ilmaha oo dhammaystiran;
   c) Cinwaanka deegaanka ee korsadaha/korsadayaasha;
   d) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay; iyo
   e) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaan-gelinta ilmo-korsashada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 30aad
Diiwaan-gelinta Guurka

1. Guurka ka dhaca gudaha dalka JFS si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo shuruucda dhaqan-galka ah waa in la diiwaan-geliyaa muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood

2. Waajibka wargelinta Diiwaan-hayaha ee ku saabsan dhicidda guurka waxay saaran tahay cidda fulisay si waafaqsan shuruucda dalka.


3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajibka wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-hayaha dhacdada guurka waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

4. Xogaha soo socda ayaa lagu diiwaan-gelinayaa diiwaanka guurka:
   a) Magacyada lamaanaha is guursaday;
   b) Goobta iyo taariikhda dhalashada lamaanaha;
   c) Wadanka ay u dhasheen lamaanuhu
   d) Goobta iyo taariikhda guurku dhacay;
   e) Goobta iyo taariikhda la diiwaangeliyay;
   f) Magacyada waalidiinta lammaanaha is guursanaya;
   g) Meesha ay deggan yihiin lamaanaha is guursanaya;
   h) Qofka isku mehriyay lammaanaha;
   i) Magacyada iyo degaannada markhaatiyada; iyo
   j) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaan guurka kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

5. Diiwaan-hayaha waa inuu 10 maalin shaqo gudahood ku siiyaa lamaanaha mid walba shahaadada guurka kadib bixinta khidmada ama lacagta loo qoondeeyay.

Qodobka 31aad
Diiwaan-gelinta Furriinka

1. Furiinka oo ku yimaada rabitaanka lamaanaha is qaba ama amar garsoor oo lagu dhammaynayo guur si sharci ku xirmay ama shuruudaha guurka aan dhammaystirnayn waa in lagu wargeliyaa Diiwaan-hayaha muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood si loogu qoro diiwaanka furiinka.



2. Wargelinta Diiwaan-hayaha waxay waajib ku tahay lammaanaha is furay ama garsooraha soo saaray amarka lagu dhammaynayo guurka.

3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajibka wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-haya dhacdada furriinka waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

4. Diiwaan-hayuhu waa inuu ku qoraa diiwaanka furriinka xogaha soo socda:
   a) Cinwaanka deegaanka ee lamaanaha is furay;
   b) Wadanka ay u dhasheen lamaanaha is furay;
   c) Taariikhda iyo goobta uu furiinku ka dhacay;
   d) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay;
   e) Tixraaca amarka maxkamadeed ee lagu go'aamiyay furiinka; iyo
   f) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaanka furiinka kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

5. Diiwaan-hayaha waa in uu 10 (toban) maalin shaqo gudahooda ku siiyaa lamaanaha mid walba shahaadada furriinka ka dib bixinta khidmada ama lacagta loo qoondeeyay.

Qodobka 32aad

Diiwaan-gelinta Degenaanshaha Qoyska iyo Qofka

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose wuxuu diiwaan-gelinayaa qoys iyo qof kasta ee deggan degmada.

2. Diiwaanka qoyska ee deggan degmada waxaa lagu muujinayaa xogaha hoose ee soo socda:
   a) Magaca dhamaystiran ee aabbaha qoyska oo ah madax qoyska;
   b) Magaca dhamaystiran ee hooyada qoyska;
   c) Magacyada caruurta ay dhaleen aabbaha iyo hooyada; iyo
   d) Magacyada dhamaystiran ee qof kasta oo kale oo la deggan kana tirsan qoyska.

3. Mas'uulka qoyska wuxuu noqon karaa hal qof oo keligiis meel deggan, hooyo carmal ah ama aabbe aan xaas lahayn oo caruur haysta.

4. Haddii madaxa qoysku leeyahay in ka badan hal xaas; qoys kasta waxaa loo diiwaan-gelinayaa si gaar ah haddii aysan ku wada noolayn hal guri.



5. Qof kasta ee mas'uul ka ah qoys waa in uu ku wargaliyaa Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose 10 (toban) cisho gudahood isbeddel kasta oo ku dhaca xogaha ka diiwaan-gashan qoyskiisa sida xaaladaha dhalashada, guurka, furiinka, baabi'inta and fasakhida guurka, dhimashada, u guuridda degmo kale, miyi ama dalka dibeddiisa.

6. Qof ama qoys kasta ee u guuraya deegaan kale oo ka tirsan isla degmada laga diiwaan-geliyay ama degmo ka duwan tii uu deganaa wuxuu ogeysiinayaa Diiwaan-hayaha dowladda hoose.

7. Diiwaan-hayaha dawladda hoose, marka uu helo ogeysiinta ku xusan faqradda kore, waa in uu cusboonaysiiyaa cinwaanka qoyska iyo qofka haddii uu qofku u guuray haddii ay tahay isla degmada. Haddii uu qoysku iyo qofku u guuray deegaan ka tirsan degmo kale; Diiwaan-hayaha dawladda hoose wuxuu nuqul xogtiisa ah u wareejinayaa Diiwaan-hayaha dawladda hoose ee uu qofku ama qoysku u guuray.

8. Diiwaan-hayaha dawladda hoose waa inuu siiyaa caddeyn degenaanshaha degmada, qof kasta oo lagu diiwaan-geliyay si waafaqsan Sharcigan iyo xeer- nidaamiyeyaashiisa.


9. Xogaha laga diiwaan-gelinayo qoyska iyo qofka waxaa lagu faahfaahinayaa xeer- nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qodobka 33aad
Buugga Qoyska

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose wuxuu qoys walba u samaynayaa diiwaan ama buug gaar u ah waalidka iyo ubadkiisa.

2. Buugga qoysku waxaa lagu kaydinayaa xogta waalidka iyo ubadkiisa, waxaana nuqul laga siinayaa marka waalidku codsadaan.

3. Maamulka, xannaanaynta iyo dhowridda buugga qoyska waxaa u xilsaaran Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose.



Qodobka 34aad
Diiwaan-gelinta Dhimashada

1. Dhimasha kasta oo ka dhex dhacda Dalka gudihiisa ama dibaddiisa khusaysana muwaadin Soomaaliyeed waa in la diiwaangeliyaa.

2. Waajibka wargelinta Diiwaan-hayaha iyo sugidda dhacdada dhimashada waxay saaran yihiin:
   a) Maamulka xarumaha caafimaad ee qofku ku dhintay;
   b) Maamulka qabuuraha lagu aasay; ama
   c) Cid kasta oo kale ee og dhimashada sida lagu faahfaahiyo xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka.

3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajib wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-hayaha dhacdada dhimashada waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

4. Duugista qofka dhintay waa in loo haystaa fasax xabaal kaasi oo lagu bixinayo si waafaqsan xeer-nidaamiye lagu fulinayo Sharcigan.

5. Diiwaan-gelinta dhimashada xubnaha ciidamada qalabka sida ee ku geeriyooda iyagoo shaqo ku jira ama xaalad dagaal waxaa u xilsaaran Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ama cidda uu igmado si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

6. Diiwaanhayaha Guud wuxuu u magacaabi karaa diiwaanhaye gaar ah oo u xilsaarnaanaya diiwaan-gelinta geeri wadareed ay sababtay musiibo si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qodobka 35aad
Xogta Diiwaanka Dhimashada

1. Xogaha soo socda waxaa lagu qorayaa Diiwaanka Dhimashada:
   a) Magaca qofka dhintay oo dhammaystiran iyo da'diisa;
   b) Labnimada ama dhedignimada qofka dhintay;
   c) Shaqadiisa;
   d) Cinwaanka deegaankiisa;
   e) Goobta iyo taariikhda dhimashada;
   f) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay;
   g) Tixraaca caddaynta sababta dhimashada; iyo



h) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaanka dhimashada kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

Qodobka 36aad
Diiwaan-gelinta Geerida Aan La Hubin

1. Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aaminaysaa jiritaanka geerida aan la hubin si waafaqsan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxayna u gudbinaysaa Diiwaan-hayaha ay awood ahaan khuseyso si uu u diiwaan-geliyo.

2. Qofka loo diiwaan-geliyay geeri aan la hubin waxaa diiwaanka looga saarayaa oo kaliya amar garsoor oo ka soo baxay maxkamad awood u leh kaasi oo baabi'inaya go'aankii lagu gaaray jiritaanka geerida aan la hubin.

Qodobka 37aad
Diiwaan-gelinta Dhicisyada

1. Dhakhaatiirta caafimaadka ayaa bixisa shahaadada dhimashada dhiciska, waana in diiwaan-hayuhu diiwaangeliyo

2. Diiwaan-gelinta xogaha dhimashada dhiciska waxaa intii ka khuseysa loo raacayaa si waafaqsan Qodobka 34aad ee Sharcigan.

3. Diiwaanhayuhu waa in uu ku keydiyaa diiwaan u gaar ah xogta dhimashada dhicisyada la diiwaan-geliyo.

CUTUBKA SHANAAD
MAARAYNTA DIIWAANNADA DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA

Qodobka 38aad
Mabaadi' Guud

1. Diiwaannada waa in ay ku jiraan dhammaan xogaha dad-dhigista ee Sharcigani faray in la diiwaan-geliyo.

2. Dhacdo kasta ee muhiim ah waa in aan la diiwaan-gelin wax ka badan hal mar.

3. Dhacdo kasta ee muhiim ah ee la diiwaan-gelinayo waa in ay yeelataa diiwaan u gaar ah.



4. Diiwaanka qoyska wuxuu noqonayaa mid gaar ah.

5. Diiwaan-haye kasta ee ka mas'uul ah dad-dhigis waa in uu ilaaliyaa xogta diiwaanka ku jirta, waxaana ka reebban inuu siiyo ama la wadaago cid uusan sharcigu u oggolayn.

Qodobka 39aad
Wareejin Nuqullada Diiwaannada

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose ee diiwaan-geliya dhacdo muhiim ah iyo qoyska waa in uu nuqul diiwaannadaasi iyo caddaymaha la xiriira u gudbiyaa Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood marka uu diiwaan-geliyo.


2. Agaasinku marka uu helo nuqullada diiwaannada ee faqradaha hore ku xusan, waa inuu u habeyaa xogaha, abla-ablayaa, oo uu keydiyaa nuqullada diiwaannada kama dambaysta ah.

Qodobka 40aad
Warbixinta iyo Tirakoobyada Xaaladaha Madaniga ah

1. Diiwaan-hayaha Guud wuxuu dhisayaa guddi farsamo oo ka kooban:
   a) Saddax xubnood oo ka imaanaya Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah; iyo
   b) min hal xubin oo ka kala socda xafiisyada diiwaan-hayayaasha dawlad-goboleedyada, Maamulka Gobolka Banaadir, Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo Wasaaradaha Caafimaadka ee labada heer.

2. Guddiga farsamo wuxuu diyaarinayaa warbixinta tirakoobka xaaladaha madaniga ah si waafaqsan shuruucda dalka iyo halbeegyada caalamiga ah, una gudbinayaa Diiwaan-hayaha Guud.

3. Diiwaan-hayaha Guud ayaa u xilsaaran u gudbinta nuqul rasmi ah ee warbixinta tirakoobka xaaladaha madaniga ah Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo Guddiga.



Qodobka 41aad
Habka Dad-Dhigista ee Dalka Dibaddiisa


1. Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku nool dalka dibaddiisa waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan adeeg dad-dhigis iyadoo loo diiwaan-gelinayo xaaladaha madaniga ah ee la soo gudboonaada.

2. Safaaradaha ama meesha aysan safaarad jirin, qunsuliyada Soomaaliya ee ku taala dalka uu joogo qofka muwaaddinka ah ee doonaya diiwaan-gelinta, ayaa ka mas'uul ah dad-dhigista.

3. Haddii meesha uu muwaaddinka Soomaaliyeed joogo aysan ka jirin safaarad Soomaaliyeed ama qunsuliyad, waxaa adeegga dad-dhigista bixinaya safaaradda ama qunsuliyadda ugu dhow degaanka muwaaddinka, ama safaaradda ama qunsuliyadda loo xilsaaro degaanka muwaaddinkaas.

4. Safaaradda ama qunsuliyadda u xilsaaran dad-dhigista ee ku xusan faqradaha (2), iyo (3) ee qodobkan, waxa ay:
   a) Qabanayaan dhammaan codsiyada iyo cadeymaha la xiriira diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah ee muwaaddinka;
   b) Hubinayaan saxnaanshaha caddeymaha ay keenaan muwaaddiniinta codsanaya diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah kadibna waxa ay siinayaan xaqiijin sugnaantooda;
   c) Codsadaha ka buuxinayaan foomka xogta dhacdada la diiwaan-gelinayo kadibna waxa ay hubinayaan dhamaystirnaanta xogta la diiwaan-geliyay iyo saxnaashaheeda kadibna saxiixayaan oo shaabadaynayaan foomka;
   d) Muddo aan ka badnayn 21 (labaatan iyo kow cisho) gudahood marka ay qabtaan wargelinnada soo gaarsiinayaan Agaasinka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah, foomka ku xusan xarafka (c) iyo dhammaan caddaymaha lagama maarmaanka ah si waafaqsan sharciyada khuseeya dad-dhigista ee dalka muwaaddinku deggan yahay.

5. Agaasinku, marka uu soo gaaro foomka iyo caddaymaha ku xusan faqradda hore, wuxuu diiwaan-gelinayaa dhacdada una soo saarayaa muwaaddinka ay khusayso warqadaha iyo shahaadooyinka haddii uu sidaasi codsado muwaaddinku.



24

Qodobka 42aad
Ilaalinta Xogta

1. Dhammaan xogaha lagu diiwaan-geliyay si waafaqsan Sharcigan waa inay dhawrsan yihiin.

2. Waxaa reebban in la ururiyo, diiwaan-geliyo ama la kaydiyo xog aan lagu sheeggin Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa.

3. Waxaa reebban in xogta la diiwaan-geliyay loo adeegsado ujeedo ka duwan midda uu tilmaamayo Sharcigani ama sharci kale ee dhaqan-gal ka ah Dalka;

4. Xogaha Diiwaan-gashan waa in la ilaaliyaa lana sugaa amnigooda si aysan u lumin, burburin, ugu gacan gelin cid aan xaq u lahayn ama aan fasax u haysan, ama loo adeegsado si aan waafaqsanayn Sharciga.

CUTUBKA LIXAAD
QODOBO GUNAANAD AH

Qodobka 43aad
Diiwaan-gelinta Xaaladaha Ka Horreeyay Dhaqan-galka Sharcigan

1. Dhammaan xaaladaha khuseeya dad-dhigista ee dhacay ka hor dhaqangalka Sharcigan waa in la diiwaan-geliyaa si waafaqsan Sharcigaan, waana in lagu dhamaystiraa muddo aan ka badnayn toban (10) sano gudahood oo ka billaabmaysa marka Sharcigani dhaqangalo.

2. Diiwaan-gelinta faqradda hore ku xusan ee dadka deggan dalka dibaddiisa waxaa loo fulinayaa si waafaqsan habraaca diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah ee muwaadiniinta ku nool dalka dibaddiisa ee ku xusan Qodobka 41aad ee Sharcigaan.

3. Wasiirka wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye si gaar ah u nidaaminaya fulinta diiwaan-gelinta ku sheeggan qodobkaan.

Qodobka 44aad
Wadashaqaynta Hay'adaha Shaqada Ku Leh Diiwaan-gelinta

1. Wasaaradda waxay xiriir wada-shaqeyn iyo iskaashi la yeelanaysaa wasaaraddaha iyo hey'adaha heer federaal ee qeybta ka ah fulinta dad-dhigista.



2. Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dawlad-goboleedyada waxay xiriir wada-shaqayn iyo iskaashi la yeelanayaan wasaaraddaha iyo hey'adaha ee heer dawlad-goboleed ah kuwaas oo qeyb ka ah fulinta dad-dhigista.

Qodobka 45aad
Lumid, Baabi'id iyo Kharribmid Diiwaanka Dad-dhigista

1. Diiwaan-haye kasta ee Dawladaha Hoose waa in uu diyaariyaa nuqul daabacan ee ah Diiwaanka uu u gudbiyay Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah.

2. Haddii diiwaanka dad-dhigistu uu lumo, tirtirmo, hallaabo (kharaabo) ama dhaawac gaaray sababo in si cad xogtiisa loo arki waayo, waa in diiwaan-hayaha mas'uulka ka ah uu sameeyaa diiwaan kale ah oo uu ku rogayo macluumaadkii ku jiray kii hore isagoo ka tixraacaya wixii diiwaankii hore ka haray iyo xogta foomamka uu hayo.

3. Diiwaanhayuhu waa in uu ku wargeliyaa Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah iyo Diiwaan-hayaha dawlad-goboleedka ee uu hoos yimaado si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 46aad
Dambiyada iyo Ciqaabaha

1. Wargeliye kasta oo aanan wargelin jiritaanka dhacdo muhiim ah hay'adaha u xilsaaran diiwaan-gelintooda si waafaqsan Sharcigan wuxuu galayaa dambi ciqaabtiisu tahay ganaax lacageed aan ka badnayn USD $100 (boqol) doolarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

2. Xog-bixiye kasta oo been ka sheegga ama qariya xog la xiriirta dhacdo muhiim ah ama diiwaanka qoyska si loo diiwaan-geliyo wuxuu galayaa dambi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhaxeeya 3 (saddax) billood illaa 2 (labo) sano.

3. Qof kasta oo:
   a) been abuura shahaado ku saabsan xaaladda madaniga ah;
   b) adeegsada shahaado been abuur ah kuna saabsan xaaladda madaniga ah;
   c) wax ka beddela ama tirtira si loo been abuuro xogaha lagu diiwaangeliyay diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo qoyska; ama



d) qariba, qariya ama burburiya xogaha iyo diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo qoyska; waxaa uu gelayaa dambi laguna ciqaabayaa si waafaqsan Buugga 2aad, Qeybtiisa 7aad, Cutubkiisa 3aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

4. Cidkasta oo bixisa diiwaannada dad-dhigista iyo xaaladaha madaniga si aan waafaqsaneyn sharciyada dhaqan-galka ku ah waxaa galayaa dambi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhaxeeya 10 (toban) illaa 15 (shan iyo toban) sano.

5. Qof kasta oo gacanta ku dhiga ama u hela xogaha iyo diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska si aan waafaqsanayn shuruucda khusaysa wuxuu galayaa dambi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhaxeeya 10 illaa 15 sano.

Qodobka 47aad
Go'aannada Maamul

1. Go'aannada maamul oo ay soo saarayaan hay'adaha u xilsaaran fulinta diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah iyo qoyska waa in ay ahaadaan kuwo qoraal ah lana siiyaa cidda uu khuseeyo go'aankaasi muddo toban (10) maalin shaqo gudahood marka la gaaro.

2. Go'aannada maamul waa in ahaadaan kuwo sababaysan kuna salaysan Sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo shuruucda kale ee khuseeya diiwaan- gelinta xaaladaha madaniga ah iyo qoyska.

3. Cabashada ku aaddan go'aannada maamul ee ku saabsan diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah iyo qoyska ee uu gaaro Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose waxaa cabasho looga qaadanayaa maxkamadda awoodda u leh ee heer dawlad-goboleed muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood marka la gaarsiiyo cidda uu khuseeyo.

4. Go'aannada maamul ee Diiwaan-hayaha Guud waxaa cabasho looga qaadan karaa maxkamadda awoodda ee u leh ee heer federaal muddo 30 maalin shaqo gudahood oo ka billaabmaysa marka go'aanka maamul la gaarsiiyo cidda uu khuseeyo.

Qodobka 48aad
Xeer-nidaamiyeyaasha Sharcigan

Wasiirku waxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal iyo hab-raacyo lagu fulinayo qodobbada Sharcigan marka uu la tashado Guddiga.



27

Qodobka 49aad
Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey sharci ama xeer kasta ee khuseeya dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah oo ka hor imaanaya Sharcigan.

Qodobka 50aad
Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.



SHARCI LR.47 **TAARIIKH: 15-TA JANAAYO 2026**

SHARCIGA KAALMA-SHARCIYEEDKA FEDERAALKA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0812/B11/25**, ku taariikheysan **11/01/2026**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Hindise-Sharciyeedka Kaalma-Sharciyeedka Federaalka.
MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Kaalma-Sharciyeedka Federaalka.


Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
04 FEB 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F. S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-011-2026
TAARIIKH : 05-02-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE EE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE-SHARCIYEEDKA
"KAALMA-SHARCIYEEDKA FEDERAALKA"

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, 2023

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad
Magaca Xeerka

1. Xeerkan waxa lagu magacaabaa "Xeerka kaalmo-Sharciyeedka Soomaaliya".

Qodobka 2aad
Qeexid

Iyadoo la tixgelinayo ujeeddada Xeerkan, erayada soo socda wuxuu mid walba leeyahay macnaha ku hor qoran:

1. **"Idman"** waxaa loola jeedaa qof ama hay'ad kasta oo ay u oggolaadeen Guddiyada Kaalma-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawlad- goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka inuu bixiyo Kaalma-sharciyeed;

2. **"Talo-bixin"** waxaa loola jeedaa talo-bixin kaalma sharci oo af ama qoraal ah oo uu bixiyo sharciyaqaan, si waafaqsan shuruucda Dalka;

3. "**Qareen**" waxaa loola jeedaa qof kasta oo leh rukhsad Qareen sida ku cad Sharciga Qareennada Soomaaliyeed;

4. **"Gargaar"** waxaa loola jeedaa gargaar loo qabanayo qof kasta oo u baahan gargaar la xiriira dacwooyinka, iyadoo loo qabanayo hab ka-wakiil-ahaansho si waafaqsan sharuucda Dalka;

5. **"Kaaliye Qareen"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo caawiya ama ka hoos shaqeeya Qareen, kaasoo aan haysan Rukhsad Qareen;

6. "**Guddi**" waxaa loola jeedaa Guddiga Kaalmo-sharciyeedka Federaalka, ama Guddiga Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;

7. **"Xafiiska Kaalma-sharciyeedka Gobolka Banaadir**" waxa loola jeedaa Xafiiska Kaalma-Sharciyeedka Gobolka Banaadir ee uu Asaasay Guddiga Kaalmo-Sharciyeedka Federaalka;

8. "**Dastuur**" waxaa loola jeedaa Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS ama Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;



1

9. "**Heshiis Iskaashi**" waxaa loola jeedaa heshiis dhexmara Guddiga iyo bixiye idman ee kaalma-sharciyeed oo dejinaya xuquuqda iyo waajibaadka Guddiga iyo bixiyaha kaalma-sharciyeedkaas;

10. "**Guddiga Federaalka ee Kaalmo-sharciyeedka**" waxaa loola jeedaa Guddiga lagu dhisay si waafaqsan Xeerkan si uu u go'aamiyo qaab-hawleedka kaalma-sharciyeedka Qaran, si looga hirgeliyo Guddiyada Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka iyo xafiisyadooda kaalma-sharciyeedka;

11. "**Guddiga Kaalma-sharciyeedka Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka"** waxaa loola jeedaa Guddi lagu dhisay si waafaqsan shuruucda Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;

12. "**Rug sharci**" waxaa loola jeedaa Rug sharci ee jaamacadeed oo hoos-timaada kormeer qareen u qalma oo shaqaaleysiiya ardayda sharciga iyo kaaliyeyaal qareen;

13. "**Kaalma-sharciyeed**" waxaa loola jeedaa kaalma-sharciyeedka asaasiga ah iyo kan heerka labaad ee la siiyo muwaadiniinta iyo degganeyaasha rasmiga ah ee aan dhaqaale ahaan awoodin in ay iska bixiyaan xushmada qareenka;

14. "**Tilmaan Kaalma-sharciyeed**" waxaa loola jeedaa tilmaan loo cuskaday si waafaqsan Qodobka 39^{aad} ee Xeerkan oo qeexaya in hab-raacyada maamul ee lagu hirgelinayo mashruuca kaalma-sharciyeedka ee federaalka, heerarka Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka;

15. "**Bixiye Kaalma-sharciyeed**" waxaa loola jeedaa qof ama cid kasta ee uu idmaday Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir ama Dawlad-goboleed kasta oo Xubin ka ah Federaalka si uu u bixiyo kaalma-sharciyeedka asaasiga ah iyo kan heerka labaad;

16. "**Kaaliye sharci**" waxaa loola jeedaa qof aan ahayn qareen ama kaaliye qareen oo ay qoratay Dawladda ama hay'ad aan-dawli ahayn si uu u bixiyo kaalma-sharciyeed asaasi ah oo ku sugnaanaya kormeerka qareen;

17. "**Wasiir**" waxaa loola jeedaa Wasiirka Cadaaladda ee Xukuumadda JFS ama Wasiiradda Cadaaladda Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka (DXF);

18. "**Wasaarad**" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Xukuumadda **JFS** ama Wasaaradaha Cadaaladda Dawlad- goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka (DXF);

19. "**Kaalmeeye sharci**" waxaa loola jeedaa qof uu qortay Guddiga, waax dawladda ka tirsan ama bulshada rayidka kaas oo dhammeystay tababar waxbarasho oo uu ansixiyey Guddiga, ama tababar waxbarasho ee uu fuliyey urur aan-dawli ahayn oo uu idmaday Guddigu, iyo bixiye kaalma-sharciyeed asaasi ah si waafaqsan kormeerka qareen idman, balse aan haysan rukhsad qareennimo;

20. **"Sabool"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo aan dhaqaale ahaan awoodi karin in uu iska bixiyo kharashaadka dacwadda ee looga baahan yahay;

21. **"Ka-wakiil-ahaansho"** waxaa loola jeedaa Ka-wakiil-ahaansho ku aaddan ujeedooyinka dacwada;

22. **"Kaalma-sharciyeedka asaasiga ah" (Primary Legal Aid)** waxaa loola jeedaa u samayn macmiilka wacyigelin, talo sharci iyo u qorid cabasho. Halka uu Kaalma-sharciyeedka heerka labaad (Secondary Legal Aid) waxaa loola jeedaa u qareemid iyo ku matalid macmiil Maxkamadd horteed.

23. **"Heerka koowaad ee kaalma-sharciyeedka"** waxaa loola jeedaa Kaalma-sharciyeedka asaasiga ah waxaana la siinayaa cid kasta, iyadoo aan loo eegeyn dadka Saboolka ah ama aan awoodin in ay iska bixiyaan adeegga qareenka dhaqaalahooda awgiis.

24. **"DXF"** waxaa loola jeedaa Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka; iyo

25. **"JFS"** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad
Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee laga leeyahay Xeerkan waxaa ka mid ah:

1. In kor loo qaado cadaaladda iyo sarreynta sharciga si qof walba u helo kaalmo-shaciyeedka uu u baahan yahay oo ah xaqa ka-wakiil-noqosho sharci, marka uusan qofku lahayn awood dhaqaale, sida dadka saboolka ah iyo kuwa nugul.

2. In la dhiso qaab-hawleed talo-bixin, gargaarid iyo ka-wakiil-noqosho iyadoo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

dhaqaalaha ay bixinayso dawladda heerkeeda kala duwan, isla markaana aragtidu tahay in la caawiyo shakhsiyaadka aan awoodin in ay helaan talo-bixin, gaargaarid ama ka-wakiil-noqosho sharci sabab la xiriirta dhaqaalahooda awgeed.

3. In Kaalma-sharciyeedku yahay qaabka keliya ee lagu xaqiijin karo in ay helaan dadka saboolka ahi fursad Cadaaladeed oo loo siman yahay.

4. In Kaalma-sharciyeedku uu u fududeeyo dadka saboolka ah iyo kuwa nugulba helidda xuquuqda Dastuuriga ah ee ku aaddan in si siman loola dhaqmo sharciga iyo Maxkamadda hortooda.

5. In ay taabba-geliyaan Dawladda Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF) nidaam ka-wakiil-noqosho sharci iyadoo la siinayo cid kasta oo u baahan oo aan dhaqaale ahaan isku-filnayn.

6. Xeerkani wuxuu waafaqsan yahay Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS iyo, Qodobka 15aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed ee 1963 iyo Qoddobka 14aad (2) ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 1962.

CUTUBKA LABAAD
MABAADI'DA GUUD

Qodobka 4aad
Mabaadi'da Guud

1. Kaalma-sharciyeedku waa inuu noqdaa adeeg ay heli karaan dhammaan qeybaha bulshadda iyo cid kasta oo sharcigu u dammaanad-qaaday helitaankeeda si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerkan.

2. Hannaanka iyo Hab-raacyadda bixinta kaalma-sharciyeedka waa inuu waafaqaa xeerarka asaasiga ah ee Qaranka, gaar ahaan Dastuurka Ku-meel-gaarka ah, Xeerarka iyo heshiisyada Caalamiga ah ee Soomaaliya ay qeyb ka tahay.

3. Hawl-galka maamul ee Kaalma-sharciyeedku waa inuu noqdaa mid u madax- bannaan fulinta hawlaha loo idmaday.

4. Kaalma-sharciyeedku wuxuu khuseeyaa dacwadaha madaniga iyo kuwa ciqaabta ee

heerka asaasiga ah iyo heerka labaad.

5. Kaalma-sharciyeedka asaasiga ah sida wacyi-gelin, bixin talo-sharci iyo cabasho u qorid sida ku cad Qoddobka 8aad farqaddiisa (1), waxaa la siinayaa cid kasta iyadoo aan loo eegayn heerka-dhaqaale, halka kaalma-sharciyeedka heerka labaad oo ah u-qareemid iyo ka-wakiil-ahaansho, la siinayo dadka saboolka ah iyo kuwa nuqul, waxaana lagu faah-faahindoonaa Xeer-nidaamiyaha iyo tilmaamaha lagu qeexay Qoddobada 38aad iyo 39aad ee Xeerkan.

6. Tayada Kaalma-sharciyeedku waa inay noqotaa mid xaqiijinaysa in dadka adeegsanaya ay fursad buuxda u helaan difaac caddaaladeed oo la siman tan la siiyo dadka kale ee leh awoodda helitaanka qareennada.

Qodobka 5aad
U-sinnaanta Xaqa Helidda Difaac-qareen

1. Xeerkani wuxuu waafaqsanyahay Dastuurka Jamhuuriyadda Federalka Soomaliya

2. Muwaadin kasta oo Sabool ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu helo difaac qareen oo lacag la'aan ah marka uu u baahdo, si waafaqsan Dastuurka Qoddobka 34aad (4) ee wax ka beddelka Dastuurka JFS, Xeerkan iyo Shuruucda kale ee Federaalka, Gobolka Banaadir iyo DXF.

3. Xaqa helitaanka adeegyada kaalma-sharciyeedka waa in uu ahaadaa xaq loo siman yahay dhammaan, dadka mutaystay si waafaqsan Dastuurka KMG ah ee JFS.

Qodobka 6aad
Takoor-la'aan

1. Kaalma-sharciyeedka ay bixiyaan hay'adaha kaalma-sharciyeedka waa inuu saldhig u noqdaa mabaadi'da iyo maqaasida shareecada Islaamka ee takoor la'aanta.

2. Waa in la helaa tallaabooyin gaar ah oo la ansixiyey (xeer-nidaamiye) si loo hubiyo xuquuqda haweenka, Carruurta, barakaceyaasha gudaha iyo dadka qaba baahiyaha gaarka ah in ay helaan Kaalma-sharciyeed waqtiga ku habboon iyo sida ugu habboon oo aan takoor lahayn.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 7aad
Helidda Kaalma-sharciyeedka Xilli Habboon

1. Qof kasta oo la qabto ama la xiro ama qeyb ka ah tallaabo maamul (administrative action) ama doonaya in uu gudbiyo ama iska difaaco dacwad madani ah wuxuu xaq u leeyahay:
   b) In uu helo kaalma-sharciyeedka asaasiga ah iyo kan heerka labaad ee uu xaqa u leeyahay;
   t) in lagu wargeliyo xuquuqda kaalmo-sharciyeed ee uu xaqa u leeyahay;
   j) in lagu wargeliyo hab-raacyada lagu heli karo kaalma-sharciyeedka si waafaqsan Xeerkan;
   x) in lagu wargeliyo halka ugu dhaw ee kaalma-sharciyeedka laga heli karo;

2. Si waafaqsan ujeeddooyinka faqradda (1) ee qodobkan, dhammaan Guddiyadu waxay xaqiijinayaan in macluumaadka ku saabsan bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka idman ee ugu dhaw laga yeelo mid laga heli karo adeegga guud ee dadweynaha ee saldhig boolis kasta, xarun hayn, dhisme Maxkamad ama Xabsi iyo la xiriiridda dadka u baahan kaalma-sharciyeedka goobahaas.

CUTUBKA SADDEXAAD
ADEEG-BIXIYEYAASHA IYO KA-FAA'IDAYSTEYAASHA KAALMA-SHARCIYEEDKA

Qodobka 8aad
Heerarka Kaalma-sharciyeedka iyo Cidda Bixin Karta

1. Kaalma-sharciyeedka asaasiga ah (primary legal aid) waxaa la siinayaa cid kasta, iyadoo aan loo eegeyn dadka Saboolka ah ama aan awoodin in ay iska bixiyaan adeegga qareenka dhaqaalahooda awgiis, waxaana ka mid ah kaalmooyinka sharci ee la siin karo cid kasta:
   b) bixinta talo sharci ee arrimaha sharciga;
   t) bixinta gargaar sharci ee xallinta khilaafaadka, iyadoo la adeegsanayo qaababka dacwad-qaadista aan tooska ahayn sida wada-xaajood, dhexdhexaadin iyo heshiisiin ay sameeyaan odoyaasha dhaqanka ama sharci-yaqaanada madaxa-bannaan;
   j) u-gudbinta macaamiisha bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka heerka labaad;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

x) gargaarka macaamiisha ee hadal-qoraalka cabashooyinka iyo dokumentiyada kale;

kh) bixinta macluumaadka sharci ee ku saabsan shuruucda khusaysa Soomaaliya, xuquuqda iyo xilalka shakhsiyaadka ee ku aaddan sharciga iyo qaababka kala duwan ee meel-marinta iyo fulinta xuquuqaha si waafaqsan sharciga; iyo

d) qabashada barnaamijyo wacyi-gelin sharci si wax looga baro dadka kaalma-sharciyeedka iyo sharuucda kale ee Dalka.

2. Shakhsiyaadka soo socda ayaa bixin kara kaalma-sharciyeedka asaasiga ah:

b) qareennada idman;

t) kaaliyeyaasha qareennada idman;

j) shakhsiyaadka mudan ee idman oo sugaya in loo oggolaado in ay qareenno noqdaan;

x) shakhsiyaadka kale ee ku habboon mudanna oo ay magacawdo Maxkamaddu si ay wakiil uga noqdaan dadka ku eedaysan dacwadaha fal-dembiyeedyada;

kh) gargaareyaasha sharci ee u shaqeeya bixiyeyaasha idman ee kaalma-sharciyeedka oo gargaara dadka eedaysaneyaasha ah;

d) kaalmeeyeyaasha sharci ee u shaqeeya bixiyeyaasha idman ee kaalma-sharciyeedka ee aan dawliga ahayn;

r) ardayda sharciga ee u shaqeeya Xarumaha sharci ee idman iyo

s) odayaasha dhaqanka ama xeer-beeg.

3. Kaalma-sharciyeedka heerka labaad waxaa la siinayaa shakhsiyaadka mudan kaalma-sharciyeedka si waafaqsan mudnaanshaha iyo heerka dhaqaalaha ee ku xiran tilmaamaha Kaalma-sharcyeedka oo ay ku jiraan:

b) la-talinta macaamiisha;

t) ka-wakiil-noqoshada iyo difaacidda macaamiisha ee dacwadaha fal-dembiyeedka inta lagu guda-jiro maxkamadaynta ka hor, maxkamadaynta dhexdeeda iyo kaddib maxkamadaynta;

j) ka-wakiil-noqoshada macaamiisha dhanka hay'adaha iyo difaaca dacwadaha madaniga ah;

x) ka-wakiil-noqoshada macaamiisha dhanka dacwadaha ee horyaal hay'adaha maamulka dadweynaha;

kh) diyaarinta hadal-qoraalada iyo jawaab-celinada dacwooyinka sharci;

d) gudbinta doodaha sharci ee maxkamadaha hortooda;

r) bixinta ka-wakiil-noqosho sharci ee heer caalami; iyo

s) qabashada dhammaan hawlahaas iyadoo wakiil laga yahay macaamiil waxaa qaban kara:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

7

i. Qareen idman iyo
ii. Kaaliye Qareen idman marka laga reebo ka wakiil noqosho matalaada Maxkamadd horteed.

Qodobka 9aad
Dhinacyada ka reeban Xeerkan

1. Xeerkan laguma dabaqayo qareennada aan idmanayn kaaliyayasha Qareenada aan idmnayn, iyo shakhsiyaadka mudan oo aysan magaacabin Maxkamadd ama kuwa u shaqeeya ururro aan dawli ahayn, oo uu xil ka saaran yahay in ay u gargaaraan dadka baahida u qaba adeeg kaalma-sharciyeed.

Qodobka 10aad
Ururrada Aan-dawliga ahayn (NGO's), Ururrada Bulshadda Rayidka iyo Xarumaha Sharciga

1. Ururrada aan-dawliga ahayn, ururrada bulshadda rayidka ah iyo Xarumaha sharciga oo loo idmaday adeeg-bixiyeyaasha Kaalma-sharciyeedka waa in ay u bixiyaan adeegyada Kaalma-sharciyeedka ee ku xusan Qodobka 8aad ee Xeerkan, si waafaqsan tilmaamaha ku xusan Qodobka 39aad ee Xeerkan, iyo heshiisyada ay ururradaasi la galeen Guddiga ay khusayso.

2. Xeerkani ma saameynayo ururrada aan-dawliga ahayn, ururrada bulshada rayidka ah iyo Xarumaha sharci oo aan shaqadoodu ahayn bixinta adeegyada Kaalma-sharciyeedka ee ku xusan Qodobka 11aad ee Xeerkan.

3. Dhammaan ururrada ama hay'adaha bixiya Kaalma-sharciyeedka waxaa looga baahan yahay in ay iska diiwaan-geliyaan, isla markaasna ka haystaan rukhsad Wasaaradda Cadaaladda ee heerarka ay ka hawl-galaan.

Qodobka 11aad
Adeegsi Kaaliyeyaasha Maxkamadda iyo Saraakiisha Xafiisyada Degmada oo aysan ka jirin Bixiyeyaal Kale ee Kaalma-sharciyeed

Guddiga ay arrintu khuseyso waa in uu:

1. U xilsaaraa meeshii aysan ka jirin bixiyeyaal kaalma-sharciyeed ee degmo, Sarkaal Boolis

8

oo u tababaran Sharciga goobta Maxkamadda Degmadda, si uu u noqdo sarkaal kaalmo-sharciyeed ee gargaara kaalma-sharciyeedka asaasiga ah.

2. U magacaabaa meeshii aysan ka jirin hay'adaha bixiya kaalma-sharciyeedka ama xafiiska degmada ay khusayso kaaliye sharci, ama wuxuu heshiis iskaashi la gelayaa hay'add aan dawli ahayn oo ka diiwaan-gashan degmada si ay ugu shaqaaleysiiso kaaliyeyaal sharci oo bixiya adeega kaalma-sharciyeedka asaasiga ah.

Qodobka 12aad
U-gudbinta Guddiyada Xallinta Khilaafaadka ee Dhaqanka iyo Diinta halka aysan ka jirin bixiyeyaal Kaalma-sharciyeed

1. Dacwooyinka ku habboon, meeshii aysan ka jirin bixiyeyaal kaalma-sharciyeed ama xafiisyo kaalma-sharciyeed kale ee degmo, saraakiisha iyo kaalmeeyeyaasha sharci ee lagu xusay Qodobka 11aad ee xeerkan, waxay macaamiisha u weecin karaan guddiyada xallinta khilaafaadka ee dhaqanka iyo diinta.

2. Marka dacwada loo gudbiyo guddi xallin khilaafaad ee dhaqanka ama diinta wuxuu guddigaasi xaqiijinayaa in khilaafkaas lagu xalliyo si waafaqsan mabaadi'da ku aaddan xuquuqda asaasiga ah ee Shareecada Islaamka & Dastuurka.

Qodobka 13aad
Ka-faa'iideysteyaasha Kaalma-sharciyeedka

1. Qof kasta oo xaq u leh helitaanka kaalma-sharciyeedka, si waafaqsan Qodobbada 5aad iyo 6aad ee Xeerkan, wuxuu yeelanayaa xuquuqaha soo socda:
   b) Xaq-u-lahaanshaha helitaanka kaalma-sharciyeedka si takoorid-la'aan ah;
   t) Xaq-u-lahaanshaha xallinta gal-dacwadeedka si ku habboon adeegyada;
   j) Xaq-u-lahaanshaha helitaanka kaalma-sharciyeed ee dhammaan heerarka dacwooyinka madaniga iyo ciqaabta ah;
   x) Xaqa uu u leeyahay in la caawiyo loolana dhaqmo si xushmad iyo qaddarin leh;
   kh) Xaqa in markasta uu bixiyaha kaalma-sharciyeedku ku wargeliyo halka ay dacwadiisu marayso, garsooridda, gaarsiinta iyo la-talinta ee adeeg-bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka; iyo
   d) Xaqa uu u leeyahay in laga dhaafo kharashka iyo khidmadda Maxkamadda.

Qodobka 14aad
Dadka Codsan kara Kaalma-sharciyeedka

1. Waxaa codsan kara kaalma-sharciyeed si loogu sameeyo adeeggan:
   b) codsadaha;
   t) qof kasta oo uu wakhiishay Codsadaha si qoraal ah; iyo
   j) qof kasta ama urur kasta oo uu u idmaday codsadaha si qoraal ah, inuu wakiil ka noqdo, sababo caafimaad oo la xiriira awood-la'aan xagga jirka ama maskaxda awgood.

CUTUBKA AFARAAD
ASAASKA GUDDIYADA KAALMA-SHARCIYEEDKA

Qodobka 15aad
Asaaska iyo xubnaha Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka

1. Xeerkan waxaa lagu asaasayaa "Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka" oo leh shakhsiyad-qaanuuneed oo u gaar ah.

2. Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa 9 (sagaal) xubnood, iyadoo la tixgalinayo haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba waana sidan soo socota:
   b) Garsoore Maxkamadda Sare oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka JFS;
   t) Xubin ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda ee Xukuumadda JFS oo uu soo magacaabay Wasiirka;
   j) Xubin ka tirsan Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Dawladda oo uu soo magacaabo Garyaqaanka Guud Ee Dawladda.
   x) Xubin ka tirsan Ururka qareennada ee JFS oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Ururka Qareennada JFS;
   kh) Xubin ka tirsan ururrada Aan-dawliga ahayn ee ka hawl-gala Federaalka ee bixiya Kaalmo-Sharciyeedka, oo ay soo magacowdo Dalladda ururradaas mideysa;
   d) Hormuudka Kulliyadda Qaanuunka ee Jaamacadda Ummada Soomaaliyeed (JUS), oo uu soo magacaabayo Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda;
   r) Xubin ka tirsan Ciidamada Asluubta ee Dawladda Federaalka oo uu soo Magacaabayo Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed ee JFS.
   s) Xubin ka socotta Guddiga Xuquuqul Insaanka Soomaaliyeed, oo uu soo magacaabo guddoomiyaha guddigaas.

sh) Sarkaal Sare oo ka tirsan qeybta xuquuqul insaanka ee Taliska Booliiska Soomaaliyeed oo uu soo magacaabo Taliyaha Booliiska Soomaaliyeed.

Qodobka 16aad
Asaaska iyo Xubnaha Guddiyada Kaalma-sharciyeedka Dawlad- goboleed Xubin ka ah Federaalka

1. Gobolka Banaadir iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka waxay si waafaqsan sharcigan ay u asaasayaan guddi kaalma-sharciyeed oo leh shakhsiyad qaanuun oo isaga u gaar ah, si waafaqsan Qodobada khuseeya ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS iyo Dastuurka Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka ee ay khusayso iyo xeerarka u gaarka ah Gobolka Banaadir.

2. Guddi kasta oo Dawlad-goboleed ama Gobolka Banaadir wuxuu ka koobnaanayaa 5 (shan) xubnood iyadoo la tixgalinayo haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba waana sidan soo socota:
   b) Garsoore ka socda Maxkamadda ugu sareysa Dawlad-goboleed kasta oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee DXF;
   t) Xubin ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda DXF oo uu soo magacaabo Wasiirka iyo qofka haya Xilka u dhigma wasiirka cadaaladda ee Gobolka Banaadir(iyadoo loo eegayo hadba maqaamka ay yeelato caasimada JFS)
   j) Xubin ka tirsan ururrada qareennada ee DXF oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha ururka Qareennada Dawlad-goboleedka iyo Gobolka Banaadir.
   x) Xubin ka tirsan ururrada aan-dawliga ahayn oo bixiya kaalma-sharciyeed, oo ka hawl-gala DXF oo uu soo magacaabo guddoomiyaha dallada ururradaas midaysa
   kh) Xubin ka tirsan Kulliyad Shareecada iyo Qaanuunka oo uu soo magacaabo Hormuudka Kulliyadaha Shareecada iyo Qaanuunka oo leh Xarun Kaalma-sharci.

Qodobka 17aad
Magacaabidda Xubnaha Guddiga

1. Xubnaha Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka waxaa lagu soo magacaabayaa qaab awood-qeybsi ah iyadoo la raacayo sida ku cad Qodobka 15aad ee xeerkan, xubin kasta oo ka mid ah Guddiga waxaa Dikreeto ku soo magacaabayo Madaxa sare ee Hay'adda uu ka socdo.

2. Xubnaha Guddiyada Kaalma-sharciyeedka ee DXF waxaa lagu soo magacaabayaa qaab awood-qeybsi ah sida ku cad Qodobka 16aad ee Xeerkan, iyadoo uu xubin kasta oo kamid ah Guddiga uu Dikreeto ku soo magacaabayo Madaxa sare ee Hay'adda uu ka socdo.

3. Xubnaha Guddiga waxaa lagu soo xulayaa mabaadi'da sinnaanta iyo takoorid-la'aanta taasoo ku saleysan isu-dheelitirnaanta Jinsiga.

4. Magacaabida Guddiga waxa wareegto ku soo saaraya Wasiirka Cadaaladda ee heerka ay khusayo.

Qodobka 18aad
Magacaabidda iyo Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga

1. Guddoomiyaha Guddiga waxaa iska dhex dooranaya xubnaha Guddiga fadhiga ugu horreeya oo uu yeesho Guddigu.

2. Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga waxaa kamid ah:
   b) u-yeeridda iyo qabashada dhammaan kulammada Guddiga;
   t) isagoo ay wehliyaan xubno kale ee Guddiga, kormeeridda habsami-u-socodka hawlaha Guddiga;
   j) isagoo la-tashi la sameynaya xubnaha kale ee Guddiga in uu bixiyo abaal-marinta iyo anshax-marinta hawl-wadeennada Guddiga;
   x) isagoo ay wehliyaan xubno kale ee Guddiga, isku-duwidda xiriirada u dhexeeya Guddiga iyo hay'adaha kale ee ay khusayso; iyo
   kh) isagoo ay wehliyaan xubno kale ee Guddiga, ansixinta iyo meel-marinta go'aannada Guddiga.

Qodobka 19aad
Magacaabidda iyo Awoodaha Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga

1. Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga waxaa iska dhex dooranaya xubnaha Guddiga ee fadhiga ugu horreeya oo uu yeesho Guddiga.
2. Awoodaha Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga waxaa kamid ah:
   b) Buuxinta kaalinta Guddoomiyaha Guddiga marka uu maqan yahay ama uusan gudan karin xilalkiisa sababo meel-mar ah awgood; iyo
   t) Qabashada wixii kale ee xilal ah ee uu u xilsaaro Guddoomiyuhu.



Qodobka 20aad
Magacaabidda iyo Awoodaha Xoghayaha Guddiga

1. Xoghayaha Guddiga waxaa magacaabaya xubnaha Guddiga kaddib faafinta xayeysiinta codsiyada jagada, qaaditaanka wareysiyo iyo xulashada tartamaha ku habboon in loo magacaabo xilkaas;

2. Awoodaha Xoghayaha Guddiga waxaa kamid ah:
   b) wargelinta iyo diyaarinta ajendayaasha kulammada Guddiga;
   t) diyaarinta dokumentiyada lama-huraanka ah ee kulammada Guddiga;
   j) isku-duwidda iyo ururinta warbixinnada loo baahan yahay in la horgeeyo Guddiga;
   x) diyaarinta misaaniyad-sannadeedka kaalma-sharciyeedka, oo ku saleysan soo- jeedinnada daneeyeyaasha, iyo u-gudbintooda Guddiga si uu u meel-marsiiyo;
   kh) xaqiijinta bed-qabka dhammaan dokumentiyada iyo warbixinnada la xiriira hawlaha maamulka ee Guddiga; iyo
   d) iyadoo wada-tashi lala sameynayo Guddiga, inuu magacaabo hawl-wadeennada lama-huraanka u ah in ay gargaaraan Xoghayaha si ay u qabtaan xilalkooda.
   r) qaadidda iyo diyaarinta dhammaan hadal-qoraallada kulammada Guddiga Kaalma-sharciyeedka iyo diiwaan-gelintooda.

3. Xoghayaha Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka wuxuu ku shaqeynayaa Xarunta Kaalma-sharciyeedka Guddiga ee ku taala Caasimadda JFS.

4. Xoghayaha Guddiga Kaalma-sharciyeedka Gobolka Banaadir wuxuu ku shaqeynayaa xafiis ku yaal Xarunta Kaalma-sharciyeedka Gobolka Banaadir, iyadoo Xoghayaha Guddiyada Kaalma-sharciyeedka Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka uu ku shaqeyn doono Xafiiska Kaalma-sharciyeedka ee magaalo-madaxda Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka ee ay khusayso.

Qodobka 21aad
Shuruudaha Xoghayaha Guddiga

1. Shuruudaha looga baahan yahay qofka noqonaya Xoghayaha Guddiga waa:
   b) inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed;
   t) in aysan da'diisu ka yarayn 30 (soddon) sano;
   j) haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay ee shareecada iyo Qaanuunka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

ama midkood;

x) in aysan maxkamadi ku xukumin fal-dembiyeed shantii (5) sano ee ugu dambeysay; iyo kh) inuu yahay qof leh anshax-wanaagsan iyo akhlaaq suuban.

Qodobka 22aad
Guntanka iyo Cod-bixinta Kulammada Guddiga

1. Guddigu wuxuu kulmayaa ugu yaraan 3(saddex) biloodba mar, balse Guddoomiyaha waa u yeeri karaa kulammada aan caadiga ahayn si waafaqsan Faqradda (5) ee isla Qodobkan.

2. Kulammada Guddigu waxay ku guntamayaan marka ay goob-joog yihiin ugu yaraan 50%+1 (boqolkiiba konton oo lagu daray hal) ee tirada guud ee Xubnaha Guddiga.

3. Guddigu wuxuu go'aannada ku gaarayaa aqlabiyad fudud oo ah 50%+1 (boqolkiiba konton lagu daray hal) ee tirada xubnaha uu fadhigu ku guntamay ama jooga kulanka.

4. Haddii codadku isla'ekaadaan xilliga cod-bixinta ee Xubnaha Guddiga, wuxuu Guddoomiyuhu yeelanayaa cod lagu kala baxo oo dheeraad ah;

5. Qabashada kulan aan caadi ahayn waxaa awood u leh Guddoomiyaha ama soo- jeedin ay saxiixaan ugu yaraan 3 (saddex) xubnood ee Guddiga ka mid ah.

6. Dhammaan kulammada waa in si rasmi ah (qoraal ama af) lagu wargeliyaa Xubnaha Guddiga ugu yaraan 24 (afar iyo labaatan) saacadood ka hor taariikhda iyo waqtiga qabashada shirka.

7. Dhammaan go'aannada Guddigu waa in loo diiwaan-geliyaa qoraal ahaan, isla markaana lagu keydiyaa galka hadal-qoraalka rasmiga ah ee Guddiga.

8. Hadal-qoraalka kulammada iyo nuqullada dhammaan go'aannada Guddiga, waa in loo diraa dhammaan xubnaha Guddiga, iyadoo isla markaana nuqullo go'aannadaas iyo dokumentiyadaas ah si rasmi ah loogu keydinayo diiwaanada xusuus-dhawrka xafiiska.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 23aad
Xarumaha Guddiga

1. Xarunta Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka waxay noqonaysaa magaalo-madaxda dalka ee Muqdisho, wuxuuna xarumo ku yeelan karaa Magaalo-madaxyada DXF.

2. Xarunta Guddiga Kaalma-sharciyeedka DXF iyo Gobolka Banaadir waxay noqoneysa Dagmooyinka ay u arkaan in ay ku haboon tahay.

Qodobka 24aad
Shuruudaha Magacaabidda Xubnaha Guddiga

1. Qofka loo xulanayo inuu xubin ka noqdo Guddiga waa:
   b) inuu yahay muwaadin Soomaali ah;
   t) inuu haysto shahaado jaamacadeed ee la aqoonsan yahay oo dhanka sharciga ah ama shahaado maamulka iyo maaraynta ah;
   j) inuu leeyahay ugu yaraan 3 (saddex) sano oo waayo-arragnimo shaqo ah ee hay'adaha Cadaaladda;
   x) in uusan lahayn taariikh fal-dembiyeed oo ay ku xukuntay maxkamad sharci si kama dambeys ah, gudaha ama dibadda dalka, kaasoo ka hor-istaagi kara inuu qabto mas'uuliyaddaas; iyo
   kh) inuu ka dhawrsan yahay anshax-xumo iyo akhlaaq-xumo.

Qodobka 25aad
Mushaarka Xubnaha Guddiga

1. Xubnaha Guddigu waxay mushaar ku leeyihiin hay'adaha ay ka kala yimaadeen laakiin waxaa la siinayaa Gunno fadhi.

Qodobka 26aad
Hawlaha Guddiga

1. Hawlaha Guddigu waxaa ka mid ah:
   b) diyaarinta iyo dib-u-eegista qaab-siyaasadeedka ku aaddan adeegga kaalma-sharciyeedka;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

t) hubinta in habsami loo fuliyey adeegyada kaalma-sharciyeedka;
j) kormeerid iyo qiimeyn lagu sameeyo waxqabadka adeegyada kaalma-sharciyeedka;
x) magacaabidda, tababaridda, dalacsiinta iyo anshax-marinta hawl-wadeennada Xafiiska Kaalma-sharciyeedka, si waafaqsan shuruucda dalka;
kh) aqoonsiga iyo la-gelitaanka heshiisyo iskaashi ee bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka;
d) xaqiijinta in Guddiga iyo Xafiisyada Kaalma-sharciyeedka ay leeyihiin hawl-wadeenno ku filan gudashada xilka iyo hawlaha loo idmaday Guddiga;
r) u-gudbinta warbixin-sanadeedka waxqabadka Guddiga Wasaaradda si loo hor-dhigo Baarlamaanka;
s) talo-siinta Wasaaradda iyo Baarlamaanka oo ku aaddan siyaasadaha iyo qaanuunka lama-huraanka ah ee looga baahan yahay si kor loogu qaado bixinta adeegyada kaalma-sharciyeedka ee la siinayo dadka saboolka ah iyo kuwa nugul ee Soomaaliya;
sh) diyaarinta miisaaniyadda iyo xisaab-xirkeeda si waafaqsan xeerarka xisaabaadka dawladda ee JFS; iyo
dh) ansixinta miisaaniyada iyo xisaab xidhkeeda si waafaqsan xeererka xisaabadka JFS.

Qodobka 27aad
Muddada Xil-haynta Xubnaha Guddiga

1. Muddada Xil-haynta Xubnaha Guddiga waa 5 (shan) sano oo la cusboonaysiin karo 1 (hal) mar oo keliya, laga bilaabo taariikhda magacaabidda xubinimada Guddiga.

2. Haddii xubinta guddiga kamid ka ah ee lasoo magacaabay ay lumiso kamid ahaanshiyaheeda Hay'adda ay ka tirsaneyd markii hore, inta lagu guda jiro mudda xileedka guddigaan si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkaan, Hay'addii soo dirsatey ayaa dib usoo magacaabaysa xubin kale, taasi oo guddiga kamid noqonaysa inta ka dhiman mudda xileedka Guddigan.

Qodobka 28aad
Xilwaayidda Xubnaha Guddiga

1. Xubinta Guddiga waxay shaqada ka joogsanaysaa haddii:
b) muddada xil-haynta ka dhammaato;
t) uu iska casilo xilka;
j) u guda-waayo xilkiisa sabab cafimaada wgeed;
x) ay ku timaado geeri;.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

kh) xil-ka-qaadis lagu sameeyo anshax-xumo baahsan awgeed oo ay ansixiyeen 2/3(saddex meelood laba) tirada guud ee Xubnaha Guddiga;

d) uu isu sharaxo mansan siyaasadeed; iyo

r) haddii uu lumiyo ka mid ahaanshihii Hay'addii soo dirsatay.

Qodobka 29aad
Hab-raaca Xil-ka-qaadista Xubnaha Guddiga

1. Xil ka qaadista xubin Guddiga ka mid ah, waxa loo marayaa hab-raacyadii ay ku yimaadeen "Ciddii soo magacawday ayaa ka qaadi karta".

CUTUBKA SHANAAD
FULINTA KAALMA-SHARCIYEED EE GUDDIGA

Qodobka 30aad
Isku-dubbaridka Xiriirka Hay'adaha Kale

1. Marka laga reebo xilkiisa gaarka ah ee ku xusan Xeerkan, Guddigu isagoo kaashanaya hay'adaha dawliga ah, kuwa aan-dawliga ahayn iyo dadka kale ama hay'adaha ku hawlan horumarinta adeegyada kaalma-sharciyeedka, waa inuu isku-duwo:

   b) horumarinta qorshe lagu fulinayo bixinta kaalmo-sharciyeed ee dhammaan Soomaaliya, oo ay fuliyaan Xafiisyada Kaalma-sharciyeedk, la-hawl-galayaasha iskaashi iyo uruurada aan-dawliga ahayn;

   t) la-tashiga hay'adaha ay khusayso;

Qodobka 31aad
Qaab-dhismeedka Xafiiska Kaalma-sharciyeedka

Qaab-dhismeedka Xafiiska Kaalma-sharciyeedka wuxuu ka kooban yahay:-

1. Xoghayaha Guddiga iyo Howlwadeenada kale ee ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda ee loo asteeyey in ay ka hawlgalaan xafiiska.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

17

Qodobka 32aad
Mas'uuliyadda Hawl-wadeennada

1. Guddigu wuxuu ka mas'uul yahay waxyeellada ka dhalata xil-gudasho-xumada ay ku kacaan Saraakiisha, Hawl-wadeennada ama Shaqaalaha Guddiga, iyagoo gudanaya xilalka loo idmaday.

2. Guddiga iyo cid kasta oo wakiil ka ah ama hawl-wadeennada fulinaya hawlaha Guddiga ee loo idmaday waxaa xil ka saaran yahay in ay waajibaadkooda u gutaan sida ugu habboon oo ku saleysan meel-mar, sida ilaalinta xogaha shakhsiyeed ee dadka ay u adeegayaan ama hay'adaha ay wada-shaqeyntu kala dhexayso.

Qodobka 33aad
Waajibaadka Guddiga

Guddigu wuxuu yeelanayaa waajibaadka soo socda:

1. Dejinta Siyaasadaha la xiriira kaalma-sharciyeedka.

2. La-talinta Wasiirka ay khuseyso intii awooddiisa ku siman in la sameeyo xeer-nidaamiye kasta ee looga baahan yahay hirgelinta Xeerka Kaalma-sharciyeedka;

3. Diyaarinta iyo ansixinta tilmaanta kaalma-sharciyeedka ee ku aaddan maamulidda iyo hirgelinta kaalma-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman.

4. Kormeeridda iyo daba-galka hawlaha ay qabtaan adeeg-bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman si waafaqsan Xeerkan.

5. Xaqiijinta la-xisaabtanka cid kasta oo bixisa adeeg kaalma-sharciyeed intii awooddiisa ku siman.

6. Dejinta iyo diyaarinta qaab iskaashi iyo wada-tashi ee dhexmara hay'daha ku hawlan bixinta kaalma-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman sida uu tilmaamayo Xeerkan.

7. Diyaarinta qorshe-hawleedka sannadlaha ah ee kaalma-sharciyeedka intii awooddiisa ku siman.

8. Diyaarinta warbixin-sannadeedka ee wax-qabadka Guddiga iyo hirgalinta kaalma-sharciyeedka intii awoodooda ku siman sida caqabadaha jira iyo katala-bixinta

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

xallintooda, iyo u-gudbinta warbixintaas dhammaan hay'adaha ay khuseyso oo ay ugu horeeyaan Guddiyada Garsoorka ee Barlamaanka ee kor-joogtaynta ku leh.

9. Qiimeynta iyo anshax-marinta hawl-wadeennada iyo adeeg-bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka intii awoodooda ku siman, iyo u-gudbinta warbixinnada lama-huraanka ah hay'adaha ay khusayso.

10. Keydinta diiwaan-gelinta, idmanaanshaha, baabi'inta idmanaanshaha iyo diiwaan-ka-saaridda adeeg-bixiyeyaasha intii awoodooda ku siman.

11. Xallinta cabashooyinka dadweynaha, iyo cabashooyinka adeeg-bixiyeyaasha iyo deeq-bixiyeyaasha ee ku aaddan hawlaha iyo adeegyada kaalma-sharciyeedka si waafaqsan Xeerkan iyo shuruucda kale ee dalka, intii awoodooda ku siman.

Qodobka 34[aad]
Idmanaanshaha Bixiyeyaasha Kaalma-sharciyeedka

1. Guddiga ay khuseyso wuxuu idmanaan siinayaa shakhsiyaadka iyo hay'adaha intii awooddiisa ku siman inay bixiyaan adeegyo kaalmo-sharciyeed si waafaqsan Qodobka 39[aad] ee Xeerkan.

2. Guddiga ay khuseyso wuxuu heshiis iskaashi la gelayaa shakhsiyaadka iyo hay'adaha intii awooddiisa ku siman si loogu idmado bixiyeyaal kaalma-sharciyeed si waafaqsan Xeerkan.

3. Guddiga ay khuseyso haddii la jebiyo heshiiska iskaashi ee ku tilmaaman Qodobkan 34[aad] (2) ee Xeerkan ama ay jirto sabab meel-mar ah wuxuu baabi'in karaa idmanaanshaha shakhsi ama hay'ad, wuxuuna wargelinayaa cid kasta oo ay khuseyso muddo ku siman 30 (soddon) maalmood gudahood, marka laga bilaabo taariikhda go'aanka la gaaray.

4. Cid kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka uu gaaray Guddiga Gobolka Banaadir ama Dawlad-goboleed Xubin ka ah Federaalka si ku aaddan diidmo idmanaansho-siin ama kala-noqosho idmanaansho, wuxuu rafcaan u gudbisan karaa Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka muddo ku siman 30 (soddon) maalmood gudahood, marka laga bilaabo taariikhda go'aanka la gaaray.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

5. Haddii rafcaanlaha lagu tilmaamay Qodobkan 34aad (4) ee Xeerkan, uu ku qanci-waayo go'aanka Guddiga Kaalma-sharciyeedka Federaalka, wuxuu rafcaanluhu codsi dib-u-eegis go'aanka u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh ee fadhigeedu yahay halka uu ka hawl-galo Guddiga gaaray go'aanka diidmada idmanaansha-siinta ama kala noqday idmanaanshaha rafcaanlaha.

Qodobka 35aad
Shuruudaha Adeeg-bixiyeyaasha Kaalma-sharciyeedka

1. Hay'ad kasta oo bixinaysa adeegyo kaalma-sharciyeed waa in:
   b) ay lahaato idmanaansho si waafaqsan Xeerkan;
   t) ay lahaato waayo-aragnimo bixinta adeegyada kaalmo-sharciyeedka;
   j) ay yeelato ugu yaraan 1 (hal) qareen oo kormeere ah ama joogto ah;
   x) ay lahaato ugu yaraan 1 (hal) kaaliye qareen; iyo
   kh) aysan hawl-wadeennadeedu lahayn taariikh anshax-xumo.

Qodobka 36aad
Kaaliyeyaasha Qareennada

1. Kaaliye Qareen oo doonaya in loo idmado inuu noqdo bixiye kaalma-sharciyeed si waafaqsan Xeerkan waa in:
   b) uu haystaa shahaado jaamacadeed ee Kulliyad Sharci oo la aqoonsan yahay;
   t) da'diisu aysan ka yarayn 21 (kow iyo labaatan) sano;
   j) uu leeyahay anshax wanaagsan;
   x) ku sugnaado kormeerka qareen idman; iyo
   kh) uu leeyahay fayo-qab caafimaad ee xil-gudasho.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

CUTUBKA LIXAAD
SANDUUQA KAALMA-SHARCIYEED IYO QODOBBO ISKU-DHAF AH

Qodobka 37aad
Asaasidda Sanduuq Kaalma-sharciyeed

Si dhaqaale loogu helo adeegyada mashruuca kaalma-shacriyeedka qaran:

1. Waxaa la aasaasayaa Sanduuq dhaqaale oo u gooni ah kaalma-sharciyeedka oo uu meel-mariyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS, si loogu maamulo kaalma-sharciyeedka ee dhammaan Soomaaliya.

2. Ilaha dhaqaale ee Sanduuqa Adeegga Kaalma-sharciyeedka Qaran waxa ay ka imaanayaan meelaha soo socda:
   b) ilaha lacagtu waxay ka imanaysaa qorshaynta Dawladda.
   t) deeq, hadiyad, iyo waxyaabaha kale ee loo hibeeyo adeeg-bixinta kaalma-sharciyeedka;
   j) lacagaha la siiyo kaalma-sharciyeedka ee uu Guddigu awood u leeyahay in uu isticmaalo si waafaqsan Xeerkan ama si ku saleysan shuruucda kale ee dalka; iyo
   x) ilaha kale ee lacageed oo si sharci ah loogu deeqay ama loo deymiyey Guddiga oo ka yimid hay'adaha kale ee dawladda oo ay tahay in la daah-furo inta aan la isticmaalin, si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha maamulka maaliyadda ee dawladda JFS.

3. Guddiga waa inuu ka furtaa bankiyada lambar xisaab-socota, si loogu adeegsado kharash-bixinta khuseysa hirgelinta mashruuca kaalma-sharciyeedka qaran ee dhammaan Soomaaliya, si waafaqsan Xeerkan.

4. Habraaca lagu maamulayo Sanduuqa Kaalma-sharciyeedka waxa lagu soo saarayaa Xeer-nidaamiye.

Qodobka 38aad
Xeer-nidaamiyeyaal

1. Wasaaradda Cadaaladda waxay soo saaraysaa Xeer-nidaamiyayaal xidhiidh la leh nidaamyada iyo habraacyada lagu dhaqan gelinayo Xeerkan.

AMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 39aad
Tilmaan Kaalma-sharciyeed

1. Guddiga ay khuseyso wuxuu baahinayaa tilmaan kaalma-sharciyeed oo ka kooban:
   b) arrimaha gaarka ah ee mashruuca lagu bixinayo kaalma-sharciyeedka;
   t) hab-raaca maamulka ee kaalmo-sharciyeedka;
   j) codsiga iyo foomamka kale ee kaalma-sharciyeedka;
   x) khidmadaha lagu dhiibayo adeegyada bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka ee dacwadaha iyo dacwad-socodsiinnada kala duwan;
   kh) hab-raacyada kor-joogteynta iyo qiimeynta bixinta kaalma-sharciyeedka; iyo
   (d) arrin kasta oo kale oo uu Guddigu go'aamiyo.

2. Qodobbada tilmaanta waxay saaran yihiin Guddiga, hawl-wadeennadiisa iyo bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka.

Qodobka 40aad
Qorsheyaasha Kala-guurka

1. Qorsheyaasha kaalma-sharciyeedka hadda jira ee ay hoggaaminayso Wasaaradda Cadaaladda Federaalka, iyo heshiisyada u dhexeeya Wasaaradda, deeq bixiyeyaasha iyo bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka, way sii soconayaan ilaa Guddiyada kaalmo-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawlad- goboleedka Xubinta ka ah Federaalka la asaaso isla markaana la bilaabo hirgelinta mashruuca kaalma-sharciyeedka qaran si waafaqsan Xeerka Kaalma-sharciyeedka.

2. Qorsheyaasha kaalma-sharciyeedka hadda jira ee u dhexeeya Wasaaradaha Cadaaladda, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka, deeq-bixiyeyaasha iyo bixiyeyaasha kaalma-sharciyeedka, way sii soconayaan ilaa Guddiyada kaalmo-sharciyeedka Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dawlad-goboleedka Xubinta ka ah Federaalka la asaaso isla markaana la bilaabo hirgelinta mashruuca kaalma-sharciyeedka qaran si waafaqsan Xeerkan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 41aad
Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan oo khuseeya bixinta kaalma-sharciyeedka Soomaaliya.

Qodobka 42aad
Dhaqan-gal

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

23

SHARCI LR.48 **TAARIIKH: 19-KA JANAAYO 2026**

SHARCIGA CADDAALADDA DA'YARTA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0813/B11/26**, ku taariikheysan **11/01/2026**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Hindise- Caddaaladda Da'yarta Soomaaliyeed.
MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Caddaaladda Da'yarta Soomaaliyeed.


Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
04 FEB 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-010-2026
TAARIIKH 05-02-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse
Hantidhowrka Guud CB JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE-SHARCIYEEDKA
CADAALADDA DA'YARTA SOOMAALIYEED

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS

CUTUBKA KOOWAAD
QODOBO GUUD

Qodobka 1aad
Magaca Sharciga

1. Sharcigan waxaa lagu Magacaabaa "Sharciga Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed".

2. Sharcigani wuxuu ku saleysan yahay raad-raac iyo wax-ka-beddel lagu sameeyey Sharciyadii hore ee Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed, sida "Sharci Lr. 13, ee soo baxay 8dii Maarso 1970" ee Maxkamadda Da'yarta iyo Dhaqancelinta.

Qodobka 2aad
Ujeeddada Sharciga

1. Asaasidda wada-shaqeyn cad oo ku salaysan sharci iyo hab-raacyo daboolaya qabashada, haynta, dacweynta, anshax-toosinta, ciqaabta ama xabsiyeynta da'yarta gudaha dalka Soomaaliya.

2. In la hubiyo in Sharcigani uu waafaqsanyahay Shareecada Islaamka, Dastuurka Dalka, Shuruucda kale ee dalka u yaala iyo mabaadi'da asaasiga ah ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta ee soo baxay 1989.

3. In maanka lagu haayo culeyska maskaxda iyo midda jirka ee da'yarta, lana siiyo adeegyo dheeraad ah si loo ilaaliyo xuquuqdooda.

4. In lagu dhiirri-geliyo da'yarta is-dhex-galka bulshada taasoo muhiim u ah anshax-toosintooda.

5. In la asaaso xarumo anshax-toosin gaar ah oo lagu xanaaneeyo da'yarta maxkamdeynta ka hor iyo ka dib.

Qodobka 3aad
Baaxadda Sharciga

1. Sharcigani waxaa lagu dabaqayaa oo uu saameynayaa dhammaan da'yarta ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

1

2. Sharcigan wuxuu dhawrayaa xuquuqda sharciga islaamku siiyay da'yarta si aan kala-sooc lahayn ee ku aaddan waalidka dhalay, daryeelaha sharciga ah, midab, jinsi (lab/dheddig), luuqad ama lahjad, siyaasad ama ra'yi kale, qowmiyad, qabiil ama asal, hanti (dabaqad dhaqaale), naafanimo, xaalad caafimaad, dhalasho, mansab ama xaalad kale oo kala-sooc ku saleysan.

Qodobka 4aad
Qeexid

"Carruur" waxaa loola jeedaa qof ka yar 18 (siddeed iyo tobon) sano sida ku xusan Qodobka 28aad (8) ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) kaas oo ah Wax-ka-beddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Xaquuqda Carruuta ee soo baxay 1989;

"Xanaaneeye/Daryeele" waxaa loola jeedaa qofka leh mas'uuliyadda xuquuqda gacan-ku-haynta iyo xanaaneynta carruurta ama da'yarta;

"Maxkamadda Da'yarta" waxaa loola jeedaa maxkamad gaar ah oo loogu talo-galay da'yarta ka yar 18 (siddeed iyo tobon) sano, si fal-dembiyeedyada ay galaan loogu qaado, taasoo ku xusan Xeer Lr.13 ee soo baxay 1970 iyo sidoo kale Qodobka 40aad ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xaquuqda Carruurta, maxkamadaas oo si buuxda awood ugu leh dhegaysiga dacwadaha lidka ku ah qof kasta oo da'diisu ka yar tahay 18 sano;

"Da'yar" waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay da'diisu gaartay 14 (afar iyo tobon) sano, kana yar tahay 18 (siddeed iyo tobon) sano;

"Danaha ugu wanaagsan ee Da'yarta" waxaa loola jeedaa go'aan kasta oo laga gaaro da'yar, si loo hubiyo fulinta xuquuqdiisa asaasiga ah iyo baahiyihiisa gaar ahaaneed, aqoonsiga xaaladiisa bulsho iyo koritaanka jireed, maskaxeed iyo hormarinta waxbarashadiisa, waxaana la tixgalinayaa mar kasta danta ugu habboon ee da'yarta;

"Qoys" waxaa loola jeedaa sida waafaqsan ujeeddada Sharcigan; aabe, hooyo, walaal, awoowe iyo ayeeyo;

"Qaraabo" waxaa loola jeedaa, sida waafaqsan ujeeddada Sharcigan qaraabada ilaa darajada 4aad (faca 4aad).

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

"Fal-dembiyeed Culus" waxaa loola jeedaa fal-dembiyeed lagu muteysan karo ciqaabta ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS) ama sharci kasta oo dhaqan-gal ah, kaasoo tilmaamaya ciqaab ka badan 3 (saddex) sano;

"Jebinta Sharciga Da'yarta" waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay da'diisu gaartay 14 (afar iyo toban) sano, kana yar tahay 18 (siddeed iyo toban) sano; oo la horkeeno garsoore, ka dib markii lagu tuhmay ama lagu eedeeyey inuu galay faldembiyeed lagu muteysanayo ciqaab si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS);

"Laanta Booliska Da'yarta" waxaa loola jeedaa Xarunta Booliska ee Da'yarta oo u xilsaaran in ay la dhaqanto dhammaan dacwooyinka khuseeya da'yarta lagu soo eedeeyo in ay galeen fal-dembiyeedyo lid ku ah Sharcigan;

"Sarkaalka Ilaalinta" waxaa loola jeedaa sarkaalka ilaalinta maxkamadda da'yarta oo u xilsaaran qiimeynta da'yarta ku xad-gudubta Sharcigan;

"Ra'yiga Da'yarta" waxaa loola jeedaa in la dhegaysto da'yarta loona oggolaado xaquuqda ay u leeyihiin in ay ka hadlaan hay'adaha fulinta sharciga hortooda;

"Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta" waxaa loola jeedaa xarun ka mid ah Xarumaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda oo mas'uul ka ah ilaalinta cadaaladda da'yarta waxaana laga furayaa degmo kasta.

"Dhegaysi Hordhac ah" waxaa loola jeedaa dhegaysi uu sameeyo Garsooraha Maxkamadda Da'yarta marka ugu horreysa ee dacwad da'yarta la soo gaarsiiyo maxkamadda.

"Baahiyaha Gaarka ah" waxaa loola jeedaa qof kasta oo qaba xanuun ama duruuf gaar ah oo waajibinaysa in la siiyo daryeel gaar ah sida; naafo, dhegool ama indhool.

"Wasaaradda" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS.

"Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS.

"Fududeyn" waxaa loola jeedaa in la siiyo eedaysanaha da'yarta ah fursad lagu fududeynayo hab-raaca nidaamka garsoorka rasmiga ah sida ugu wanaagsan danta da'ayartu ku jirto.



Qodobka 5aad
Danaha ugu Wanaagsan ee Da'yarta

1. Danaha ugu wanaagsan ee da'yartu waa in tixgelin weyn la siiyo marka tallaabo sharci laga qaadayo ama go'aan laga gaarayo da'yarta si waafaqsan Sharcigan.

2. Da'yarta waa in la dhegaysto si ay u muujiyaan waxa maankooda ka guuxaya iyo dareenkooda ku aaddan arrinta mar kasta laga wareysanayo.

Qodobka 6aad
Ilaalinta Sirta

1. Ilaalinta sirta da'yarta fal-dembiyeedyada gasha ama lagu soo eedeeyo iyo kuwa dhibbanayaasha ah waa in la dhawro heer kasta oo la joogo.

2. Macluumaad kasta oo wax u dhimaya ama suurta-gelinaya in la aqoonsado da'yarta xad-gudubyada gasha ama lagu soo eedeeyey iyo kuwa dhibbanayaasha ah lama faafin karo.

3. Macluumaadka shakhsiyadeed ee da'yarta gasha xad-gudubyada iyo kuwa dhibbanayaasha ah, waa in si adag loo dhawraa isla markaasna aan loo oggolaan cid saddexaad, haddii aysan dhinacaas si toos ah u khuseyn dacwadda ama aysan amrin cid awood u leh bixinta macluumaadkaas.

Qodobka 7aad
Da'da Mas'uuliyadda Fal-dembiyeedka

1. Haddii uusan gaarin qofka carruurta ah 14 (afar iyo toban) sano oo ah waqtiga fal-dembiyeedka da'yartu gali karo, ma qaadayo mas'uuliyad fal-dembiyeed.

2. Da'yar kasta oo gaaray da'da 14 (afar iyo toban) sano balse aan gaarin 18 (siddeed iyo toban) sano, wuxuu leeyahay mas'uuliyad fal-dembiyeed, balse ma lahan mas'uuliyad buuxda oo fal-dembiyeed.

3. Cid kasta oo gaartay da'da 18 (siddeed iyo toban) sano waqtiga faldembiyeedku dhacay, waxaa loo aqoonsan yahay qaan-gaar. Sidaas darteed, wuxuu lahaanayaa mas'uuliyad buuxda oo uu ku qaado fal-dembiyeed mana ahan qof da'yar ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

4. Mas'uuliyadda qaadidda fal-dembiyeedka da'yarta waxaa keliya go'aamin kara maxkamad awood u leh iyadoo raacaysa hab-raaca Sharciyada dalka iyo Sharcigan.

Qodobka 8aad
Maxkamadda Da'yarta

1. Maxkamadaha darajada kowaad iyo labaad waxay yeelanayaan qeybta da'yarta.
2. Qeybaha da'yartu waxay qaadayaan dhammaan dacwadaha khuseeya qof kasta oo da'yar ah.
3. Qeybta da'yartu waxay dabaqaysaa Shareecada islaamka,Qodobbada Sharcigan, Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta.
4. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka wuxuu yeelanayaa qeybta da'yarta.

Qodobka 9aad
Qaab-dhismeedka Maxkamadda Da'yarta

Maxkamadda da'yarta ee darajada kowaad iyo labaad waxay ka koobnaanaysaa garsoorayaal si gaar ah u tababaran oo u gaar ah qaybta carruurta, iyaga keliya ayaana qaadaya dhammaan kiisaska la xiriira da'yarta.

Qodobka 10aad
Awoodda Maxkamadda Da'yarta

1. Dhammaan dacwadaha da'yartu waxay ka bilaabanayaan qeybta da'yarta ee maxkamadda degmada ay khuseyso.
2. Qeybta da'yarta ee maxkamadda degmadu waxay awood buuxda u leedahay qaadidda fal-dembiyeedyada ciqaabtoodu ku xaddidan tahay awoodda maxkamadda degmada ee ku xusan Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta iyo Shareecada Islaamka.
3. Dhammaan dacwadaha kale oo ciqaabtoodu dhaafsiisan tahay awoodda maxkamadda degmada, waxay ka bilaabanayaan qeybta da'yarta ee maxkamadda gobolka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 11aad
Rafcaanka

1. Da'yar kasta oo ay xukuntay maxkamadda darajada kowaad, wuxuu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Racfaanka ee awoodda u leh, go'aankeedu wuxuu noqonayaa mid kama-dambeys ah.

2. Rafcaannada laga qaadanayo xukunnada da'yarta waa inay waafaqsan yihiin qodobbada Sharcigan iyo Xeerka Habka Ciqaabta.

Qodobka 12aad
Kaaliyeyaasha Maxkamadda

1. Garsooraha maxkamadda da'yarta ayaa u xil-saaraya dacwadda da'yarta 2 (labo) kaaliye isagoo tixgelinaya dabeecadda fal-dembiyeedka ee da'yarta lagu soo eedeeyey, lana tashanaya wakiilka sharci ee eedaysanaha.

2. Waxaa waajib ku ah garsooraha in uu kaaliyeyaasha ku wargeliyo taariikhda, waqtiga iyo goobta dhegaysiga dacwadda maxkamadda 7 (toddobo) maalmood ka hor.

3. Liiska kaaliyeyaasha waxaa laga soo qaadanayaa liis magacyo kaaliyeyaal hore loo ansixiyey, isla markaana uu dib-u-eegis ku sameeyey Golaha Adeegga Garsoorka.

CUTUBKA LABAAD
HAB-RAACA CADAALADDA
Qodobka 13aad
Booliska Da'yarta

1. Saldhig boolis oo kasta waa in laga abuuro oo laga helaa "Laanta Booliska Da'yarta" oo gaar ah.

2. Laanta Booliska Da'yarta waxaa magacaabaya Taliyaha Guud ee Booliska, isagoo wada-tashi la sameeyey Wasiirka Amniga Gudaha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

6

Qodobka 14aad

Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Laanta Booliska Da'yarta

1. Laanta Booliska ee Da'yarta waxaa xil ka saaran yahay hawlahan soo socda:
   b) la-tacaamulka (maamulidda) dacwadaha khuseeya da'yarta ku xad-gudubta sharciga iyo kuwa u baahan in la dhawro, baarista fal-dembiyeedyada ay galaan ama laga galo da'yarta;
   t) inuu ilaaliyo amniga guud, nabad-gelyada iyo kala-dambeynta isagoo u maraya:
      i. ka-hortagga dembiyada caruurta;
      ii. qabashada da'yarta dembiga gasha;
      iii. baarista dembiyada da'yarta gasha iyo kuwa iyaga laga galo.

2. In xaqa qarsoodiga iyo asturnaanta ee macluumaadka da'yarta la dhawro, lana fuliyo.

3. In la dhawro da'yarta halista ugu jirta in la dhibaateeyo ama looga faa'iideysto qaab sharci-darro ah.

4. In lagala shaqeeyo waalidka/daryeelaha sharci iyo guud ahaan bulshada sidii looga hortegi lahaa fal-dembiyeedyada ay ku dhici karaan da'yarta.

5. Waa in Saraakiisha Laanta Booliska Da'yarta la siiyo tababar gaar ahaaneed iyo aqoon-kororsi joogto ah oo ku saabsan cadaaladda da'yarta iyo hab-raaca dhawristeeda.

6. Laanta boolisku markay hawshan gudanayso, waxay ku shaqeynaysaa amarka iyo hagidda Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

Qodobka 15aad

Xiritaan

1. Sarkaal boolis wuxuu keliya xiri karaa qof da'diisu gaartay 14 (afar iyo toban) sano kana yar tahay 18 (siddeed iyo toban) sano, marka ay tahay xalka ugu dambeeya ee la xiriira badbaadadiisa ama amniga bulshada.

2. Sarkaal boolis wuxuu sidoo kale ku xiri karaa da'yarta, haddii:

   b) la siiyo amar xiritaan oo sharciga waafaqsan;
   t) da'yarta lagu qabtay isagoo faraha kula jira fal-dembiyeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

7

3. Sarkaal boolis waxaa keliya oo uu adeegsan karaa xoog marka uu fulinayo amar xiritaan maxkamadeed,

4. Sarkaal boolis ee soo xira da'yar waa inuu si dhaqsi ah ugu wargeliya waalidkiisa, qof mas'uul ka ah, ama qareenkiisa.

Qodobka 16aad
Gacan-ku-hayn

1. Marka uu qofka da'yarta ah galo gacan-ku-haynta sarkaal boolis ah, waa inuu ogeysiiyaa waalidkiisa/daryeelihiisa iyo Xafiiska Cadaaladda Carruurta ee Wasaaradda, waana in uu si qayaxan iyo luqad fudud ugu sharaxaa sababta hayntiisa, waana in uu si dhaqso ah sarkaalku u geeyo xarumaha lagu hayo da'yarta.

2. Sarkaalka booliska waa in uu ku war-geliyaa da'yarta dhammaan xuquuqdiisa inta uu ku sugan yahay gacan-ku-haynta booliska iyo in uu siiyo macluumaad dhammeystiran oo ku qoran luqadda uu eedaysanuhu fahmayo.

3. Waa in loo keenaa turjumaan ku habboon da'yarta qabta baahiyaha gaarka ah.

Qodobka 17aad
Xaqa La-talinta Sharci

1. Da'yarta la-hayo waa in lagu war-geliyaa xaqa uu u leeyahay la-talin sharci (Qareen) oo lacag-la'aan ah si degdeg ah, sida ku cad Qodobka 28aad (5) ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kaas oo ah Wax-ka-beddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah iyo sida ku xusan Sharciga Kaalma-sharciyeedka.

2. Da'yarta waxba lama su'aali karo, iyadoo uu maqan yahay waalidka/daryeelaha, la-taliye sharci (Qareen) ama turjumaan da'yarta qabta baahiyaha gaarka ah.

3. Si gaar waxaa ugu xilsaaran xaqa la-talinta sharci ee da'yarta Xafiiska Cadaaladda Carruurta ee Wasaaradda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

8

Qodobka 18aad
Weydiimo

1. Sarkaalka booliska wuxuu wax su'aali karaa da'yarta oo keliya marka ay joogaan waalidka/daryeelaha ama la-taliye sharci (Qareen) ama turjumaan ku habboon kuwa qaba baahiyaha gaarka ah.
2. Sarkaalka booliska ah ee wax su'aalaya da'yarta waa in uusan u muuqan cadow xilliga su'aalaha.
3. Da'yarta waa in wax loo su'aalaa qaabka ugu wanaagsan oo ay ku caddeyn karaan fikradahooda.

Qodobka 19aad
Xuquuqda Waalidka

1. Waalidka iyo daryeelaha sharciyeysan waxay xaq u leeyihiin in lagu wargeliyo gacan-ku-haynta da'yartooda sida ugu dhaqsaha badan
2. Haddii ay dhacaan hab-raacyo maxkamadaynta ka hor, waa in waalidka ama daryeelaha sharciga ah lagu wargeliyaa ka hor baarista iyo hab-raacayada dhegaysiga dacwadda.

Qodobka 20aad
Shuruudaha Gacan-ku-hayn

1. Da'yarta waxaa gacan-ku-hayn lagu sameyn karaa marka ay noqoto gacan-ku-hayntu xal kama-dambays ah.
2. Wasaaraddu waxay asaasaysaa Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta oo lagu haynayo Da'yarta Maxkamadaynta ka hor taasoo u gaar ah da'yarta.
3. Xarumaha Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta, waxaa kormeeraya Wasiirka si loo ilaaliyo xuquuqda da'yarta inta gacanta lagu hayo.
4. Da'yarta waa in lagu siiyaa xarunta dhawris iyo amni ka hor inta aan la maxkamadayn ama aan la sii-dayn.



5. Inta lagu hayo da'yarta Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta, waxaa laga diyaarinayaa warbixinno shakhsi ah, raad-raacyo iyo qiimeyn ku saabsan da'yarta inta uu ku jiro gacan-ku-haynta, iyadoo loo gudbinayo Maxkamadda Da'yarta.

6. Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yartu maxkamadaynta ka hor waa in ay hubisaa in dhammaan da'yarta loola dhaqmay si sharaf iyo ixtiraam leh.

7. Xarunta da'yarta lagu hayo maxkamadaynta ka hor, waa in lagu maamulaa si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo u dhigma Sharcigan, waxaana ka hawl-galaya dad takhasus gaar ah u leh baxnaaninta iyo daryeelka da'yarta.

Qodobka 21aad
Dhegaysiga Hordhaca ah

1. Dhegaysiga hordhaca ah, eedaysanaha da'yarta waa in uu ka-jawaab-celiyaa eedaymaha loo haysto.

2. Dhegaysigaas hordhaca ah waa in loo tixgaliyo in ay tahay markii kowaad oo maxkamad la hor-geeyo da'yarta.

Qodobka 22aad
Ujeeddada Dhegaysiga Hordhaca ah

Ujeeddada dhegaysiga hordhaca ah waa in:

b) la darso heerka caddeynta lidka ku ah eedaysanaha iyo in dacwadda la horgeyn karo maxkamad;

t) loo tilmaamo qaabka kale oo ku habboon in loo fududeeyo eedaymaha da'yarta loo haysto; iyo

j) in Garsooruhu uu qaado dacwadaha si dadban (waxa lagu dhamayn karaa heshiis labada dhinac ay gaaraan)

Qodobka 23aad
Qiimeynta Da'da

1. Haddii aysan jirin dokumenti laga hayo da'da dhalashada eedaysanaha, garsooraha dhegaysiga hordhaca ah ee maxkamadda da'yarta wuxuu amrayaa in la sameeyo qiimeynta da'da sida ugu dhaqsaha badan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

10

2. Maxkamadda da'yartu waxay tixgelinaysaa go'aaminta da'da ku saleysan ee baaritaannada caafimaadka.

CUTUBKA SADDEXAAD
HAB-RAACA MAXKAMADDA

Qodobka 24aad
Awoodaha Gaarka ah

1. Maxkamadda Da'yarta ee lagu asaasay si waafaqsan Qodobka 8aad ee Sharcigan, waxay lahaanaysaa awood buuxda ama gaar ah oo ay ku dhegaysato dhammaan dacwadaha la xiriira da'yarta heerarkeeda kala duwan waxayna awood u leedahay go'aan ka-gaarista eedaymaha da'yarta lagu soo oogay si madaxbannaan.

Qodobka 25aad
Hor-imaanshaha Maxkamadda Da'yarta

Qaababka loo xaqiijinayo hor-imaanshaha da'yarta ee maxkamadda waa sidan:

b) xabsi-ku-hayn;

t) amar in uu yimaado maxkamadda horteeda;

j) u-yeeritaan maxkamadeed; iyo

x) haddii lagu qabto isagoo gacanta kula jira xad-gudubyo ku tilmaaman Qodobka 35aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed (XHCS) ama faldembiyeedada culus lagu qeexay sharciyada kale ee dalka.

Qodobka 26aad
Furitaanka Maxkamadeynta

1. Maxkamaddu waxay ugu sharraxaysaa da'yarta luqad sahlan nuxurka faldembiyeedka lagu soo eedeeyey ama waxay adeegsaneysaa turjumaan haddii ay jirto baahi gaar ah.

2. Maxkamaddu waxay weydiinaysaa da'yarta wuxuu doonayo inuu yiraahdo oo sharraxaad ah iyo haddii uu qabo sabab kasta oo uu ku muujinayo inaan dacwadaas lagu qaadin.

3. Haddii hadal-qiraalka uu bixiyey da'yartu noqdo inuu qirto fal-dembiyeedka, ka dib marka lasoo mariyo xaqiijinta loo baahan yahay, Maxkamaddu waxay awoodaa inay xukun ku rido.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

11

Qodobka 27aad
Caddeyn

1. Maxkamaddu waxay markhaatiga weydiinaysaa su'aalaha ay u aragto inay yihiin lama-huraan ama ku habboon si looga gun-gaari karo runta ama sida kale ee loo xaqiijin karo eedaynta ama in la hubiyo markhaatiga.

2. Marka markhaatiyada dacwad-oogaha ay bixiyaan caddeyntooda maxkamadduna ay ku qanacdo caddeymaha la hor-keenay, iyagoo si habsami leh u caddeeyey dacwadda lidka ku ah eedaysanaha, taasoo haddii aan laga jawaabin noqonaysa mid ka maran sharci kasta oo meel-mar ah oo uu ku noqonayo dembiile da'yarta, maxkamaddu waxay dhegaysanaysaa markhaatiyaasha difaaca iyo hadal-qiraal kasta oo dheeraad ah ee uu eedaysanuhu door-bidayo inuu u adeegsado difaaciisa.

Qodobka 28aad
Hab-raaca Xukunnada

1. Haddii ay maxkamaddu ku qanacdo in fal-dembiyeedyada la caddeeyey, iyadoo helaysa macluumaadka la xiriira akhlaaqda, tixraaca taariikh-nololeedka, nolol-guriyeedka, meheradda iyo caafimaadka eedaysanaha, maxkamaddu waxay xukun ku ridaysaa da'yarta, si ay ugu suurta-gasho maxkamadda inay la tacaamusho dacwadda sida ugu wanaagsan oo ay ku jirto danaha da'yarta.

2. Xabsiyeyntu waxay noqonaysaa goobta da'yarta lagu anshax-toosinayo.

3. Xukunnada lagu ridayo da'yarta waa inay waafaqsan yihiin Qodobbada Sharcigan iyo Xeerka Habka Ciqaabta.

Qodobka 29aad
Asaasidda Xarumo Anshax-toosin ee Da'yarta

1. Wasaaradda waxaa xil ka saaran yahay asaasidda xarumaha anshax-toosin ee da'yarta sida ugu suurta-galsan ee awooddu saamaxayso, waxaana asaasidda xarunta anshax-toosinta da'yarta dikreeto ku soo-saaraya Wasiirka.

2. Xarumaha anshax-toosinta da'yarta waxay kala yeelanayaan labo heer oo kala ah:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

b) **heerka kowaad:** maxkamadeynta ka hor waxaa da'yarta lagu haynayaa Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta, waxaana loo sameynayaa Xeer-nidaamiye gaar ah oo lagu maamulo.

t) **heerka labaad:** maxkamadeynta ka dib waxaa da'yarta lagu haynayaa Xarumo Anshax-toosin gaar ah, waxaana loo sameynayaa Xeer-nidaamiye gaar ah oo lagu maamulayo.

Qodobka 30aad
Mas'uuliyadda Xarumaha Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta (Heerka 1aad)

Sarkaalka mas'uulka ka ah Xarumaha Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta (Heerka 1aad) wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha hoos ku xusan:

b) siinta Maxkamadda Da'yarta, Xeer-ilaalinta iyo Wasaaradda Cadaaladda warbixin qoraal ah oo koobeysa xad-gudubka ama xad-gudubyada lagu soo oogay iyo akhlaaqda eedaysanaha da'yarta ah;

t) ka-war-haynta iyo kormeerka is-beddel kasta oo uu sameeyo garsooraha Maxkamadda Da'yarta iyo Laanta Booliska Da'yarta;

j) iskuduwidda iyo kala-shaqeynta waalidka, da'yarta, booliska iyo hawlwadeennada bulshada arrimaha la xiriira Da'yarta; iyo

x) fulinta hawl kasta oo ay amarto Maxkamadda Da'yarta iyo amarrada maamul ee Wasaaradda Cadaaladda.

Qodobka 31aad
Mas'uuliyadda Xarumaha Anshax-toosinta ee Da'yarta (Heerka 2aad)

Xarumaha Anshax-toosinta Da'yarta (Heerka 2aad) waxaa xil ka saaran yahay:

b) xaqiijinta in da'yarta lagu hayo meel ka gooni ah dadka waaweyn;

t) anshax-toosin-ku-sameynta da'yarta si ay ugu suurta-gasho in ay dib ula qabsadaan bulshada oo u noqdaan xubno waxtar u leh bulshada;

j) bixinta dhawrid, waxbarasho iyo tababar la siiyo da'yarta inta ay ku jiraan anshax-toosinta;

x) horumarinta iyo dhiirri-gelinta iskaashiga u dhexeeya wasaaradaha iyo waaxyaha ee ku aaddan ujeeddooyinka lagu xaqiijinayo in la siiyey da'yarta daryeelo ku filan oo ku habboon, dhawrid iyo adeegyo hufan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

13

kh) dhiirri-gelinta caafimaadka, is-ixtiraamidda iyo amni ay da'yartu ku helaan xaruntooda; iyo

d) qabashada mas'uuliyadaha kale ee lagu siiyey Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaasha gaarka ah si ay u gaarto ujeeddooyinkeeda.

CUTUBKA AFARAAD
QODOBBO KAMA-DANBEYS AH

Qodobka 32aad
Fududeyn

1. Ujeeddada fududeynta waa in la siiyo eedaysanaha da'yarta ah fursad looga fududeynayo hab-raaca nidaamka garsoorka rasmiga ah sida ugu wanaagsan danta da'ayartuna ku jirto.

2. Fududeynta waxay imaan kartaa marka la doonayo in loo sameeyo da'yarta arrimahan soo socda:
   b) tixgelinta baahiyaha da'yarta; iyo
   t) dhiirri-gelinta dib-u-dhexgalkiisa bulshada.

Qodobka 33aad
Noocyada Fududeynta

1. Garsooraha Maxkamadda Da'yartu wuxuu awood u leeyahay in uu amro hal ama ka badan oo fududeyn sida:
   b) **"amar tegid dugsi qasab ah"** waxaa loola jeedaa amar looga doonayo da'yartu inuu tago dugsi maalin kasta ee waqti muddo go'an, tegidaas oo uu kormeerayo qof u gaar ah oo la ogyahay;
   t) **"amar akhlaaq-wanaag"** waxaa loola jeedaa warqad amar ay ku qoran tahay heshiisyo u dhexeeya da'yarta, qoyskiisa iyo maxkamadda, da'yartu waa inuu ku dhaqmaa qodobbadan;
   j) **"amar xabsi-guri ku-hayn"** waxaa loola jeedaa da'yarta in ay ku sugnaadaan hoyga muddo la isku waafaqay; iyo
   x) **"amar warbixin"** waxaa loola jeedaa amar looga baahan yahay da'yarta inuu isaga warbixiyo cid cayiman, sida anshax-toosiye, muddo cayiman, si uu ula socdo akhlaaqda da'yarta.

2. Fududeyn kasta oo Garsooraha ula muuqata in ay habboon tahay.



14

Qodobka 34aad
Mudnaanta Fududeynta

Garsooraha waa inuu tixgeliyaa amarka fududeynta da'yarta, haddii ay:

b) tahay markii ugu horreysay ee ay dembi galaan ama fal-dembiyeed ciqaabtiisu aysan ka badnayn 10 (toban) sano;

t) tahay in da'yarta aqoonsan yahay mas'uuliyadda dembiga uu geystay; iyo

j) tahay in caddeymo ku filan oo lagu xukumo aan loo hayn.

Qodobka 35aad
Arrimaha Tixgelinta Mudan

Garsooraha wuxuu tixgelinayaa arrimaha soo-socda marka uu soo saarayo fududeynta:

b) qaan-gaarnimada maskaxeed ee da'yarta;

t) heerka waxbarasho, awoodda garasho, xaaladaha guriga iyo degaanka;

j) da'da da'yarta;

x) xaaladaha qoyska;

kh) caafimaadka da'yarta; iyo

d) arrin kasta oo Garsooruhu u arko lagama-maarmaan si meel-mar ah.

Qodobka 36aad
Xeernidaamiyeyaal

Wasiirka wuxuu soo saarayaa;

1. Xeer-nidaamiyeyaal lagu hirgelinayo Sharcigan.
2. Hab-raacyo iyo hagitaanno tilmaamaya xilka iyo waajibaadka Xafiiska Cadaaladda Carruurta ee Wasaaradda.
3. Xeer-nidaamiye lagu hagayo xarumaha anshax-toosinta ee gaarka loo leeyahay.

Qodobka 37aad
Baabi'in


Sharcigan waxaa lagu baabi'iyey Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin oo la xiriira arrimaha cadaaladda da'yarta.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

15

Qodobka 38aad
Dhaqan-gal

Sharcigan waxaa uu dhaqan-galayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, uuna saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.



SHARCI LR.49 **TAARIIKH: 22-DA FEBRAAYO 2026**

SHARCIGA HANNAANKA LACAG BIXINTA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0825/B11/26**, ku taariikheysan **11/02/2026**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Hindise-Sharciyeedka Hannaanka Lacag Bixinta Qaranka.
MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hannaanka Lacag Bixinta Qaranka.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY: FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-01-2026
TAARIIKH: 02-03-2026
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Odale
Hantidhowraha Guud Ee JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE-SHARCIYEEDKA HANNAANKA LACAG-BIXINTA QARANKA

QEYBTA KOWAAD
QODOBBO HORDHAC AH

Qodobka 1aad
Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "**Sharciga Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka**".

Qodobka 2aad
Eray-bixin

Erayada ku xusan sharcigan gudihiisa waxaa loo fasirayaa sidan hoos ku qeexan:

"Farac" waxaa loola jeedaa hay'ad ka hoos shaqeysa fuliye, hawl-wadeen, adeeg-bixiye, ka-qeyb-qaate ama shirkado maamula adeeg-bixin iyo kuwa kale ee ku xiran maamulka guud ee hawl-wadeenka;

"Bankiga Dhexe" waxaa loola jeedaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ee lagu asaasay Qodobka 3aad ee Sharci Lr. 130 ee 2012;

"Xarunta Iibka" waxaa loola jeedaa xarun u dhexeysa iibiyaha iyo gataha, iyadoo gatuhu uu noqon karo iibiye halka iibiyuhu uu markiisa noqon karo gate, iyagoo adeegsanaya nidaamka kala-baxa xisaabaadka;

"Xarunta Keydka Rahanta" waxaa loola jeedaa xarun awood u leh arrimaha soo socda:

a) ilaalinta rahanta iyadoo aan la isticmaali karin, lana adeegsan karin;
b) diiwaan-gelinta dhaqdhaqaaqyada rahanta;
c) ilaalinta iyo bixinta adeegyada maaliyadda; iyo
d) haynta iyo diiwaan-gelinta rahanta hab muuqaal ah iyo hab elektaroonig ah.

"Is-waafajin" waxaa loola jeedaa isku dheeli-tirka, is-waafajinta ama xaqiijinta dhammaan dhaqdhaqaaqyada ka hor inta aan la bixin lacagaha sida jaangoynta iyo ka-gun-gaarista xisaabta;

"Xarunta is-waafajinta" waaxaa loola jeedaa nidaam isku xiran kaasoo ka-qeyb-qaateyaashiisa u fududeynaya in ay isku dhaafsadaan tilmaamaha lacag-bixinta, is-waafajinta, dhaqdhaqaaqyada rahmadaha iyo adeegyada kala-baxa xisaabaadka.



"Nidaamka is-waafajinta"-

a) waxaa loola jeedaa hannaan macaamiisha ay isku dhaafsanayaan xogaha la xiriira lacagaha ama hantida loo wareejinayo macaamiisha kale, iyadoo la marayo nidaam dhexe ama hal xarun; iyo
b) waa hab lagu go'aaminayo ama lagu xisaabinayo xaaladda ka-qeyb-qaateyaasha oo ka kooban laba dhinac ama in ka badan, iyadoo lagu salaynayo kala-baxa xisaabaadka dhexmaray;

"Joojinta heshiiska" waxaa loola jeedaa nidaam lagu joojinayo heshiis hore u jiray, kaasoo wakiilka dhexe uu isaga ilaalinayo khasaaro kaga imaan kara hay'adda ama qofka fulin waayey wajibaadka laga rabay;

"Xisaab isu-celinta" waxaa loola jeedaa marka ay laba dhinac go'aansadaan in ay joojiyaan heshiiska u dhexeeya sabab jirta awgeed, marka la joojiyo heshiiska labada dhinac waa in ay isu celiyaan lacagaha ay isku yeeshaan;

"Rahan" waxaa loola jeedaa hanti ama damiinu-maal kaasoo loo adeegsanayo damaanad-qaad si loo xaqiijiyo waajibaadka labada dhinac ama midkood,

"Guddi" waxaa loola jeedaa Guddiga Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka;

"Kaarka Amaahda" waxaa loola jeedaa kaar u oggolaanaya qofka sita in uu ku gadan karo agab iyo adeeg taas oo amaah ku ah akoonkiisa, muddo ka dibna laga rabo in uu dib u bixiyo;

"Khatarta Amaahda" waxaa loola jeedaa khatarta ka imaan karta heshiiska amaahda maaliyadeed ee dhexmara laba dhinac oo uu midkood bixin waayo deynta oo dhammeystiran xilliga lagu balamo.

"Macmiilka":

a) waa hay'ad ama shakhsi, kaasoo adeegsaday ama ku haminaya in uu adeegsado agabka iyo adeegga uu bixiyo fuliye ama hay'adda adeegga lacag-bixinta, si toos ah ama si dadban; iyo
b) waxaa ka mid ah macaamiisha ku xiran shirkadda qaabilsan lacag-bixinta.

"Kaarka Lacag-qaadashada" waxaa loola jeedaa kaar ama hab si toos ah lacagta loogala bixi karo akoonka hay'adda lacagta lagu keydiyey si wax loogu gato;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

"Fulin-waa":

a) waxaa loola jeedaa marka dhinac ka soo bixi waayo shuruuddii ay ku heshiiyeen Bankiga Dhexe oo ah fuliyaha, hawl-wadeenka iyo ka-qeyb-qaataha; taasoo ku qeexneyd heshiis dhexmaray laba dhinac; arrintani waxay la xiriirtaa lacag ku maqan dhinaca ka-qeyb-qaataha;
b) sidoo kale waa marka lagu guul-dareysto bixinta lacagta ama hantida oo dhammeystiran sida ku cad shuruudaha iyo nidaamka degsan.

"Maareynta Fulin-waaga Deymaha"

a) waxaa loola jeedaa, nidaaam loo dejinayo kuwa bixin waaya deymaha iyo hab looga fogaanayo khataraha ka dhalan kara markii deynta la bixin waayo;
b) Nidaamka loo maareynayo waxaa ka mid ah:
   i. xisaab isu-celinta;
   ii. u-kala-celinta xisaabaha furan;
   iii. xaqiijinta iyo qabashada damaanadda; iyo
   iv. in la helo hababka kale oo lagu sugi karo damaanadda rahmadda.

"Fulin-waayaha" waxaa loola jeedaa ka-qeyb-qaataha nidaamka lacag-bixinta kasoo tallaabo rasmi ah laga qaadey kadib markii uu ku guul-dareystey inuu fuliyo waajibaadkiisii lacag-bixinta.

"Wareejinta Lacagaha Elektarooniga ah" waxaa loola jeedaa marka uu qofku bixinayo si guud ama qeyb ahaan lacagaha isagoo adeegsanaya kaarkiisa keydka ama kaarkiisa amaahda, isagoo isticmaalaya xisaabtiisa bangiyada, adeegsanayana alaadaha kala duwan ee lacagaha la isugu diro iyo qalabyada kale. Iyadoo ay ka reebanyihiin jeegagga boostada, kuna jiraan:

a) mishiinka fudud ee wax lagu iibiyo;
b) mishiinka lacagta lagala baxo;
c) habka lacagta la isugu diro ee taleefoonada; iyo
d) dhammaan lacagaha kale ee la iskugu diro habab kale sida, internetka iyo wadiiqooyinka kale ee isgaarsiinta.

"Lacagta Elektarooniga ah" waxaa loola jeedaa lacag elektaroonig ah oo qiimo ahaan u dhiganta lacagta caadiga ah, taasoo uu sheeganayo soo-diruhu sida:

a) mid ku keydsan aaladaha lacag-bixinta sida: kaararka lacagta, taleefoonnada, ama kumbiyuutarrada;
b) lacagta uu helo waa in aysan ka yaraan qiimaha lacagta caadiga ah; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

c) waa in ay tahay adeegsigeeda lacag-bixintaasi mid bulshada dhexdeeda laga oggol yahay.

"Hay'adda Maaliyadda" waxaa loola jeedaa hay'ad maaliyadeed oo haysata shati sida uu qabo Sharciga Hay'adaha Maaliyadda ee sharci Lr. 38 ee 2025;

"Ka-qeyb-qaate Shisheeye" waxaa loola jeedaa hay'ad ka hawl-gasha gudaha Soomaaliya laakiin asalkeedu ka diiwaan-gashan yahay ama laga leeyahay meel ka baxsan Soomaaliya;

"Habka Kala-wareejinta Guud" waxaa loola jeedaa hannaan la isku dhaafsanayo lacagaha, tilmaamo la isugu wareejinayo lacagaha ama waajibaadyada kale ee qofka saaran, iyadoo hannanka lacag is-dhaafsiga uu yahay mid dhammeystiran;

"Habka Isku Xiranka":

a) waxaa loola jeedaa is-waafajinta labo nidaam ama ka badan si ay awood ugu helaan in ay isku xirmaan una wada shaqeeyaan, iyadoo la adeegsanayo hab farsamo ama sharci; iyo
b) waxaa ka mid ah in labo hab oo kala duwan ama laba macaamiil ay lacag isku wareejin karaan ama labo akoon oo hay'ado kala duwan ah ay lacag isu diri karaan si caqabad la'aan ah.

"Khatar Sharci" waxaa loola jeedaa marka aad sharciga ama xeer-nidaamiye ugu dhaqantid si aan sharciga waafaqsanayn taasoo keeni karta khasaare;

"Shati-qaate" waxaa loola jeedaa fuliye, hay'ad ka shaqeysa nidaamka lacag-bixinta ama bixisa adeegga lacag-bixinta;

"Khatarta Lacag-yarida" waxaa loola jeedaa marka ka-qeyb-qaateyaasha qeybaha ka ah adeegga lacag-bixinta aysan haysan lacag caddaan ah oo ku filan, si ay ugu maamulaan hawlaha joogtada ah ee hay'adooda ama ay ku gutaan waajiibaadka maaliyadeed ee laga rabo, haseyeeshe ay suurto-gal tahay in ay awoodaan muddo kadib;

"Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka" waxaa ka mid ah dhammaan hay'adaha, kaabayaasha, nidaamka, hawlaha, sharciyada, xeer-nidaamiyaha, iyo hab-raacyada Soomaaliya, haddii ay yihiin kuwa guud ama kuwa gaar u ah ee la xiriira hababka lacag-bixinta, fuliyaha, hay'adaha lacag-bixinta, adeegga lacag-bixinta, agabka lacag-bixinta iyo isticmaalayaasha hannaanka lacag-bixinta;



"Isku Jaangoyn" waxaa loola jeedaa dhammeystirka waajibaadka ka dhexeeya hay'adaha ama shakhsiyaadka, iyadoo la yareynayo tirada iyo dhaq-dhaqaaqyada lacagaha badan, si ay u bixiyaan hay'adaha lacagta dheeriga ah ee lagu yeesho marka u dambeysa;

"Maareynta Jaangoynta" waxaa loola jeedaa diyaarinta hab-qoraal ah oo kulminaya qeybaha kala duwan ee qaan-sheegatooyinka, waajibadyada, iyadoo la isugu geynayo hal qaan-sheegad ama hal waajib sida: isku jaangoynta laba, hay'adood ama hay'ado badan, jaangoynta heshiis la beddelay, xisaab isku-celinta wadajirka ah ama isku dhafka qaar ka mida ah;

"Heshiis Beddelid" waxaa loola jeedaa hannaan loo marayo in la baabi'iyo heshiis hore oo u dhexeeyey laba dhinac oo kala ah iibiye iyo iibsade, labada dhinac ayaa beddelaya heshiiskoodii hore, iyadoo iibiyaha uu isku beddelayo gate halka gatuhu uu isku-beddelayo iibiiye, iyagoo gelaya heshiis cusub;

"Sarkaal" waxaa loola jeedaa hawl-wadeen ka shaqeeya fuliyaha, adeegga lacag-bixinta, sida maamule ama qof kasta oo ka shaqeynaya ama loo siiyey awood in uu qabto hawlaha la xiriira fuliyaha, adeegyada lacag-bixinta, sidoo kale qeyb ka ah maamulka hay'adaha maaliyadda ee ka dhisan gudaha Soomaaliya;

"Khatar Hawleed" waxaa loolaa jeedaa khataraha la xiriira nusqaan ku timaadda hawlaha hay'adda dhexdeeda ah, maamulkeeda, qaladaad ka dhaca shaqaalaha ama xaalad uga timaadda dibadda, taasoo sababta hoos u dhac ama kala go' ku yimaada adeegii ay bixinayeen fuliyaha ama hay'adaha lacag-bixinta;

"Fuliye/Hawl-wadeen" waxaa loola jeedaa Bankiga Dhexe ama hay'ad kasta oo uu Bankiga Dhexe siiyay shati in ay uga shaqeyn karto adeegyada lacag-bixinta, adeegga jaangoynta ama is-weydaarsiga lacagta; sidoo kale hawl-wadeenka ayaa noqon kara wakiil jaangoyneed ama xarun dhexe oo lacagaha la isku weydaarsado;

"Ka-qeyb-qaate"

a) waxaa loola jeeda xubin loo oggolaaday in uu qeyb ka noqdo nidaamka lacag- bixinta, lana siiyey awood uu lacag ugu wareejin karo ka-qeyb-qaateyaasha kale ee nidaamka ugu xiran si toos ah ama si dadban;
b) marka habka tooska loo eego, waa marka xubinta nidaamka isticmaalaya uu isagu bixinaayo qaantiisa isagoo anan cidna maraynin, sidoo kalena bixinaaya qaanta macaamiishiisa iyo qaanta kuwa sida dadban ugu xiran nidaamka; iyo



c) xubin dadban waa mid ku tiirsan xubin kale oo nidaamka lacag-bixinta toos ugu xiran lacagna ku kala wareejin kara si uu u qaan baxo.

"Kaarka Lacag-bixinta"

a) waxaa loola jeeda kaar, buuga boonada ama qalab kale, sida lambarka sirta ama hab kasta oo loogu furan karo akoonka, taasoo lacag loogala bixi karo ama lacag looga diri karo; iyo
b) waxaa kale oo ka mid ah kaararka amaahda, qaanta ama kaararka kale ee wax lagu kaydsado.

"Tilmaamaha Lacag-bixinta" waxaa loola jeedaa hab elektaroonik ah ama hab muuqda kaasoo lagu dalbanayo wareejin lacag, hanti ama hababka kale ee lacagaha ay isku weydaarsan karaan, fuliye iyo ka-qeyb-galeyaasha hannaanka lacag-bixinta;

"Aaladda Adeegga Lacag-bixinta"

a) waxaaa loola jeedaa hab la taaban karo ama aan la taaban karin, kaasoo qofka awood u siinaya in uu helo lacag, adeegga, agab uu ku bixin karo, kuna wareejin karo lacag; iyo
b) hababka waxaa ka mid ah, jeegaga, qaabka lacagta caadiga ah ama agabyada lacagaha la isugu diro (mishiinada lacagaha lagala baxo, mishiinada wax lagu iibiyo, internet-ka, telefoonada, kaararka lacag-bixita), waxaa kaloo ka mid ah kuwa lagu keydsado lacagaha elektarooniga ah.

"Adeegyada Lacag-bixinta"

a) adeegyadan waxaa ka mid ah:
   i. lacag dhigashada iyo lacag la bixid;
   ii. fulinta dhaqdhaqaaqyada maaliyadda;
   iii. soo-saarista ama qabashada habka lacag-bixinta;
   iv. bixinta adeegayada xawilaadaha; iyo
   v. adeegyada kale ee lacagaha la isugu diro.
b) sidoo kale soo-saarista lacagaha elektarooniga ah iyo aaladaha lacagaha elektarooniga ah;
c) laakiin kama mid ahan adeegyada tooska ah (online) sida internet-ka dhexdiisa, isgaarsiinta ama shabakadaha lagu galo.

"Adeeg-bixiye Maaliyadeed" waxaa loola jeedaa qofka ama hay'ad leh shati uu soo saaray Bankiga Dhexe, si uu uga shaqeeyo adeegga lacag-bixinta;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

"Hannaanka Lacag-bixinta"

a) waxaa loola jeedaa hannaanka lacag-bixinta, is-waafajinta iyo nidaamka xallinta lacagaha;
b) waxaa kaloo ka mid ah:
   i. agabyada, hab-raacyada, iyo xeer-nidaamiyeyaasha la raaco marka ay lacag isu wareejinayaan adeeg-bixiyeyaasha dhexdooda; iyo
   ii. ka-qeyb-qaateyaasha iyo hay'adaha ka shaqeeya habaynta iyo hagaajinta hannaanka lacag-bixinta.

"Kala-baxa Xisaabaadka Waqtiga La Taagan Yahay" waxaa loola jeedaa marka ugu dambeysa ee lagu kala-baxayo xisaabaadka iyo waajibaadyada lacagaha la is-weydaarsaday saacadahaas iyo maalintaas, iyadoo loo fiirinayo dhaqdhaqaajinta lacagaha waqtiga shaqada ee maalintaas;

"Adeegga Xawilaadda" waxaa loola jeedaa adeeg ka shaqeeya dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, waana hab lacagaha isugu xawili karaan laba qof oo kala jooga goobo kala duwan, iyagoo isticmaalaya xubin ka tirsan nidaamka lacag-xawilidda isla markaana adeegsanaya hab elektaroonik ah, lacag caddaan ah, jeeg ama dhammaan siyaabaha kala duwan ee lacagaha la isugu diro. loo-diruhu wuxuu heli doonaa fariin caddeynaysa in lacag loo soo xawilay;

"Sugitaanka Mulkiyadaha" waxaa loola jeedaa maal-gashiyada ku saleysan mid laga gorgortami karo iyo mid aan laga gorgortami karin, taasoo qofka siinaysa lahaansho mulkiyadeed maal-gashigiisa sida, shahaadada rahanta, saamiga iyo waraaqaha damaanadda;

"Kala-bax" waxaa loola jeedaa oofinta waajibaadyada, iyadoo la wareejinayo lacagaha ama sugitaanka mulkiyadaha iyo wixii agab maaliyadeed ah oo dhexmaray labo xubnood iyo wixii ka badan;

"Akoonka Kala-baxa Xisaabaadka" waxaa loola jeedaa akoon ka furan Bankiga Dhexe oo loogu talo-galay in lagu hayo lacagaha ka-qeyb-qaateyaasha nidaamka lacag-bixinta si ay ugu kala-baxaan xisaabaadka dhexmara ka-qeyb-qaateyaasha kale ee qeybta ka ah hannaanka lacag-bixinta;

"Wakiil Kala-baxa Xisaabaadka" waxaa loola jeedaa hay'ad maamusha hannaanka lacag kala-wareejinta ama heshiisyada kale, taas oo loo baahan yahay marka la kala baxayo ama

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

xisaabaadka la kala wareejinayo lacagaha, waxayna ka-qeyb-qaateyaasha uga furtaa xisaabaad nidaamka dhexdiisa taasoo lagu keydinayo lacagaha loo kala wareejinayo ka-qeyb-qaateyaasha adeegsanaya nidaamka lacag- bixinta;

"Khatarta Kala-baxa Xisaabaadka" waxaa loola jeedaa khatarta ka imaan karta marka hal dhinac uu ku guul-dareysto in uu fuliyo waajibaadka kaga aaddan dhinaca kale ama wakiilka kala-baxa xisaabaadka;

"Nidaamka Kala-baxa Xisaabaadka" waxaa loola jeedaa nidaaam uu asaasay uuna maamulo Bankiga Dhexe ama hay'adaha kale kuwaasoo lagu fulinayo waajibaadka la xiriira lacag-bixinta, sidoo kale hantida iyo adeegyada kale ee maaliyadda;

"Isku-xire" waa hab fududaynaya xiriirka u dhexeeya hay'adaha ka shaqeeya adeegga lacag-bixinta ama nidaamyo kala duwan;

"Hannaan" waxaa loola jeedaa nidaam ka dhexeeya seddex dhinac ama in ka badan kuwaasoo isticmaalaya hal nidaam iyo heshiis qaabaysan, kaasoo sameynaya is- waafajin ama fulin dalabka lacag-wareejinta u dhaxeysa dhinacayada; waxaa ka mid ah: nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta lacag-bixinta, kala-baxa xisaabaadka, iyo xallinta lacag-bixinta, balse waxaan ku jirin:

a) xarun is-waafajineed oo uu Sharci kale aqoonsan yahay;
b) nidaam ay Hay'ad gaar u leedahay si ay ugu adeegsato fulinta arrimaheeda maamul ee gaarkaah; nidaamkaas oo aan ka-qeyb-qaateyaal kale u sameynin is-waafajinta, kala-wareejinta iyo kala-baxa xisaabaadka lacagaha; iyo
c) Nidaamyada ama heshiisyada kale ee uu Sharci qeexayo.

"Hannaanka Lacag-bixinta Muhiimka ah" waxaa loola jeedaa hannaan lacag-bixin oo awood u leh in uu keeno ama gudbiyo carqalad baahsan, waxaana ka mid ah hannaan lacag-bixineed oo keligiis ah ama ah kan ugu weyn marka la eego wadarta guud ee qiimaha lacag-bixinta; iyo

"Khatarta Baahsan" waxaa loola jeedaa khatar ka dhalan karta marka hal ka- qeyb-qaate uu gudan waayo waajibkiisa, taasoo keenta in ay ka-qeyb-qaateyaasha kalena fulin waayaan waajibaadka laga filayey.



Qodobka 3aad
Ujeeddada Sharciga

Ujeeddooyinka sharcigani waa:

1. Kor-u-qaadista bed-qabka iyo ilaalinta wax-ku-oolnimada iyo hufnaanta nidaamka Lacag-bixinta Qaranka.
2. Kor-u-qaadista xasiloonnida guud ee nidaamka maaliyadda Soomaaliya.
3. Yareynta khatarta iyo waxqabad la'aan ku imaan karta Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka.
4. Kor-u-qaadista awoodda Bankiga Dhexe si uu u abuuro una maamulo nidaamka lacag-bixinta midaysan ee qaranka.
5. Kobcinta maal-gashiyada iyo ilaalinta macaamiisha.

Qodobka 4aad
Dabaqaad

Sharcigan waxaa lagu dabaqayaa:

1. Hawl-wadeenka nidaamka lacag-bixinta, nidaamka is-waafajinta, nidaamka kala-baxa xisaabaadka, iyo
2. Bixiyaha adeegga lacag bixinta.

QEYBTA LABAAD
QAAB-DHISMEEEDKA HAY'ADDA
Qodobka 5aad
Awoodaha iyo Wajibaadka Bankiga Dhexe

Bankiga Dhexe wuxuu awood u leeyahay sidoo kalena qaban karaa hawlaha soo socda:

1. In uu qaabeeyo, dhaqan-geliyo nidaamka lacag-bixinta si waafaqsan hal-beegyada caalamiga ah.



2. Shati-siinta, nidaaminta, kor-joogteenta iyo kormeerka fuliyaha nidaamka bixinta, Is-waafajinta, nidaamka is-waafajinta iyo bixiyaha adeegga maaliyadeed.

3. Nidaaminta iyo kormeerka shaqooyinka lacagaha elektarooniga ah.

4. Qeexitanka xeernidaamiyaasha lagu dhaqayo, lagula soconayo, sidoo kalena lagu ilaalinayo bed-qabka Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka.

5. In uu noqdo hawl-wadeenka, abaabulaha, aasaasaha hay'adaha ka shaqeeya dhinaca hal-abuurada casriga ah si waafaqasan sharciga.

6. In uu go'aamiyo shuruudaha guud iyo kuwa gaarka ah, hab-raacyada, xeer-nidaamiyaha si waafaqsan Sharcigan, kuwaasoo lagu dhaqayo hay'ad kasta oo qaadatay shatiga, iyadoo la hubinayo in ay dhaqan-geliyeen shuruudaha, hab- raacyada iyo xeer-nidaamiyaha.

7. Soo-saarista xeer-nidaamiyeyaal, awaamiir, habraacyo, wareegtooyin kuwaasoo lagu xaqiijinayo ka gun-gaarista ujeeddooyinka dhaqan-galka Sharcigan.

8. In uu diyaariyo xeer-nidaamiyeyaal lagu qaabaynayo adeegyada bixinta, is-waafajinta, xallinta lacag-bixinta, gaar ahaan:
   a) maareynta xisaab isu-celinta;
   b) habka wadaagga xogaha iyo xakameynta khataraha;
   c) dhammeystirka xallinta iyo kala-baxa xisaabaadka ugu dambeeya ee lacag-bixinta; iyo
   d) arrimaha kale ee la xiriira yareynta khataraha ka dhalan kara nidaamka.

9. Diyaarinta habka loo qabanayo damaanadaha maaliyadda.

10. In uu xaqiijiyo dadka isticmaala adeegga lacag-bixinta in loola dhaqmo si siman oo daah-furan.

11. In uu sameeyo hagayaal, xeer-nidaamiyeyaal iyo wareegtooyin Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka:
   a) in uu aruuriyo, faafiyo dhammaan xogaha iyo warbixinada la xiriira nidaamka lacag-bixinta qaranka;
   b) in uu mas'uul ka yahay dhaqan-gelinta Sharcigan; iyo



c) in uu qabto hawlaha la xiriira hannaanka lacag-bixinta sida: is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka iyo wixii kale oo la xiriira nidaamka lacag-bixinta, si uu uga miro-dhaliyo hawlaha uu u xilsaaran yahay.

Qodobka 6aad
Hawlaha Joogtada ah ee Bankiga Dhexe

1. Bankiga Dhexe Wuxuu bixinayaa adeegyada sida:
   a) nidaamka bixinta, is-waafajinta iyo kala-bixidda xisaabaadka lacagta; iyo
   b) hawl-wadeenka, ka qeyb-qaata is-waafajinta, iyo kala-baxa xisaabaadka hannaanka lacag-bixinta.

2. Bankiga Dhexe wuxuu awood u leeyahay:
   a) in uu asaaso, lahaado kana-shaqeysiiyo, qeyb ka noqdo milkiyadda nidaamka bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka lacag-bixinta;
   b) in uu ahaado xarun u dhexaysa hay'adaha ka qeyb-qaata lacag-bixinta;
   c) in uu u furo, hayo akoonnada ay lacagaha ku keydsadaan fuliyaha iyo hay'adaha qeybaha kaah hannaanka. iyagoo u isticmaalaya is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka iyo ka-qeyb-qaateyaasha kale ee hannaanka lacag- bixinta;
   d) in uu ka hayo dammaanad ka-qeyb-qaateyaasha iyo hawl-wadeennada kale, taasoo loo isticmaali karo is-waafajinta, iyo kala-baxa xisaabaadka hannaanka lacag-bixinta;
   e) in uu bixiyo deyn maalinle ah, habeen-dhax ah iyo shuruudaheeda ama deyn kale oo laga haynayo dammaanad ku habboon;
   f) in uu qabto adeegayada xisaab isu-celinta, xarunta is-waafajinta iyo qabashada rahanta;
   g) in uu qeyb ka noqdo hawlaha is-waafajinta iyo hawl-gallada kala-baxa xisaabaadka;
   h) in uu noqdo xarun dhexe oo lagu keydiyo rahanta (Securities) ama in uu rukhsad u siiyo hay'adaha kale in ay noqdaan xarun lagu keydiyo rahanta;
   i) in uu noqdo wakiilka kala-baxa xisaabaadka damaanadaha;
   j) in uu isku-duwe ka noqdo hawlaha adeegga lacag-bixinta kaasoo ay qeyb ka yihiin daneeyeyaasha kale oo ay khuseyso;
   k) in uu sameeyo guddi ka talo bixiya nidaaminta, kor-joogtaynta iyo kormeerka nidaamka lacag-bixinta qaranka;

3. Bankiga Dhexe wuxuu qabanayaa hawlaha ay ka mid yihiin nidaamka lacag- bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka, kuwaas oo ka mid noqonaya:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

a) nidaamka kala-baxa xisaabaadka waqtiga la taagan yahay;
b) xarunta is-waafajinta adeegga elektarooniga ah;
c) isku xirka dhaqdhaqaaqyada maaliyadda ee qaranka; iyo
d) nidaamka bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka ee uu Bankiga u arko in ay yihiin muhiim.

4. Isagoo gudanayo hawlihiisa ama adeegsanaya awoodda Sharcigu siinayo, Bankiga Dhexe, waa inuu dhaqan-geliyaa xeer-nidaamiyaha caalamiga ah ee la xiriira Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka.

Qodobka 7aad
Dhisidda Guddiga Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka

1. Bankiga Dhexe waa in uu asaasaa guddiga nidaamka lacag-bixinta qaranka.

2. Guddiga wuxuu noqonayaa madal kala talinaysa Bankiga Dhexe arrimaha soo socda:-
   a) Diyaarinta istaraatijiyado lagu horumarinayo Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka;
   b) Dejinta habraac iyo farsamooyinka ee saameynta ku leh nidaamka Lacag-bixinta Qaranka oo ay ka mid yihiin adeegyada lacag-bxinta, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka (xasilinta xisaabaadka) iyo damaanadaha;
   c) In uu qeexo nidaamyada cusub ee lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka ee lagu horumarin karo Dawladda Soomaaliya;
   d) In uu isku xiro daneeyeyaasha, si loo dhaqan-geliyo horumarinta Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka;

3. Bankiga Dhexe ayaa xoghayn ka noqonaya Guddiga Hannaanka Lacag-bixinta Qaranka.

4. Guddiga tala-bixinta wuxuu ka koobnaanayaa:
   a) Guddoomiyaha Bankiga Dhexe oo noqonaya Guddoomiyaha Guddiga;
   b) Agaasimaha sare ee lacagaha iyo nidaaminta hab-maaliyadeedka Bankiga Dhexe;
   c) Xubin ku xeel-dheer arrimaha hannaanka lacagta-bixinta oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.
   d) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda;
   e) Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka;
   f) Maamulaha Ururka Bankiyada Soomaaliya;
   g) Maamulaha Ururka Xawaaladaha Soomaaliya;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

h) Xubin kasocota Ururka Shirkaddaha Bixiya Adeegga Tacagta Taleefoonnada; iyo,
i) Cidii kale ee Guddoomiyaha Bankigu u magacaabo iyada oo lagu soo daabacayo Website-ka Bankiga Dhexe.

5. Iyadoo la raacaya tilmaamaha Bankiga Dhexe, guddigan wuxuu ku shaqeynayaa hab-raacayo u gaar ah ee uu soo saaro Bankiga dhexe.

QEYBTA SEDDEXAAD
SHATI-BIXIN
Qodobka 8aad
Awoodda Shati-bixinta iyo Kormeerka

Bankigu wuxuu awood u leeyahay in uu bixiyo shatiga, isla markaana uu kormeero:

1. Dhammaan hawl-wadeennada iyo hay'adaha ka shaqeeya hannaanka lacag-bixinta, is-waafajinta, iyo kala-baxa xisaabaadka.

2. Cid kasta oo qabata adeegyada lacagaha lagu bixiyo.

Qodobka 9aad
Mamnuucidda ku Shaqeynta Shati La'aan

1. Cidna kama shaqeyn karto hannaanka lacag-bixinta, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka iyo dhammaan adeegyada kale ee la xiriira, iyagoo aan shati laga haysan Bankiga Dhexe.

2. Mamnuucidda ku cad faqradda (1) ee qodobkan, laguma dabaqi karo hannaanka lacag-bixinta, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka iyo dhammaan adeegyada kale ee uu bixiyo Bankiga Dhexe.

Qodobka 10aad
Hawlaha iyo Adeegyada uu Nidaamiyo Bankiga Dhexe

Hawlaha iyo adeegyada soo socda waxaa nidaaminaya Bankiga Dhexe sida uu qabo sharcigan:

1. Tilmaamaha is-waafajinta lacag-bixinta ee u dhexeeya hay'adaha maaliyadda iyo kuwa aan aheyn.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Hubinta tilmaaamaha waajibaadyada is-waafajinta xisaabaadka la is-dhaafsaday.

3. Lacagaha laysugu dirayo koontooyinka, iyadoo la adeegsanayo aaladaha elektaroonikada ah.

4. Qulqulka lacagaha laysugu diro aaladaha danabeysan ama elektroonikada.

5. Bixinta adeegyo casri ah, si loo fududeeyo isku beddelidda marinnada iyo maareynta xogaha nidaamka is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka ee hawl-wadeenka ama adeeg-bixiyeyaasha hannaanka lacag-bixinta.

6. Fududaynta isku-xiranka nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka iyo adeegyada kale ee u dhexeeya hay'adaha bixiya adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-qaateyaasha, macaamiisha gudaha iyo dibaddaba.

7. Bixinta adeegyada lacag-bixinta ee elektarooniga ah.

8. Dhisidda shabakad isgaarsiineed oo u dhaxeysa hay'adaha maaliyadda.

9. Dalbashada ama gudbinta tilmaamaha lacag-bixinta.

10. Keydinta macluumaadka xambaarsan ujeeddooyin saameynaya lacag-bixinta.

11. Soo-saarista agabka lacag-bixinta.

12. Dejinta marinnada la isugu gudbiyo lacagaha sida mishiinada yaryar (POS), mishiinada lacagaha lagala baxo (ATM), xarumaha wakiilada kale, adeegyada internet-ka ku shaqeeya iyo meelaha kale ee lacagaha la isugu diro.

13. Hawlaha ama adeegyada kale ee uu Bankigu ku qeexi doono xeer- nidaamiyeyaasha.

Qodobka 11aad
Codsiga Shatiga

1. Cid kasta oo daneyneysa in ay hawl-geliso nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta, iyo kala-baxa xisaabaadka waa in ay shati ka soo dalbataa Bankiga Dhexe.

2. Cid kasta oo daneyneysa in ay bixiso adeegga nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta, iyo kala-baxa xisaabaadka waa in ay shati ka soo dalbataa Bankiga Dhexe.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Dhaqan-gelinta faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan, waxaa loo marayaa xeer-nidaamiyaha uu sameeyo Bankiga Dhexe, iyadoo lagu lifaaqayo dukumentiyada, xogaha iyo khidmadda ku qeexan xeer-nidaamiyaha.

Qodobka 12aad
Bixinta Shatiga

1. Ka dib markuu Bankiga Dhexe helo araajida shatiga ama marka loo soo diro dukumentiyada codsadaha looga baahan yahay oo dhammeystiran, Bankiga Dhexe muddo (90) maalmood gudahood ah ayuu go'aan kaga gaarayaa bixinta shatiga.

2. Bankiga Dhexe wuxuu shatiga oggolaanayaa ka dib markuu qiimeeyo shuruudaha ku xusan xeer-nidaamiyaha, kuwaasoo xilli kasta wax lagu dari karo, lagana beddeli karo, haddii loo arko in ay ku habboon yihiin xaaladda taagan.

3. Shatiga lagu soo saaray si waafaqsan sharcigan, wuxuu jirayaa muddada lagu cayimay xeer-nidaamiyaha Bankiga Dhexe.

4. Marka Bankiga Dhexe diido codsadaha arjigiisa:
   a) Bankiga Dhexe waa in uu sababeeyaa diidmadiisa, isla markaana uu ku wargeliyo codsadaha go'aanka diidmada ah muddo afar iyo toban (14) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta go'aanka la soo saaro;
   b) codsadaha la diiday wuxuu dib u soo codsan karaa shatiga muddo lixdan (60) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta uu helo go'aanka diidmada shatiga, haddii codsadaha uu soo dhammeystiro waxyaabihii ka dhimanaa oo keenay in shatiga loo diido; iyo
   c) Bankiga Dhexe waa in uu tixgeliyaa codsiga labaad isaga oo fiirinaya shuruudaha ku qeexan sharcigan, waxaana u furan in uu diido ama bixiyo shatiga codsadaha.

5. Codsadaha uu Bankiga Dhexe u diido shatiga sida ku cad faqradda (4)(b) ee qodobkan, wuxuu cabasho u qaadan karaa Guddoomiyaha Bankiga Dhexe soddon (30) maalmood gudahood, kadib marka uu helo go'aanka diidmada ah.

6. Cabashada ku cad faqradda (5) ee qodobkan, waxaa go'aan ka gaaraya golaha sare ee maamulka Bankiga sida ku cad xeer-nidaamiyaha Bankiga.

7. Haddii uu ku qanci waayo go'aanka guddiga, waxuu cabasho dacwad maamul u gudbin karaa maxkamada awooda u leh.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 13aad
Faafinta Shatiga

Bankiga Dhexe ayaa soddon (30) maalmood, ka dib bixinta oggolaanshaha shatiga, website-kiisa ku daabacaya magaca codsadaha shatiga loo oggolaaday, taariikhda shatiga la bixiyey iyo nooca ganacsiga shatiga la oggolaaday.

Qodobka 14aad
Noocyada Shatiyada

1. Iyadoo la raacayo xeer-nidaamiyaha Bankiga Dhexe wuxuu soo saarayaa shatiyo kala duwan sida ku cad sharcigan, kuwaas oo kala yeelanaya noocyo kala gaar ah iyo shuruudo kal duwan.

2. Shatigu waa in ay ku cadahay nooca ganacsiga, hawsha ama adeegga uu qabanayo shati-qaatuhu. Waa suurtagal in labo shati lagu mideeyo hal shati laguna hawl-geliyo.


3. Shati-qaatuhu ma qaban karo ganacsi ama adeeg lacag-bixineed oo aan ahayn kan ku cayiman shatigiisa.

Qodobka 15aad
Diiwaan-gelinta Looga Maarmayo Shatiga

1. Bankiga Dhexe wuxuu diiwaan-gelin karaa codsade, si uu u bixiyo ama u maareeyo adeegga lacag-bixin iyadoo aan la siin shati, haddii maareynta nooca lacag-bixinta aysan keeni karin:
   a) ku lug-lahaansho ama khatar halis gelin karta suuqyada maaliyadda; ama
   b) dhaawac ku yimaada tartanka furan.

2. Diiwaan-gelinta waa in aysan takoorin qaar ka mid ah hay'adaha bixiya ama qabta adeegyda lacag-bixinta.

3. Diiwaan-gelintu waa in ay wafaqsanaataa shuruudaha loo dejinayo.



Qodobka 16aad
Ka-qeyb-qaateyaasha Dadban

Bankiga Dhexe wuxuu ku xiri karaa ka-qeyb-qaateyaasha aan tooska ahayn in ay soo buuxiyaan shuruud la mid ah kuwa laga rabo ka-qeyb-qaateyaasha tooska ugu xiran, marka uu u arko khatar ku imaan karta nidaamka, ayadoo lagu ogeysiinayo go'aanka fuliyaha hab qoraal ah.

Qodobka 17aad
Cusboonaysiinta Shatiga

1. Shati-qaatuhu waa in uu ka codsadaa Bankiga Dhexe cusboonaysiinta shatiga ka hor sagaashan (90) maalmood inta uusan ka dhicin.

2. Shatiga lagu soo saaray Sharcigan ayaa la cusbonaysiinayaa, ka dib markii la buuxiyo shuruudaha isla markaana la bixiyo khidmadda lagu cusbooneysiinayo sida uu qabo xeer-nidaamiyuhu.

Qodobka 18aad
Codsiga, Khidmadaha iyo Cusboonaysiinta Shatiga

1. Bankiga Dhexe ayaa qeexaya khidmadaha nooc kasta oo shatiga ama diiwaan-gelinta ah taasoo uu Bankigu awood u leeyahay in uu ku bixiyo shatiga sida uu qabo Sharcigan, khidmadahan waxa ka mid ah:
   a) khidmadda aan celiska lahayn waa midda codsiga shati-siinta taasoo lagu daboolayo hawlaha shati-bixinta;
   b) khidmadda ugu horaysa ee diiwaan-gelinta ama shati-bixinta, waxana la bixinayaa markaugu horaysa ee la oggolaado shatiga ama shahaadada diiwaan-gelinta.
   c) khidmadda sanadlaha ah ee shatiga ama diiwaan-gelinta waxaa la bixiyaa marka shatiga ama diiwaan-gelinta la cusboonaysiinayo.

2. Khidmadaha waxaa loo qaadayaa si xaq ah, isla markaana dheeli-tiran oo eex ka madax-bannaan.



Qodobka 19aad
Hay'adaha Maaliyadda ee Shatiga Laga Dhaafay

1. Banki ama hay'ad kasta oo arrimaha maaliyadda ka shaqeeya, isla markaana doonaya in uu bixiyo adeegga lacag-bixinta, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka waa in ay shati ka qaataan Bankiga Dhexe sida uu qabo Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa.

2. Banki kasta oo qaata shatigiisa Banki sida uu dhigayo Sharciga Hay'adaha Maaliyadda, waxaa laga dhaafay in uu qaato shatiga adeegga lacag-bixinta sida ku cad Sharcigan.

3. Bankiga Dhexe wuxuu ka dhaafi karaa shati hay'ad kasta oo maaliyadeed taasoo Sharciga hay'adaha maaliyadda uu u fasaxayo in uu bixiyo adeegga lacag-bixinta.

4. Si kastaba ha ahaatee, Iyadoo ay jirto ka-dhaafid ku xusan faqradda (2) ee qodobkan, Banki ama hay'ad kasta oo arrimaha maaliyadda ka shaqeysa, isla markaana bixisa adeegga lacag-bixinta, waa in ay u hoggaansantaa Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaashiisa.

5. Ma jiro banki ama hay'ad maaliyadeed oo ka shaqeyn kara adeegga lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka, iyadoo aan haysan shati.

Qodobka 20aad
Soo-bandhigidda Shatiga

1. Shati-qaatuhu waa in uu suraa nuqul ka mid ah shatigiisa dhammaan goobaha ganacsiga ee hay'adda shatiga la siiyey sida xarumaha iyo laamaha,

2. Wakiilka bixinaya adeegga lacag-bixinta kaasoo matalaya shati-qaataha waa in uu suraa goobta uu ku shaqeynayo nuqul ka mid ah shatiga hay'adda uu wakiilka u yahay.

Qodobka 21aad
Lama Wareejin Karo Shatiga

1. Shatiga lagu soo saaro Sharcigan lama wareejin karo, iyadoo aan oggolaansho laga haysan Bankiga Dhexe

2. Shatiga aan lagu wareejin oggolaanshaha Bankiga Dhexe ma noqonayo mid sax ah.



Qodobka 22aad
Diiwaanka Shatiyada

1. Bankiga Dhexe waa in uu diyaariyaa keydka xogaha diiwaan-gelinta guud ee shatiyada la bixiyey iyo kuwa la hakiyey ama dib loola noqday.

2. Bankiga Dhexe waa in uu website-kiisa ku soo baahiyaa diiwaanka sidoo kalena waa in uu siiyaa nuqul hadba qofkii codsada.

3. Diiwaanka shatiyada waxaa haynaya Diiwaan-haye fadhigiisu yahay Bankiga Dhexe, uuna magacaabay Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

Qodobka 23aad
Hakinta Shatiga

1. Bankiga Dhexe wuxuu hakin karaa shatiga ka dib marka:
   a) uu ku qanco in fuliyaha ama hay'adda ka shaqeysa adeeggga lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka ay ku guul-daraysatay in ay soo buuxiso shuruudaha ku xusan xeer-nidaamiyaha;
   b) uu ku qanco in fuliyaha ama hay'adda ka shaqeysa adeegga lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka ay ku guul-daraysatay in ay soo dhammeytirto kaabayaasha isgaarsiinta looga baahan yahay sida uu qeexay Bankiga;
   c) uu ku qanco in fuliyaha ama Hay'adda ka shaqeysa adeegga lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka aysan u danaynayn ka-qeyb- qaateyaasha iyo macaamiisha; iyo
   d) hay'adda ka shaqeysa adeegga lacag-bixinta uu sharci kale oo qoran uu ku amro in ay hakiso adeegga.

2. Bankiga Dhexe ma hakinayo shatiga isagoo aan u dirin wargelin fuliyaha ama hay'adda ka shaqeysa adeegga lacag-bixinta muddo 14 (afar iyo toban) maalmood, iyadoo fursad loo siinayo inuu muujiyo sababta aan looga hakinayn shatiga.

3. Haddii waxyaabaha ku xusan faqradda (1)(b) ee Qodobkan, ay saameyn halis ah ku yeeshaan xasiloonnida maaliyadda ama siyaasadda lacagta, Bankiga Dhexe wuxuu isla markiiba wargelin dhaqso ah u dirayaa fuliyaha ama hay'adda adeegga lacag-bixinta, go'aanka hakinta shatiga isagoo u raacinaya sababta go'aankiisa.



a) marka shati-qaatuhu uu ku qancin waayo Bankiga Dhexe in uu xaliyey tuhunkii taagnaa, Bankiga Dhexe wuxuu hakinayaa shatiga ama wuxuu soo saarayaa go'aan ku qeexan xeer-nidaamiyaha;
b) hakinta shatiga waxay noqon kartaa muddo kooban taasoo uu qeexayo xeer-nidaamiyaha, sidoo kale dib ayaa loo hakin karaa ka dib inta laga saxayo waxyaabaha uu Bankiga soo sheegay ama ciladaha ku arkay; iyo
c) marka la hakiyo shatiga, Bankiga Dhexe waa in uu baahiyaa wargelinta hakinta shatiga 48 (afartan iyo sideed) saacadood gudahood, iyadoo la raacayo nidaam degsan.

Qodobka 24aad
Kala-noqoshada Shatiga

1. Bankiga Dhexe wuxuu la noqon karaa shatiga ka dib marka uu dhaco mid ka mid ah arrimahan soo socda:
   a) Haddii shati-qaatuhu uusan ku shaqo bilaabin mudo 6 (lix biloold) ah;
   b) Haddii shati-qaatuhu uu joojiyo adeegga lacag-bixinta muddo dhan 30 (soddon) maalmood, iyadoo aysan jirin sabab maan-gal ah oo keeni karta in uu shaqada hakiyo;
   c) Haddii shati-qaatuhu uu jabiyo qodob ka mid ah Sharcigan;
   d) Haddii shati-qaatuhu diido ama uu ku guul-dareysto ama dayaco in uu fuliyo go'aannada iyo awaamiirta ka soo baxa Bankiga Dhexe ee shatiyada khuseeya;
   e) Haddii ay Bankiga Dhexe u caddaato in shati qaatuhu uu u soo gudbiyo Bankiga xoga been-abuur ah ama uu qariyo xogo muhiim ah;
   f) Haddii shati-qaatuhu uu ka codsado in lagala noqdo shatiga;
   g) Haddii shati-qaatuhu uu diido in kormeere ka socda Bankiga Dhexe uu baaris ku sameeyo xaruntiisa, habka uu u shaqeeyo, dukumentiyadiisa, xogihiisa, ama diiwaankiisa;
   h) Haddii shati-qaatuhu nidaamka uu ku shaqeynayo caqabad ku yahay, bed-qabka, xasiloonnida ganacsiga ama nidaamka maaliyadda, ama waxyeelo ku keeni karo danaha macaamiisha iyo ka-qeyb-qaateyaasha;
   i) Haddii shati-qaatuhu uu musalafo ama dacwad musalafnimo laga gudbiyo ama uu qaato go'aan ah in uu iskiis iska celiyo shatiga lana xaraasho hay'adda;
   j) Haddii nidaamka uu ku shaqeynayo uusan u danaynayn danaha dadweynaha ama danaha ka-qeyb-qaateyaasha;
   k) Sababihii kale ee Sharcigu uu sheegayo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

l) Bankiga Dhexe lama noqonayo shatiga ilaa uu ka siiyo wargelin muddo aan ka yarayn 21 (labaatan iyo kow) maalmood fuliyaha, hay'adaha bixiya adeegga lacag-bixinta taasoo lagu sheegayo sababta loogala noqday shatiga.

2. Hadii shati-qaatuhu uu keeni waayo Bankiga Dhexe sababo macquul ah oo aan loogala noqon karin shatiga, Bankiga Dhexe waxa uu kala noqonayaa shatiga wuxuuna soo saarayaa go'aan ku habboon sida:
   a) waxaa laga dalbanayaa fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta, sarakiisheeda, shaqaalaheeda iyo wakiiladeeda, in ay dib u soo saxaan qaladaadkooda muddo uu Bankiga u cayimay;
   b) in lagu soo rogo ganaax lacageed fuliyaha, hay'adda bixisa adeegga lacag- bixinta, sarakiisheeda, shaqaalaheeda iyo wakiiladeeda kaasoo ku qeexan xeer-nidaamiyaha;
   c) in laga qaado tilaabo kasta oo ku habboon fuliyaha, hay'adda bixisa adeegga lacag-bixinta taasoo ku qeexan Sharciga ama Xeer-nidaamiyaha Bankiga Dhexe; iyo
   d) kuwa lagala noqday shatiga wuxuu Bankiga Dhexe ku faafin doonaa wargelinta kala-noqoshada shatiga 7 (toddobo) maalMood gudahood, iyadoo la raacayo sida ku qeexan xeer-nidaamiyaha.

Qodobka 25aad
Saameynta Kala-noqoshada iyo Hakinta Shatiga

1. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta taasoo lagala noqday shatiga ma bixin karto adeegga lacag-bixinta laga bilaabo maalinka lagala noqdo shatiga.

2. Fuliyaha, hay'adda bixisa adeegga lacag-bixinta oo laga hakiyay shatigeeda ma sii wadi karto shaqooyinka ka dib maalinta laga hakiyo shatiga.

3. Hay'addii lagala noqdo ama laga hakiyo shatiga ma saameynayso:
   a) in ay hirgeliso heshiis la xiriira lacag-wareejin ama adeeg lacag-bixin, ay la galshay fuliyaha, hay'ad bixisa adeegga lacag-bixinta ka hor inta aan lagala noqon ama laga hakin shatiga; iyo
   b) ma taabanayso heshiisyada xuquuqaha, waajibaadyada iyo qaamaha ka horeeyey intii aan shatiga laga hakin ama lagala noqon.



QEYBTA AFARAAD
SHARCIYADA LAGU MAAMULAYO NIDAAMKA LACAG-BIXINTA
Qodobka 26aad
Dajinta Xeerka Nidaamka Lacag-bixinta

1. Fuliyaha, hay'adda ka shaqeysa adeegga lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka waa in ay dejisaa hab-raacyo lagu maamulayo nidaamka maareynta shaqada ee hay'adda loo siiyey shatiga oo ay ka mid yihiin ugu yaraan hab-raacyada soo socda:
   a) maareynta dhammaan khataraha kala duwan sida: yaraanshaha lacag caddaan ah (kaash-yarida), shaqooyinka, deymaha, sharciga lacag-dhaqista iyo maal-gelinta argagixisada, warbixinnada, khatarta tiknoolajiyadda iyo sumcad xumida;
   b) go'aan-ka-gaarista waqtiga ugu dambeeya ee kala-baxa xisaabaadka;
   c) maamul-wanaagga shirkadaha, fududeynta, maareynta dhacdooyinka degdega ah, xuquuqaha iyo waajibaadka macaamiisha iyo hawl-wadeenka ka dhexeeya;
   d) hirgelinta shuruucada guud iyo hab-raacyada lagu hagayo marka la kala wareejinayo lacagaha xilliyada caadiga ah iyo xilliyada ay jiraaan xaladaha gaarka ah;
   e) go'aan qaadashada marka uu isafgaran-waa yimmaado;
   f) xilliga macaamisha akoonadooda lagu shubayo lacagta;
   g) habraaca isku-xiraha nidaamka lacag-bixinta iyo Bankiga; iyo
   h) sharciyada kale ee uu qeexayo Bankiga Dhexe.

2. Arrimaha ku xusan faqrada hore waa:
   a) in ay waafaqsan yihiin Sharciga, xeer-nidaamiyeyaasha, hab-raacyada iyo tilmaamaha uu soo saaro Bankiga Dhexe ee la xiriira maamulka nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka;
   b) in uu ansixiyo Bankiga Dhexe inta uusan dhaqan-gelin fuliyaha;

3. Bankiga Dhexe wuxuu wax-ka-beddel ku sameyn karaa, joojin karaa ama meeshaba ka saari karaa Go'aan ku xusan qodobkan haddii loo arko muhiim;
   a) haddii wax-ka-beddelka, hakinta iyo ka noqoshada go,aan loo arko dan guud;
   b) haddii loo arko danta ka-qeyb-qaateyaasha;
   c) haddii aysan ku habboonayn danaha ka-qeyb-qaateyaasha mustaqbalka kuwaasoo adeegsan doona nidaamka lacag-bixinta iyo is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka;
   d) arrimaha kale ee uu Bankiga Dhexe u arko in ay muhiim yihiin;
   e) Fuliyaha, waxba kama beddeli karo Sharciga, nidaamka, qaab-dhismeedka maamulka, iyadoo aan oggolaansho laga haysan Bankiga Dhexe;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

f) haddii ay dhacdo in ay is-waafajin waayaan habraaca nidaam lacag-bixin iyo Sharcigan, xeer-nidaamiyaha, sharciyada, awaamirta, hab raacyada uu soo saaray Bankiga Dhexe, waxaa lagu dhaqmayaa sharcigan;
g) sharciyada nidaamka lacag-bixinta waa in ay heli karaan ka-qeyb-qaateyaasha iyo cid kasta oo daneynaysa; iyo
h) sharciyada nidaamka lacag-bixinta waa in fuliyuhu ku baahiyaa website-kooda 14 (afar iyo toban) maalmood gudahood ka dib marka uu soo ansixiyo Bankiga Dhexe.

Qodobka 27aad
Adeegsiga Nidaamka

Hawl-wadeenka nidaamka;

1. Waa in ay samaysaa sharciyo hufan, u dhigma hawlaha hay'adda, sidoo kalana aan kala soocaynin ka-qeyb-galeyaasha taasoo ay ku isticmaali karaan hannaanka lacag-bixinta.

2. Waa in aysan ka hor-istaagin adeegsiga nidaamka haddii aysan jirin khatar laga ilaalinayo, sida:
   a) khataraha deymaha, kaash-yarida nidaamka ka imaan karta;
   b) khataraha kala-baxa lacag-bixinta; iyo
   c) khataraha ka jira dhanka xogaha iyo khatarta gudaha hay'adda kuwaasoo keeni kara khasaaro lama-filaan ah.

QEYBTA SHANAAD
JOOGTEYNTA KORMEERKA
Qodobka 28aad
Kormeerka Nidaamka Lacag-bixinta

1. Bankiga Dhexe waa in uu kormeeraa hawlaha nidaamka lacag-bixinta qaranka iyo adeegyada lacag-bixinta, si loo xaqiijiyo sugnaanta, bed-qabka iyo wax-ku-oolnimada nidaamka lacag-bixinta.

2. Bankiga wuxuu xilli kasta soo rogi karaa xeer-nidaamiye iyo shuruudo guud, si loo qabto adeegyada lacag-bixinta ama socod-siinta hawalihiisa.

3. Iyadoo aan waxba laga beddelayn faqradda (1) ee qodobkan, Bankiga waxaa suurta-gal ah:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

a) in uu hab-raacyo u soo saaro hawl-wadeennada, hay'adaha bixiya adeegga lacag-bixinta iyo ka-qeyb-qaateyaasha si loo xaqiijiyo sugnaanta, bed-qabka iyo wax-ku-oolnimada nidaamka lacag-bixinta qaranka;
b) in uu soo saaro ama baddelo hab-raacyo kala duwan ee hawl-wadeennada, hay'adaha adeegyada lacag-bixinta, ama macaamiisha si guud ama si gaar ah;
c) in uu digniino u soo qoro hawl-wadeennada, hay'adaha adeegga lacag-bixinta iyo ka-qeyb-qaateyaasha;
d) in uu amar ku soo rogo hawl-wadeenka haddii loo baahdo in wax-ka-beddel lagu sameeyo hab-raacyada ama tilmaamaha shaqada is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka lacag-bixinta; iyo
e) baabi'inta ama hakinta hawl-galka hannaanka lacag-bixinta.

Qodobka 29aad
Amarrada Bankiga Dhexe

1. Bankiga Dhexe wuxuu soo saari karaa amarro:
   a) iyadoo loo eegayo maamulka ka shaqeeya adeegga lacag-bixinta, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka;
   b) iyadoo loo eegayo xiriirka ka dhexeeya hawl-wadeennada, hay'adaha adeegyada lacag-bixinta iyo macaamiishooda; iyo
   c) ku aaddan hufnaanta habka fulinta, maamulka, dhaqan-gelinta qodobbada ku xusan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha hoos yimaada.

2. Amarrada ayaa waxay khuseyn doonaan cid kasta oo ka shaqeysa, sida hawl-wadeennada adeegga lacag-bixinta si guud, ka-qeyb-qaateyaasha ama qeyb ka mid ah fuliyaha, hay'adaha bixiya adeegga lacag-bixinta sida uu qeexo Bankiga Dhexe.

3. Iyadoo loo eegayo in la soo saaro amar iyo in kale si waafaqasan faqradda (1) ee qodobkan, Bankiga Dhexe wuxuu tixgelinayaa qeyb ama dhammaan arrimaha soo socda:
   a) iyadoo la eegayo suurta-galnimada lagu aamini karo in uu ruux ku lug leeyahay ama ku lug yeelan karo fal kasta oo wax u dhimi kara nidaamka lacag-bixinta ama adeegyada lacag-bixinta kaasoo ku keeni kara khatar guud nidaamka lacag-bixinta;
   b) iyadoo la eegayo suurta-galnimada lagu aamini karo in uu ruux ku lug leeyahay ama ku lugyeelan karo fal kasta oo wax u dhimi kara, ama uu fududaysan karo, sugidda iyo wax-ku-oolnimada nidaamka lacag-bxinita ama adeegyada lacag-bixinta;



c) danaha guud ee dadweynaha;
d) xasiloonnida Maaliyadda Qaranka; iyo
e) arrimaha kale ee uu Bankiga Dhexe u arko in ay yihiin kuwa muhiim ah.

4. Bankiga Dhexe wuxuu amar qoraal ah ugu soo saari karaa shakhsi si uu qofkaas:
   a) ka joojiyo in uu ku lug yeesho fal kasta oo wax u dhimi kara ama jebin kara nidaamka;
   b) in la qaado talaabooyin muhiim ah si loo dhaqan-geliyo hab-raacyada ama is-beddelada lagu sameynayo nidaamka; iyo
   c) in uu soo gudbiyo Bankiga Dhexe, bixiyo macaluumadka iyo dukumintiyada la xiriira amarka.

5. Bankiga Dhexe wuxuu si qoraal ah uga laaban karaa amar kasto uu soo saaro

6. Sida ku cad farqadda (5) ee qodobkan, haddii laga laabto amarka ama haddii aan laga noqon, Bankiga Dhexe wuxuu ku dhaqmayaa sida ku cad faqradda (3) ee qodobkan.

7. Amarrada uu soo saaray Bankiga Dhexe waa in aysan saameyn ku yeelan wixii hore u jiray.

8. Qofka hela amarrada ku xusan qodobkan, waa in uu u hoggaansamaa fulinta amarrada muddada ku xusan qoraalka amarka.

Qodobka 30aad
Hanti-dhawraha Gaarka ah

1. Bankiga Dhexe wuxuu magacaabi karaa ama amri karaa hanti-dhawre madax- bannaan kaasoo baaritaan gaar ah ku sameynaya akoonada, buugaagta, dukumentiyada, keydinta xogaha, nidaamyada iyo arrimaha kale oo la xiriira, fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-qaateyaasha ee uu qeexayo Bankiga Dhexe.

2. Hay'adda lagu sameynayo baaritaanka sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa in ay u hogaan sanaataa, si loo baaro nidaamka shaqada, dukumentiyada, keydka xogaha, xisaabaadka waana in ay u suurta-gelisaa hanti-dhawraha in uu hawshiisa u guto si hufan.

3. Wixii kharash ah oo ku baxaya hanti-dhawraha madaxa-bannaan ee lagu soo sheegay faqradda (1) ee Qodobkan, waxaa bixinaya Bankiga Dhexe.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 31aad
Baaritaanka

1. Bankiga Dhexe, isagoo gudanaya mas'uuliyadiisa, waa in uu baaritaano ku sameeyaa hawl-wadeennada, hay'adaha bixiya adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb- qaateyaasha iyo kuwa kale oo la xiriira ama wakiilada u ah.

2. Bankiga Dhexe wuxuu u magacaabi karaa sarkaal ka tirsan shaqaalihiisa ama xirfadle kale, si uu u fuliyo baaritaanka lagu sameynayo hawl-wadeennada, hay'adaha adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-qaateyaasha; sarkaalka la magacaabo wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:
   a) wuxuu geli karaa dhismaha ganacsiga ee uu baarayo, qalabka iyo aaladaha lagu shaqeeyo;
   b) wuxuu baarayaa diiwaannada, dukumentiyada, koontooyinka iyo dhaqdhaqaayada xisaabaadka;
   c) wuxuu nuqul ka sameysan karaa dukuminti kasta iyo waxyaabaha kale ee uu u baahdo;
   d) wuxuu qaadan karaa oo keliya nuqul ka mid ah ama sawiran karaa dukumintiga uu rabo ee uu u arko in ay muhiim u yihiin baaritaanka;
   e) wuxuu ka codsan karaa xog ama caawimaad cid kasta oo uu u baahdo; iyo
   f) wuxuu waraysi la yeelan karaa sarkaal, shaqaale, wakiil ama cid kasta oo matalaysa hawl-wadeenka, hay'adda bixisa adeegga lacag-bixinta ama ka- qeyb-qaateyaasha.

3. Hawl-wadeenka, hay'adda adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-qaateyaasha, faracyada ama wakiilka la baarayo waa in ay siiyaan baaraha dukumentiyada, macaluumaadka inta lagu guda-jiro baaritaanka.

4. Agaasimaha, sarkaalka, shaqaalaha ka shaqeeya fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka qeyb-qaateyaasha baaritaanka lagu sameynayo oo ku guul-daraysta, diida ama dayaca in uu siiyo baaraha dukumentiyada, xogaha ama taageerada looga baahan yahay taasoo uu awoodo ama uu hayo, waxaa Bankiga Dhexe uu awood u leeyahay in uu ganaaxo ama ka qaado talaabo kasta oo waafaqsan xeer-nidaamiyaha.

5. Nuqulka warbixinta baaritaanka ee uu diyaariyey Bankiga Dhexe sida uu qabo Sharcigan waxaa loo dirayaa fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka-qeyb-qaataha baarintaanka lagu sameeyey sida hoos ku qoran.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

a) xad-gudub kasta oo uu ku sameeyey Sharciga, xeer-nidaamiyaha, hab-raacyada, tilmaamaha, sharciyada, awaamiirta, shuruudaha kuwaas oo uu soo rogay Bankiga Dhexe;
b) tallaabooyinka wax lagu saxayo ee looga baahan yahay in uu qaado hawl-wadeenka, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka-qeyb-qaataha;
c) muddada lagu fulinayo tallaabooyinka wax lagu saxayo;
d) tallaabo kasta oo ku aaddan maamulka, ganaaxa iyo tallaabooyinka kale oo uu Bankiga Dhexe ka qaadayo hawl-wadeenka, hay'adda adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-qaataha, sarkaalka, shaqaalaha, wakiilka, faraca kuwaasoo ka tirsan hawl-wadeenka, hay'adda adeegga lacag-bixinta iyo ka-qeyb-qaataha.

6. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka-qeyb-qaataha waa in uu u soo gudbiyo Bankiga Dhexe warbixin xilliyeysan, si looga dheehdo fulinta tallaabooyinkii uu Bankiga Dhexe faray in uu saxo.

7. Marka Bankiga Dhexe uu arko in ay tahay muhiim in la sameeyo baaritaan ama in la dedejiyo baarista, waxaa fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta, ama ka-qeyb-qaataha lagu sameynayaa baaritaan khaas ah, waxaana looga jeedaa in lagu ogaado bed-qabka maaliyadda ee fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka-qeyb-qaateyaasha iyo haddii uu u hoggaansamay Sharcigan ama sharciyada kale ee lidka ku ah Lacag-dhiqista iyo Maalgelinta Argagixisannimada, xeer-nidaamiyaha, hab-raacyada, go'aamada uu soo saaray Bankiga Dhexe.

Qodobka 32aad
Aqoonsiga Nidaamka Lacag-bixinta

1. Bankiga Dhexe waxuu u aqoonsanayaa nidaamka lacag-bixinta mid muhiim ah.

2. Aqoonsiga nidaamka lacag-bixinta waxaa lagu salaynayaa shuruudaha Bankiga Dhexe ee ku xusan xeer-nidaamiyaha.

Qodobka 33aad
Xogaha Muhiimka u ah Bankiga Dhexe

1. Bankiga Dhexe waa in uu helaa xog kasta oo la xiriirta nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka.



2. Bankiga Dhexe wuxuu uga baahan karaa fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-qaataha, faracyada, wakiilada in ay siiyaan warbixinnada sida uu qabo sharcigan iyo xeer-nidaamiyaha hoos yimaada.

3. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta iyo ka-qeyb-qaateyaasha waa in ay u soo gudbiyaan Bankiga Dhexe warbixinnada, diiwaannada, akoonnada iyo xogaha kale ee la xiriira nidaamka maaliyadda, lacag-bixinta ama qabashada adeegga lacag-bixinta marka uu dalbado Bankiga Dhexe sida uu qabo sharcigan.

4. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka-qeyb-qaataha looma oggola waxyaabaha soo socda:
   a) in ay si ogaal ah u siiyaan Bankiga Dhexe warbixino been-abuur ah ama marin-habaabin ku ah Bankiga; iyo
   b) in ay Bankiga Dhexe u diidaan xogaha si bareer ah ama taxadar la'aan ah.

Qodobka 34aad
Soo-gudbinta Xisaabaadka La Hubiyey iyo Nidaamka Hubinta

1. Hawl-wadeenka, hay'adda adeegga lacag-bixinta waa in ay sameeyaan waxyaabaha soo socda:
   a) in la asaaso lana hawl-geliyo waaxda hanti-dhawraha gudaha;
   b) in la magacaabo hanti-dhawre madax-bannaan, si uu u baaro warbixinnada maaliyadeed iyo hawlaha fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka-qeyb-qaataha, markii loo baahdo;
   c) in ay leedahay nidaam-hawleed shaqeeya isla markaana uu baaro sanadkiiba mar baare xirfad u leh nidaamka ay ku shaqeyso;
   d) in ay diyaariso warbixin-maaliyadeed sanadle ah; iyo
   e) in ay la wadaagto Bankiga Dhexe warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyey.

2. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka-qeyb-qaateyaasha waa in ay u hoggaansamaan shuruudaha uu qeexayo xeer-nidaamiyaha ee la xiriira baaritaanka iyo in ay Bankiga Dhexe u soo gudbiyaan dukumintiyada, warbixinnada iyo xogaha kale.



Qodobka 35aad
Ilaalinta Xogta

1. Bankiga Dhexe, saraakiishiisa, hawl-wadeenadiisa iyo wakiiladiisa waa in ay ilaaliyaan xogaha loo soo gudbiyo ama ay helaan inta lagu gudo-jiro shaqooyinka, marka laga reebo:
   a) haddii faafinta xogtaas ay tahay mid muhiim ah oo lagu ilaalinaayo sumcadda, habsami-u-socodka nidaamka lacag-bixinta qaranka;
   b) haddii hay'adaha lacagta, hay'adaha korjoogtaynta leh, hay'adaha canshuuraha, hay'adaha denbi-baarista ee Soomaaliya iyo kuwa caalamka ay u baahdaan xogahaan, Bankigana ka codsadaan in la siiyo xogahaas;
   c) haddii loo baahdo iyadoo la xiganayo sharci jira; iyo
   d) haddii ay maxkamadi soo amarto.

2. Ilaalinta xogta ee ku xusan faqrada (1) ee qodobkan, waa in ayasan waxba u dhimayn Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha iyo heshiisyada caalamiga ah ee Dawladda Soomaaliya gashay.

3. Bankiga Dhexe ayaa ku qeexaya xeer-nidaamiye sida loo wadaagayo xogaha ku cad qodobkan.

Qodobka 36aad
Xaddiga Ra'sumaalka La Iska Rabo

Bankiga Dhexe ayaa xeer-nidaamiye ku qeexaya xaddiga raa'sumaalka ugu yar ee laga rabo noocyada kala duwan ee hawl-wadeennada, hay'adaha adeegga lacag-bixinta iyo ka-qeyb-qaateyaasha.

Qodobka 37aad
U-hoggaansanaanta Sharciga Ka-hortagga Lacag Dhaqista iyo La-dagaallanka Maal-gelinta Argagixisada (AML/CFT)

1. Fuliyaha, hay'adaha, adeegga lacag-bixinta waa in ay u hoggaansamaan Sharciga Ka-hortagga Lacag Dhaqista iyo Maal-gelinta Argagixisada iyo Xeer-nidaamiyaha

2. Dhaqan-gelinta hab-raacyada baarista qotada dheer:
   a) waa in ay adeegsadaan nidaamka lagu aqoonsanayo laguna stigayo dhammaan xogaha la xiriira macaamiisha;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

b) waa in la adeegsado hab-raaca lagu ogaanayo xogta milkiilaha akoonka iska leh; iyo
c) waa in la caddeeyaa lana fahamsan yahay isha dhaqaalaha, ama lacagta halka ay ka soo gasho milkiilaha.

3. Waa in la dhaqan-geliyaa hab-raacyada lagu ogaanayo baarista qotada dheer ee xogaha muhiimka ah; iyo

4. In la dhiso nidaam hagaagsan iyo hab-raacyada kormeerka gudaha:
   a) waa in si joogto ah loola socdaa dhaqdhaqaaqyada xisaabaadka;
   b) waa in la ogaan karo lagana warbixiyo dhaqdhaqaaqyada laga shakiyo; iyo
   c) waa in ay jirto diiwaan-gelin joogta ah.

5. Waa in la oggaado, lala socdo, lalana kormeero dhammaan khataraha ka dhalan kara lacag-dhaqista iyo maal-gelinta argagixisada;

6. In la hirgeliyo hab lagula soconayo khataraha ka imaan kara lacag-dhaqista iyo maal-gelinta argagixisada, waana in la sameeyo daba-gal joogta ah si loo ogaado xaddiga khatarta, isla markaana looga hortago khataraha ka imaan kara lacag-dhaqista iyo maal-gelinta argagixisada, iyadoo kor loo qaadayo tababarada shaqaalaha;

7. Waa in la sameeyo shuruuc lagu xakamaynayo lacag-dhaqista iyo maal-gelinta argagixisada sidoo kalena la abuuro xafiis qaabilsan ilaalinta shuruucdaas iyadoo la raacayo sharciga iyo xeer-nidaamiyaha;

8. Waa in loo sameeyo tababar joogta ah shaqaalaha iyo wakiilada si ay ula socdaan arrimaha la xiriira lacag-dhaqista iyo maal-gelinta argagixisada;

9. Waa in loo hoggaansamaa tilmaamaha sharciga hay'adda warbixinnada maaliyadda taasoo lagu daba-galayo dhaqdhaqaaqyada laga shakiyo iyo lacagaha la isu wareejiyo;

10. Waa in lagula xisaabtamo wakiilada in ay u hoggaansamaan shuruucda iyo xeer-nidaamiyaha lagu xakamaynayo lacag-dhaqista iyo maal-gelinta argagixisada; iyo

11. Waa in lagu sameeyo dib-u-eegis madax banaan hannaanka iyo habraacyada lagula dagaalamayo lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada, si waafaqsan Sharciga Ka-hortaga Lacag Dhaqida iyo Maalgelinta Argagixisada.



30

Qodobka 38aad
Keydinta Diiwaanka

1. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta waa in ay keydiyaan diiwaannada xogaha lacag-bixinta, adeegyada maaliyadeed ugu yaraan 5 (shantii) sano ee u dambaysay.

2. Diiwaannada ayaa loo keydin doonaa hab elektaroonig ah ama nuqul ah iyadoo ay ku xiran tahay hadba sidii loo helay xogta lacag-bixinta markii hore middeeda asalka ah.

Qodobka 39aad
Magacaabista Wakiilka

1. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta wuxuu heshiis la geli karaa wakiil qabanaya hawlihii ay hay'addu qaban lahayd isagoo ka wakil ah Hay'adda.

2. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta waa in uu qaadaa mas'uuliyadda shaqada ama qaladaadka ka imaan kara wakiilkiisa kuwaasoo la xiriira hawlaha loo wakiishay.

3. Bankiga Dhexe ayaa ku qeexaya xeer-nidaamiye sida loo magacaabayo wakiilka Hay'adda.

Qodobka 40aad
Heshiis Shaqo Idman

1. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta, isagoo ogolaansho ka haysta Bankiga Dhexe, wuxuu shaqaalaysiin karaa hay'ad kale oo ka caawisa hawlihiisa lacag-bixinta.

2. Hay'adda la idmaday waa in aysan waxba u dhimin shaqooyinkii socday ee hay'adda sida:
   a) tayada hannaanka kormeerka shaqada ee gudaha, fuliyaha ama hay'adda adeegga lacag-bixinta;
   b) sii-wadista u hoggaansanaanta shuruudaha shatiga ee la xiriira fuliyaha, ama hayadda adeegga lacag-bixinta sida uu qabo sharcigan;
   c) awoodda uu Bankiga Dhexe u leeyahay in uu kormeero fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta sida uu qeexayo sharcigan, xeer-nidaamiyaha ama sharciyada kale;
   d) in aysan waxba u dhimin waxqabadka Maaliyadeed;
   e) xiriirka ka dhexeeya fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta iyo macaamiishooda; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

f) bed-qabka iyo sii-socoshada adeegga lacag-bixinta.

3. Bankiga ayaa ku qeexaya xeer-nidaamiyaha shuruudaha kale ee idmashada shaqada.

Qodobka 41aad
Nidaamka Is-waafajinta iyo Lacag Bixinta ee Bankiga

Bankiga Dhexe marka uu sameynayo nidaamka xaqiijinta bixinta lacagta iyo iswaafajinta waa in uu ilaaliya raacaana hab-raacyada u degsan ee lagu soo rogay nidaamka bixinta, is-waafajinta iyo adeegga lacag-bixinta, kuwaas oo ay raacaan hawlwadeennada kale iyo hay'adaha kale ee adeegga lacag-bixinta.

QEYBTA LIXAAD
TALLAABOOYINKA MAAMULKA IYO GANAAXYADA
Qodobka 42aad
Tallaabooyinka Maamul

1. Fuliye walba, hay'adaha, adeegga lacag-bixinta, ka qeybqaataha, shaqaalaha, wakiilka kuwaas oo ku xad-gudba ama ku guul-dareysto in ay u hogaansamaan qodobada sharcigaan, xeer-nidaamiyaha, habraayacada, awaamiirta ama shuruudaha uu soo rogay Bankiga Dhexe sida ku xusan sharcigan, Bankiga Dhexe ayaa ka qaadaya talaabo maamul.

2. Bankiga dhexe waxa uu qaadi karaa talaabooyin ka dhan ah fuliye kasta, hay'adaha, adeegga ka shaqeeya lacag-bixinta, ka qeybqaataha, shaqaalaha ama wakiilka, talaabooyinkaas waxaa ka mid ah:
   a) in uu soo saaro digniin qoraal ah;
   b) in uu soo saaro amar qoraal ah oo looga hortagayo qaladaadka iyo talaabo lagu saxayo qaladaadkaas;
   c) in uu soo saaro amar qoraal ah si loogu hogaan-samo ku dhaqanka sharciga;
   d) in uu ku soo rogo xannibaad ka qeyb-galayaasha iyo kuwa ka shaqeeya adeegga lacag-bixinta;
   e) in uu ka joojiyo shaqada wakiilka ama hay'adda kale uu la xiriira;
   f) in shaqada uu ka joojiyo sarkaal, hawl-wadeen ama wakiil si ku meel-gaar ah; iyo
   g) in uu hakiyo ama uu la noqdo shatiga diiwaan-gelinta haddii loo baahdo.



2. Marka Bankiga Dhexe uu qaadayo talaabooyinka maamulka waxa uu tixgalin doonaa arrimaha soo socda:
   a) inta uu la egyahay halista xad-gudubka;
   b) khatarta ka dhalan karta ama saameynta ay ku yeelan karto nidaamka
   c) heerka uu gaarsiisanyahay xadgudubka la ogaaday;
   d) haddii qofka xadgudubka sameeyay uu soo sheegay si iskiis ah; iyo
   e) tilaabada ku haboon ee lagu joojin karo xadgudubka.

3. Ma jirto talaabo maamul oo laga qaadayo fuliyaha, hay'adda, adeegga lacag bixinta ama qof kale sida ku xusan qodobkan, ilaa Bankiga Dhexe uu ugu diro fariin lagu wargelinayo sababta talaabada looga qaadayo, muddo 21 (labaatan iyo kow) maalmood ka hor.

Qodobka 43aad
Dambiyada

1. Ficiladaan soo socda ayaa loo aqoonsan karaa dambi ama xadgudub:-
   a) in laga shaqeeyo nidaamka lacag-bixinta shati la'aan;
   b) in la wareejiyo shatiga iyada oo aan ogalaasho laga haysan Bankiga Dhexe;
   c) in lagu xadgudbo shuruudaha shatiga ee sharcigu qeexayo;
   d) in la soo idmado hey'ad kale iyada oo aan oggolaansho laga haysan Bankiga Dhexe;
   e) in lagu guuldareysto u hoggaansamidda shuruucda looga hortagayo lacag dhaqista, la dagaalanka maalgalinta argagixisada iyo shuruucda kale ee wadanka;
   f) in lagu guuldareysto in la bixiyo ganaaxyada lacagta oo uu soo saaro Bankiga Dhexe.
   g) in laga hor-yimaado awaamiirta Bankiga Dhexe kuwaas oo lagu soo saaray sharcigaan ama xeer-nidaamiyaha;
   h) in laga hor istaago Bankiga Dhexe ama hanti-dhawraha in uu baaritaan ku sameeyo goobta ganacsiga, nidaamka, shaqada, dukumintiyada, xogaha, iyo diiwaanada;
   i) in loo soo gudbiyo Bankiga Dhexe xog been abuur ah.

2. Hay'adda lacag bixinta, ka qeyb-galayaasha ama shakhsiyaadka kale ee gala dambiyadan sida ku cad sharcigan kadib marka maxkamadi ku hesho dambiga waxaa lagu ciqaabi doonaa:
   a) haddii ay tahay hey'ad waxaa la ganaaxayaa lacag aan ka badneyn $100,000.00 (boqol kun)oo doolar; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

b) haddii uu yahay qof caadi ah waxaa lagu ganaaxi doonaa lacag aan ka badaneyn $50,000.00(konton kun) oo doolaar ama sedex sano oo xarig ah ama labadooda oo wadajir ah.

Qodobka 44aad
Ganaaxyada

1. Bankiga Dhexe waxa uu soo rogi doonaa ganaax lacageed oo aan ka badneyn $100,000 (boqol kun) oo doolar oo ka dhan ah fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-galayaasha ama wakiiladooda kuwaas oo ku xadgudba qodobbada ku qoran sharcigan, xeer-nidaamiyaha, hab-raacyada, tilmaamaha, shuruucda iyo awaamiirta uu soo saaro Bankiga Dhexe si waafaqsan sharcigaan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Haddii uu yahay shakhsi caadi ah, Bankiga Dhexe waxa uu ganaaxi doona lacag aan ka badnayn $10,000(tobon kun) oo doolar haddii uu ku xadgudbo qodobada ku qoran sharcigaan, xeer-nidaamiyaha, hab-raacyada, tilmaamaha, shuruucda iyo xaaladaha uu soo saaro Bankiga Dhexe si waafaqsan sharcigan.

3. Bankiga Dhexe wuxuu ku qeexayaa xeer-nidaamiyaha ganaax lacageed oo gaar ah, kuwa ku xadgudba qodobbada ku qoran sharcigan, xeer-nidaamiyaha, hab- raacayada, tilmaamaha, shurucda, iyo xaaladaha uu soo saaro Bankiga Dhexe si waafaqsan sharcigaan.

4. Haddii xadgudubka uu yahay mid joogta ah ama u hogaansanaan la'aan , Bankiga Dhexe waxaa uu soo rogayaa ganaax lacageed oo dheeri ah sida:
   a) lacag aan ka badnayn $1000 (kun) doolar oo maalinle ah haddii ay tahay fuliye, hay'adaha, adeegga lacagta bixinta ama ka-qeyb-qaate; iyo
   b) lacag aan ka badnayn $100 (boqol) doolar oo maalinle ah haddii uu yahay shakhsi caadi ah.

5. Dhammaan lacagaha ganaaxyada ah ee lagu sheegay qodobkaan waxaa lagu bixinayaa muddada uu Bankiga Dhexe soo cayimo.



Qodobka 45aad
Cabashooyin Ganaaxyada Lacagta iyo Tallaabooyinka Maamul

1. Fuliye, hay'adda adeegga lacag bixinta, ka-qeyb-galayaasha ama shakhsiyaad kale kuwaas oo dhibsada go'aannada ka soo baxa Bankiga, kuwaas oo isugu jira talaabooyinka maamulka iyo ganaaxyada lacagta waxa ay qaadan karaan cabasho iyaga oo maraya hannaanka cabasho qaadashada ee ku xusan xeer-nidaamiyaha iyadoo aan la duudsiineynin xaqa ay u leeyihiin in ay u cabtaan maxkamadda awooda u leh.

2. Bankiga Dhexe wuxuu dejinayaa nidaam ay ku dhagaysan karaan cabashooyinka dhibanaha kaas oo ay qeyb ka yihiin saraakiisha Bankiga Dhexe oo aan hore ugu lug laheyn go'aannada cabashada laga qaadanayo.

QEBYTA TODDOBAAD
WAREEJINTA KALA-BAXA XISAABAADKA IYO LACAG-BIXINTA U-DANBAYSA

Qodobka 46aad
Lacag Wareejin

1. Xubin kasta oo adeegsada nidaamka lacag-bixinta qaranka waa in uu:
   a) akoonnada kala-baxa xisaabna ka furtaa Bankiga Dhexe ama wakiilka kala-wareejinta ee shatiga haysta, sidoo kale waa in uu xaqiijiyaa in ay ku jirto akoonnada lacag ku filan iyadoo la raacayo shuruudaha u dagsan Bankiga Dhexe ama fuliyaha; iyo
   b) u wakiisho xubin kale kaas oo uu akoonka kala-baxa xisaabaadka u furan yahay si uu ugu fududeeyo bixinta dhammaan lacagaha laga rabo.

2. Wakiilka lagu soo sheegay faqradda (1)(b) ee qodobkan, xubnaha inta uusan bilaabin hawlihiisa lacag wareejinta, waa in uu u geeyaa fuliyaha warqadda caddeynta ah ee magacaabista wakiilkiisa, isla markaana ay la socoto warqadda oggolaanshada wakiilka.

3. Ka-qeyb-galaha haddii uu rabo in uu ka laabto heshiiska uu la galay wakiilkiisa waa in uu soo wargaliya fuliyaha muddo 7 (toddobo) maalmood gudahood ka hor inta uusan ka joojin shaqada wakiilka.

4. Wakiilka waa in uu ogeysiiyaa hawl-wadeenka joojinta wakaaladda ka qeyb-galihiisa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

5. Heshiiska lacag wareejinta ee ku xusan faqradda (1) (2) ee qodobkan, ayaa ah kuwa ugu dambeeya ee aan laga noqon karin.

6. Bixinta kama dambeysta ah ee daymaha u dhaxaya ka qeyb-galayaasha iyo hay'adda waa in ay martaa Bankiga Dhexe ama hay'ad maaliyadeed.

7. Haddii ay dhacdo in si khalad ah loo wareejiyo lacag ama hanti, waxaa lagu yeelan doonaa lacagtaas ama hantidaas hay'adda ama qofka lacagta loo wareejiyey, waxa ayna ku noqonaysaa dayn.

8. Bankiga Dhexe ayaa qeexaya shuruudaha kale ee loo arko in ay yihiin lagama maarmaan.

Qodobka 47aad
Tilmaamaha Lacag-bixinta ugu Dambeysa iyo Qaan-baxa

1. Fuliyuhu waa in uu caddeeyaa shuruudaha:
   a) si loo fuliyo nidaamka shaqada ee waafaqsan sharciga, iyo timaamaha qeexaya shuruudaha iyo xeer-nidaamiyaha kuwaas oo uu Bankiga Dhexe soo saaray.
   b) si loo sameeyo nidaamka aan ka noqosho laheyn iyo tilmaamaha lacag-bixinta marka la guda galo nidaamka shaqada.

2. Iyadoo la raacayo sida ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waa in lagu kala-baxa xisaabaadka deymaha ee lacagaha ay isku leeyihiin ka qeyb-galayaasha, iyada oo la isticmaalayo lacag ahaan ama akoonnada ka furan hay'adaha lacag wareejinta.

3. Lacagaha la isku wareejiyey ee ku xusan faqaradda (1)(2) ee qodobkan, waa:
   a) Lacag kama dambeys ah oo aan laga noqon karin, aan dib loo celin karin, ama meel aan la dhigi karin, haddii aysan jirin xaaladaha sida: dhaqaale yari, dacwad ku saabsan musalafid iyo waxyabaha kale ee sharciga ah;

4. Dhaq-dhaqaaqyada liddiga ku ah faqradda 3aad, waa waxba kama jiraan.

5. Si kastaba ha ahaatee iyadoo la raacaayo faqradda (1)(2)(3), ee Qodobkan, waa in hawl-wadeenku la yimaadaa hab-raac lagu soo celinayo lacagaha ku lumay xatooyada, qaladaadka iyo waxyaabaha la mid ka ah.

6. Bankiga Dhexe ayaa qeexaya shuruudaha kale ee muhiimka ah.



Qodobka 48aad
Xaqiijinta iyo Dhaqan-gelinta Diyaarinta Kala-baxa xisaabaadka Waqtiga la Taaganyahay

1. Nidaamka diyaarinta qaan-baxa waa in uu ahaadaa mid la xaqiijiyey oo la dhaqan- gelin karo.

2. Qaamaha lagu leeyahay fuliyaha iyo ka qeyb-galaha oo ay bixin waayeen, waxa ay cadeyn u tahay isbixin la'aan dhaqaale oo haysata hay'adda, waana in laga bixiyaa faa'iidada saamileyda hay'adda.

Qodobka 49aad
Ilaalinta Nidaamka iyo Rahanta ee Lacag-bixinta iyo Qaan-baxa

1. Si loo guto waajibaadka ama loo ilaaliyo xuquuqaha fuliyaha, ka qeyb-galayaasha, arrinta kala wareejinta, dhex-dhexaadiyaha ganacsiga iyo dhinacyada kale, lacagta dibaajiga ah ee uu ka hayo Bankiga Dhexe ee lagu ilaalinayo hab-sami u socodka waajibaadka lacag-bixinta, waa in aysan saameyn ku yeelanin dhaqaale xumo ama dacwad musalafnimo iyo sharciyada kale ee qaban kara.

2. Waajibaadka iyo xuquuqaha ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, kama joojineyso dadka daynta ku leh hay'adda, xuquuqda ay u leeyihiin rahanta.

3. Bankiga Dhexe ayaa qeexaya shuruudaha muhiimka ah ee loo baahanyahay.

Qodobka 50aad
Hab-raaca Rahanta

1. Bankiga Dhexe waa in uu xeer-nidaamiye ka soo saaraa qaabka loo qabanayo rahanta lacagta ah oo lagu ilaalinayo gudashada waajibaadka hay'adda.

2. Rahanta lagu soo sheegay faqrada (1) ee qodobkan, waa in:
   a) loo isticmaalaa in lagu bixiyo deymaha lagu yeesho hay'adda, haddii ay ku guul dareysato in ay iska bixin waydo qaanta lagu leeyahay dhaqaala xumo darteed; iyo
   b) lagu ilaaliyaa dhaqaala xumada soo wajahdo hay'adda.

3. Fuliyuhu waxa uu codsan karaa in hay'ad kale ay ka bixiso rahanta taas oo lagu badalayo rahanta ama lagu kordhinayo si loo yareeyo khatarta ka imaan karta dhaqaala xumada.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

4. Habka damaanad-qaadka maaliyadeed waa inuu ahaadaa mid ansax ah oo lagu dhaqan-galin karo dhinac saddexaad oo uu ka mid yahay xaraashaha, waana in la waafajiyaa shuruudaha soo socda:
   a) Mulkiyadda maaliyadeed waxaa loo wareejin doonaa cidda rahanta qaadatay; iyo
   b) Mulkiyadda lacagta caddaanka ah waxaa loo wareejin doonaa cidda rahanta qaadatay.

5. Qofka qaadaya ama haaya rahanta maaliyadda waa in uu ilaaliya xuquuqda dadka daynta laga qabo.

6. Sharciga lagu maamulaayo qabashada rahanta iyo arrimaha ka imaan kara waxaa gun-dhig u ah sharciga wadanka, isla markaana Bankiga Dhexe ayaa laga raba in uu dhaqangaliyo.

QEYBTA SIDDEEDAAD
XIRITAANKA IYO LA WAREEGIDDA MAAMULKA FULIYAHA AMA KA-QEYB-QAATAHA
Qodobka 51aad
Wargelinta Isbixin-la'aanta Maaliyadeed

1. Haddii fuliyaha:
   a) uu ku jiro ama uu ku dhawyahay xaalad isbixin-la'aan maaliyadeed;
   b) uu awoodi waayo in uu iska bixiyo deymaha lagu leeyahay ama uu ku dhawaado in uu iska bixin waayo;
   c) uu hakiyo lacagaha deymaha uu bixineyay ee isbiirsaday; iyo
   d) waa in ay si deg deg ah ugu wargalisaa 1(hal) maalin gudaheed ka qeyb-galayaasha nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta iyo kala-baxa xisaabaadka.

2. Haddii ka qeyb-galayaasha nidaamka lacag-bixinta, is-waafajinta, iyo kala-baxa xisaabaadka:
   a) ay ku jiraan ama ay ku dhawyihiin xaalad isbixin-la'aan maaliyadeed
   b) ay awoodi waayaan ama ay ku dhawyihiin in ay iska bixin waayaan deymaha lagu leeyahay;
   c) ay hakiyaan lacagaha iyo deymaha ay bixinayeen; iyo
   d) waa in ay si deg deg ah ugu wargaliyaan maalin (1) gudaheed fuliyaha si uu ugu wargeliyo ka qeyb-galayaasha kale.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 52aad
Wargelinta Xiritaanka ama La-wareegidda

1. Fuliyaha, hay'adaha bixiya adeegga lacagta ama ka qeyb-galaha midna looma ogala in ay xiraan hay'adda ama maamul kale ay ku wareejiyaan iyaga oo aan la wargelin Bankiga Dhexe.

2. Fuliyaha, hay'adaha bixiya adeegga lacagta ama ka qeyb-galaha taas oo la xiraayo, maamulkeeda la wareejinayo, la xaraashayo ama rabto in ay si iskeed ah suuqa uga baxdo, waa in 24 (afar iyo labaatan) saac gudahood ay Bankiga Dhexe ugu soo gudbisaa go'aankeeda.

3. Marka fuliyaha ama ka qeyb-galahu ay joojinayaan shaqada, waa in ay wargaliyaan Bankiga Dhexe iyo hay'adaha kale ay quseyso wargelinta, waa in:
   a) ay soo gudbisaa codsiga xiritaanka hay'adda iyo goorta la dhaqan galinayo; iyo
   b) inta uu socdo qorshaha xiritaanka fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka qeybgalaha, waa in la cayimaa maalinta ay xirayaan hay'adda laguna beegaa maalmaha shaqada, Bankiga Dhexe waxa uu wargelinayaa sida ugu dhaqsaha badan hay'adaha gudaha iyo dibadda ee uu quseeyo xiritaanka hay'adda.

4. Hay'adda la xirayo waa in ay dhaqan galisaa go'aanka xiritaanka hay'adda kadib marka ay wargaliso Bankiga Dhexe sida ugu dhaqsaha badan.

5. Marka hay'adda go'aansato in ay xirto hay'adda isla markaana ogolaasho ka hesho Bankiga Dhexe, hay'adda waa in ay wargalisaa dhammaan hay'adaha kale ee xiriirka kala dhexeeyo muddo 24 (afar iyo labaatan) saacadood gudahood ah.

6. Bankiga Dhexe waxa uu wargelinayaa hay'adaha gudaha, kuwa dibadda iyo hay'adaha kale ee xiriirka la leh hay'adda go'aansatay in ay xirto ganacsigeeda, wargelinta ayaa loo diri doona hay'adaha isla maalinta uu Bankiga Dhexe helo wargelinta go'aanka xiritaanka.

Qodobka 53aad
Waxyaabaha aan la Oggoleyn

1. Fuliyaha, hay'adda ama ka qeyb-qaataha la xirayo, maamulkeeda la wareejinayo, la xaraashayo ama iskeed u go'aansatay in ay ka baxdo hawlaha adeegga lacag-bixinta ma

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

fulin karto wax hawl ah inta laga dhameystirayo hawlaha xiritaanka, xaraashka iyo wareejinta maamulka hay'adda.

2. Shaqooyinka laga mamnuucay hay'adda qeyb kama ahan bixinta deymaha lagu leeyahay oo ay tahay in ay iska bixiso.

Qodobka 54aad
Xeer-nidaamiyaha Qabanaya Xaraash-layaasha

1. Sida shuruucda kale ay dhigayaan, hay'adda xireysa ganacsigeeda, u wareejineysa maamulkeeda cid kale sidoo kale ay maxkamaddu ku caddeyso in hay'addu aysan dhaqaale ahaan is bixin weyday ama ay jiraan arrimaha kale oo la xiriira is-waafajinta, qaan-baxa, jaangooynta xisaabta laga helay hay'adda iyo maamulkeeda, xaraashaha iyo kuwa la wareego maamulka hay'adda waa in ay hayaan xogahaas si hay'adda ay uga bixiyaan deymaha lagu leeyahay:
   a) waa in la ogaadaa deymaha lagu leeyahay hay'adda inta aan la xirin; iyo
   b) waa in la bixiyaa marka hay'adda la xiro kadib dhammaan deymaha hay'adda lagu leeyahay kuwaas oo isugu jiro kuwa waqtigooda bixinta la soo dhaafay iyo kuwa aan waqtigooda la gaarinba.

2. Xaraashaha waxa uu awood u leeyahay lacag qabashada iyo lacag-bixinta akoonnada hay'adaha la xirayo, iyada oo ujeedku yahay.
   a) si loo bixiyo deymaha taagan iyo deymihii hore;
   b) si loo qaado masuuliyadda deynta; iyo
   c) in la ogaado rahanta hay'adda u taala si loogu bixiyo deymaha lagu leyahay hay'adda.

Qodobka 55aad
Arrimaha Aan Saameyn ku Laheyn Xiritaanka ugu Dambeeya ee Hay'adda

Marka laga reebo Sharciyada la xirriira dhaqaale xumada ama musalafka, hay'adda la xirayo, maamulkeeda la wareejinayo, la xaraashayo ama go'aansatay in ay xirto ganacsigeeda saameyn kuma yeelaneyso, dhammaan lacagihii in la bixiyo u diyaarsanaa inta uusan soo bixin go'aanka xiritaanka, xaraashka, iyo wareejinta maamulka, taas oo loo soo gudbiyay Bankiga Dhexe.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 56aad
Saameynta Bilowga Xiritaanka ama Maamul Wareejinta

1. Inta lagu gudajiro nidaamka lagula tacaalayo fuliyaha, hay'adda lacag bixiyaha ay ku dhacday dhaqaale xumada wax saameyn ah kuma lahan xuquuqda kuwa deynta ku leh hay'adda oo mar kasta deyntooda way leeyihiin, si walba oo hay'adda dhaqaale xumo ugu dhacdo, deyntaasna hay'addu waxa ay ku tahay waajib laga rabo in ay bixiso.

2. Sida uu qabo sharcigaan, talaabooyinka lagula tacaalayo dhaqaale xumida soo wajahdey fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta, talaabooyinka laga qaaday Hay'adda waxa ay bilaabanayaan kadib marka lagu wargaliyo hay'adda in ay gashay xaalad dhaqaale xumo.


3. Iyadoo aan laga tagayn habraaca xaraashka ee hay'adaha musalifta, dhammaan dhaq-dhaqaaqyadani waa kuwo ansax ah, dhaqan gal ah lagana rabo inay fuliyaan dhammaan dhinacyadu sida xaraashlayaasha, maamulka la wareegay iyo iibsaduhu:
   a) in ay wareejin karaan hanti ama lacag kaash ah kadib marka ay bilaabato talaabooyinka laga qaadayo hay'adda dhaqaala xumada ku jira, way sii socon karaan hawlaha wareejinta lacagta inta ay hay'adda ku jirto dhaqaala xumada; iyo
   b) in ay bixin karaan deymaha lagu leeyahay hay'adda inta lagu jiro xaaladda dhaqaala xumada ee hay'adda, waa labixin karaa deymaha soo baxa inta lagu guda jiro xaaladda dhaqaala xumada.

4. Lacagta la galiyo habka, si loo bixiyo, kama laaban karaan hay'adda, xaraashaha, kuwa hay'adda mamulkeeda la wareega, kuwa rahanta hayo sida ku qeexan sharciga aan ka noqashada lahayn.

Qodobka 57aad
Maareynta Fulin La-aanta

1. Qodobkaan waxaa uu khuseeyaa haraaga (net sum) ee uu leeyahay ama lagu leeyahay fulin-waayaha kadib marka la dhamaystiro talaabooyinka loo diyaariyay maareynta fulin-waayaha.

2. Iyada oo aan loo eegin Sharciga Shirkadaha, haddii maxkamad ay soo saartay amar musalafit (bankruptcy), ama baabi'in shirkadeed (winding up), ama shirkad si iskeed u go'aansatay isbaabi'inteeda. Lacagta haraaga (net sum) ee uu leeyahay ama lagu leeyahay fulin-waayaha, kadib marka la dhamaystiro talaabooyinka loo diyaariyay



maareynta fulin-waayaha, waxa loo tixgalinaya sheegasho ansax ah (valid claim) oo qayb ka noqonaysa hanaanka loo maamulaayo musalafida, ama baabi'inta shirkadda hadba sida xaalku yahay.

Qodobka 58aad
Hay'adda si iskeed ah u Go'aansata Xiritaankeeda Ganacsi

1. Fuliyaha, hay'adda bixiya adeegga lacagta waa in uu weydiistaa Bankiga Dhexe marka uu go'aansado in uu xiro ganacsigiisa si iskiis ah. Hay'adda waa in ay u hogaansantaa shuruudaha ku qeexan xeer-nidaamiyaha uu dajiyey Bankiga Dhexe.

2. Bankiga Dhexe waxa uu ansixinayaa go'aanka hay'adda ay ku xirayso ganacsigeeda si iskeed ah haddii uu Bankigu ku qanco in hay'adda awood u leedahay in ay iska bixiso deymaha ay ku leyihiin hay'adaha kale iyo macaamiisha.

3. Bankiga Dhexe waa in uu u qeexaa hannaanka iyo muddada ay hay'addu ku bixinayso deymaha lagu leeyahay iyadoo warbixin buuxda u gudbineysa Bankiga Dhexe.

4. Bankiga Dhexe ayaa xeer-nidaamiye ku qeexaya shuruudaha kale ee la xiriira go'aanka xiritaanka hay'adda.

Qodobka 59aad
Lacag Dhigista iyo Ka Bixinta Akoonnada Qaan-baxa

Iyadoo la tixraacayo xaaladda dhaqaale xumada ee fuliyaha, ama ka-qeyb-qaataha nidaamka lacag-bixinta ama wakiilka kala-waraajinta, haddii loo ogolaado waxa ay sameyn karaan arrimaha kala ah:

1. In lacagaha ugu jira akoonnada ay u wareejin karaan daymaha lagu leeyahay.

2. In uu isticmaali karo haraaga ku hara xisaabta marka uu qaan-baxo, si uu ugu bixiyo deymaha kale ee lagu leeyahay.

3. In la isku jaangooyo deynta la siiyay hay'adda iyo rahanta laga hayo si loo xaqiijiyo in ay isku dhigmaan deynta iyo rahanta.



Qodobka 60aad
Ilaalinta Xuquuqaha

Qofna lagama xanibi karo xuquuqda uu sharcigu siinayo, mana saameyneyso inta lagu guda jiro bixinta lacagaha iyo dhaqan-galinta nidaamka qaan-bixidda ee ku xusan sharcigan.

QEYBTA SAGAALAAD
WAREEJINTA JEEGGAGA IYO LACAGAHA ELEKTAROONIGA

Qodobka 61aad
Adeegsiga Jeeggaga

1. Banki waxa uu lacagta ku bixin karaa jeeg leh astaamo u fududeynaya in lacagta lagula baxo hab elektaroonik ah isaga oo ka maarmaya in banki kale uu keeno jeegag.

2. Muhiimadda laga leeyahay faqraddan waa qeexitaanka astaamaha jeegga, sida:
   a) lambarka tixraaca jeegga;
   b) lambarka gaarka ah ee bankiga soo saaray jeegga;
   c) lambarka akoonka ee ku xusan jeegga;
   d) xaddiga lacagta ee ku qoran jeegga; iyo
   e) astaamaha kale ee uu qeexay Bankiga Dhexe.

3. Iyadoo la tixraacayo faqradda (1)(2) ee qodobkan, Bankiga Dhexe, wuxuu qeexayaa habka uu u ekaanayo jeegga iyo sida ay u adeegsanayaan hay'adaha.

4. Jeegga lacag-bixinta ee qodobkan waxa uu qofku adeegsan karaa wakhti kasta, loomana baahna in lala tago farac bangi, wakhti gaar ah.

5. inta aan lagaarin wakhtiga xiritaanka ganacsiga ee maalinta xigta, Bankiga jeegga loo geeyay, waxa uu codsan karaa in uu qofku layimaado jeegii uu horey usoo diray oo waraaq ah:
   a) hadii bangigu dalbado in qofku layimaado jeegga oo waraaq ah, dhaqdhaqaaqa faqradda (4) ee qodobkan lama tixgalinayo;
   b) madiidayo qodobkani in qofku mar kale isku dayo adeegsiga jeegga habka elektroonikada.

6. Sida ku cad faqradda (5) jeegga la diiday in lacagta lagula baxo waxba uma dhimeyso saxnaanta jeeggaas.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

7. Bankiga loo keenay jeegga iyo Bankiga iska leh jeegga waxaa wada saaran mas'uuliyad isku mid ah taas oo ay tahay in ay qabtaan iyo in ay ku bixiyaan lacagta, haddii jeegga loo keenay in lacag lagula baxo.
8. Arrimaha soo socda ayaa lagu dhaqayaa haddii jeegga loo arko mid aan sax aheyn
   a) haddii jeegga loo diido lacag la'aan owgeed, Bankigii soo saaray wuxuu jeegga sawirkiisa u celinayaa ciddii iska laheyd;
   b) iyadoo la raacayo faqradda (2) ee qodobkan, nuqulka jeegga oo sawirka ah, wataha wuxuu kula bixi karaa lacag qofka haddii nuqulka sawirka iyo jeegga asalka ah ay is yeeshaan;
   c) nuqulka jeegga ee sawirka ah waxaa loo isticmaalayaa sida jeegga oo kale, sida ku cad faqradda (2) ee Qodobkan, sidoo kalena waa la ogolyahay in loo isticmaalo sharci ahaan waana la isticmaali karaa; iyo
   d) nuqulka jeega sawirka ah waxaa kaliya oo lacag kula bixi karaa qofka iska leh jeega sida faqradda (2) ee Qodobkan:
      i. haddii Bankiga jeega soo saaray uu caddeeyo in dukumintiga uu yahay mid saxsan; iyo
      ii. dukumintiga waxaa lacag loogala bixi karaa inta lagu guda jiro muddada uu bankigu cayimo.

   e) haddii nuqulka jeegga sawirka ah uu yahay mid dhacsan, qofka dukumintiga sawirka wato waxa uu ka codsan karaa bankiga in loo soo saaro jeeg u dhigma dukumintiga, bankigana waa in uu aqbalaa codsiga; iyo
   f) marka uu lumo nuqulka jeegga:
      i. qofku waxa uu ka codsan karaa Bankiga in la siiyo nuqul kale; iyo
      ii. bankiga waa in uu bixiyaa nuqul kale oo sawir ah sidoo kalana waa in uu joojiyaa kii hore.

   g) dukumintiga nuqulka ee sawirka ah waa in uu lahaadaa tilmaamaha soo socda:
      i. magaca iyo astaanta Bankiga;
      ii. sawirka jeegga la diiday;
      iii. tilmaamaha muhiimka ah ee jeegga;
      iv. sababta loo diiday jeegga;
      v. shuruudaha doonashada lacagta ay ku jirto muddada loo jaangooyay in lacagta lagula bixi karo; iyo
      vi. saxiixa qofka uu Bankiga u idmaday in uu soo saaro dukumintiga nuqulka ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

h) soo-celinta dukumintiga nuqulka ah ee lagu dalbado lacagta, waxay ugu filantahay bankiga ogaysiin in jeega la diiday:
i) erayga "haystaha" waxaa loola jeedaa qofka iska leh dukumintiga nuqulka ah "Bankiga loo geeyo" waxaa loola jeedaa Bankiga iska leh jeegga.

9. Wargelinta diidmada jeegga ayaa lagu diri doonaa hab elaktroonik ah, Bankiga waxa uu dirayaa wargelinta marka qofka jeegga iska leh uu ku cowdo in uusan helin wargelinta joojinta jeegga.

10. Ujeedka faqradahan ayaa ah:
a) nuqulka sawirka jeegga waa in uu ka sawirnaadaa labada dhinaca ee jeegga; iyo
b) tilmaamaha muhiimka ee jeegga:
i. tirada taxan ee jeegga;
ii. taariikha jeegga la soo saaray;
iii. lambarka gaarka ah ee Bankiga soo saaray jeegga;
iv. lambarka akoonka ee ku xusan jeegga;
v. xaddiga lacagta ee ku xusan jeegga;
vi. saxiixa jeegga; iyo
vii. waxayaabaha kale ee gaarka ah u ah Bankiga soo saaray jeegga sida qoraalada, tirooyinka iyo astaamaha kale.

11. Bankiga Dhexe ayaa soo saaraya xeer-nidaamiye lagu maamulayo hay'adaha ka shaqeeya arrimaha maaliyadda iyo soo saarista jeeggaga sida ku cad qodobkaan.

Qodobka 62aad
Caddeynta Nuqulka Jeegga

Marka loo baahdo in caddeyn ahaan loo adeegsado nuqulka jeegga ah ama sawirkiisa ee loo soo saaray qaab elektaroonig ah, waxaa loo gudbin karaa guddiga loo xilsaaray ama maxkamadda awooda u leh.

Qodobka 63aad
Caddeynta Wareejinta Lacagaha Elektarooniga ah

1. Lacagta elektarooniga ah ee la isku dirayo waa sharci, waxaana loo adeegsan karaa caddaymo maxkamadda horteeda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Bankiga Dhexe marka uu dhaqan galinayo sharcigan, waxa uu soo saarayaa xeer-nidaamiye, hab-raac iyo tilmaamo lagu maamulaayo arrimaha la xiriira lacag-bixinta, dalbashada lacagta, isku wareejinta lacagaha hab elektarooniga ah.

3. Bankiga Dhexe marka uu dhaqan galinayo sharcigan, waxa uu soo saarayaa hab- raac, awaamir iyo tilmaamo lagu maamulaayo arrimaaha la xiriira lacag-bixinta, dalbashada lacagta, isku wareejinta lacagaha habka elektarooniga marka ay ku haboontahay iyada oo la ilaalinayo xuquuqda macaamiisha isticmaasha lacagaha elektarooniga ah.

QEYBTA TOBANAAD
LACAGAHA ELEKTAROONIGA AH
Qodobka 64aad
Mamnuucidda Soo Saarista Lacagaha Elektarooniga ah Shati La'aan

Qofna ma soo saari karo lacagaha elektarooniga isaga oo aan ogolaansho ka haysan Bankiga Dhexe.

Qodobka 65aad
Shatiga Lacagaha Elektarooniga ah

1. Shuruudaha lagu qaadanayo shatiga lacagaha elektarooniga ah sida uu qabo sharcigan, hay'adda rabta in ay soo saarto lacagaha elektarooniga ah ama ay ka shaqeeyso adeegga lacagaha elektarooniga ah, waa in ay u hogaansamaan shuruudaha lagu qaadanayo shatiga sida ay qeexayaan sharciyada Bankiga Dhexe.

2. Bankiga Dhexe waa in uu ka soo saaraa xeer-nidaamiye lagu qaadanayo shatiga lacagaha elektarooniga iyo soo saaristooda, kuwaas oo ay ka mid yihiin arrimaha soo socda:
   a) Shuruudaha shati bixinta sida xaddiga ra'sumaalka ugu yar iyo xaqiijinta awoodda kaashka;
   b) Qaab-dhismeedka hay'adda, maamulka hay'adda, maareynta khataraha, iyo maareynta shaqooyinka joogtada ah;
   c) Soo-saarista lacagaha elektarooniga ah iyo qabashada adeegga lacagaha elektarooniga;
   d) Keydinta, maareynta, ilaalinta iyo adeegsiga lacagaha macaamiisha;
   e) Sugnaanta, bed-qabka iyo joogteynta maareynta ganacsiga;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

f) Waxyaabaha mamnuuca ah iyo waxyaabaha la ogol yahay;
g) Furitaanka xarumo, magacaabista, hawl galinta iyo kormeeridda wakiilada;
h) U-hogaansanaanta Sharciyada Ka-hortaga Lacag Dhaqista iyo Maalgalinta Aragagixisada;
i) Warbixinnada iyo tiro-koobka lala wadaagayo Bankiga Dhexe;
j) Ilaalinta xuquuqda macaamiisha;
k) Dambiyada, talaabooyinka maamul iyo xayiraadaha;
l) Xiritaanka adeegga lacagaha elektarooniga ah; iyo
m) Shuruudaha kale ee muhiimka ah.

Qodobka 66aad
Soo-saarista iyo Qul-qulka Lacagaha Elektarooniga ah

1. Hay'adda haysata shatiga adeegga lacagaha elektarooniga ah:
   a) Waa in ay soo saarataa lacagaha elektarooniga ah kadib marka ay dhigto akoonnada loogu talagalay lacag u dhiganta midda ay soo saareyso;
   b) Hay'addu waa in ay xaqiijiso lacagaha elektarooniga ah oo ay soo saarayso hay'adda in ay la egtahay lacagta ku jirta akoonnada Bankiga;
   c) Hay'adda waa in ay foom u gudbiso Bankiga ay ku leedahay akoonka lacagta loogu keydiyay, kaas oo ay ku xusan tahay xogta guud ee adeegsadayaasha lacagaha elektarooniga ah, kuwaas oo lacagtooda ay yaallaan akoon cayiman;
   d) U-hogaansanaanta sharciyada uu Bankiga Dhexe qeexay.

2. Bankiga dhexe waa in uu heli karo fahfaahinta xogta adeegsadayaasha lacagaha elektarooniga ah, kuwaas oo lacagtooda ay yaallaan akoon cayiman.

3. Lacagaha elektarooniga ah waa in ay ku qiimo yihiin lacagaha caadiga ah waana in aysan dhicin.

4. Iibsiga ama ka ganacsiga lacagaha elektarooniga ah waxaa qaban kara wakiilada hay'adaha bixiya adeegga lacagaha elektaroniga ah ee haysta shatiga iyada oo la eegayo heshiiska wakiilnimada.

5. Hay'adda bixisa adeegga lacagaha waa in ay furtaa akoon gaar ah oo lagu qabto lacagaha elektarooniga ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

6. Cidna ma soo saari karto lacag elektaroonig ah iyada oo aan qaban lacag caddaan ah oo u dhiganta tirada lacagta elektarooniga ah ee uu bixinayo.

7. Mamnuucidda faqradda sare ma reebeyso isku baddalka lacagaha caddaanka ah ee macaamiisha akoonada u taala iyo lacagaha elektarooniga si loo fududeeyo dhaq-dhaqaaqa lacagaha elektarooniga ah.

8. Dhibcaha iyo abaal marinta shaqaalaha looguma badali karo lacagaha elektarooniga ah.

9. Warbixinta tirakoobka lacagaha elektarooniga ah ee lagu shubto ama labixiyo waxaa loo gudbinayaa Bankiga Dhexe si joogto ah.

10. Hay'adda bixisa adeegga lacag bixinta waa in ay u gudbisaa Bankiga Dhexe warbixin sax ah si loo ogaado isla markaana loola socdo tirada, qul-qulka lacagaha elektarooniga ah ee saameynta ku leh dhaqaalaha wadanka.

11. Habka is-waafajinta iyo lacag-bixinta wa in aysan dib u dhigin adeegga lacag- bixinta wax ka badan 24 saac kadib marka lacagta la soo dalbado.

12. Soo saarayaasha lacagaha elektarooniga ah waa in ay ku qiimeeyaan lacagaha ay soo saaraan lacag uu Bankiga Dhexe ogolyahay.

13. Maareynta sababeynta kor-u-kaca qiimaha suuqa ee lacagaha elektarooniga, soo saaraha waa in si hufan uu ula socod siiyaa macaamiilka haysta lacagta.

14. Hay'adda adeegga lacag-bixinta waa:
    a) in aysan lacagaha ka qeybqaatayaasha u adeegsan ujeeddooyin kale;
    b) in aysan isku qasin lacagaha macaamiilka iyo lacagaha hawlaha hay'adda;
    c) sameynta qeyb u gooni ah shaqada adeegga lacagaha elektarooniga ah;
    d) sameynta hal-beegyo looga ilaalinaayo lacagaha in ay ku yimaadaan khataro kuwaas oo macaamiisha ay ku waayi karaan lacagahooda;
    e) in la yareeyo khataraha keydinta lacagaha iyada oo la dhigaayo bangiyo kala duwan oo uu ogolyahay Bankiga Dhexe;
    f) in la baaro isla markaana la soo saaro xisaab xirka lacagaha elekataroniga ah;
    g) in la soo gudbiyo warbixinnada shaqooyinka hay'adda si bille ah ama siyaabaha kale taas oo uu qeexaayo Bankiga Dhexe;
    h) in la xaqiijiyo dalabka lacag la bixidda ee macaamiisha in la fuliyo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

i) in la xaqiijiyo in lacagaha elektarooniga ah ee yaala akoonnada ay la egyihiin lacagaha caddaanka ah; iyo
j) In loo hogaansamo sharciyada kale ee uu Bankiga Dhexe qeexaayo.

15. Lacagaha elekrooniga ah maalgalin iyo deen kuma bixin karo adeegbixiyuhu.

16. Hay'adda adeegga lacag-bixinta waa in ay diyaarisaa nidaam dabagal oo dhamaystiran oo lagu fududaynaayo baarintaanka sida uu qeexayo Bankiga Dhexe.

QEYBTA KOW & TOBANAAD
QODOBO GUUD
Qodobka 67aad
Maareynta Khataraha

1. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta waa in uu aqoonsadaa, qiimeeyaa, maareeyaa, ilaaliyaa, yareeyaa dhammaan khataraha kala ah:
   a) khataraha ra'sulmaalka;
   b) khataraha kaashka;
   c) khataraha deymaha;
   d) khataraha hawl maal-meedka;
   e) khataraha lacag-bixinta;
   f) khataraha keydinta xogaha iyo xiriirka tiknoolajiyadda;
   g) khataraha dhanka sharciga;
   h) khaataraha magaca iyo sumcadda hay'adda;
   i) khataraha lacag dhaqista iyo maalgalinta argagixisada.

2. Fuliyaha iyo hay'adda bixisa adeegga lacag-bixinta waa in ay u hoggaansamaan xeer-nidaamiyaha, hab raacyada farsamo ama tilmaamayaasha ee uu Bankiga Dhexe soo saaro kuwaas oo la xirriira maareynta khataraha.

Qodobka 68aad
Isku xirka

1. Fuliyaha, shirkadaha qabta adeegga lacag-bixinta iyo ka qeyb-galayaasha waa in ay adeegsadaan sistam awood u leh la fal galidda sistamyada kale ee maxaliga ah ama kuwa caalamiga ah si loo hirgeliyo xirriirka sistamyada oo dhamaystiran.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Bankiga Dhexe waa in uu xaqiijiyaa isla-falgalka sistamyada kala duwan ee fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta iyo ka qeyb-glayaasha kaas oo ku salaysan qaab dhismeed uu Bankiga Dhexe u dajiyay.

3. Shirkadaha bixiya adeegga lacag-bixinta iyo ka qayb-galayaasha waxa ay u soo jeedin karaan Bankiga Dhexe qiimaha heshiisyada isku-xirnaanta iyo isla fal-galka sistamyada.

4. Bankiga Dhexe ayaa jaangoynayaa qiimaha khidmadda is-ku-xirnaanta iyo isla falgalka sistamyada ee fuliyaha, shirkadaha qabta adeegga lacag-bixinta iyo ka qeyb-galayaasha.

Qodobka 69aad
Dukumantiyada Elektarooniga, Xiriirka iyo Xogaha

1. Bankiga Dhexe, fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta, ka qeyb-galayaasha, wakiilada, adeegsadayaasha iyo cid kasta oo saameyn ku yeelan karta sharcigan, waxaa ay adeegsan karaan aalad elektarooniga ah:
   a) in ay soo saaraan dukumiinti, diiwaan ama xogo kale;
   b) in ay ugu gudbiyaan xogta cid kasta;
   c) in ay ka helaan xogta cid kasta; iyo
   d) in ay ugu keydiyaan dukumiinti, diiwaan ama xogo kale.

2. Isticmaal kasta ee Dukumintiga elektarooniga ah, xiriirka ama xogaha waa in ay xaqiijiyaan arrimaha soo socda:
   a) dukumintiga asalka ah, xiriirka ama macluumaadka waa in la keydiyaa mar kasta;
   b) asalka iyo cidda leh dukumintiga, xiriirka ama xogaha waa in la ogaan karaa;
   c) dhammaan khataraha la xiriir dukumintiga elektarooniga ah, xirirka iyo xogaha waa in la aqoonsadaa, la qiimeeyaa, la maareeyaa, la xakameeyaa ama meesha laga saaraa;
   d) dukumintiga, xiriirka ama xogaha la keydiyay waa in la heli karaa asalkooda marka loo baahdo;
   e) fariimaha elektarooniga ah waa in ay lahaadaan faah-faahin buuxda sida: marinka fariinta, qofka xogta ay ka timid, taariikhda, xiliga la diray iyo waqtiga la helay xogta ama meesha ay ku socoto; iyo
   f) shuruudaha kale ee Bankiga Dhexe uu qeexayo.

3. Dukumintiyada elektarooniga, diiwaannada, xiriirka, xogaha, waa in la daabici karaa haddii maxkamaduhu ay uga baahdaan cadeyn ahaan;



4. Dukumintiyada elektarooniga, diiwaannada, xiriirka, xogaha waa in la heli karaa asalkoodi hore.

5. Bankiga Dhexe ayaa xeer-nidaamiye ka soo saaraya shuruudaha kale ee looga baahan yahay dukumintiyada elektarooniga, diiwaaannada, xiriirka iyo xogaha.

Qodobka 70aad
Horumarinta iyo Casriyaynta

1. Bankiga Dhexe si uu u horumariyo nidaamka lacag-bixinta qaranka wuxuu u ogolaanayaa fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta in ay ku sameeyaan tijaabo baaris adeegga ama agabka la hormarinayo, si keli ah ama iyaga oo kaashanaya Bankiga Dhexe, kuna sameeyaan tijaabada qaab taxaddar leh.

2. Bankiga Dhexe waa in uu qeexaa shuruudaha ay tahay in loo hogaansamo marka la sameynayo tijaabada baarista.

3. Tijaabada baaris kasta ee la sameynayo sida ku xusan faqradaan waa in aysan ka hor imaan sharcigaan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa.

Qodobka 71aad
Dhawrista Xuquuqda Macaamiilka

1. Fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta waa in ay soo saaraan, aas-aasaan, dhaqan galiyaan, siyaasadaha iyo hab-raacyada xaqiijinaya ka qeyb-galayasha iyo macaamisha in la dhowro xuquuqdooda.

2. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta waa in ay sameeyaan hab lagu xaqiijinayo dhowrista xuquuqda macaamiisha, kuwaas oo ay ka mid yihiin:
   a) is-waafajinta hawl maal-meedka;
   b) adeeg aan hakad iyo kala joogsi laheyn.
   c) ilaalinta xogaha khaaska ah ee macaamiisha;
   d) adeeg tayo leh oo la isku haleyn karo;
   e) hufnaanta adeegga;
   f) deg deg siimada adeegga; iyo
   g) xallinta deg dega ah ee cabashooyinka macaamiisha.



3. Iyadoo aan laga gudbaynin faqaradda (2) ee qodobkan, fuliyaha, hay'adda adeegga lacag bixinta waa in ay u diyaariyaan macaamiilka ama ka qayabgalaha, arrimaha soo socda:
   a) shuruudaha iyo heshiiska waa in uu daah-furan yahay, sharcina yahay, kuna qoran yahay ereyo la fahmi karo;
   b) dukumiintiga heshiiska oo ay ku faah-faahsan tahay xuquuqda iyo waajibaadka dhinac kasta;
   c) habka maareynta cabashooyinka iyo xallinta khilaafka;
   d) caddeynta dhammaan xogaha la xirira adeegga taas oo ay ku jirto khidmadaha adeegga ama agabka iyo khataraha imaan kara.

4. Bankiga Dhexe ayaa xeer-nidaamiye ka soo saaraya shuruudaha kale ee la xariira ilaalinta xuquuqda macaamiisha.

5. Hay'adda looma ogola in ay macaamiisha ku soo jiidato xayeysiinta adeeg been abuur ah, ama usoo bandhigto adeeg aysan shati u haysanin.

Qodobka 72aad
Ilaalinta Xogaha

1. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta waa in ay dhowraan xuquuqda gaarka ah ee xogaha ee ka qeybqaatayaasha iyo ka qeyb-galaha, waana in aan lala wadaagin xogahaas qofna marka laga reebo:
   a) Ka qeyb-galaha iyo macaamiilka xogta lahaa;
   b) Bankiga Dhexe;
   c) Qof kale oo ay u ogolaadeen ka qeyb-galaha iyo macaamiilka xogta leh;
   d) Cidda uu u ogalaanayo sharcigu; ama
   e) Cidda ay u amarto maxkamadda.

Qodobka 73aad
Lacagaha Baadida ah

1. Lacagaha ay hayaan fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta kuwaas oo cid sheegata la waayo muddo 7 sanno ah waxaa loo aqoonsan doonaa lacago baadi ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Fuliyaha waxa wajib ku ah in uu raadiyo macaamilka ama ehelkiisa sharciga ah, inta lagu jiro muddada 7 sanno iyadoo la raacayo habraacyada iyo shuruudaha u dagsan fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta.

3. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka qeyb-galaha haya lacago baadi ah oo ay leeyhiin macaamiisha waa in ay ku soo wareejiyaan Bankiga Dhexe iyaga oo ay la socoto faahfaahinta ka qeybqaatayaasha.

4. Bankiga Dhexe ayaa go'aaminaya hababka macaamiilka, qaabka uu u maareynayo lacagaha baadida ah iyo akoonka lagu keydinayo.

Qodobka 74aad
Habka Xallinta Khilaafaadka

1. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka qeyb-galaha waa in ay dajiyaan nidaaam fudud oo la fahmi karo taas oo loo soo gudbin karo cabashooyinka.

2. Cabashooyinka ama muranka waa in lagu xaliyaa si deg deg ah haddii aysan surta geli karin waa in lagu xaliyaa (30) soddon maalmood oo ka bilaabanaysa maalinka la soo gudbiyay cabashada ama khilaafka.

3. Macaamiilka waa in si joogta ah loola socod siiyo halka ay marayso howsha xallinta khilaafka.

4. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta ama ka qeyb-galaha waa in ay u xalliyaan cabashada sida uu doonayo macaamiilka, haddii macaamiilku uu san ku qancin xalkii la gaaray waxa uu cabshadiisa u gudbisan karaa cid kasta oo uu u arko in ay xal u keeni karto si sharci ah oo uu ka mid yahay Bankiga Dhexe.

5. Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta waxa ay aas-aasi karaan nidaam ka baxsan maxkamadda oo lagu xallinayo khilaafaadka kala dhaxeeya ka qeyb-galaheeda.

6. Bankiga Dhexe waxa uu si sharciga waafaqsan u aas-aasi karaa qaab-dhismeed garmaqal oo aan maxkamad ahayn taas oo lagu qaadayo dacwadaha ka dhasha muranka u dhaxeeya:
   a) Fuliyaha, hay'adda adeegga lacag-bixinta iyo ka qeyb-galaha;
   b) Hay'adda adeegga lacag-bixinta iyo macaamilkeeda; iyo
   c) Bankiga Dhexe, fuliyaha iyo ka qeyb-galayaasha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 75aad
Is-burrinta Sharciyada

1. Xuquuqda iyo waajibaadka ka qeyb-galaha ajnabiga oo adeegsanaya nidaamka lacag-bixinta maxaliga, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka waxaa lagu dhaqayaa oo kaliya shuruucda Dawladda Soomaaliya.

2. Faqarada (1) ee qodobkan, waa lagu dabaqi karaa nidaamka lagu la tacaalayo marka hay'adda ajnabiga ah uu ku yimmaado dhaqaale xumo.

3. Xuquuqda iyo waajibaadka ka qeybgalaha Soomaaliga ah oo adeegsanaya nidaamka lacag-bixinta qalaad, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka waxaa lagu dhaqayaa oo kaliya shuruucda lagu dhaqo lacag-bixinta qalaad, is-waafajinta, kala-baxa xisaabaadka shisheeye.

4. Faqradda (1) ee qodobkan, waa lagu dabaqi karaa nidaamka lagu la tacaalayo marka hay'adaha Soomaaliyeed ay ku timaado dhaqaale xumo.

Qodobka 76aad
Khidmadaha Maamulka

Bankiga Dhexe waxa uu soo rogi karaa khidmado lagu qaadayo hawlaha maamul iyo fududaynta sida uu qabo sharcigan.

Qodobka 77aad
Wada Shaqaynta Hay'adaha Kale

1. Bankiga Dhexe waxa uu la shaqeyn karaa:
   a) Hay'adaha dowliga ah ee la xiriira nidaamka lacag-bixinta; iyo
   b) Hay'adaha ajnabiga ah ee qaabilsan arrimaha lacagta, hay'adaha kormeerka iyo ururrada caalamiga ee ka shaqeeya sharciyeynta iyo kormeerka nidaamka lacag-bixinta.

2. Bankiga Dhexe si waafaqsan ujeeddooyinka bankiga dhexe waxa uu ula shaqayn karaa hay'adda sida ku xusan faqradda (1), waxa ayna la gali karaan heshiis is-faham hay'addaas.



3. Faqradda (2) ee qodobkan, kama mamnuucayso Bankiga Dhexe in uu la shaqeeyo hay'ad ama shirkad sida ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan, iyadoo laga maarmayo in lala galo heshiis is fahan hay'addaas.

Qodobka 78aad
Qoraalo Farsamo

Bankiga Dhexe waxa uu mar kasta soo saari karaa qoraalo farsamo ee uu ku faah-faahinayo ama ku sharaxayo erayada, qodobbada loo adeegsaday sharcigan ama xeer-nidaamiyaha si uu sharaxaad dheeraad ah uga bixiyo qodobbada ku xusan sharcigan ama xeer-nidaamiyaha.

Qodobka 79aad
Soo Saarista Wareegto iyo Habraacyo

1. Bankiga Dhexe waxa uu mar kasta soo saari karaa wareegtooyin la xiriira fulinta iyo hirgalinta qodob kasta oo ku xusan sharcigan ama xeer-nidaamiyaha.

2. Bankiga Dhexe waxa uu mar kasta soo saari karaa hab-raacyo in la dhaqan galiyaa ay waajib tahay kuwaas oo la xiriira:
   a) habka loo fulinayo Sharciga ama xeer-nidaamiyaha; ama
   b) dhaqan-galinta talooyinka iyo habraacyada caalamiga kuwaas oo ay ka mid yihiin mabaadi'ida caalamiga ah ee kaabayaasha dhaqaalaha suuqa iyo mabaadiida la xariirta lacag-bixinta.

Qodobka 80aad
Xeer-nidaamiyaha

1. Bankiga Dhexe isaga oo dhowraya mabaadi'ida iyo qodobbada ku xusan sharcigaan waxa uu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaal la xariira sharcigaan.

2. iyadoo la adeegsanayo awoodaha ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, Bankiga Dhexe wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye qeexaya arrimaha soo socda:
   a) shati bixinta, maamulka iyo kormeerka lagu samaynayo fuliyaha, hay'adaha qabta adeegga lacag-bixinta, is-waafajinta, iyo kala-baxa xisaabaadka;
   b) diiwaangelinta hay'ado cayiman ee adeegga lacag-bixinta;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

c) foomka lagu codsanayo shatiga, ansixinta, diiwaangelinta, dalabyada iyo dukumintiyada kale ee uu u baahan yahay sharcigaan;
d) macluumaadka ay tahay in lagu xuso warbixinnada, iyo dukumintiyada kale ee loo gudibinaya Bankiga Dhexe si loo hirgaliyo sharcigan;
e) khidmadaha laga qaadayo fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta ama ka qeyb galayaasha;
f) soo saarista iyo bixinta adeegyada lacagta elektrooniga ah;
g) ganaaxyada lacageed ee gaarka ah kuwaas oo la soo rogayo marka la jabiyo ama la dhaqan-gelin waayo sharciyada, hab-raacyada, xeer-nidaamiyaha, dalabyada, shuruudaha, uu soo saaro Bankiga Dhexe;
h) dambiyada ka dhasha jabinta qodobbada ku xusan Sharcigan;
i) dhaqan galinta xeer-nidamiye kasta oo caalami ah, mabaadiida, kuwaas oo faa'iido u leh fuliyaha, hay'adaha adeegga lacag-bixinta, ka-qeyb-galayaasha, macaamiisha ama hannaanka lacag-bixinta qaranka;
j) shuruudaha kale ee dheeriga ah kuwaas oo la xariira sharcigaan; iyo
k) arrin kasta oo aan lagu sheegin sharcigaan balse lagama-maarmaan u ah sugidda, amaanka iyo ka shaqaysiinta nidaamka lacag-bixinta qaranka, nidaamka maaliyadda, ama muhiim u ah danaha bulshada.

Qodobka 81aad
Dhaqan-gal

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan Barlamaanka JFS, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo-saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.



XEER MADAXWEYNE LR.635 **TAARIIKH: 14-TA JANAAYO 2026**

MAGACAABIS GARSOORE

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Sharciga Nidaamka Garsoorka lambar 3, soona baxay 12 Juun 1962.
MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **MS/XG/96/2025,** taariikheysan **26/11/2025**, kuna saabsan Soo-Jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare JFS ee Magacaabidda Garsoore.
MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha loo magacaabayo xilkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan Waxaa **Avv. Aweys Sheeikh Cabdulaahi,** in uu noqdo Garsoore ka hawl-gala Maxkamadaha Racfaanka Gobolka Banaadir.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa faafinta rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAIHI
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-018-2026
TAARIIKH: 02-03-2026
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Gulale
Hantidhowrana Guud Ee JFS

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.636 **TAARIIKH: 15-TA JANAAYO 2026**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2816/2025**, ku taariikheysan **06/06/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Maxamed Cali Maxamed.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Maxamed Cali Maxamed,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Maxamed Cali Maxamed**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-19-2026
TAARIIKH SAXIIX: 01-03-2026
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud EA JFS

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.637 **TAARIIKH: 15-TA JANAAYO 2026**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2820/2025**, ku taariikheysan **06/06/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Mohamed Abdishakur Ibraahim.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Mohamed Abdishakur Ibraahim,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Mohamed Abdishakur Ibraahim**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-20-2026
TAARIIKH : 02-03-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Guiale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.641 **TAARIIKH: 03-DA JANAAYO 2026**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2213/2025**, ku taariikheysan **12/05/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Xasan Xirsi Diiriye.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Xasan Xirsi Diiriye** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxaa **Dr. Xasan Xirsi Diiriye** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-012-2026
TAARIIKH: 02-03-2026
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowrka Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.658 **TAARIIKH: 29-KA JANAAYO 2026**

XILKA-QAADIS TALIYIHII HORE EE TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED IYO MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Hor keenista Wasiirka Gashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/021/01/26** ee soo baxday ***29/01/2026***, Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis iyo Xil-Ka Qaadis Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Golaha Wasiirradda warqadda summadeedu tahay **XRW/552/01/2026**, ee soo baxday ***29/01/2026***, Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis iyo Xil-Ka-Qaadis Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa **S/Gaas Odawaa Yuusuf Raage** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidaanka Xoogga Dalka, waxaana loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Xoogga **S/Guuto Ibraahim Maxamed Maxamuud**.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-01/02/2026
TAARIIKH: 02-03-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Guhad
Hantidhowraha Guud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.659 **TAARIIKH: 29-KA JANAAYO 2026**

MAGACAABISTA GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka "B"ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare Warqadda summadeedu tahay **WWH&TS/XW/507/01/2026,** kuna taariikhaysan **29/01/2026** ujeedaduna tahay Soo Jeedin Magacaabis Guddoomiye Ku Xigeennada Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo khibradda ay leeyihiin musharraxyadan.

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan waxaa loo magacaabay Mudanayaasha iyo Marwada hoos ku xusan loo magacaabay mid kasta xilka ku hor qoran.

Lr.	Magaca	Xilka
1	Dr. Cabdiraisaaq Cabdullaahi Xaashi	Guddoomiye Ku-Xigeenka Arrimaha Tacliinta
2	Ms. Deeqo Maxamed Qaalib	Guddoomiye Ku-Xigeenka Maamulka & Maaliyadda
3	Dr. Cabdullaahi Sheekh Rashiid	Guddoomiye Ku-Xigeenka Arrimaha Ardayda & Isku Xirka Bulshada
4	Dr. Cali Cawil Axmed	Guddoomiye Ku-Xigeenka Arrimaha Cilmibaarista & Hal-Abuurka
5	Dr. Fuaad Mire Xasan	Guddoomiye Ku-Xigeenka Arrimaha Qorshaynta & Horumarinta

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAMIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S

XEER MADAXWEYNE LR.696 **TAARIIKH: 28-DA FEBRAAYO 2026**

XIL-KA-QAADIS TALIYAHII HORE EE CIIDANKA CIRKA EE C.X.D.S & MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA CIRKA EE C.X.D.S.

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/054/02/26**, ee soo baxday **25/02/2026,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis Taliye iyo xil-ka-qaadis.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waaya aragnimada uu leeyahay Sarkaalkan.

Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan;

1. Waxaa ***S/Gaas Duuliye Maxamuud Sheekh Cali*** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidanka Cirka ee C.X.D.S.
2. Waxaa ***S/Guuto C/Risaaq Maxamuud Xaaji*** loo magacaabay in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Cirka ee X.D.S.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAKA GUUD
DIWAAN NO. HAN-019-2026
TAARIIKH 02-03-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Ese Guuleh
Hantidhowraha Guud Ee XFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAADIHI
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

XEER MADAXWEYNE LR.697 **TAARIIKH: 28-DA FEBRAAYO 2026**

XIL-KA-QAADIS TALIYAHII HORE EE CIIDANKA GAARKA EE C.X.D.S & MAGACAABIS TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA GAARKA AH EE C.X.D.S.

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY:	Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY:	**Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.
MARKUU TIXGELIYAY:	Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/055/02/26**, ee soo baxday **25/02/2026,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis Taliye iyo xil-ka-qaadis.
MARKUU TIXGELIYAY:	Aqoonta iyo waaya aragnimada uu leeyahay Sarkaalkan.

Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan;

1. Waxaa ***G/Dhexe Xasan Saalax Cabdi*** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidanka Gaarka ah ee C.X.D.S.
2. Waxaa ***S/Guuto Aadan Maxamed Cumar*** loo magacaabay in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Gaarka ee C.X.D.S.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA GUUD
DIWAAN NO. HAN-014-2026
TAARIIKH 02-03-2026
SAXIIX
AVV Ahmed Abdi Omale
Hantidhowraa Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 MAR 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIH
SAACAD SAXIIX

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S.

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 189 **Taariikh: 27/12/2025**

XEER: SIYAASADDA SANDUUQA QARAN EE HORUMARINTA WAXBARASHADA (NEDF)

XRW - BIXIT
27 DEC 2025
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Soojeedinta Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha Iyo Tacliinta Sare ee JFS **WWH&TS/XW/483/11/2025**, ku taariikhaysan 18/11/2025, kuna saabsan Siyaasadda Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada (NEDF);

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.36.139.12.25** ee **18/12/2025**, kuna saabsan **"Siyaasadda Sanduuqa Qaran ee Horumarimta Waxbarshada (NEDF)"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda ay uleedahay sanduuqa Qaran iyo horumarinta waxbarashada Dalka.

Waxaa uu meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.36.139.12.25** ee **18/12/2025**, kuna saabsan **"Siyaasadda Sanduuqa Qaran ee Horumarimta Waxbarshada (NEDF)"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Qodobka 2aad
Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Waxbarashada Hidaha iyo Tacliinta Sare loo igmaday inay hirgaliso, meelmarisana Siyaasaddan.

Qodobka 3aad
Dhaqangal

Siyaasaddan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-002-2026
TAARIIKH : 31-01-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gulaid
Hantidhowraha Guud ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA WAXBARASHDA, HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

وزارة التربية والثقافة والتعليم العالي

SIYAASADDA SANDUUQA QARAN EE HORUMARINTA WAXBARASHADA (NEDF)

November, 2025

Hordhac

Waxbarashadu waa asaaska dhismaha horumarka waara, isku-duubni bulsho iyo baraaraha qaranka. Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay garwaaqsan tahay in maalgelinta waxbarashadu– gaar ahaan tacliin tayeysan oo xaq-sooran– ay tahay tallaabo dardargelisa kobaca dhaqaalaha, isbeddelka bulshada iyo xasilloonida mustaqbalka fog. In kasta oo dadaalladan la sameeyay ay joogteeyeen jiritaanka waxbarashada, haddana sidaas oo ay tahay, waxa ay sababeen nidaam waxbarasho oo kala daadsan, loo sinnayn oo aan nidaamsanayn.

Dawladda Federalka Soomaaliya oo ay wakiil uga tahay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(WWH&TS),** waxaa si weyn uga go'an abuuridda nidaam waxbarasho loo dhan yahay, islamarkaana xaqsoor iyo adkeysi leh. Sanduuqa NEDF waxa uu u taagan yahay ballan-qaadka Soomaaliya ee ku aaddan dib u dhiska hay'adaha qaranka, kor u qaadista sinnaanta bulshada, iyo gaarista yoolka horumarinta la joogteyn karo (SDG) waxbarasho tayo leh oo ay u dhan yihiin una siman yihiin dhammaan. Waxaa uu u shaqeeyaa sanduuq isbeddel keena, oo lagu hagi karo kheyraadka wadajirka ah ee dawladda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, qurbajoogta, iyo bah-wadaagta horumarinta si loo gaaro yoolka guud ee ah in cunug kasta oo Soomaali ah uu helo fursado waxbarasho oo tayo leh.

1. Raadraaca iyo Sababta Loo Sameeyey

Nidaamka waxbarasho ee Soomaaliya waxaa uu weli ka mid yahay kuwa ugu liita caalamka, waxaana raad ku yeeshay colaado socday in ka badan soddon sano, burburka hay'adaha dawladda, iyo dhaqaale liita. Burburkan ku yimid kaabayaasha dadweynaha horaantii **1990-kii** ayaa waxa uu horseeday in waxbarashada tooska ah ay ku dhowaato in ay gebi ahaan burburto. Bulshooyinka, ururro diimeedyada iyo xoogagga aan dawliga ahayn ayaa booska dawladda buuxiyay, oo dhisay iskuullo gaar loo leeyahay iyo kuwo aan toos ahayn. In kasta oo dadaalladan la sameeyay ay joogteeyeen jiritaanka waxbarashada, haddana sidaas ay tahay, waxa ay sababeen nidaam waxbarasho oo kala daadsan, loo sinnayn oo aan nidaamsanayn.

Haddaba, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(MoECHE)** waxa ay Dawlad-Goboleedyada **(FMS)** kala shaqeysaa maareynta waxbarashada. Haseyeeshee, qaab-dhismeedkan iskaashiga ayaa wajahaya kala duwanaanshaha kartida, kheyraadka iyo

hirgelinta siyaasadda. Magaalooyinka waaweyn waxa ay ka faa'iidaystaan macaahidda gaarka loo leeyahay, iyadoo degaamada miyiga iyo kuwa gobollada fog fog ay helaan adeegga dawladda oo xaddidan. Sannadkii **2024ta,** qiyaastii saddex milyan oo carruur ah ayaan iskuul dhigan, waxaana jira tiro badan oo dhallinyaro ah oo aan helin fursadda waxbarasho dugsiga hoose dhexe kadib.. Kooxaha nugul—oo ay ka mid yihiin gabdhaha, carruurta naafada ah, shakhsiyaadka gudaha ku barakacay **(IDPs),** iyo bulshooyinka reerguuraaga ah—waxa ay caqabado waaweyn kala kulmaan waxbarashada.

Waaxda waxbarashada waxaa sii xannibaya maal-gelin la'aan ba'an. Inkasta oo si tartiib tartiib ah uu dakhliga qaranka u kordhayo, haddanna **waxbarashada waxaa miisaaniyadda qaranka looga qoondeeyay 10.5% kaliya sannadkii 2024, oo aad uga hooseysa heerka ay Hay'adda Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka ee Qaramada Midoobay (UNESCO) u xaddiday oo ah 15–20%.** Ku tiirsanaanta xooggan maal-gelinta deeq-bixiyeyaasha ee mashaariicda miisaaniyadda ka baxsan ayaa waxa ay keentay hufnaan la'aan, iswaafajin la'aan iyo lahaanshaha dawladda oo xaddidan. Haddii aan la helin hannaan mideysan oo maal-gelin ah, dhaqaalihii ayaa ku kala firdhaya jidad badan, taas oo wiiqaysa isku-xirnaanta, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka.

Dhawrkii sano ee la soo dhaafay, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (MoECHE) ee Dawladda Federaalka, Wasaaradda Maaliyadda (MoF) iyo Wasaaradaha Waxbarashada ee Dawlad-Goboleedyada (FMS) ayaa helay waayoaragnimo ballaaran iyo waxbarashada tooska ah ee nidaamsan iyaga oo hirgelinaya mashruuca Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada **(GPE)** iyo mashaariicda uu maalgeliyo Bankiga Adduunka. Dadaalladan waxaa ay ku guuleysteen adeegsiga nidaamyada dalka (country system) ee Soomaaliya, gaar ahaan Xisaabta **(Akoonka)** Mideysan ee Khasnadda Qaranka **(TSA),** kaas oo si weyn u sii wanaajiyay hufnaanta, daahfurnaanta, iyo anshaxa maaliyadda amaanada ah. Waayo-araginimadan kaliya ma sii wanaajin isuduwidda dawladaha dhexdooda iyo kartida maareynta maaliyadda dawladda, laakiin waxaa ay sidoo kale dhistay aasaas adag oo loogu talagalay soo bandhigidda waxku-oolka ah ee sanduuqa NEDF. Awoodda muuqata ee hay'adahan u leeyihiin maareynta barnaamijyo waxbarasho baaxad weyn leh, oo ay maalgelinayaan deeq-bixiyeyaasha iyada oo loo marayo nidaamyada qaran ayaa dhidibada u taagay hab lagu maal-gelinayo waxbarashada, oo la joogteyn karo, daahfuran, la isu-duway oo hoostaga qaabka guud ee sanduuqa NEDF. Iyada oo laga jawaabayo, Dawladda Federaalka Soomaaliya, oo loo marayo Wasaaradda MoECHE, ayaa waxaa ay bilowday dhismaha **Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada (NEDF)**-oo ah hab maaliyad qaran oo loo naqshadeeyay in si daahfuran oo loo

siman yahay loo abaabulo, loo ururiyo, oo loo qoondeeyo kheyraadyada ama lacagaha mashaariicda waxbarashada. Sanduuqa NEDF waxa uu la jaanqaadayaa **Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Waaxda Waxbarashada (ESSP 2022–2026) iyo Qorshahaha Isbeddelka Qaranka (NTP).** Waxa uu hiigsanayaa in uu yareeyo ku tiirsanaanta deeq-bixiyayaasha, in la hubiyo joogtaynta maaliyadda, iyo in la xoojiyo kalsoonida ay dadweynuhu ku qabaan maalgelinta waxbarashada ee ay dawladdu hoggaamiso. Sanduuqa NEDF waxa uu u taagan yahay ballanqaadka Soomaaliya ee ku aaddan dib-udhiska hay'adaha qaranka, kor-u-qaadista sinnaanta bulshada, iyo gaarista **Yoolka Horumarinta La Joogteyn Karo (SDG) 4: Waxbarasho Tayo leh oo Ay u Dhan Yihiin una Siman Yihiin Dhammaan**. Waxaa uu u shaqeeyaa sanduuq isbeddel keena ahaan, oo lagu hagi karo kheyraadka wadajirka ah ee dawladda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, qurba-joogta, iyo bah-wadaagta horumarinta si loo gaaro yoolka guud ee ah in cunug kasta oo Soomaali ah uu helo fursado waxbarasho oo tayo leh.

2. Himilada, Ujeeddooyinka iyo Istiraatiijiyadaha

Himilada Sanduuqa NEDF waa in la dhiso hab maaliyadeed adkaysi leh, hufan, oo waara, kaas oo dammaanad qaadaya in dhammaan carruurta Soomaaliyeed ay helitaanka waxbarasho tayo leh, loo dhan yahay, oo sinnaan ku dhisan.

Ujeeddooyinka Istiraatiijiga ah:

- Ballaarinta ilaha kala duwan ee maal-gelinta iyada oo lagu darayo dakhliga gudaha, tabarrucaadda qurbajoogta, maal-gashiga ganacsiyada gaarka loo leeyahay, iyo gargaarka caalamiga ah iyada oo la adeegsanayo qaab qaran oo mideysan.
- Sii wanaajinta daahfurnaanta iyo Isla-xisaabtanka iyada oo loo marayo la socoshada maaliyadaha waqtiga la joogo ama tooska ah, baaritaanno madaxbannaan, iyo warbixinno dadweynaha u furan.
- Kor-u-qaadista sinnaanta iyo u-dhammaanshaha iyada oo kheyraadyada lagu hagaajinayo bulshooyinka la faquuqo iyo kuwa adeegyadu ay ku yar yihiin.
- Xoojinta horumarinta macallinka iyo tayada waxbarashada iyada oo la joogteynayo maal-gelinta tababarka, agabka, iyo jaan-gooyooyinka.
- Hubinta joogteynta muddada dheer iyada oo hawlgallada sanduuqa NEDF la dhexgalinayo gudaha nidaamyada Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) iyo kor-u-qaadista anshaxa maaliyadda.

Qeybaha Muhiimka ah in La Maal-geliyo:

a. **Horumarinta Cudadda Macallimiinta:** Kor-u-qaadista aqoonta macallimiinta, mideynta shahaadooyinka, iyo xoojinta macallimiinta loo dirayo ama la geynayo deegaamada miyiga ah iyo kuwa ay colaaduhu saameeyeen.
b. **Horumarinta Kaabayaasha:** Dhisidda iskuullo cusub, dayactirka kuwa hadda dhisan, iyo xaqiijinta tas-hiilaadyada Biyaha, Fayo-dhowrka, iyo Nadaafadda **(WASH)** ee dhammaan xarumaha waxbarashada.
c. **Agabka Barashada iyo Hal-abuurka Dhijitaalka ah:** Bixinta buugaagta aqriska, agabka kaaba barashada, iyo dhexgelinta tiknoolajiyadda waayo-aragnimada barashada ee casriga ah.
d. **Barnaamijyada Sinnaanta iyo U-dhammaanshaha:** Ballaarinta deeqaha waxbarashada, barnaamijyada quudinta iskuulka, iyo dedaallada waxbarashada gaarka ah ee loogu talagalay carruurta naafada ah iyo ardayda barakacayaasha ah.
e. Maamulka waxbarashada

Himilada Muddada Dhexe:

Marka la gaaro **sannadka 2030,** sanduuqa NEDF waxa uu ku hamminayaa nidaam waxbarasho oo la heli karo, loo dhan yahay, oo la jaanqaadaya ajendaha ballaaran ee Soomaaliya, ee horumarinta awoodda aadanaha. Sanduuqa waxaa uu hiigsanayaa in la dhimo tirada carruurta aan iskuulka dhigan oo ay noqoto wax ka yar 25%, in la gaaro sinnaanta jinsiga, in la ballaariyo waxbarashada carruurta yaryar, iyo in la dhiso cududda macallimiin qaran oo ka badan **80,000**

(sideetan Kun) oo macallimiin aqoon leh. Sidaa si la mid ah, sanduuqa NEDF waxa uu ku hamminayaa in la xoojiyo dadaallada lagu siinayo fursad labaad oo waxbarasho dadka aan helin waxbarashada tooska ah, iyada oo loo marayo waxbarashada xirfadaha iyo farsamada gacanta, barnaamijyada akhris-qoraalka ee dadka waaweyn, iyo tababbarrada xirfadeed si ay uga qeyb qaataan kobaca dhaqaale ee dalka. Dhinaca tacliinta sare, sanduuqa NEDF waxa uu hiigsanayaa in la dhiso nidaam tacliin sare, adkaysi leh oo la tartama caalamka, kaas oo horumariya cilmibaarista, halabuurka, iyo xirfadaha loogu talagalay isbeddelka qaran**.**

3. Qaab-dhismeedka Maamul ee Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada

Qaab-dhismeedka maamulka ee sanduuqa NEDF waxaa loo qaabeeyey **hannaan lagu xaqiijinayo hufnaanta, ka-qeybgalka, daahfurnaanta, iyo isla-xisaabtanka** heer kasta oo maamul. Qaabkan waxaa laga soo qaatay hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee caalamiga ah, sida kuwa ay isticmaalaan **Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada / Global Partnership for Education (GPE),** Sanduuqa **Education Cannot Wait (ECW)**, iyo sanduuqyada qaran ee waxbarashada kale ee ka jira dalalka gobolka sida Rwanda iyo Tanzania.

3.1. Doorarka Daneeyayaasha Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada

Guusha hawlgalka iyo istiraatiijiyadda sanduuqa NEDF ee Soomaaliya waxa ay ku xiran tahay qeybinta joogtada ah, qeexidda, iyo dhaqan-gelinta waajibaadka hay'adaha oo laga dhaqan-gelinayo heer federaal iyo heerarka hoose ee dawladda. Qaab maamul loo dhan yahay oo si wanaagsan la isku dubbariday ayaa muhiim u ah kor-u-qaadidda wax-ku-oolnimada iyo hufnaanta, ku dhisidda islaxisaabtan, lahaanshaha, iyo wax-ka-qabashada ee gudaha habdhiska waxbarashada. Doorarka iyo mas'uuliyadaha hay'adaha daneeyayaasha muhiimka ah ee ka tirsan habdhiska sanduuqa NEDF waa sida soo socota:

1. **Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (MoECHE):** Ilaaliyaha ugu weyn iyo guddoonka sanduuqa NEDF ahaan, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(MoECHE)** waxa ay xaqiijisaa in jihada istiraatiijiga ah ee NEDF ay la jaanqaaddo siyaasadda waxbarasho ee guud iyo ajendaha horumarineed ee Soomaaliya. Wasaaradda MoECHE waxa ay guddoomisaa Guddiga Haga NEDF **(NEDF-SC),** waxayna martigelisaa Xoghaynta Farsamada ee NEDF **(NEDF-TS).** Sidoo kale, waxa ay

dammaanad-qaaddaa in ay waafajiso siyaasadaha waxbarasho ee mudnaanaha heer qaran, gaar ahaan kuwa lagu caddeeyay Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Waaxda Waxbarashada ee Soomaaliya **(ESSP),** Qorshaha Isbeddelka Qaranka **(NTP),** iyo sidoo kale la jaanqaadidda qaab-dhismeedyada caalamiga ah sida Yoolka Horumarka Waara ee SDG 4.

2. **Wasaaradda Maaliyadda:** Wasaaraddan waxa ay xaqiijisaa joogtaynta maaliyadeed iyo daacadnimada, hufnaan, iyo mas'uuliyadda buuxda ee lagu maareeyo sanduuqa NEDF, iyada oo la dhexgalinayo qaab-dhismeedka miisaaniyadaha heer qaran iyo heer dawladgoboleed. Waxa ay fududaysaa la-socoshada maaliyadda dawladda/dadweynaha, dabagalka kharashaadka, iyo qoondeynta daahfuran ee kheyraadka iyada oo loo marayo Qaab-dhismeedka Kharashaadka Muddada Dhexe **(MTEFs),** calaamadeynta miisaaniyadda, iyo taageeridda hababka maal-gelinta ku saleysan natiijooyinka. Iskaashiga ay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(MoECHE)** la yeelanayso waa mid aad muhiim u ah si maalgelinta waxbarashada loogu dhex daro qorsheynta dhaqaalaha guud ee dalka.

3. **Wasaaradaha Waxbarashada Dawlad-goboleedyada:** Wasaaradahan waa fuliyeyaasha ugu waaweyn ee sanduuqa NEDF ee heer gobol, iyaga oo la jaanqaadaya kana shaqeynaya istiraatiijiyadaha waxbarashada ee heer qaran si ay uga tarjumaan xaqiiqooyinka dhabta ah ee gobollada ka jira. Waxa ay hormuud u yihiin hirgelinta barnaamijyada uu sanduuqa NEDF taageero ee heer gobol, waxa ayna xaqiijiyaan in adeegyada waxbarasho si caddaalad ah loo gaarsiiyo dhammaan bulshada. Sidoo kale, waxa ay ku biiriyaan aragtiyo dhab ah iyo jawaab-celin siyaasadeed oo wax-ku-ool ah oo lagu hormarinayo wada-hadalka heer qaran.

4. **Ururrada Bulshada Rayidka ah (CSOs):** Ururrada Bulshada Rayidka ah **(CSOs)** ayaa door muhiim ah ka ciyaara iyaga oo ah wakiillada isla-xisaabtanka iyo la hawlgalayaasha adeeg-bixinta ee gudaha qaab-dhismeedka sanduuqa NEDF. Waxa ay si cad u muujiyaan baahiyaha waxbarasho ee ka jira heerka hoose ee bulshada, waxayna u doodaan dadka laga tirada badan yahay ama aan si buuxda uga faa'iideysan adeegyada waxbarasho. Sidoo kale, waxay hirgeliyaan barnaamijyo si gaar ah ugu saleysan baahiyaha deegaanka. Waxa ay sidoo kale gacan ka geystaan xoojinta daahfurnaanta iyada oo loo marayo hababka isla-xisaabtanka bulshada, waxa ayna ka qaybqaataan wadahadalka siyaasadeed si loo hubiyo

in sanduuqa NEDF uu sii ahaado mid u furan bulshada oo ka jawaabeya baahiyaha dhabta ah.

5. **Ururrada Macallimiinta:** Ururrada macallimiintu waa daneeyayaal muhiim ah oo door weyn ka ciyaara qaabaynta xiriirka shaqo, horumarinta xirfadda, iyo hagaajinta xaaladaha shaqo ee ka jira qeybta waxbarashada. Ka qeybgalkooda waxa uu xaqiijiyaa in daryeelka iyo danaha macallimiinta la hormariyo marka la qoondeynayo kheyraadka, waxa ayna gacan ka geystaan wada-naqshadeynta qaab-dhismeedka Horumarinta Xirfadda Joogtada ah **(CPD)** iyo tubta horumarka xirfadaha macallimiinta.

6. **Qeybaha/Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay:** Qeybaha gaarka loo leeyahay waxaa loo arkaa in ay yihiin bahwadaag dhiirrigelinaysa hal-abuurka iyo ballaarinta bixinta adeegyada waxbarasho ee hoos yimaada sanduuqa NEDF. Iyada oo loo marayo iskaashiyada dawladda iyo qeybaha gaarka loo leeyahay **(PPPs),** dadaallada mas'uuliyadda bulshada ee shirkadaha **(CSR),** iyo xalalka tiknoolajiyadeed, ayaa qeybaha gaarka loo leeyahay waxaa ay ka qeybqaadan karaan horumarinta kaabeyaasha waxbarasho, madalaha waxbarasho ee dhijitaalka ah, iyo qaabab kale oo maal-gelin ah, oo beddel u ah kuwa caadiga ah.

7. **Bahwadaagta Horumarinta:** Bahwadaagta horumarinta, oo ay kamid yihiin hay'adaha caalamiga ah ee dhinacyada badan leh, deeq-bixiyeyaasha laba-geesoodka ah, iyo NGO-yada caalamiga ah, ayaa waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan maal-gelinta iyo bixinta taageerada farsamo ee qeybta waxbarashada ee Soomaaliya. Waxa ay ku biiriyaan aragtiyo istiraatiiji ah, waxa ayna mudnaanta deeq-bixiyeyaasha waafajiyaan siyaasadaha qaran, waxa ay soo bandhigaan agab aqooneed, cilmibaaris siyaasadeed, iyo hal-abuurro gacan ka geysta go'aan qaadasho ku saleysan caddeymo.

3.2. Hababka Isla-xisaabtanka iyo Kormeerka

Si loo xaqiijiyo ku kalsoonaanta, daahfurnaanta, iyo hufnaanta sanduuqa NEDF, waxaa la dhisi doonaa qaab-dhismeed kormeer iyo isla xisaabtan oo heerar badan leh oo si rasmi ah loo hirgeliyo. Qaabkan wuxuu isku daraa kormeer siyaasadeed oo heer-sare ah, baaris madax bannaan, ka qaybgalka bulshada, iyo daahfurnaanta tiknoolajiyadeed, taas oo abuureysa nidaam dhammeystiran oo yareynaya halista maareynta hantida **(fiduciary risks),** oo xoojinaya kalsoonida ka dhaxeysa daneeyayaasha.

1. **La-socosho Istiraatiiji ah oo Loo Marayo Guddiga Haga oo Heer-Sare:** Guddiga Haga ee Heer Qaran waxa uu bixin doonaa hagid istiraatiiji ah, waxa uu ansixin doonaa siyaasadaha, waxa uu xaqiijin doonaa in ay la jaanqaadaan mudnaanaha waxbarasho ee qaran, waxa uuna di-bu-eegi doonaa warbixinaha horumarka ee muddo kadibba mar la sameeyo.

2. **Baaritaanno Maaliyadeed iyo Mid Waxqabad oo Madax-bannaan:** Baaritaanno sanadle ah oo ay sameeyaan shirkado baaris/hantidhawr dhinac-saddexaad oo la xaqiijiyay ayaa ilaalin doona daacadnimada maaliyadeed waxayna xaqiijin doonaan in kheyraadka si caqli ku dhisan loo isticmaalo, iyada oo waxyaabihii la ogaaday lagu daabici doono barta daahfurnaanta sanduuqa NEDF.

3. **Korjoogteynta Bulshada Ku Saleysan iyada oo loo marayo Guddiyada Waxbarashada Degaanka:** Guddiyada Waxbarashada ee Degaanka waxa ay korjoogteyn doonaan mashaariicda dhismaha, waxa ay xaqiijin doonaan in agabka iskuullada si sax ah loo keenay, waxa ayna hubin doonaan deeqaha waxbarasho ama gargaarka in si caddaalad ah loogu qaybiyo ka-faa'iideystayaasha.

4. **Hirgelinta Hababka Ilaalinta Dadka Soo Sheega musuqmaasuqa ama khaladaadka:** Waxaa la sameyn doonaa madal ammaan ah oo qarsoodi ah oo loogu talagalay dadka soo sheega musuqmaasuqa ama khaladaadka (whistleblowers), taas oo lagu maamulo siyaasad adag oo xog ilaalin ah, isla markaana la jaanqaadaysa sharciyada qaranka ee ka hortagga musuqmaasuqa.

5. **Daah-furnaanta Waqtiga La joogo oo loo marayo Baro Dhijitaal ah:** Madal daahfuran oo dhijitaal ah oo leh shaashado guud oo waqtiga la joogo ah oo muujinaya bixinta dhaqaalaha, heerka hirgelinta mashruuca, cabbirrada waxqabadka goobta gaarka u ah, iyo natiijooyinka baarista ayaa kor u qaadi doonta maamulka furan iyo kalsoonida dadweynaha.

3.3. Ilaalinta Sharciga iyo Hay'adaha

Sanduuqa waxaa si rasmi ah loo hirgelin doonaa iyada oo loo marayo Go'aan Siyaasadeed oo ka soo baxa Golaha Wasiirrada, kaas oo lagu aasaasayo Sanduuqa Qaran ee Horumarinta

Waxbarashada, laguna caddeynayo waajibaadkiisa, madaxbannaanidiisa hawlgal, iyo heerarka maamulka maaliyadeed ee la raacayo. Siyaasaddan waxa ay la jaanqaadaysaa Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda/Dadweynaha ee Soomaaliya **(PFM Act, 2019)** iyo Siyaasadda Qaranka ee Ilaalinta Bulshada **(2023).** Aasaaskan sharciyeed waxa uu dammaanad qaadayaa joogteynta Sanduuqa iyo in laga ilaaliyo faragelin siyaasadeed.

4. Siyaasadda Maal-gelinta iyo Abaabulka Kheyraadka

Joogteynta muddada-dheer ee Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada Soomaaliya **(NEDF)** wuxuu ku xiran yahay qaab maal-gelin oo kala duwan oo adkaysi leh. Tobannaan sano, waaxda waxbarashadu waxay si weyn ugu tiirsanayd gargaar dibadeed oo aan la saadaalin karin, taas oo muujinaysa baahida loo qabo in loo guuro maalgelin gudaha ah oo waarta. Sanduuqa NEDF wuxuu mudnaan siin doonaa abaabulka dhaqaalaha gudaha iyo kordhinta miisaaniyadda dawladda ee lagu bixiyo kharashaadka guud ee waxbarashada. Ilaha dakhliga gudaha ee hal-abuurka leh, sida canshuur gaar u ah waxbarashada iyo tabarrucaadka bulshada, ayaa xoojin doona salka sanduuqa.

In kasta oo taageerada deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah ay weli muhiim tahay, haddana gargaarka gooni gooniga ah ee mashruuca ku saleysan waa in loo beddelaa habab mideysan oo wadajir ah, iyada oo la raacayo tusaaleyaal guuleystay sida GPE iyo ECW. Isuduwidda noocan ah waxa ay kor u qaadaysaa saadaalinta, isku xirnaanta, iyo saameynta. Qurba-joogta Soomaaliyeed, ee sannad walba dalka u soo dirta ilaa **$2** bilyan, waxa ay ka dhigan tahay fursad weyn oo aan wali si buuxda looga faa'iideysan. Deymo si nidaamsan looga qaato qurbajoogta, madalo lacag ururineed **(crowdfunding)**, iyo iskaashiyo u dhexeeya dawladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay **(PPP),** ayaa gacan ka geysan kara in la hago maal-gelintan waxbarashada. Maaliyad dheeraad ah—sida maal-gelin natiijooyin ku saleysan **(RBF)** iyo maaliyadaha waqafka waxbarashada— waxa ay keeni doonnaan kala duwanaanta ilaha kheyraadka waxa ayna yareyn doonaan saameynta isbed-bedelka dhaqaale.

4.1. Maal-gelinta Gudaha

Maal-gelinta gudaha waxa ay udub dhexaad u tahay lahaanshaha qaran iyo yareynta ku tiirsanaanta deeqaha dibadda. Hadda, waaxda waxbarashada waxa ay heshaa **qiyaastii 10.5%** oo ka mid ah miisaaniyadda qaranka, taas oo aad uga hooseysa heerka lagu taliyey ee u dhexeeya **15–20%. Qaabka Guud ee Maal-gelinta Waxbarashada Soomaaliya (2024)** waxa uu ballan-qaadayaa in la kordhiyo saamigan, oo la gaarsiiyo ilaa **20% marka la gaaro sannadka 2030,** iyada oo lagu taageerayo dib-u-habeynta Maareynta Maaliyadda Dawladda/Dadweynaha **(PFM)** iyo la-socoshada baarlamaanka. Sanduuqa NEDF waxa uu raaci doontaa hab dhawr qaybood ka kooban oo isku-daraya **u-qareemaynta siyaasad, canshuuro gaar u ah waaxda tusaale ahaan (isgaarsiinta iyo kastamka), iyo Habka Isku-dheellidda ama Simidda Maaliyadda Waxbarashada / Equalization Mechanism for Education (FEME)** si loo xaqiijiyo sinnaanta gobollada dalka oo dhan. Dabagalka dhijitaalka ah ee loo marayo **Nidaamka Maamulka Macluumaadka Maaliyadeed ee Soomaaliya (SFMIS**) iyo baaritaanno ay muwaadiniinta hoggaaminayaan ayaa xoojin doona daahfurnaanta.

4.2. Ka-qeybgalka Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay

Ganacsiyada gaarka loo leeyahay waxa ay durba si dadban u taageeraan waxbarashada, laakiin waxaa loo baahan yahay isuduwid nidaamsan. Istiraatiijiyadda Ka-qeybgalka Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay ee Sanduuqa NEDF **(PSES)** waxa ay dhiirrigelin doontaa tabarrucaadka iyada oo loo marayo canshuur-dhaaf, deeqo u dhigma deeqaha laga helay ilaha kale (matching grants), iyo waajibaadyada la xiriira Mas'uuliyadda Bulshada ee Shirkadaha **(CSR).** Iskaashiyada u dhexeeya dawladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay **(PPP)** ayaa mudnaan gaar ah loo siin doonaa dhismaha iskuullada, barashada dhijitaalka ah, iyo tababarka macallimiinta, iyadoo la hagayo Madal Wadajir ah oo ay ka qeyb-galayaan daneeyayaal kala duwan si loo hubiyo in hawlahaasi ay waafaqsan yihiin mudnaanaha qaran.

4.3. Ka Faa'iideysiga Tabarrucaadka Qurba-joogta

Iyadoo lacagaha ay dibadda ka soo diraan qurba-joogta Soomaaliyeed ay ka dhigan yihiin ku dhowaad 30% ee dakhliga guud ee dalka (GDP), qurba-joogtu waa il dhaqaale muhiim ah oo wax ka beddelaysa maalgelinta waxbarashada. Sanduuqa NEDF wuxuu soo bandhigi doonnaa Warqado Caddeynaya Deynta ay Qurba-joogta Ku Bixisay Waxbarashada Education Diaspora Bonds (EDBs), lacago loogu talagalay waxbarashada oo dibadaha laga soo diro, iyo madal dhijitaal ah oo la yiraahdo— "EdFund Somalia" —si qurbajoogta u bixiso tabarrucaad toos ah.

Guddiyada Waxbarashada ee Qurbajoogta Gobollada/Regional Diaspora Education Committees (RDECs) waxaa ay abaabuli doonnaan ka-qeybgalka bulshooyinka si loo hubiyo isla-xisaabtan iyo ka-qeybgal joogto ah.

4.4. Tabarrucaadka Bulshada iyo Maaliyadda Islaamiga ah

Bulshooyinka ayaa taariikh ahaan taageeray nidaamyada waxbarashada ee maxalliga ah. Sanduuqa NEDF ayaa sharciyeyn doonna ama nidaamka waafajin doonna dadaalladan iyada oo loo marayo Guddiyada Waxbarashada Bulshada **(CECs)** iyo Qorshayaasha Horumarinta Iskuullada **(SIPs)** kuwaas oo lagu darayo dhaqaalaha laga ururiyo degaanka. Nidaamka maaliyadda Islaamiga ah—sida sakada iyo waqafka. Kuwan ayaa la ururin doonaa, waxaana lagu dari doonaa Sanduuqa Qaranka ee Waxbarashada Loo
Qoondeeyey **(NEDF)** oo leh deeqo u dhigma oo waxqabad ku saleysan, daahfurnaan si kor loogu qaado lahaanshaha bulshada degaanka.

4.5. Ka-qeybgalka Deeq-bixiyayaasha Caalamiga ah iyo Maalgelin Iskudhaf ah

Taageerada deeq-bixiyeyaasha ayaa weli ah mid aad muhiim u ah iyada oo la eegayo dhaqaalaha xaddidan ee Soomaaliya. Si saameynta loo kordhiyo, taageerada ayaa lagu mideyn doonaa Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada (NEDF) oo diiradda saaraya mudnaano gaar ah. Kormeerka Guddiga Haga Sanduuqa NEDF oo Daneeyayaal Badan ka kooban, oo taageero ka helaya lasocoshada SFMIS ee waqtiga la joogo ah iyo baaritaannada madaxbannaan, ayaa koruqaadi doona daahfurnaanta, yareynta kucelcelinta, iyo hubinta waafaqsanaanta nidaamyada qaran.

4.6. Maal-gelinta Hal-abuurka leh iyo Maareynta Halista

Sanduuqa NEDF waxa uu raadin doonaa warqado deyn dowladeed oo waxbarashada lagu maal-gelinayo, maal-gelin la xiriirta cimilada, iyo waqafka si loo ballaariyo awoodda miisaaniyadeed. Sanduuq Lacag Kayd **10** sano ah iyo Bayaanka Siyaasadda Maal-gashiga **(IPS)** ayaa hagi doona maareynta hantida iyo xasilloonida maaliyadeed. Maareynta halista oo loo marayo qorsheynta xaalad la hal-abuuray iyo tijaabinta culeyska si looga hortago gilgilaadaha.

5. Soo-jeedimaha Muhiimka ah oo u Baahan Go’aanka Golaha Wasiirada

- **Ansixinta Tilmaanta Siyaasadda Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada** si loo sharciyeeyo dhismaha sanduuqa.
- Oggolaanshaha in la dhiso **Guddiga Haga NEDF iyo Xoghaynta Farsamo.**
- Ballan-qaadka miisaaniyad kordhin horey u socoto si loo **gaaro 20% ee kharashaadka qaran ee waxbarashada marka la gaaro 2030**.
- Dhiirrigelinta iskaashiyada lala yeelanayo **qaybta gaarka loo leeyahay, qurbajoogta, iyo bahwadaagta caalamiga ah** si loo helo maal-gelin wadajir ah iyo hal-abuur.
- **Caadiyeynta hababka daahfurnaanta** oo ay ka mid yihiin shaashadaha guud ee dhijitaalka ah, baarista dadweynaha, iyo kormeerka bulshada.

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.190 **Taariikh: 21 Jan, 2026**

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCI

XRW - BIXIT
25 JAN 2026
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Sharciga Qareenada (Sharci Lr. 3/1986).

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **WC&AD/XW/2629/26** ee ku taariikheysan **16/11/2025** ee Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci ;**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.02.142.1.26** ee **12/1/2026,** kuna saabsan Ansixinta **"Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci "** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgeliyay: Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay Hubinta & bixinta adeeg sharci .

Wuxuu Meelmariyay
Qodobka 1aad
Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.02.142.1.26** ee **12/1/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad
Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 3aad
Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-003-2026
TAARIIKH : 31-01-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud E.J.S

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCI

Qodobka 1aad:

Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa **"Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci".**

Qodobka 2aad:

Qeexitaanno

1. **Shirkad:** waxaa loola jeedaa shirkad bixisa adeeg sharci oo lagu diiwaangeliyey si waafaqsan xeernidaamiyahan, ama shirkad bixisa adeeg sharci oo horey u jirtay oo la waafajiyay xeernidaamiyahan;
2. **Adeeg Sharci**: waxaa loola jeeda adeegyada ay bixiyaan qareennadda si waafaqsan Sharciga Qareennada Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975 iyo wax-kabeddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986
3. **Wasaarad:** waxaa loola jeedaa wasaaradda Cadaaladda. JFS 4. **Wasiir:** waxaa loola jeedaa wasiirka u xilsaaran arrimaha Cadaaladda.
5. **JFS:** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Somaaliya.
6. **ALBA:** waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu keydiyo qareennada si waafaqsan qodobka 7aad (1) ee Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975.
7. **Rukhsad Qareen:** waxaa loola jeedaa rukhsad qareennimo uu bixiyo Guddiga talabixinta iyo diiwaangelinta qareenada laguna qoro diiwaanka ALBAHA.
8. **Qareen:** waxaa loola jeedaa Sharciyaqaan ku hawlgala mihnadda qareennimo, isla markaana ku qoran Diiwaanka Guud ee Qareennada (ALBA) ee yaala Maxkamadda Sare.
9. **JFS:** waxaa loola jeeda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qodobka 3aad:

Ujeeddo

Ujeeddada Xeer-nidaamiyahan waa:

1. Dejinta nidaam lagu diiwaangeliyo shirkadaha bixiya adeegyada sharci (Law Firms).
2. Ku Xaddididda adeegyada qareennimada inay bixiyaan keliya qareennada heysta rukhsad qareennimo.
3. Ilaalinta madaxbannaanida iyo hufnaanta xirfadda qareennimada.

Qodobka 4aad:

Baaxadda

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabaqayaa;

Shirkadaha bixiya adeegyada sharciga ee uga diiwaangashan gudaha JFS qaab shirkadeed una hawlgala ujeeddooyin la xiriira bixinta adeegyo sharciyeed.

Qodobka 5aad:

Shuruudaha Lahaanshaha Shirkad bixisa adeeg sharci

1) Hal qareen ama ka badan oo heysta rukhsad qareen si waafaqsan sharuudaha iyo habraacyada Sharciga Qareennada Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975 iyo wax-ka-beddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986 ayaa keliya leh xaqa asaasidda iyo hawlgelinta shirkad bixisa adeeg Sharci gudaha JFS.
2) Qof aan heysan rukhsad qareen looma oggola in uu furto ama lahaado shirkad bixisa adeeg Sharci, fal kasta oo noocaas ah waxaa loo aqoonsanayaa ku shaqeyn sharci darro oo lagu muteysanayo ciqaab si waafaqasan qodobka 383 iyo 496 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodobka 6aad:

Shakhsiyad Qaanuuneed

1. Shirkad sharci oo lagu diiwaangeliyo si waafaqsan xeernidaamiyahan waxay yeelanaysaa Shakhsiyad qaanuuneed ay ku dacwoon karto laguna dacweyn karo, islamarkaasna ay ku geli karto heshiis sharci.
2. Shirkad sharci waxaa loo magacaabi karaa maamule ama hawlwadeen farsamo oo aan qareen ahayn, si gaar ahna loogu xilsaaray hawlaha maamulka maaliyadeed, maamulka shaqaalaha iyo hawlaha farsamo ee aan toos ugu lug lahayn bixinta adeeg sharci ee mihnadeed.
3. Maamule ama hawlwadeen lagu hawlgeliyo si waafaqsan ujeeddada ku xusan faqradda (2) ee qodobkan, looma aqoonsanayo inuu leeyahay awood sharciyeed oo ku saabsan bixinta adeeg sharci, dacwad, difaac, heshiis ama hawl kale oo leh dabeecad adeeg sharciyeed, mana fulin karo adeeg kasta oo fulintiisu u baahan tahay rukhsad qareen.
4. Layli qareen ama kaaliye sharci waxaa loo oggol yahay in uu qabto oo keliya hawlaha uu si toos ah ugu xilsaaran yahay inuu ka hoos shaqeeyo qareenka, iyadoo mas'uuliyadda sharci iyo mihnadeed ee hawlahaas si buuxda iyo si kama dambeys ah u saaran tahay qareenka.

Qodobka 7aad:
Diiwaangelinta Shirkadaha

1) Ka hor inta aan la hawlgelin shirkad bixisa adeeg sharci oo cusub, waa in laga diiwaangeliyaa Wasaaradda.
2) Waaxda Arrimaha Garsoorka ee Wasaaradda ayaa diiwaangelinaysa si waafaqsan xeer-nidaamiyahan, iyadoo lagu lifaaqayo dokumentiyada ku cad Qodobka 8aad ee Xeer-nidaamiyahan.
3) Xog kasta oo la gudbinayo waa inay noqotaa mid sax ah oo dhammeystiran.
4) Marka la xaqiijiyo u hoggaansamidda shuruudaha ku xusan iyo bixinta khidmadda loo qoondeeyey, Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Shahaadada diiwaangelinta oo leh Lambar diiwaangelin oo taxane ah; shahaadada waa in si muuqata loogu dhejiyo xafiiska shirkadda.
5) Isbeddel kasta oo ku yimaadda magaca shirkadda, cinwaanka, qaabka lahaanshaha ama liiska qareennada rukhsadda heysta ee asaasayaasha ama saamile ah waa in lagu soo wargeliyaa Wasaaradda muddo shan iyo toban (15) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda isbeddelka.
6) Soo gudbinta xog qaldan ama ka gaabinta buuxinta shuruudahan waxay keeni kartaa diidmo diiwaangelin, hakinta ama tirtiridda diiwaangelinta iyo in laga qaado tallaabo sharci si waafaqan Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 8aad:
Xogta iyo Dokumentiyada Diiwaangelinta

Codsi kasta oo diiwaangelin ah waa inuu la socdaa dokumentiyada iyo xogta soo socota:

1. Codsi qoraal ah oo lagu caddeeyay magaca shirkadda, qareenka, ciwaanka rasmiga ah iyo goobta hawlgalka oo uu ku saxiixan yahay mas'uulka ugu sarreeya Shirkadda.
2. Magacyada oo dhameystiran, taariikhda dhalashada, jinsiyadda iyo ciwaanka deggenaansho ee qareenka ama qareennada asaasay.
3. Nuqulka shahaadada iyo rukhsadda qareennimo ee qareenka ama qareennada asaasay iyo qareennada ka hawl-gala xafiiska, oo lagu bixiyay si waafaqsan Sharciga Qareennada, Sharci Lr. 85 ee 21 Oktoobar 1975 iyo wax-ka-beddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986.
4. Heshiiska asaaska ama qoraal sharciyeedka dhisidda shirkadda adeega sharci.
5. Caddeyn ku saabsan cinwaanka shirkadda ama lahaanshaha goobta shaqada; iyo

6. Dokumentiyada iyo xogta ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa in lagu gudbiyaa si dhammeystiran, sax ah, oo waafaqsan tilmaamaha maamulka ee ay soo saarto Waaxda Arrimaha Garsoorka ee Wasaaradda.
7. Codsi kasta oo aan buuxin shuruudaha kor ku xusan waxaa loo aqoonsanayaa mid aan dhammaystirnayn, laguna diidi karo diiwaangelinta rasmiga ah.

Qodobka 9aad:

Dhisid iyo Diiwaangelin Shirkad Shisheeye

1) Waxaa aasaasi kara shirkad shisheeye hal ama in kabadan, qareenno shisheeye oo loo ogolaaday inay kaga hawlgalaan gudaha JFS mihnada sharcig, iyo haddii qareenada shisheeye dawladahooda asalka ah sidaa oo kale u ogol yihiin qareenada Soomaaliyeed.
2) Waa in saamileyda shirkada qeyb ka yahay ugu yaraan hal qareen Soomaaliyeed oo heysta rukhsad qareen si waafaqsan Sharciga Qareennada Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975 iyo wax-ka-beddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986.
3) Ka hor inta aan la hawlgelin shirkad shisheeye oo bixisa adeeg sharci oo cusub, waa in laga diiwaangeliyaa Wasaaradda.
4) shirkadda shisheeye waa in ay u keentaa qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Agaasimaha waaxda Garsoorka wasaarada si uu ugu ogolaado diiwaangelin, iyada oo la dhowrayo shuruudaha ku cad qodobka 8aad ee Xeer-nidaamiyahan oo lagu daray;
    a) Magaca saxda ah oo ay shirkadu qaadatay;
    b) Qaabka shirkada looga aqoonsanyahay sharciga wadanka lagu aasaasay, haddii shirkadu tahay mid ka diiwaangashan wadan kale asal ahaan;
    c) Ciwaanka xarunteeda dhexe;
5) Codsi kasta oo aan buuxin shuruudaha ku xusan qodobka 8aad iyo 9aad waxaa loo aqoonsanayaa mid aan dhammaystirnayn, laguna diidi karo diiwaangelinta rasmiga ah.

Qodobka 10aad:

Shirkadaha Horey u Jiray

1) Dhammaan shirkadaha bixiya adeegyada sharciga ee horey uga hawlgalayay dalka ka hor dhaqangalka Xeernidaamiyahan waa inay iska diiwaangeliyaan Wasaaradda, muddo lixdan (60) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda dhaqangalka Xeernidaamiyahan.

2) Shirkad kasta oo aan muddadaas gudaheed isku diiwaangelin waxaa loo aqoonsanayaa inay ku shaqeynayso si sharci darro ah, waxayna Muteysanaysaa tallaabooyin Anshax-marineed sida ku xusan Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 11aad:

Faafinta Liiska Shirkadaha Adeegyada Sharciga

1) Kaddib soojeedinta Waaxda Arrimaha Garsoorka, muddo sagaashan (90) maalmood gudahood laga bilaabo dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan, wasaaradda waxay soo saaraysaa liiska dhammaan xafiisyada shirkadaha ee si sharci ah uga hawlgala JFS, kuwaas oo u hoggaansamay shuruudaha iyo waajibaadka ku cad Xeer-nidaamiyahan.
2) Liiska Shirkadaha waa in la gaarsiiyo hay'adaha dawladda iyo muwaadiniinta Soomaaliyeed iyada oo la adeegsanayo Mareegta Wasaaradda.
3) Shirkadaha ku qoran liiska rasmiga ah oo keliya ayaa xaq u leh in magacyadooda iyo sumaddooda lagu isticmaalo maxkamadaha dalka iyo hay'adaha dawladda marka ay bixinayaan adeeg kasta oo mihnad sharciyeed ah.
4) Liiska rasmiga ah waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa.

Qodobka 12aad:

Cusboonaysiinta Diiwaangelinta

1. Diiwaangelinta lagu bixiyay si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan wuxuu jirayaa muddo hal (1) sano ah oo ka bilaabmaysa taariikhda la bixiyay, haddii aan la hakin ama aan dib looga noqon, taariikhda dhicitaankana waxaa lagu caddaynayaa shahaadada diwaangelinta.
2. Shirkadda bixisa adeegga sharciga, waa in ay soo gudbisaa arji cusbooneysiin ah ugu dambeyn soddon (30) maalmood gudahood, kadib dhicitaanka Shahaadada diwaangelinta.
3. Shuruudaha cusboonaysiinta waxaa loo marayaa Habraaca diinwaangelin ee ku cad qodobka 8aad ee xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 13aad:

Kormeer

Wasaaradda, waxay leedahay awood buuxda oo ay ku kormeerto, ku baarto, kuna hubiso xafiisyada shirkadaha adeegyada sharci si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta Xeernidaamiyahan iyo shuruucda kale ee Dalka.

Qodobka 14aad:

Anshax-marin

1. Shirkad kasta oo jebisa ama ka gaabisa fulinta waajibaadyada ku xusan Xeernidaamiyahan waxaa laga qaadayaa tallaabooyin Anshax-marineed oo kala duwan, kuwaas oo kala ah:
   a) Digniin rasmi ah oo qoraal ah;

b) Hakin hawlaha shirkada muddo cayiman;

c) Xiritaan shirkada;

2. Tallaabooyinka Anshax-marinta waa in lagu saleeyaa culayska iyo dabeecadda jebinta Xeer-nidaamiyahan, iyadoo la tixgelinayo ilaalinta danaha bulshada iyo sharafta xirfadda qareennimada.

Qodobka 15aad:

Xilliga Kala-guurka

Saddex (3) bilood ka dib marka uu dhaqangalo xeer-nidaamiyahan, looma oggola cid aan diiwaangashaneyn ama aan haysan rukhsad in ay ka hawlgalaan si toos ah ama si dadban gudaha Dalka.

Qodobka 16aad:

Dhaqangal

Xeernidaamiyahan wuxuu dhaqangalayaa marka ay Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS ansixiyaan, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Lifaaqa koowaad

Jadwalka kowaad

Khidmadaha diiwaangelinta shirkadaha

Codsadaha	Khidmadda	Waqtiga
Shirkad bixisa adeeg sharci oo maxalli ah.	$300-dollar ama shilling Soomaali u dhigma.	3 maalmood

Shirkad bixisa adeeg sharci oo shisheeye	1,000 dollar ama shilling Soomaali u dhigma.	5 maalmood

Lifaaqa labaad

Qaababka codsiga diiwaangelinta, codsiga wax-kabedelka, codsiga cusboonaynsiinta iyo codsiga diiwaangelinta shirkadaha shisheeye waa sidatan:

1. **Qaabka 1aad:**

   Qaabka Isdiiwaangalinta shirkadaha sharciga

2. **Qaabka 2aad:**

   Qaabka Codsiga Cusbooneysiinta

3. **Qaabka 3aad:**
   Qaabka Codsiga Waxkabadelka Shirkadda
4. **Qaabka 4aad:**

   Qaabka Codsiga Diiwaangelinta Shirkadaha Shisheeye

Qaabka 1aad:

Qaabka Isdiiwaangalinta shirkadaha sharciga

1. Magaca Shirkadda: _____
2. Lambarka Diiwaangelinta (haddii uu jiro): _____
3. Ciwaanka Xafiiska: _____Magaalada: ____ Gobalka: _____
4. Taariikhda La Aasaasay: ___/____/____
5. Nooca shirkada Sharciga (shirkad / shuraako / xirfadle kaligiis);
6. Shuraakada/Aasaasayaasha Qareenada (ku lifaaq haddii ay ka badan yihiin hal adigoo isticmaalaaya habkan):

   Magaca Qareenka: _____ Rukhsadda: _____ _

Jinsiyadda: _____Taariikhda Dhalashada: ___/____/____

Cinwaanka (address) deegaanka: _____

7. Liiska Qareenada ka shaqeeya shirkada (ku lifaaq haddii ay ka badan yihiin hal adigoo isticmaalaaya habkan):

   Magaca Qareenka: _____ Rukhsadda: _____

   Xilliga uu shaqo bilaabay: ___/____/____

8. **<u>Bayaanka codsadaha</u>**:

   Anigoo ah qofka hoos ku saxeexan, waxaan caddaynayaa in xogta lagu sheegay codsigan ay run tahay oo ay dhammaystiran tahay;

   Magaca: _____ Saxiixa: _____Taariikhda: ___/___/___

9. Ku lifaaq codsiga dokumentiyada soo socda:

a) Nuqulka rukkasdda qareenka aasaasaha ah, ama qareenada Aasaasayaasha ah;
b) Nuqulka shahaadada diiwaangelinta shirkadda.
c) Caddaynta cinwaanka diiwaangashan (address);
d) Heshiiska ama dokumentiga lagu dhisay shirkadda.

<u>Wasaaradda</u>

Lambarka Codsiga: __/___/___ Lr. diiwaangelinta: _____

Lr. Shahaadada la soo saaray: ____/____/_____

Diyaariyey:

Magaca:_____ Saxiixa_____ Agaasimaa
Arrimaha Garsoorka: _____Saxiixa: _____

2aad:

Qaabka Codsiga Cusbooneysiinta

1. Magaca Shirkadda: _____
2. Lambarka Diiwaangelinta: _____
3. Ciwaanka Xafiiska shirkada: _____ Magaalada: ____Gobalka: ___
4. Ma jiraan wax isbeddel ah oo ku dhacay kuwan soo socda laga soo bilaabo diiwaangelintii u dambaysay ama dib u cusboonaysiinta u dambaysay?

a) Magaca shirkadda: ☐ Haa ☐ Maya: Hadday (Haa) tahay, qor magaca cusub:

_____

b) Deegaanka: ☐ Haa ☐ Maya: Hadday (Haa) tahay, qor deegaanka cusub:

_____

Nooca shirkada sharciga (shirkad / shuraako / xirfadle kaligiis): ☐ Haa ☐ Maya
Hadday (Haa) tahay, qor qaabka cusub: _____

5. Liiska qareennada shatiga leh ee ka shaqeeya: ☐ Haa ☐ Maya: Hadday (Haa) tahay, ku lifaaq liiska la cusboonaysiiyay

6. Liiska Qareenada ka shaqeeya shirkada (ku lifaaq haddii ay ka badan yihiin hal adigoo isticmaalaaya habkan);

Ku lifaaq dukumeentiyadan oo la cusboonaysiiyay:

a) Rukhsadda qareennada oo ee la cusboonaysiiyay;

b) Ciwaanka deegaanka la cusboonaysiiyay;

c) Isbeddel kasta oo ku saabsan lahaanshaha ama dokumentiga saami-qeybsiga xubnaha;

7. **<u>Bayaanka codsadaha</u>**;

Anigoo ah qofka hoos ku saxeexan, waxaan caddaynayaa in xogta lagu sheegay codsigan ay run tahay oo ay dhammaystiran tahay;

Magaca: _____ Saxiixa: _____Taariikhda: ___/___/___

<u>Wasaaradda</u>

Codsiga cusboonaysiinta la helay: _/__/__Lr. Cusboonaysiiyey Shahaadada:
____/____/____

Diyaariyey:

Magaca:_____ Saxiixa_____

Agaasimaa Arrimaha Garsoorka: _____Saxiixa: _____

3aad:

Qaabka Codsiga Waxkabadelka Shirkadda

1. Magaca Shirkadda: _____ **2.** Lambarka Diiwaangelinta: _____

3. Xogta isbeddeshay (sax dhammaan kuwa khuseeya):

a) Magaca shirkadda ( )

b) Cinwaanka diiwaangashan ( )

c) Cinwaanka ganacsiga ( )

d) Nooca shirkada sharci: shirkad/shuraako/ xirfadle kaligiis ah ( )

e) Liiska qareenada rukhsadda leh ee ka hawlgala ( )

f) Qaab dhismeedka saamiqeybsiga ama lahaanshaha ( )

g) Mid kale; _____

4. Bixi tafaasiisha cusub (goob kasta oo kor lagu so saxay):

a) Magaca Cusub: _____

b) Ciwaanka Cusub ee Diiwangashan: _____

c) Ciwaanka cusub ee shirkada: _____

d) Nooca shirkada Sharci ee Cusub (shirkad/shuraako/xirfadle keligiis ah):__

e) Liis cusub oo qareeno rukhsad leh (ku lifaaq liiska haddii ay badan yihiin):

f) Magaca buuxa: _____ lamberka rukhsadda: _____

g) Taariikhda Ogolaanshaha: ____/____/____

h) Lahaanshaha/saamiqeybsiga la cusboonaysiiyay (ku lifaaq jadwalkan):_____

h) Isbeddellada kale: _____

5. Taariikhda isbeddelka: ___/____/____

6. Sababta isbeddelka: _____

7. **<u>Bayaanka codsadaha:</u>**

Waxaan halkan ku cadeynayaa in xogta kore ay sax tahay, waxaana aan ku soo gudbin doonaa dhammaan dukumeentiyada taageeraya isbeddelka ee loo baahan yahay.

Magaca: _____Saxiixa: _____ Taariikhda: ____/____/____

8. Ku lifaaq dukumeenti la cusboonaysiiyay sida ku habboon:
   a) Nuqul shahaado muujinaysa beddelka magaca/nooca shirkada sharciga
   b) Caddaynta ciwaanka cusub
   c) Rukhsadda qareenada oo la cusboonaysiiyay
   d) Jadwalka lahaanshaha/wadaaga la cusboonaysiiyay
   e) Iyo waxkle haddii ay jiran: _____

Wasaaradda

Diyaariyey:

Magaca:_____ Saxiixa_____

Codsiga baddelidda: __/__/__ Lr. Diiwaanka la Cusbooneysiiyay: __/_/_

Agaasimaa Arrimaha Garsoorka: _____Saxiixa: _____

4aad:

Qaabka Codsiga Diiwaangelinta Shirkadaha Shisheeye

1. Magaca buuxa ee Codsadaha (Qofka Ajnabiga): _____
2. Jinsiyadda: _____
3. Baasaboorka / Lambarka Aqoonsiga: _____Dalka Bixinaya: ___
4. Taariikhda Dhalashada: / /____ Meesha dhalashada: ____
5. Ciwaanka Dalka asalka: _____Magaalada: ____Dalka: ____ Koodhka Boosta / ZIP: _____
6. Ciwaanka Xafiiska / Laanta JFS (haddii ay khusayso): _____ Magaalada: _____ Gobalka: ____ Koodhka Boostada: _____
7. Ciwaanka (Email-ka): _____ Taleefan: _____
8. Magaca shaqa-wadaaga maxaliga ah ama wakiilka sharciga ah ee Soomaaliya: _____Dhalashada: _____ rukhsadda/ Diiwaangelinta Lamr: _____
9. Magaca Shirkadda / Laanta (haddii ay khusayso): _____
10. Nooca shirkada Sharciga ee shisheeye: ☐ Shirkad Shisheeye ☐ Xafiis Laan ☐ shuraako ☐ Xafiis wakiil ☐ Mid kale;
11. Taariikhda La Aasaasay: _/_/_

12. Magaca(yada) Qareenada rukhsadda Ajaanibka ah ee la shaqeeya Shirkada (ku lifaaq haddii ay ka badan yiihin hal adigoo isticmaalaaya habkan):

a) Magaca: _____Lambarka rukhsadda: _____ Dalka: ____

b) Magaca: _____Lambarka shatiga: _____ Dalka: _____

13. Ku lifaaq dukumeentiyada soo socda (meesha ay khusayso)

I. Nuqulka baasaboorka codsadaha
II. Caddaynta rukhsadda ama diiwaangelinta (dalka hooyo) ee Codsadaha ama Shirkadda
III. Shahaadada ka mid noqoshada/diwaangelinta shirkada (dalka Asalka)
IV. Awoodda Qareenka / Warqadda Oggolaanshaha ee wakiilka degaanka ee JFS
V. Soo jeedinta ijaarka xafiiska ama caddaynta ciwaanka ee JFS
VI. Liiska qareennada ajnabiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee la xiriira shirkadda/laanta
VII. Dukumeenti kale oo khuseeya: _____

14. Codsadaha ama Shirkaddu waligeed ma lagu soo rogay tallaabo anshaxeed, cunaqabatayn ama anshax-xumo mihnadeed oo xukun kasta ah? ☐ Haa ☐ Maya: Hadday Haa tahay, ku soo lifaaq faahfaahin buuxda;

_____

15. **Bayaanka codsadaha**

Waxaan halkan ku caddaynayaa in macluumaadka lagu bixiyey codsigan uu yahay run oo dhammaystiran inta aqoontayda ah.

Saxeexa Codsadaha: _____Taariikhda: ____ / ____ /____

Magaca Saxiixayaasha: _____ Xilka: _____

<u>Wasaaradda</u>

Lr. Codsiga: ___/____/___ Lr. diiwaangelinta:_____

Lr. Shahaadada la soo saaray:___/____/____

Diyaariyey:

Magaca:_____ Saxiixa_____

Agaasimaa Arrimaha Garsoorka:_____Saxiixa: _____

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.191 **Taariikh: 27 Dec, 2025**

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA BUUGGA BADMAAXA SOOMAALIYEED

XRW - BIXIT
27 DEC 2025
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 203 ee Sharciga Badda (Sharci Lr. 5/1989).

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **XW/WDGB /119/25** ee ku taariikheysan **18/11/2025** ee Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed;**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.36.139.12.25** ee **18/12/2025,** kuna saabsan **Ansixinta "Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed "** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgeliyay: Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay Badbaadinta nolosha iyo hantida Badmaaxiinta Soomaaliyeed .

Wuxuu Meelmariyay

Qodobka 1aad

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW. 36.139.12.25** ee **18/12/2025,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 3aad

Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Ha11-004-2026
TAARIIKH : 31-01-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Dutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA DEKADAHA IYO GAADIIDKA BADDA

XEER-NIDAAMIYAHA BUUGGA BADMAAXA SOOMAALIYEED

MUQDISHO – SOOMAALIYA
2025

Qodobka 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabayaa "**Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed**"

Qodobka 2aad:Ujeedada iyo Baaxadda

1. Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan waa sida hoos ku xusan:
   (a) Dejinta habraacyada iyo shuruudaha lagu maamulayo diiwaangelinta badmaaxiinta Soomaaliyeed.
   (b) Nidaaminta Daabacaadda Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed(BBS)
   (c) Unkidda nidaam qaran ee aqoonsiga badmaaxa oo la jaanqaadaya Xeerarka Qaran iyo kuwa caalamiga.
   (d) Qeexidda waajibaadka iyo xuquuqda badmaaxiinta

2. Xeerkan wuxuu khuseeyaa oo lagu dhaqayaa:
   (a) Badmaaxiinta ka shaqeeya maraakiibta ku diiwaangashan calanka Soomaaliyeed, sida lagu qeexay Sharciga Badda ee Lr.5 ee 1989.
   (b) Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ka shaqeeya maraakiib kale balse u baahan caddayn xirfadeed oo rasmi ah.
   (c) Marna lama oggola qof badmaaxi ah inuu ka shaqeeyo Markab ama ku lug yeesho arrimaha badmaaxidda asiga oo aanan haysan aqoonsiga rasmiga ee Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

3. Dadka ka reebban ee aanan qaadan karin Buugga Badmaaxa:
   (a) Xeerkan laguma dabaqayo qof kasta oo aan ka tirsaneyn shaqaalaha badmaaxiinta Soomaaliyeed ama dadka uu ka reebay Qodobka 35aad ee Sharciga Badda Soomaaliyeed ee Sharci Lr. 5 ee 1989.

Qodobka 3aad: Qeexid

Erayada soo socda waxay leeyihiin macnaha ku hor qoran:

(a) **Badmaax**: waxaa loola jeedaa shaqsi leh khibrad uu uga shqeyn karo ama uga hawlgalo gaadiid badeed dushiisa si sharci ahna uu xaqiijiyo badqabka, badbaadada gaadiid badeedka, shaqaalaha iyo hantida saaaran, shaqadoodana waa ku kala duwan tahay gaadiid badeedka dushiisa.

(b) **Buugga Badmaaxa**: waxaa loola jeedaa Aqoonsiga rasmiga ah ee Badmaaxa Soomaaliyeed, waana dokumenti muhiim ah oo caddeynaya xirfadda, darajada iyo waayo-aragnimada badmaaxa si waafaqsan shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah.

(c) **Sharciga Badda**: waxaa loola jeeda Sharciga Badda Soomaaliyeed sharci Lr.5 ee 1989.

(d) **Wasiir**: waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

(e) **Agaasimaha Guud**: waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

(f) **Waaxda Maamulka Badda**: waa Waaxda loo idmaday Maamulka Arrimaha Badda Soomaaliya kana tirsan Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

(g) **Kabtan**: waxaa loola jeedaa qofka haysta shahaado Jaamacad badeed, lehna khibrad badeed oo aan ka yareyn 10 (toban) sano loona doortay hoggaanka markabka.

(h) **Sarkaal**: waxaa loola jeedaa qof ka mid ah shaqaalaha markabka oo aan ahayn kabtanka, buuxiyeyna heerarka waxbarashada iyo tababarrada Badda ee Maraakiibta dushooda, sidoo kalena haysta magacaabis rasmi ah ee loo cuskaday Xeer-Nidaamiyahan, Sharciga Badda, iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya dhinac ka tahay.

(i) **Diiwaangelin**: waxaa loola jeedaa habka lagu xaqiijiyo in badmaaxu buuxiyo shuruudaha lagama-maarmaanka ah ee uu ku heli karo buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.

(j) **NIRA**: waxaa loola jeedaa Soo gaabinta ereyada ingiriisiga ee ah sida tan (National Identification&Registration Authority) oo afsoomali ku noqotay Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwangelinta Qaranka ee u idman bixinta iyo daabacaadda Kaarka Aqoonsiga Qaranka.

(k) **BBS**: Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.

Qodobka 4aad: Maamulka iyo Fulinta

1. Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda, gaar ahaan Waaxda Maamulka Badda oo raacaysa tilmaamaha Madaxda/Hoggaanka Wasaaradda ayaa fulineysa habraacyada uu qeexayo Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale la xariira arrimaha Badmaaxiinta Soomaaliyeed.

2. Xafiiska diiwaangelinta ee Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ayaa u xilsaaran Waajibaadkan:

    (a) Qabashada Codsiga Badmaaxa iyo hubinta saxnaanta iyo sugnaanta xogta si waafaqsan habraacyada Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Badda Soomaaliyeed.

    (b) Diiwaangelinta iyo cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.

    (c) Keydinta iyo ilaalinta xogta Badmaaxiinta Soomaaliyeed.

    (d) Xuquuda badmaaxa

    (e) Diyaarinta warbixnno muddeysan oo joogto ah iyo kuwo gaar ahba hadba sidii looga dalbado xafiiska.

    (f) Diiwaangelinta dhammaan fasaxyada, socodsiinta, iyo wareejinta badmaaxiinta

3. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda wuxuu soo saari karaa tilmaamo iyo habraacyo farsamo oo lagu jiheynayo diwaangelinta iyo daabacaadda BBS asagoo kala tashanaayo wasiirka Wasaaradda,sidoo kalena waxa uu si joogta ugu korjoogteynayaa waaxda Maamulka Badda fulinta iyo dhaqangelinta Xeernidaamiyahan.

Qodobka 5aad: Shuruudaha Helitaanka Buugga Badmaaxa

Qof kasta oo doonaya in la siiyo Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

(a) Waa inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed.

(b) Waa in da'diisu tahay ugu yaraan 18 sano.

(c) Waa inuu caafimaad qabo oo fiyow yahay, haystana shahaado caafimaad oo ka timid dhakhtar ama isbitaal caafimaad oo la aqoonsan yahay, gaar ahaan dhinacyada aragga, maqalka, iyo awoodda shaqo.

(d) Waa inuu leeyahay aqoonta asaasiga ee culuumta badda iyo badmaridda, sidoo kalena haystaa shahaadooyin tababar aasaasi ah sida ku cad Shraciga Badda Soomaaliyeed soona gudbiyaa dhamaan caddeymaha iyo docukentiyada la xariira arrimahan aqoonta iyo tababarrada ee ku xusan qodobkan.

(e) Waa inuusan ahayn qof hore loogu xukumay dambiyo la xiriira hanti, amni, ama falal dambiyo-badeed (maritime-related offenses).

(f) Waa inuu yaqaanno dabbaasha.

(g) Waa inuu leeyahay/haysto kaarka aqoonsiga Qaranka (NIRA) ama baasaaboor.

Qodobka 6aad: Habraaca Codsiga iyo Qaadashada Buugga Badmaaxa

Qofka badmaaxa ah ee doonaya inuu helo/qaato Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxa uu marayaa habraaca hoos ku xusan:

(a) Soo gudbinta codsi rasmi ah ee la xariira dalabka Buugga Badmaaxa

(b) Buuxinta iyo soo gudbinta foomka codsiga (application form) ee Wasaardda ee la xariira dalabka buugga Badmaaxa.

(c) Soo gudbinta shahaado caafimaad-qab oo goordhow ah taas oo muujineysa in Badamaaxuhu uu fiyow yahay gaar ahaan aragga iyo maqalka sida ku cad Xeerka Badda Soomaaliyeed Lr.5 ee 1989.

(d) Soo gudbinta aqoonsi Qaran sida Baasaboor ama Kaarka Aqoonsiga Qaranka ee NIRA.

(e) Bixinta kharashka diiwaangelinta

(f) Soo gudbinta (2) sawir oo muddo dhow ah.

Qodobka 7aad: Daabacaadda iyo Tilmaamaha Buugga Badmaaxa

1. Buuggaa Badmaaxa Soomaaliyeed waa dokument rasmi ah oo ay bixiso Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS oo nidaaminaya howsha badmaaxidda iyo qofka badmaaxa ahba lehna ujeeddooyinka soo socda:
    (a) Buuxinta waajibaadka Qaran ee la xariira bixinta aqoonsinsiga Badmaaxaha Soomaaliyeed
    (b) Diiwaangelinta Badmaaxiinta Soomaaliyeed iyada oo la ilaalinayo habraacyada iyo shuruudaha ku xusan Xeer-nidaamiyahan si haystuhu u noqdo badmaaxe si sharci ah loo diiwaangeliyay.
    (c) Caddeynta aqoonta, khibradda, darajada, iyo taariikhda shaqo ee badmaaxaha Soomaaliyeed.
    (d) Fududeynta socdaalka/Safarka Badmaaxaha Soomaaliyeed iyo kor u qaadista kalsoonidda badmaaxiinta iyo fursadaha shaqo helidda.
2. Buuga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa hagaya oo lagu bixinayaa si waafaqsan shuruucdan hoos ku xusan gaar ahaan qodobada khuseeya aqoonsiga iyo diiwaangelinta badmaaxiinta:
    (a) Xeer-nidaamiya Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.
    (b) Sharciga Badda Soomaaliyeed (Sharci Lr.. 5 1989).
3. Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS ayaa mas'uul ka ah daabacaadda, bixinta, hakinta ama joojinta Buugga Badmaaxa sida ku xusan Sharciga Badda Soomaaliyeed ee sharci Lr.5 ee 1989.
4. Buugga Badmaaxa waa hanti dawladeed, waxaana loo isticmaali karaa oo keliya ujeeddooyin xirfadeed iyo shaqo oo waafaqsan shuruucda badda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
5. Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa lagu muujinayaa oo lagu qorayaa macluumaadka aasaasiga ah ee soo socda:
    (a) Faahfaahinta Aqoonsiga Shaqsiga ah sida: Magaca, taariikhda dhalashada, jinsiga, sawirka, darajada iyo lambarka aqoonsiga.
    (b) Lambarka rasmiga ah ee buugga iyo taariikhda bixinta.

(c) Taariikhda Shaqada Badda (Sea Service Record): Faahfaahinta shaqo ee markab kasta oo uu badmaaxu ka shaqeeyay, oo ay ku jiraan magaca markabka, nooca shaqada, iyo muddada shaqada.

6. Waqtiga jiritaanka buuggu waa 5 (shan) sano, kaddib wuu dhacayaa oo waxaa waajib ah in la cusboonaysiiyo.
7. Hab-qoraalka Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed wuxuu ka koobnaanayaa laba qeybood oo rasmi ah:
   (a) Qeybta Aqoonsiga Shaqsiga ah iyo
   (b) Qeybta Taariikhda Shaqada Badda ee Badmaaxaha
8. Qaabka, naqshadda iyo heerarka amni (Security Features) ee daabacaadda Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa go'aaminaya Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.
9. Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waa in lagu daabacaa oo lagu maamulaa si waafaqsan heerarka ilaalinta xogta, lana adeegsadaa walxo ammaan ah oo ka hortagaya been-abuurka iyo isticmaalka sharci-darrada ah.
10. Dokumentigan (Buugga badmaaxa) lama wareejin karo, lama beddeli karo, lagamana dhigi karo dokumenti ganacsi ama dammaanad (collateral).
11. Qof ama badmaax kasta oo si sharci-darro ah u helo, isticmaala, beddela, ama been-abuura Buugga Badmaaxa, tababaradda, ama shahaadooyinka wuxuu muteysanayaa ciqaab waafaqsan Xeerarka iyo Shuruucda Dalka.

Qodobka 8aad: Cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed

1. Shuruudaha iyo habraaca cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxa ay la mid yihiin shuruudaha ku xusan Qodobka 5aad ee Xeernidaamiyahan.
2. Badmaaxuhu waxa uu soo codsan karaa cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa 6 bil ka hor waqtiga dhicitaanka Buugga.
3. Codsiga cusboonaysiinta Buugga Badmaaxa waxaa loo soo gudbinayaa Xafiiska Diiwaangalinta ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda iyada oo lagu soo lifaaqayo dhamaan dokumentiyadaya iyo caddeymaha lagama-maarmaanka u ah howsha cusbooneysiinta buugga iyo shaqada Badmaaxaha.

Qodobka 9aad: Joojinta ama Kala-noqoshada Buugga Badmaaxa

1. Buugga Badmaaxa waxaa lagala noqon karaa ama la joojin karaa badmaaxaha haddii:

   (a) Badmaaxu ku guuldarraysto gudashada waajibaadkiisa

   (b) Badmaaxu ku xad-gudbo Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaxa Soomaaliyeed ama Sharciga Badda Soomaaliyeed.

   (c) La helo caddeyn caafimaad oo muujinaysa in codsaduhu uusan u qalmin shaqada badda.

   (d) Shahaadooyinka ama tababarada uu haysto aysan sax ahayn ama kala dhiman yihiin

   (e) Lagu xukumo dembiyo lid ku ah hantida, badbaadada, ama nolosha dadka.

   (f) Lagu helo caddeyn khatar amni ama badbaado la'aan markabka.

   (g) Ka tagidda shaqada markabka ama raacista la'aanta waajibaadka badmaaxnimo ee habraaca.

   (h) Luminta, xatooyada, ama been-abuurka Buugga Badmaaxa.

2. Ka joojintu waa inay noqotaa mid qoraal ah oo la diiwaangeliyay, waxaana go'aanka joojinta soo saaraya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda asiga oo tixraacaya warbixinta xafiiska diiwaangelinta ee Wasaaradda, qofka badmaaxa ahna waxaa la siinayaa qoraal sharraxaya sababta.

3. Qofka Buugga laga joojiyey ama lagala noqday wuxuu codsan karaa dib-ubixinta Buugga haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha isla markaana uu keeno dokumentiyo lagu qanco.

Qodobka 10aad: Tirtiridda Buugga Badmaaxa, iyo Ka hortagga Been-abuurka

1. Badmaaxiinta waxaa laga tirtirayaa diiwaannada rasmiga ah, Buugga Badmaaxiintana waa lagala noqonayaa haddii ay jiraan sababaha hoos ku qoran:

   (a) Haddii Badmaaxaha ku qoran diiwaanka uu geeriyoodo/dhinto;

   (b) Codsigiisa;

   (c) Haddii Badmaaxu lumiyo ama waayo Jinsiyadda/Dhalashada Soomaaliyeed

   (d) Waayidda joogtada ee caafimaad ahaan taas oo ku saabsan badmaridda.

(e) Lagu dhawaaqo xukun kama-dambeys ah inuu galay dambi ama xadgudub halis ah.

(f) Si kas iyo ula kac ah uu u diido amarrada sharciga ah ee uu bixiyay Kabtanka Markabka ama Sarkaal kale ee haya hoggaanka.

2. Dadka laga tirtiro waxay dib u codsan karaan Buugga marka sababihii tirtiridda ay dhammaadaan.

3. Tirtiridda waa in la diiwaangeliyaa iyadoo la hubinayo waafaqsanaanta Xeernidaamiyahan, Sharciga Badda Soomaaliyeed.

4. Xafiiska diiwaangelinta Wasaaradda waxaa waajib ku ah ka hortagga beenabuurka Buugga Badmaaxa, xatooyada ama isticmaalka sharci-darrada ah iyo wax-ka-beddelka shahaadooyinka iyo macluumaadka diiwaanka.

Qodobka 11aad: Waajibaadka Badmaaxa

1. Qof kasta oo haysta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa waajib ku ah inuu:

(a) Haysto buugga mar kasta oo uu ku sugan yahay markab ama uu ku jiro hawl badeed.

(b) Ilaaliyo buugga iyo macluumaadka ku qoran si ammaan ah.

(c) Kusoo wargeliyo isla markiiba Wasaaradda haddii buuggu lumo, xumaado, ama la xado.

(d) Ka fogaado isticmaalka ama gudbinta aan sharciga ahayn ee Buugga Badmaaxa.

(e) Ilaalinta habraacyada badmaridda iyo nidaamyada amni ee shaqada badda.

(f) U hoggaansamo shuruucda badda, amarrada kabtanka, iyo tilmaamaha la xariira badmaaxidda ay soo saarto Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

2. Badmaaxu waa inuu fuliyo dhammaan waajibaadka sharci sidoo kalena dhowro waajibaadka shaqo ee lagula heshiiyay, waana inuu ilaaliyo badbaadada markabka iyo shaqaalahaba sidoo kalena ka qeybqaato qaadashada tababarrada hormarinta xirfadda Badmaaxa.

3. Ku xadgudubka qodobada waajibaadka badmaaxa ee uu xusayo Xeernidaamiyahan waxaa lagu muteysanayaa ciqaab waafaqsan Sharciga Badda Soomaaliyeed.

Qodobka 12aad: Ilaalinta Xuquuqaha iyo Amniga Badmaaxiinta

1. Buugga Badmaaxa waa caddeyn rasmi ah oo muujinaysa aqoonsiga badmaaxiga iyo xuquuqihiisa shaqo ee la aqoonsan yahay.

2. Shaqsi kasta oo mas'uul ka ah maamulka ama shaqada badmaaxiinta, oo ay ku jiraan milkilayaasha markabka, kabtannada, iyo shaqaalaha diiwaangelinta ee Waaxda Maamulka Badda, waa inuu:

   (a) Ilaaliyo xuquuqda shaqo iyo mushaharka badmaaxiinta.

   (b) Damaanad qaado badbaadada iyo caafimaadka shaqaalaha badda.

   (c) Ka hortago xadgudub, tacaddi, ama khiyaano kasta oo la xiriira shaqada badmaaxnimo.

3. Badmaaxiintu waxay xaq u leeyihiin fasaxa nashaadka (shore leave) iyadoo la raacayo:

   (a) Shuruucda amniga markabka.

   (b) Jadwalka shaqada markabka.

   (c) Xeerarka gudaha ee dekedaha iyo shuruucda soo gelitaanka dalka.

4. Badmaaxu wuxuu xaq u leeyahay mushahar waafaqsan heshiiska shaqada iyo Xeerarka nidaayimaya arrimaha badmaaxiinta, waxbarasho iyo tababar joogto ah, iyo ilaalinta xuquuqdiisa shaqo, caafimaad, iyo badbaado.

5. Badmaaxu wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado baaritaan sharci oo ka dhan ah xadgudub kasta oo lagu sameeyo shaqadiisa ama lagula kaco badmaaxa naftiisa.

Qodobka 13aad: Ciqaabta iyo Ganaaxyada

1. Qof kasta oo sifo aan sharci aheyn u soo saara/sameeya ama u adeegsada Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed, la yimaada ama sameeya been-abuur, ka been sheega xogta la xiriirta aqoonsiga shakhsiyadeed ama shahaadooinka waxbarasho waxaa loo aqoonsanayaa inuu la yimid fal dambiyeed, waxuuna muteysanayaa ciqaab si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

2. Ciqaabta iyo ganaaxa waxa ay noqon karaan:

   (a) Ganaax lacageed oo aan ka yareyn $350 kana badneyn $2,400. (b) Mamnuucid ku-meel-gaar ah ama joogto ah ee hawlaha badda.

3. Shirkadaha, milkiilayaasha maraakiibta, ama loo shaqeeyayaasha lagu helo inay ku xadgudbeen xuquuqda badmaaxiinta, oo ay ka mid yihiin musuqmaasuq, hoos u dhigista mushaharka, ka hortagga xuquuqda shaqada iyo badbaadada, ama tacaddi kale, waxay la kulmayaan ciqaab adag oo ay ka mid tahay:

   (a) Magdhaw iyo ganaax lacageed oo gaari kara ilaa $10,000 (toban kun oo doolar), oo lagu dabaqo shirkad kasta ama milkiilaha markabka.

   (b) Xannibaadda markabka

   (c) Xayiraad ku meel gaar ah ama joogto ah oo ku saabsan hawlaha badda ama ka qeybgalka ganacsiga maraakiibta Soomaaliya.

4. Ciqaab kasta waa in si cad loo diiwaangeliyaa oo lagu qoraa keydka/diiwaanka badmaaxiinta, laguna fuliyo ciqaabaha iyadoo la raacayo Sharciga Badda Soomaaliyeed, iyo Xeer-nidaamiyahan si loo xaqiijiyo hufnaanta, waafaqsanaanta sharci, iyo ilaalinta xuquuqda badmaaxiinta

5. Ciqaab kasta oo ka baxsan qodobada aan kor ku soo sheegnay amaba aanan ku xusneyn Xeer-nidaamiyahan, waxaa loo cuskanayaa Xeerka Badda Soomaaliyeed ama Xeerarka Ciqaabeed ee Dalka.

Qodobka 14aad: Khidmadaha(Lacagta) Buugga Badmaaxa

1. Lacagta laga qaadayo codsadaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waa sida shaxda hoose ku xusan.

Lr	**Nooca Khidmadda Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed**	**KHARASHKA (USD)**
1	Khidmada Codsiga iyo Diiwaangelinta	$25
2	Daabacaadda/Cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa	$130

2. Marka laga tago khidmadda ku qoran Xeer-nidaamiyahan, dhammaan khidmadaha kale ee soo haray ee la xariira arrinkan sida shahaado-siinta, tabarrada iyo ganaaxyadaba

waxaa Xeer Wasiir oo gaar ah ku soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

Qodobka 15aad: Dhanqangal

Xeer-nidaamiyahani waxa uu dhaqangeliyanaa marka Golaha Wasiirradu ay meelmariyaan, Ra'iisul Wasaaruhuna uu qaraar ku soo saaro, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ah Dawladda.

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.192 **Taariikh: 11 Jan, 2026**

XEERKA: XEERKA DHISMAHA MACHADKA SOOMAALIYEED EE BADAHA

XRW - [illegible]
14 JAN 2026
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), iyo, (f) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **XW/WDGB/127/25** ee ku taariikheysan **09/12/2025** ee Wasaaradda Dekadaha kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeerka Dhismaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha;**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.01.26** ee **05/01/2026,** kuna saabsan **Ansixinta "Xeerka Dhismaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgeliyay: Muhiimadda Xeerkaan uu u leeyahay Ilaalinta & Horumarinta Kheyraadka Badda .

Wuxuu Meelmariyay

Qodobka 1aad

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.1.26** ee **05/01/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeerka Dhismaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Dekadaha & Gaadidka Badda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeerka.

Qodobka 3aad

Dhaqangal

Xeerkaan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Mudane, Saalax Axmed Jaamac
Kusimaha Ra'iisul Wasaaraha ahna
Ra'iisul Wasaare kuxigeenka Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-006-2026
TAARIIKH SAXIIX: 31-01-2026
AVV Ahmed [illegible] Gutale
Hantidhowraha Guud [illegible]



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA WASAARADDA DEKADAHA IYO GAADIIDKA BADDA

XEERKA DHISMAHA MACHADKA SOOMAALIYEED EE BADAHA

Maritime Institute of Somalia (MIS)

CUTUBKA KOWAAD: QODOBO GUUD

Qod. 1: Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Machadka Soomaaliyeed ee Badaha".

Qod. 2: Eray Bixin

Ereyada soo socda haddii aan si kale loogu fasirin xeer kale, xeerkan gudihiisa waxaa loola jeedaa macnaha ku hor qoran:

1. **Wasaaradda:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.
2. **Machadka:** waxaa loola jeedaa Machadka Soomaaliyeed ee Badaha.
3. **Agaasimaha Guud:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.
4. **Agaasimaha:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Machadka Soomaaliyeed ee Badaha.
5. **Wasiirka:** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

Qod. 3: Ujeeddooyinka Guud ee Machadka

1. Kor u qaadista aqoonta mihnadlayaasha Soomaaliyeed ee culuumta badmaaxidda iyo gaadiidka badda.
2. Kobcinta xirfadda iyo aqoonta hawlwadeennada dekadaha Soomaaliyeed.
3. Kaabista hawlaha diyaarinta, soo saarista siyaasadaha, go'aammada, xeerarka la xiriira badaha, dekadaha iyo gaadiidka badda.
4. Horumarinta culuumta badaha, badmaaxnimada, gaadiidka badaha iyo maamulka dekadaha.
5. Hubinta aqoonta iyo xirfadda mihnadlayaasha ay Wasaaradda iyo hay'adaheedu siinayaan rukhasadda ama ay la geleyso heshiisyada shaqo.

CUTUBKA LABAAD: QAAB-DHISMEEDKA, DABEECADDA IYO ASTAANTA MACHADKA

Qod. 4: Dhismaha iyo Dabeecadda Machadka

1. Xeerkan waxa uu dhisayaa "Machadka Soomaaliyeed ee Badaha", af Carabigana ku noqonaya " المعمدماموماليمممحامم لم ملم م م مم", halka af Ingiriisna uu ku noqonayo "Maritime Institute of Somalia" loona soo gaabiyo (MIS).
2. Machadku waa xarun tacliin iyo tababar farsamo oo hoos yimaada Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.
3. Xarunta dhexe ee Machadka waa Muqdisho, wuxuuna xarumo ku yeelan karaa dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka.
4. Afka rasmiga ah ee Machadka waa Af-Soomaali, hase yeeshee, daraasaadka iyo tababarrada waxaa lagu bixin karaa afafka Carabiga iyo Ingiriisiga.

Qod. 5: Astaanta, Calanka iyo Shabadda Machadka

1. Machadku waxa uu yeelanayaa astaan u gaar ah oo ka kooban: Markab dul maraya biyo hirar ah, oo uu hoos yaallo bug furan, laguna weegaaray magaca Machadka oo Af-Soomaali iyo Carabi ku qoran sida ku cad lifaaqa xeerka.
2. Calanka Machadku waxa uu noqonayaan Leydi cad oo dhexda ku leh astaanta Machadka.
3. Shabadaha Machadka waxaa nidaaminaayo xeer-hoosaadka maamulka Machadka waase in shabbad walba oo uu Machadku isticmaalayo ay ka dhex muuqataa astaanta machadka.

Qod. 6: Hawlaha Machadka

1. Bixinta barnaamijyo tacliin sare oo la xiriira culuumta badaha, badmaaxidda, gaadiidka badda iyo maamulka dekadaha oo waafaqsan hannaanka tacliinta sare ee dalka.
2. Bixinta tababarrada gaarka ah iyo koorsooyinka gaagaaban ee xirfadeed;
3. Soo saarista cilmibaarisyo kaabaya sameynta iyo fulinta siyaasadaha qaran ee la xiriira hawlaha Wasaaradda.
4. Dhisidda iyo dhaqangelinta hannaanka hubinta aqoonta iyo xirfadda mihnadlayaasha ku shaqada leh hawlaha Wasaaradda iyo hay'adaheeda.
5. Soo tarjumidda iyo Soomaaliyeynta culuumta iyo adeegsiga teknoloojiyada la xiriirta aqoonta badmaaxidda, gaadiidka badda, maamulka dekadaha iyo xeerarka caalamiga ah ee la xiriira;
6. Maareynta xiriirrada iyo iskaashiga caalamiga ah ee khuseeya akademiyadaha machadyada, jaamacadaha iyo guud ahaan xarumaha ay isku shaqada yihiin ee caalamka

Qod. 7: Qaab-dhismeedka Machadka

1. Machadku waxa uu yeelanayaa qeybo maamul oo fuliya hawlaha Machadka.
2. Faahfaahinta qaab-dhismeedka Machadka waxaa qeexaya xeer-hoosaad uu soo saarayo golaha sare ee Machadka.

Qod. 8: Golaha Sare ee Machadka

1. Machadku waxa uu yeelanayaa Gole Sare oo uu Gudoomiye u yahay Wasiirka Wasaaradda, kana kooban sagaal (9) xubnood oo kala ah:

    a) Wasiirka Wasaaradda (Gudoomiye);
    b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda (Xubin);
    c) Agaasimaha Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda;
    d) Agaasimaha Machadka (Xubin); iyo
    e) 5 (Shan) xeel-dheereyaal oo aqoon durugsan u leh hawlaha Machadka oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaradda.

Qod. 9: Waajibaadka Golaha Sare ee Machadka

1. Waajibaadka Golaha Sare ee Machadka waxa ay yihiin:

    a) Jaan-goynta siyaasadaha maamul ee Machadka iyo qorshayaashiisa;
    b) Abuurista iyo go'aan ka gaarista barnaamijyada kala duwan ee Machadka;
    c) Soo-saarista xeerhoosaadyada Machadka;
    d) Meelmarinta natiijooyinka imtixaannada Machadka;
    e) Bixinta shahaadooyinka iyo darajooyinka cilmiyeed ee Machadka; iyo
    f) Go'aan ka gaarista arrimaha masiiriga ah ee Machadka,
2. Golaha Sare ee Machadka waxa uu yeelanayaa xeer-hoosaad u gaar ah oo faahfaahinaya shaqooyinkiisa.

Qod. 10: Shuruudaha Agaasimaha Machadka

Qofka loo magacaabayo xilka agaasimaha Machadka waa in uu buuxiya shuruudaha soo socda:

a) In aysan da'diisu ka yareyn 35 sano.
b) Inuu shahaadada labaad ka haystaa Jaamacad laga aqoonsan yahay JFS;

c) Inuu leeyahay khibrad Shaqo ugu yaraan 5 sano ah, si fiicanna u yaqaan afafka Soomaaliga, iyo English-ka ama Carabiga;

d) In aysan maxkamad si kama dambaysa ah ugu xukumin ciqaab ka reebaysa qabashada shaqo guud.

Qod. 11: Magacaabista iyo Xil ka-qaadista Agaasimaha Machadka

1. Wasiirka ayaa u magacaabaya qof ku habboon Agaasimaha Machadka.
2. Mudo-xileedka Agaasimaha Machadka waa 5 (shan) sano oo hal mar keliya la cusubooneysiin karo.
3. Aaasimaha Machadka waxaa xilka ka qaadi karo shaqadana ka joojin kara Wasiirka Wasaaradda oo kaliya.

Qod. 12: Mas'uuliyadaha Agaasimaha Machadka

a) Maareynta hawlaha guud ee Machadka iyo hirgelinta ujeeddooyinkiisa;

b) Diyaarinta qorshayaasha barnaamijyada tacliinta, tababarka, cilmi-baarista iyo guud ahaan hawlaha Machadka.

c) Korjoogteynta shaqada qeybaha Machadka iyo hawlwadeennadiisa,

d) Soojeedinta magcaabista xilalka Machadka ee uu Wasiirku magacaabo,

e) Waxa uu si buuxda u matalaa Machadka, waxa uuna magaciisa ku geli karaa heshiisyo shaqo iyo iskaashiyo marka uu helo oggolaanshaha Wasiirka ama ay xeerhoosaadyada Machadku u fasaxayaan.

f) Soo gudbinta warbixinta sanadlaha ah iyo xisaabaadka Machadka.

CUTUBKA SEDEXAAD: QODOBO QUBANE AH

Qod. 13: Miisaaniyadda iyo Ilaha Dhaqaalaha Machadka

1. Machadku waxa uu miisaaniyadda guud ee Wasaaradda ku dhex yeelanayaa madax-miisaaniyadeed u gaar ah .
2. Machadka waxaa u furan in uu sameeyo dakhli maaliyeed, sida lacagaha ka soo xaroodo:
   a) khidmadda waxbarashada ee laga qaado ardayda;
   b) Adeegyada tababarrda iyo cilmi-baarista;
   c) Abaal-marinnada iyo hal-abuurka cilmiyeed;
   d) Faafinnada Machadka iyo wax-soo-saarkiisa cilmiyeed;

e) Adeegyada la-talinta iyo gacansiinta shirkadaha gaarka ah ee daneeya hawlaha
Machadka; iyo

f) Guud ahaan hawlaha Machadka ee dakhli laga sameyn karo.

3. Dakhliga Machadka waxaa la waafajinayaa Shuruucda nidaamisa Maaliyadda guud ee Dalka.
4. Waxaa u furan Agaasimaha Machadka ama cidda uu wakiisho in heshiis shaqo oo aan joogta aheyn uu la galo macalimmiin, tababarayaal, cilmibaarayaal iyo hawlwadeenno aan shaqaale rasmi ah aheyn, si waafaqsan qorshaha Machadka ee uu meelmariyay golaha sare ee Machadku iyo xeerhoosaadyada Machadka.
5. Machadka waxa uu yeelanayaa xisaab-bankiyeed rasmi ah oo lagu qabto nooc walba oo dakhli ah, si waafaqsan nidaamka dakhli uruurinta dalka.
6. Hannaanka maaliyadeed ee u gaarka ah Machadka waxaa nidaaminaya xeerhoosaad uu soo saaro Golaha Sare ee Machadka si waafaqsan shuruucda maaliyadeed ee dalka.

Qod. 14: Warbixinta Sanadlaha ah

1. Sanad-maaliyadeedka Machadka wuxuu ka bilaabanayaa 1da Janaayo wuxuna ku dhammaadaa 31da diseembar sanad kasta.
2. Machadku wuxuu warbixinta xisaab-xirka sanad-maaliyadeedka u gudbinayaa Wasiirka sanad kasta.

Qod. 15: Shaqaalaha & Howlwadeennada Machadka

1. Shaqaalaha Machadka waxa ay isugu jiri karaan Shaqaale Rayid ah oo ka tirsan wasaaradda iyo howlwadeenno noqon kara Soomaali iyo ajanabi oo Machadka kula shaqeeya heshiisyo shaqo oo gaar ah ama gacansiin.
2. Maamulka arrimaha shaqaalaha iyo howlwadeennada Machadka waxaa la waafajinayaa shuurcda dhaqangalka ah Dalka ee khuseysa arimahan.

Qod. 16: Kaalinta Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha & Tacliinta Sare

Wasaaradda Waxbarashada Hiddah & Tacliinta Sare waxa ay Machadka ku yeelaneysa kaalinta soo socota:

1. Hubinta iyo meelmarinta barnaamijyada Tacliinta Sare ee Machadka.
2. Korjoogteynta hannaanka waxbarasho iyo qiimeyn ee Machadka.
3. Tasdiiqinta shahaadooyinka Machadka ee ku soo baxay si waafaqsan xeerka Machadka.

4. Jiheynta Machadka ee la xiriirta siyaasadda guud ee waxbarashada iyo tacliinta Sare ee Dalka.

Qod. 17: Shahaadooyinka iyo Halbeegyada Tacliinta Machadka

1. Waxbarashada, tababarrada, hannaanka qiimeyta iyo shahaadooyinka uu bixiyo Machadka waxaa la waafajinayaa:
    a) Axdiyada iyo hagayaasha caalamiga ah ee halbeegyada tacliinta, tababarka, qiimeynta iyo shahaadasiinta khuseysa culuumta badaha iyo badmaaxnimada.
    b) Xeerarka, siyaasadaha iyo go'aannada maamul ee ku shaqada leh howlaha Machadka ee waafaqsan inti suuragal ah axdiyada iyo hagayaasha caalamiga ah.

Qod. 18: Xeer-hoosaadyada Machadka

1. Golaha Sare ee Machadka ayaa soo saaraya dhammaam xeer-hoosaadyada Machadka.
2. Dhammaan xeer-hoosaadyada Machadka waa in la waafajiyo xeerkan iyo shuruucda kale ee dalka.

Qod. 19: Dhaqangal

Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan Golaha-wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna xeer ku soo saaro Ra'iisul-wasaaraha JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.


MACHADKA SOOMALIYEED EE BADAHA
المعهد الصومالى للبحار

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.193 **Taariikh: 11/01/2026**

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

XRW - BIXIT
14 JAN 2026
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 41(1) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha (Sharci Lr. 005 ee Maarso 20/2023).

Markuu arkay: Warqadda Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyadda ee summaddeedu tahay **XW/WI&T/119/25,** ku taariikheysan **03/12/2025** kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha;**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.001.141.1.26** ee **05/01/2026,** kuna saabsan Ansixinta **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgeliyay: Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan uu u leeyahay ilaalinta Xogaha Muwaadiniinta Soomaaliyeed .

Wuxuu Meelmariyay

Qodobka 1aad

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.001.141.1.26** ee **05/01/2026** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Isagaarsiinta iyo Tiknolojiyadda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 3aad

Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-005-2026
TAARIIKH : 31-01-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gulaid
Hantidhowraha Guud E. JFS

Mudane, Saalax Axmed Jaamac
Kusimaha Ra'iisul Wasaaraha ahna
Ra'iisul Wasaare kuxigeenka Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda

XEER-NIDAAMIYAHA
SHARCIGA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

CUTUBKA 1AAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad
Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "Xeer-nidaamiyaha Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha", waxaana lagu dhaqan-gelinayaa Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, Sharci Lr. 005 ee Maarso 20, 2023.

Qodobka 2aad
Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyaha

1. Ueeddooyinka guud ee Xeer-nidaamiyahan waa dhaqan-gelinta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha ee soo baxay Maarso 20, 2023, iyadoo lagu faahfaahinayo arrimaha lagamamaarmaanka u ah hab-sami-u-dhaqan-gelinta sharciga.
2. Ujeeddada guud ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, xeer-nidaamiyahan waxaa looga gol-leeyahay xaqiijinta ujeeddooyinkan soo socda:
    a. Fasiraadda qodobbada iyo mabaadi'da Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha;
    b. Xaqiijinta in xogta shakhsiga loo adeegsado si waafaqsan Dastuurka JFS iyo Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha;
    c. In lagu jideeyo hannaanka sharci iyo tilaabooyinka Dhowrista xogta dadweynaha; iyo
    d. Qeexidda waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha si loo ilaaliyo xaquuqda la xiriirta xogta shakhsiga.

Qodobk 3aad
Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan wuxuu ku kooban yahay hirgelinta xaquuqda Dastuuriga ah ee xogta shakhsiga, Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, hab-raacyada iyo xeer-nidaamiyeyaasha kale ee la xiriira Dhowrista xogta.
2. Xeer-nidamiyahan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan Xog-dhawreyaasha, Xogadeegsadeyaasha iyo dadka xogta leh ee ku sugan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Jabinta Xeer-nidamiyahan waxay la mid tahay iyadoo lagu xad-gudbay Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
4. Xeer-nidaamiyahan laguma dabaqayo:
    a. Cidda xogta leh oo aanan ahayn bani'aadam;
    b. Xogaha loo qaado ujeeddooyinka ah Madadaalo, Guri/qoyska, xogta lagama maarkaamka u ah Bilaabidda, Dhaqan- gelinta iyo Difaaca dacwadda sharciga ee maxkamadda horteeda, hab-raaca ay soo saarto hay'ad maamul, hababka xallinta khilaafaadka ee ka baxsan maxkamadda, Saxaafad, Waxbarasho, farshaxan ama suugaan iyo Hay`adaha dawliga ah ee ka shaqeeya:

i. Ka-hortagga; ii. Baarista; iii. Ogaanshaha; iv. Dacwad-ku-oogista; v. Garsooridda dembiyada; vi. Fulinta ciqaabta dembiyada; vii. Xakameynta iyo ka-hortagga xaaladaha caafimaadka guud ee dadweynaha; iyo viii. Waxyaalaha Amniga qaranka lagama-maarmaanka u ah.

CUTUBKA 2AAD
MABAADI'DA LAGU MAAMULAYO ADEEGSIGA XOGTA

Qodobka 4aad
Sharci-ahaanshaha Adeegsiga Xogta Shakhsiga

1. Xog-dhawre iyo Xog-adeegsade kasta waa in uu xaqiijiyaa in xogta shakhsiga loo adeegsanayo ujeeddo sharciga waafaqsan. Adeegsiga xogta waa in aysan dhib u keenin qofka xogta leh.
2. Xog-dhawraha waa in uusan xogta shakhsiga adeegsan, ama uusan oggolaan in la adeegsado xogta shakhsiyadeed oo uu mas'uulka ka yahay, marka laga reebo asbaabaha ku xusan Qodobka 14aad (2) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

Qodobka 5aad
Adeegsi Dheeraad ah ee Xogta Shakhsiga

1. Haddii Xog-dhawruhu uu doonayo in uu u adeegsado xogta shakhsiga ujeeddo ka duwan tii markii hore loo ururiyey, waa in uu ku wargeliyaa ujeeddada cusub qofka xogta leh isagoo siinaya wixii xog dheeri ah ee la xiriira ujeeddada cusub.
2. Marka Xog-dhawraha uu doonayo in uu adeegsi dheeraad ah ku sameeyo xogta shakhsiga ee markii hore la ururiyey ujeeddo gaar ah, waa in uu tixgeliyo arrimaha soo socda:
    a. In uu jiro xiriir ka dhexeeya ujeeddada asalka ah iyo ujeeddada la soo jeediyey;
    b. In la qiimeeyo xaaladda iyo duruufihii markaa xogta lagu soo ururiyey;
    c. In la xaddido dabeecadda xogta shakhsiga ah;
    d. In la qiimeeyo saameynta adeesiga cusub uu ku yeelan karo qofka xogta leh; iyo
    e. In la xaqiijiyo in uu jiro nidaam ku habboon oo lagu ilaalin karo xogta shakhsiga ah.
3. Qofka xogta leh waa in la siiyaa xogta kor ku xusan, ka hor inta aan la sameyn adeegsi dheeraad ah iyadoo adeegsiga dheeraadka ah la sameyn karo haddii:
    a. Qofka xogta leh bixiyo oggolaanshaha adeegsiga dheeraadka ah;
    b. Adeegsiga dheeraadka ah loo sameynayo keliya sababo la xiriira cilmi-baaris, ama ujeeddooyin tiro-koob oo dan guud ah; iyo
    c. Adeegsiga dheeraadka ah oo lagama-maarmaanka u ah fulinta waajibaad sharci.

Qodobka 6aad
Oggolaanshaha Qofka Xogta Leh

1. Oggolaanshaha qofka xogta leh waxaa loola jeedaa fasax kasta oo xor ah, cayiman, ogaalna lagu sameeyey, kaasoo si aan mugdi ku jirin u cabbiraya rabitaanka qofka xogta leh, isagoo ku muujinaya hadal ama tallaabo cad oo caddeynaysa in uu bixiyey oggolaanshaha adeegsiga xogtiisa gaarka ah.
2. Xog-dhawraha waa in uu ku wargeliyaa qofka xogta leh:
   a. Cidda mas'uulka ka ah ururinta iyo adeegsiga xogta shakhsiga ah;
   b. Sababta iyo ujeeddooyinka loo ururinayo ama loo adeegsanayo xogta shakhsiga ah;
   c. Nooca xogta shakhsiga ah ee la ururinayo, lana adeegsanayo;
   d. Macluumaad ku saabsan isticmaalka xogta shakhsiyeed ee lagu fulinayo go'aanqaadashada tooska ah (Automatic decision-making), haddii ay khusayso;
   e. Khataraha suurta-galka ah ee ku saabsan wareejinta xogta, sabab maqnaanshaha go'aan ku filan ama tallaabooyin ku habboon oo ilaalinaya;
   f. Haddii xogtiisa lala wadaagayo dhinac saddexaad, iyo sababta loola wadaagayo;
   g. In uu qofku xaq u leeyahay in uu ka laaban karo oggolaanshaha uu hore bixiyey, marka laga reebo adeegsigii hore ee sharciga ahaa;
   h. Saameynta ay leedahay bixinta, diidmada, ama ka-noqoshada oggolaanshaha.
3. Xog-dhawraha waa in uu ugu sheegaa qofka xogta leh luqad uu fahmi karo oo ah; qoraal, af, iyo fariin maqal ama muuqaal ah, macluumaadka ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan.
4. Xog-dhawruhu inta uusan oggolaanshiyo ka qaadin qofka xogta leh waa in uu hubiyaa:
   a. In qofka xogta leh uu awoodo in uu bixiyo oggolaansho (capacity to give consent) si wafaqsan qodobka 9 aad ee Xeer-nidaamiyahan.
   b. In oggolaanshuhu yahay mid qofku si xor ah u bixiyey; iyo
   c. In oggolaanshuhu yahay mid ku kooban ujeeddada loo isticmaalayo xogta.
5. Oggolaanshaha waxaa loo qaadanayaa in si xor ah loo bixiyey, marka laga reebo xaaladaha hoose:
   a. Marka oggolaanshaha la bixiyey iyadoo lagu saleynayo in qofka xogta leh uusan ka horimaan karin soo-jeedinta habka loo isticmaalayo xogtiisa;
   b. Haddii oggolaanshaha loo soo bandhigo sidii shuruud aan qayb-ahaan la beddeli karin oo ku lifaaqan habka loo isticmaalayo xogta;
   c. Marka qofka xogta leh uusan awoodin in uu diido ama ka laabto oggolaanshihiisa iyadoo aan wax dhibaato ah ka dhalan;
   d. Marka Xogdhawruhu isku daro dhawr ujeeddo oo xogta loo isticmaalayo, iyadoo aan si gaar ah loo helin oggolaansho u go'an ujeed kasta; iyo

e. Marka ujeeddada qofka xogta leh ay tahay mid aan caddayn ama mugdi ku jiro.

6. Qofka xogta shakhsiga leh waa inuu bixiya oggolaanshiyo cad oo aan mugdi ku jirin sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, qaab-qoraal, saxiixid dokumenti, ama fal kasta oo muujinaya oggolaanshaha adeegsiga xogta gaarka ah.

Qodobka 7aad
Awood-bixinta Oggolaanshaha

Qofka waxaa loo qaadanayaa in uu leeyahay awood-bixin oggolaansho marka:

a. Qofka xogta leh uu gaaray da'ada 18 (siddeed iyo toban) sano;

b. Maskax ahaan uu fayo-qab yahay (Maankiisu dhammeystiran yahay). Qofka waxaa loo tixgelinayaa in uu maankiisu dhammeystiran yahay haddii dhakhtar idman uusan caddeyn sidaa wax ka duwan; iyo

c. Qofka aan lahayn awood sharci (incapacity) oggolaanshihiisa waxaa bixinaya wakiilkiisa sharci, marka laga reebo xaaladaha ku xusan Qodobka 16aad (6) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

Qodobka 8aad

Noocyada
Oggolaanshaha

1. Oggolaanshaha la aqbalayo wuxuu noqon karaa:

   a. Oggolaansho cad: Qofka leh xogta wuxuu bixinayaa oggolaansho cad oo la dokumentiyeyn karo, sida calaamadeynta meesha loogu talo-galay, bixinta koodhadhka hubinta (OTP), bixinta xogta dhalyada ama muunadda faraha (finger-print), saxiixidda foom diyaarsan, ama diridda Email-ka; ama

   b. Oggolaanshaha xulashada ku dhisan: Qofka ma saameynayso illaa uu asagu ikhtiyaari ku doorto in lagu daro, ka dib aqbalaadiisa.Tusaalaha oggolaanshaha doorashada ku dhisan waa sida soo socota: "Waxaan rabaa in aan helo warsidaha (newsletter) XXX" - Haddii meesha loogu talo-galay laga tago iyadoo aan la calaamadeyn, laguuma soo diri karo warsidaha XXX."

2. Lama aqbalayo oggolaansho isku duuban, waa in oggolaasho loo helaa noocyada kala duwan ee adeegsiga xogta.

Qodobka 9aad
Adeegsiga Xogta Carruurta iyo Dadka aan Lahayn Awood Sharci

1. Marka laga hadlayo arrimaha Dhowrista xogta, carruur waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka yar sideed iyo toban (18) sano. Haddii xog-dhawraha ama xog-adeegsaduhu uu isticmaalayo xogta carruurta, waa in uu oggolaanshiyo ka helaa walidka ama wakiilka sharci ee caruurta.

2. Oggalaanshaha adeegsiga xogta carruurta ka yar 18 (sideed iyo toban sano ama dadka aan la hayn awood sharci wuu aansaxaya haddii ay dan cad ugu jirto si waafaqsan Qodobka 16aad
   (6) ee Sharciga Dhowrista Xogta.

Qodobka 10aad
Oggolaanshaha Xog-qabteyaasha Bogagga (Cookies)

1. Adeegsiga xogta shakhsiga ee xog-qabteyaasha bogagga ku xiran Internet-ka wuxuu u baahan yahay oggolaansho haddi aysan ahayn kuwo lagama-maarmaan ah, waa in bogagga internetka ay si cad u muujiyaan cookies-ka, iyadoo isticmaalayaasha loo oggolaanayo inay si fudud u aqbalaan ama u diidaan.
2. Ka hor adeegsiga xogta shakhsiga ee bogagga internet-ka waa in qofka la ogeysiiyaa:
   a. Jiritaanka iyo ujeeddada xog-qabtaha;
   b. Xogta laga ururinayo iyo waqtiga la haynayo;
   c. Cidda mas'uulka ka ah isticmaalka xogaha uu ururiyo xogqabtaha;
   d. Xog ku saabsan sida loola noqon karo oggolaanshaha; iyo
   e. Siyaasadda Dhowrista xogta ee Bogagga ku xiraninternet ka.
3. Hay'addu waxay xeer-nidamiye ka soo saaraysaa adeegsiga xogta shakhsiga ee danabeysan.

Qodobka 11aad
Qiimeynta Saameynta Dhowrista Xogta

1. Adeegsiga xogta marka ay u badantahay inay keento khataro ku wajahan xuquuqda iyo xoriyaadka dadka xogta leh, xog-dhawraha muhiimka ah waa inuu sameeyo qiimeyn ku saabsan saameynta Dhowrista xogta kahor inta uusan adeegsan si waafaqsan Qodobka 29aad

(1) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

2. Ujeedka faqradda hore ee qodobkan, Adeegsiga xogta ee keeni kara halis sare oo lid ku ah xuquuqda iyo xorriyadda qofka xogta leh waxaa ka mid ah:
   a. Go'aan qaadasho si deg deg ah oo leh saameyn sharci ama mid la mid ah, taas oo ay ku jirto isticmaalka falanqayn muuqaal ama hab-algoritam, ama isticmaal xogta shakhsiyeed oo xasaasi ah;
   b. Isticmaalka xogta shakhsiyeed si ballaaran ujeeddo aan ahayn tii markii hore xogta loo ururiyey;
   c. Marka isbeddel ku yimaado qayb kasta oo ka mid ah adeegsiga xogta taas oo kordhin karta khatarta uu la kulmayo qofka xogta leh;
   d. Adeesiga xogta xasaasiga ah ama xogta carruurta iyo dadka nugul;
   e. Isku darka, isku xiridda, ama isbarbardhigga xogaha kala duwan ee laga helay ilo kala duwan iyo adeegsiga loo sameeyo ujeeddooyin kala duwan;
   f. Isticmaalka farsamooyin iyo Alado cusub oo tiknoolajiyeed ama xog-ururin; iyo
   g. Marka adeegsigu ka hor-istaagayo qofka xogta leh inuu isticmaalo xuquuqdiisa Dastuuriga ah.
3. Xaaladaha qiimeynta loo baahan yahay sida kuxusan faqradda 2aad ee Qodobkan, Xogdhawraha wuxuu isticmaali karaa foomka ay Hay'adda Dhowrista Xogta soo saarto si loo sameeyo qiimeynta.

4. Sid waafaqsan qodobka 29 (2) ee Sharciga Dhowrista xogta , haddii Xog-dhawraha muhiimka ah laga rabo inuu la tashado Hay'adda Dhowrista Xogta ka hor Adeegsiga xogta, wada tashigaas waa in lagu sameeyaa sodon (30) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda soo saarista warbixinta qiimeynta saameynta (Impact assisment).
5. Marka laga rabo xogdhawraha inuu la tashado Hay'adda Dhowrista Xogta Sida waafaqsan qodobka 29 (2) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, waa inuu soo gudbiyaa:
    a. Warbixinta qiimeynta saameynta Dhowrista xogta (Data Protection Impact Assessment) ee loo diyaariyey siwafaqsan qodobka 29 (4) (d) ee sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha; iyo
    b. Mas'uuliyadaha Xog-dhawraha ee la xiriirra adeegsiga xogta, marka ay ku habboon tahay.
6. Hay'adda Dhowrista Xogta waxey muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah qiimeyn kusameyneysaa warbixinta losoo gudbiyey siwafaqsan faqradda 5aad ee qodobkan.
7. Hay'addu haddii u aragto in adeegsiga larabo uu lid ku yahay Shariciga Dhowrista Xogta Dadweynaha iyo Xeer-nidamiyahan waxay soo saareysaa talooyin qoraal ah si loo maareeyo khataraha imankara.

Qodobka 12aad
Ka-noqoshada Oggolaanshaha

(1) Qofka xogta leh wuxuu xaq u leeyahay in uu ka noqon karo oggolaanshiyihii adeegsiga xogta uu hore u bixiye xilli kasta, si waafaqsan Qodobka 21aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

(2) Ka noqoshada oggolaanshaha waxaa ka dhalanaya;
    a. Adeegsigii xogta oo joogsada;
    b. In la tirtiro xogtii la hayey;
    c. In la ogeysiiyo dhinac saddexaad ka noqoshada oggolaanshaha; iyo
    d. In dukumenti ahaan loo kaydiyo ka noqoshada oggolaanshaha.

(3) Ka noqoshada oggolaanshaha adeegsiga xogta ee ku xusan qodobkan masaameyneyso xogaha lasiiyey Hay`addaha dawliga ah.

Qodobka 13aad
Ujeedka, Yareynta Iyo Saxnaanta Xogta

1. Xogta shakhsiga waa in loo aruuriyaa u jeedo cad, cayiman oo sharci ah lana jaan-qaadeysa u jeedadii loo ururiye, wax ka baxsan ne loo isticmaalin haddii sharciga si kle u sheegin.
    a. Sida ku xusan Qodobka 14 (4) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, waxaa loo qaadanayaa adeegsiga in uu la jaan-qaadaayo ujeeddadii loo ururiyey; iyo
    b. Marka lagu gaarayo dano la mid ah kuwii loo ururiyey xogta.
2. Xogta shakhsiga waa in laga ururiya inta ugu yar oo muhiimka ah ee lagama-maarmaanka ah.
3. Xogta shakhsiga laga qaadayo waa iney ahaataa mid saxan, hadday qaldantana la sixi karo ama cusbooneysin lagu sameeyn karo marka loo baahdo.

Qodobka 14aad
Muddada Keydinta Xogta

1. Haddii aan sharci ama heshiis gaar ah lagu sheegin muddada keydinta xogta waxay noqoneysaa 7 (todobo) sano.
2. Keydinta xogta mihiimka u ah danta qaranka oo ay hayaan xog-dhawreyaasha dawliga ah laguma dabaqayo faqradda 1aad ee qodobkan.

CUTUBKA 3AAD
NIDAAMKA U-HOGGAANSANAANTA IYO AMNIGA XOGTA

Qodobka 15aad
Waajibaadka Xog-dhawreyaasha Iyo Xog-adeegsadeyaasha

1. Dhammaan Xog-dhawreyaasha iyo xog-adeegsadeyasha gaarka ah iyo kuwa dawladeed waa

   in ay ku soo bandhigaaan siyaasadahooda ilaalinta xogta muddo 3 (saddex) bilood gudahood ah, laga billaabo taariikhda uu dhaqan-galo xeer-nidaamiyahan si waafaqsan Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
2. Xog-dhawre iyo Xog-adeegsade kasta waa inuu magacabaa Sarkaal Dhowrista Xogta haddii;
   a. Uu yahay Xog-dhawre ama Xog-adeegsade Dawladeed marka laga reebo Hay'adaha dawladda ee aan sharcigan lagu dabaqeyn
   b. Uu si joogto ah u adeegsado xogta shakhsi ee xasaasiga ah ee lagu qeexay Qodobka 2aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha; iyo
   c. Hawlaha ugu muhiimsan ee Xog-dhawraha ama Xog-adeegsadaha uu ku lug leeyahay fulinta hawl-gallo, kuwaas oo sababo la xiriira dabeecaddooda, baaxadooda iyo ujeedadooda, u baahan kormeer baaxad leh, nidaamsan (systematic) oo joogto ah, kuna saabsan dadka xogta leh.
3. Xog-dhawreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha waa inay sameeyaan baaritaaan faahfaahsan oo ku saabsan hab-dhaqanka ilaalinta iyo sir-ahaanshaha xogta muddo 6 (lix) bilood gudahood ah, laga billaabo markuu dhaqan-galo Xeer-nidaamiyahan, baaritaan kasta waa in lagu caddeeyo qodobbada soo socda:
   a. Macluumaadka shakhsiyeed ee la aqoonsan karo ee xog-dhawruhu hayo, oo ay ku jiraan xogta shaqaalaha iyo xogta shakhsi ee dadweynaha;
   b. Ujeeddada loo ururiyo macluumaadka shakhsiyeed;
   c. Ogeysiiska la siiyo shakhsiyaadka ee ku saabsan ururinta iyo adeegsiga macluumaadkooda shakhsiyeed;
   d. Fursadaha la siiyo shakhsiyaadka si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan, wax uga beddelaan, saxaan, dheeraad ku daraan, ama tirtiraan macluumaadkooda shakhsiyeed;
   e. Oggolaanshaha laga helo shakhsiyaadka ka hor inta aan laga ururin, la adeegsan, la wareejin, ama la shaacin macluumaadkooda shakhsiyeed, iyo hababka loo adeegsaday oggolaanshahaas;

f. Siyaasadaha iyo hab-dhaqanka xog-dhawraha ee ku saabsan ilaalinta amniga macluumaadka shakhsiyeed ee la aqoonsan karo;

g. Siyaasadaha iyo hab-dhaqanka xog-dhawraha ee isticmaalka saxda ah ee macluumaadka shakhsiyeed;

h. Siyaasadaha iyo nidaamyada xog-dhawraha ee la xiriira ilaalinta xogta iyo sirta;

i. Siyaasadaha iyo nidaamyada xogdhawraha ee daba-galka iyo soo-gudbinta xadgudubyada la xiriira xogta iyo sirta; iyo

j. Nidaamyada xog-dhawraha ee lagu qiimeynayo saameynta tiknoolajiyadda ku leedahay siyaasadaha amniga iyo sirta ee la dejiyey.

4. Xog-dhawrayaasha iyo Xog-adeegsayasha waa inay soo gudbiyaan nuqul kamida baarista iyo daba-gal ka lagu sameeyey siwafaqsan faqradda 3[aad] ee qodobkan, haddii

a. Xogdhawraha ama Xog-adeegsadaha adeegsado xogta Shakhsiyeed ee xasaasiga ah

b. Xog-dhawruha ama Xog-adeegsadaha adeegsado xog dad ka badan 1,000 lix bilood gudahood, Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha sanad kasta waa iney hay'adda Dhowrista Xogta u soo gudbiyaan warbixinta baarista marka ay adeegsadaan xog dad ka badan 2,000.

5. Xog-dhawreyaaasha iyo Xog-adeegsadayasha muhiimka ah waa inay iska diwaan-geliyaan Hay'adda Dhowrista xogta muddo lix bilood gudahood, ayagoo raacaya Xeer-nidaamiyaahan iyo Sharciga Dhowrista xogta Dadweynaha.

Qodobka 16aad
Sarkaalka Dhowrista Xogta

Sarkaalka Dhowrista xogta ee lagu magacaabay si waafaqsan faqradda (2) ee qodobka 15aad ee Xeernidaamiyan, wuxuu yeelanayaa hawlaha soo socda:

a. In uu hubiyo in Xog-dhawrahu raacayo shuruucda, siyaasadaha, iyo awaamiirta ilaalinta xogta;

b. Bixinta talooyin ku saabsan habka ugu wanaagsan ee ilaalinta xogta;

c. Maamulka iyo daba-galka hawlaha adeegsiga xogta si looga hortago jabsashada xogta;

d. U fidinta shaqaalaha tababarro iyo wacyigelin ku saabsan ilaalinta xogta;

e. Isku xirka Hay'adda Dhowrista xogta, Xog-dhawraha iyo shakhsiyaadka Xogta leh si loo xalliyo cabashooyinka la xiriira xogta;

f. Aqoonsiga, maareynta iyo yareynta khataraha la xiriira ilaalinta xogta; iyo

g. Hubinta in la hayo diiwaanno sax ah oo ku saabsan adeegsiga xogta.

Qodobka 17aad
Diiwaan-gelin

1. Hay'adda Dhowrista xogtu waxay diiwaan-gelineysa dhammaan Xog-dhawreyaasha iyo Xogadeegsadeyaasha marka ay soo gudbibiyaan:

a. Rukhsadda ama oggolaanshiyaha kale u haysto shaqadiisa;

b. Magaca iyo cinwaanka Xog-dhawraha; sidoo kale magaca iyo macluumaadka xiriirka ee mas'uulkiisa ilaalinta xogta (Sarkaalka Xog-Dhowrista);

c. Sharraxaad ku saabsan nooca xogta shakhsiga ah ee ka dhigaysa Xog-dhawre;
d. In ay caddahay qaybaha iyo tirada guud ee ay yihiin dadka xogta shakhsiyeed la xirirto;
e. Ujeeddooyinka uu ka lee yahay xogta shakhsiga ah ama uu u adeegsado;
f. In uu sheego qaybaha xog-qaatayaasha uu la wadaago ama la wadaagayo xogta shakhsiga ah;
g. Hay'ad kasta oo caalami ah ama dal kasta oo ka baxsan JFS, oo uu xogta shakhsiga ah u gudbiyey ama uu doonayo in uu u gudbiyo; iyo
h. Sharraxaad guud oo ku aaddan khataraha, ilaalinta iyo tallaabooyinka amniga iyo hababka uu ku xaqiijiyo Dhowrista xogta shakhsiga ah.

2. Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha soo gudbiya maclumaadka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waa inuu buuxiyaa Foomka diiwaan-gelinta ee Hay'adda.
3. Xog-dhawre iyo Xog-adeegsade kasta ee soo buuxiya sharuudaha diiwaan-gelinta waxaa lagu qorayaa diiwaanka, wuxuuna yeelanayaa tirsi aqooneyd ugu qormaya Diiwaanka Hay'adda Dhowrista Xogta.
4. Xog-dhawraha ama Xog-adeegsadaha aan soo buuxin shuruudaha Diiwaan-gelinta ee sharcigu u dajiyey lama diiwaan-gelinayo. diidma kasta uu soo saaro madaxa diiwaan-gelinta waxaa lagu wargalinayaa codsadaha, waxayna noqonaysaa mid qoraal ah oo lagu caddeynayo sababta diidmada, waxaa cabasho looga qaadan Maareeyaha Guud ee Hay'adda. haddii uu

   ku qanci waayo go'aanka Maareeyaha Guud waxuu rafcaan u qaadan karaa wuxuu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda awoodda u leh.
5. Xog-dhawraha muhiimka ee dawladeed wuxuu diiwaanka gelaya sharuud la`aan, hay`addaha ama shirkada gaar loo leeyahay oo ay qeybta ka tahay dawladda, waxaa la marsiinayaa hannaanka kuwa gaarka loo leeyahay ay maraan haddii saamiga dawladda uu ka yar yahay 51%.
6. Hay'adda Dhawrist xgta waxay diiwangalineysaa Sarkaalka Dhowrista xogta ee ay magacaabeen Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha, iyo shirkadaha Baarista iyo Dabagalka (Data protection Compliance Audit), waxaana laga soo saarayaa xeer- nidaamiyeyaal u gaar ah.

Qodobka 18aad
Khidmado

1. Cid kasta oo laga rabo in ay iska diiwaan-geliso Hay'adda Dhowrista Xogta, si waafaqsan Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha waxaa waajib ku ah in ay bixiso khidmadaha diiwaangelinta ee hay'addu jaan-goyso.
2. Xog-dhawreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha dawladeed kuma waajibayso in ay bixiyaan khidmadda is-diiwaan-gelinta, si waafaqsan Qodobka 33aad (3) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
3. Khidmadaha iyo arrimaha kawaajibaya waxaa loo raacayaa sida lagu caddeeyay lifaaqa (Annex) xeer-nidaamiyehaan.

Qodobka 19aad
Rukhsadda Dhowrista Xogta

1. Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadeyasha buuxiya shuruudaha diiwaan-gelinta lagu xusay Qodobka 17aad ee Xeer-nidaamiyahan iyo waajibaadka kale ee sharcigu saaray, wuxuu xaq u yeelanayaa in uu helo Rukhsadda Dhowrista Xogta.
2. Hay'adda Dhowrista Xogta waxay bixineysaa Rukhsadda Dhowrista Xogta ka dib marka ay qiimeyn ku sameyso u-hoggaansananta Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha ee Sharciga Dhowrista Xogta.
3. Sarkaalka Dhowrista Xogta iyo Shirkadaha Baarista iyo Daba-galka (Data Protection compliance Audit) ee soo buuxiya shuruudaha iyo wajibaadka lagu soo saaro xeer-nidaamiye u gaar ah waxaa la siinayaa Rukhsadda Dhowrista xogta (Data Protection Certified).
4. Rukhsadda Dhowrista Xogta waxay ku dhacaysaa muddo ku siman 1 (hal) sano.
5. Xog-dhawraha muhiimka ah waa in uu cusboneysiyaa rukhsaddiisa 15 (shan iyo toban) maalin ka hor muddada dhicitaanka.

Qodobka 20aad
Kala-noqoshada Iyo Laalidda Rukhsadda

Hay`adda Dhawritsa Xogta waxay awood u leedahay in ay kala noqoto ama laasho rukhsadda, Xog-dhawraha, Xog-adeegasadaha, Shirkadaha Baarista iyo Daba-galka (Data Protection compliance Audit) iyo Sarkaalka Dhowrista Xogta ee ku xad-gudba Sharciga Hay'adda, Xeernidaamiyihiisa iyo hab-raacyada kale ee ay hay'addu soo saarto.

Qodobka 21aad
Daba-galka Dhawrsanaanta Xogta (Compliance audit)

1. Daba-galka dhawrsanaanta xogta waa daba-gal xirfadeed oo madax-bannaan laguna sameynayo Sanad kasta diiwaannada (keydka), Nidaamyada (Systems), Hawl-fuliyeyaasha (Applications) nidaamyada, Shabakadaha, Siyaasadaha iyo hab-raacyada xog-dhawreyaasha iyo xog-adeegsadeyaasha, si loo hubiyo u-hoggaansanaanta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, Xeer-nidaamiyeyaashiisa, iyo siyaasadaha Dhowrista xogta ee hay'addu soo saarto.
2. Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha waxay awood u leedahay in ay soo saarto go'aanno ku saabsan:
    a. Sameynta daba-gal qorsheysan;
    b. Soo-gudbinta warbixinnada baarista gudaha ah ee uu sameeyo Sarkaalka Dhowrista Xogta; iyo
    c. Sameynta baaritaanno goobeed ama baaris gaar ah oo lagu hubinaayo uhoggaansanaanta ama jabsashada xogta.
3. Daba-galka Dhowrista xogta waxaa loo sameynayaa sababo ay ka mid yihiin:
    a. Qiimeynta heerka u-hoggaansanaanta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha iyo Xeernidaamiyeyaashiisa;
    b. Qiimeynta u-hoggaansanaanta siyaasadda Dhowrista xogta ee gudaha;

c. Ka jawaabista cabashooyinka ay Hay'adda u soo gudbiyaan dadka xogta leh
d. Ogaanshaha daldaloollada iyo habacsanaanta ka jirta nidaamka ay Xog-dhawraha iyo Xog-adeegsadaha isticmalaan; iyo
e. Bixinta tilmaamaha lagama-maarmaanka ah iyo tallaabooyinka lagu xallinayo daldaloollada la ogaaday.

4. Daba-galka Dhowrista xogta ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, hay'addu waxay u wakiilan kartaa dhinac seddaxaad, si waafaqsan Sharciga Dhowrista Xogta iyo shuruucda kale ee dalka.
5. Hay'addu waxay Xeer-nidaamiye gaar ah ka soo saareysaa hannaanka daba-galka Dhowrista xogta.

Qodobka 22aad
Jabsashada Xogta

1. Xogdhawreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha waa in ay ku soo wargeliyaan Hay'adda Dhowrista Xogta 72 saacadood gudahood, laga billaabo marka ay ogaadaan jabsashada xogta, haddii ay jirto dib u dhac, waa in sababaha dib u dhaca lagu soo lifaqaa ogeysiis
2. Ogeysiiska jabsashada ee faqradda hore waa in lagu sheegaa:
   a. Nooca jabsashada sida; adeegsi aan la fasixin, lumid iyo xadid xog;
   b. Xogta shakhsi ee la jabsaday sida; xog maaliyadeed ama xog caafimaad;
   c. Magaca iyo xiriirka (contacts) Sarkaalka Dhowrista Xogta;
   d. Tirada dadka ay saameysay iyo diiwaannada xogta la jabsaday;
   e. Saameynta jabsashada xogtu ku yeelatay shakhsiyaadka xogta leh;
   f. Tallaabooyinka la qaaday ama la qorsheeyey si loo xakameeyo dhibaatada ama loo yareeyo waxyeellada;
   g. Goorta ay dhacday jabsashada, qaabka loo ogaaday, iyo waxa sababay; iyo
   h. Caddeyn haddii la wargeliyey shakhsiyaadka xogtooda la jabsaday ama sababta haddii aan la wargelin.
3. Xog-dhawre ama Xog-adeegsade kasta waa in uu diiwaan-geliyaa xogta shakhsiga ee la jabsaday iyo xaqiiqooyinka la xariira jabsashadaas, si waafaqsan Qodobka 27aad ee Sharciga Dhowrista Xogta.
4. Hay'adda Dhowrista Xogta marka ay soo gaarto wargelin la xariirta jabsashada xogta waxay qaadaysaa tallaabooyin baaritaan oo waafaqsan xeer-nidaamiyahan iyo hab-raacdayada kale ee khuseeya.

Qodobka 23aad
Wacyi-gelinta Joogtada ah ee Dadweynaha

Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha waxay keligeed ama iyadoo la kaashanaysa Ururrada Bulshada Rayidka ah, ama cid kasta oo fududeyn karta, soo abaabuleysaa siminaarro, aqoon-isweydaarsiyo, shirar, iyo barnaamijyada lagu wacyi-gelinayo bulshada, laguna xoojinayo uhoggaansanaanta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, Xeer-nidaamiyihiisa, Hageyaalsha iyo Hab-raacyadiisa kale ee khuseeya.

CUTUBKA 4AAD
WAREEJINTA XOGTA

Qodobka 24aad
U-wareejin Xogta meel ka baxsan Dalka

1. Xog-dhawraha waxaa u bannaan in uu u wareejiyo xogta shakhsiga meel ka baxsan Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, marka la helo shuruudaha Sharciga Dhowrista Xogta u dejiyey wareejinta, si waafaqsan Qodobka 30aad ee Sharciga Dhowrista Xogta, haddii ay jiraan:
    a. Tallaabooyin ku habboon oo lagu ilaalinayo xogta;
    b. Go'aan ku saabsan jiritaanka ilaalin ku habboon xogta oo ay gaartay Hay'adda Dhowrista Xogta;
    c. Wareejinta oo loo arko mid lama-huraan ah; ama
    d. Oggolaanshaha laga helo qofka xogta leh.
2. Wareejinta xogta shakhsiga meel ka baxsan Jumuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa loo qaadanayaa in ay jiraan tallaabooyin ilaalineed oo ku haboon marka laga helo xaaladaha lagu sheegay Qodobka 30aad (2) ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.
3. Marka wareejinta xogta u dhacdo si waafaqsan farqooyinka sare ee qodobkan waa in:
    a. Wareejinta xogta la diiwaan-geliyo;
    b. Diiwaan-gelinta loo soo gudbiyaa Hay'adda Dhowrista xogta marka ay dalbato; iyo
    c. Diiwaan-gelinta waa in laga helaa:
        i. Taariikhda iyo waqtiga wareejinta;
        ii. Magaca qofka ama hay'adda xogta loo dirayo;
        iii. Asbaabta lagu saleynayo wareejinta; iyo
        iv. Faahfaahin ku saabsan xogta shakhsiga ah ee la wareejiyey.

Qodobka 25aad
Wareejin Xogta marka aysan jirin Ilaalin Ku habboon

Haddii aan la helin shuruudaha ku xusan godobka 30 (1) ee Sharciga Dhowrista Xogta, xog-dhawraha wuxuu u wareejin karaa xogta shakhsiga ah dal ka baxsan JFS ama urur caalami ah, si waafaqsan Qodobka 31aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha, haddii:

a. Qofka xogta leh uu sii cad u bixiyo oggolaanshaha wareejinta xogtiisa shakhsi, ka dib markii lagu wargeliyey khataraha ka dhalan kara wareejinta xogtiisa;
b. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay fulinta heshiis ka dhexeeya qofka xogta leh iyo xog-dhawraha, ama tallaabooyin lagu hirgelinayo heshhiis hore markuu codsaday qofka xogta leh;
c. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay gelidda ama fulinta heshiis ay dan ugu jirto qofka xogta leh, oo u dhaxeeya xog-dhawraha iyo dhinac saddexaad;
d. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay danta guud;

e. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay dejinta, fulinta, ama difaaca dacwadaha sharciyeed; iyo

f. Wareejintu lagama-maarmaan u tahay ilaalinta danaha muhiimka ah ee qofka xogta leh, aysanna suuragaleyn in uu bixiyo oggolaanshiyo iyadoo la rumeysan yahay in uu bixin lahaa oggolaanshiyaha haddii lagu wargeliyo.

CUTUBKA 5AAD
FULIN

Qodobka 26aad
Cabashooyin

1. Qofka xogta leh ee waxyeello ku soo gaarto falka ama fal-la'aanta Xog-dhawraha ama Xogadeegsaha, ee ka dhalatay xad-gudub ka dhan ah xaquuqda dastuuriga ah ee la xariirta xogta shakhsiga, Sharciga Dhowrista Xogta, Xeer-nidaamiyahan iyo hab-raacyada kale ee ay hay'addu soo saarto, wuxuu cabasho u soo gudbisan karaa Hay'adda Dhowrista Xogta, si waafaqsan faqradda (2) ee Qodobkan.
2. Hay'addu waxay qabaneysaa cabashooyinka loo soo gudbiyey marka laga helo shuruudaha hoose:
   a. Magaca iyo cinwaanka laga heli karo dhinaca laga cabanayo;
   b. In ay xaddidan tahay dulucda mowduuca ay cabashadu la xiriirto;
   c. In cabtuhu dan ka leeyahay mowduuca ay cabashadu la xiriirto;
   d. In cabashada lagu soo gudbiyey muddo soddon bari (30) gudaheed, laga billaabo markii la ogaaday xad-gudubka cabashadu la xiriirto. Haddi uu kadib dhaco mudadaas waa inuu soo gudbiyaa asbab maan gal ah; iyo
   e. Faahafahin kooban oo ku saabsan falka xad-gudubka ah, saameynta ka dhalatay iyo codsiga cabtaha.
3. Qofka xogta leh inta uusan cabashadiisa u soo gudbin Hay'adda Dhowrista Xogta, waa in uu xalka la kaashadaa Xog-dhawraha ama Xog-adeegsadaha, haddii aysan jirin baahi degdeg ah, ama waxyeello khatar leh.

Qodobka 27aad
Baarista Cabashooyinka Iyo Jabsashada Xogta

1. Hay'addu waxay billaabi kartaa baaris ku saabsan cabashada loo soo gudbiyey, si waafaqsan Qodobka 26aad ee Xeer-nidaamiyahan, ama si iskeeda ah marka ay jirto asbaab maangal ah oo tilmaameysa in Xog-dhawruhu uu ku xad-gudbay ama ay u
2. badan tahay in uu ku xad-gudbo Sharcigan; xeer-maamul; xeer-hoosaad ama amarro lagu soo saaray sharcigan.
3. Waaxda Baarista iyo Daba-galka ee hay'adda, waxay mas'uul ka tahay baarista iyo daba-galka u-hoggaansananta ee lagu xusay Qodobka 21aad ee Xeer-nidamiyahan.
4. Sarkaalka loo xil saaray baaris gaara ee ka tirsan Waaxda Baarista iyo Daba-galka, ee gudanayo shaqadiisa, marka uu oggolaansho ka helo Maareeyaha wuxuu dalban karaa:

a. In uu qofku yimaado Xarunta Shaqada ee Hay'adda wagti cayiman, si wax looga waydiiyo arrin ku saabsan cabashada;

b. In la keeno bayaan qoraal ah oo lagu sameeyey dhaar, ama xaqiijin tibaaxeysa dhammaan macluumaadka loo baahan karo si waafaqsan amarka;

c. gofka in uu soo saaro ama oggolaado in la galo qalabka qaab la arki karo, oo u habeysan luqad la fahmi karo iyo format la akhrin karo, marka sheyga baaristu la xiriirto ay ku jirto macluumaad lagu keydiyey qalab makaanik ama elegtaroonig ah; iyo

d. In la keeno dukumintiga, diiwaanka ama qoraalka looga baahan karo arrin kasta oo baarista la xiriirta, kaas oo aan qofka ka hor-istaageyn sharci kale in uu shaaciyo.

5. Sarkaalka u xilsaaran waa in uu baaristiisa ku soo gabagabeeyaa muddo 45 maalin gudahooda, oo ka billaabaneysa marki ay cabashadu soo gaartay

6. Haddii baaristiisa lagu ogaado dhicitaanka fal-dambiyeed ka mid ah kuwa qaranku oogo, waa in lagu wargeliyaa Booliska, si waafaqsan Qodobka 18aad ee Sharciga Habka Ciqaabta Somaliyeed.

7. Natiijada Baarista la sameeyey si wafaqsan qodobkan waa in loo gudbiyaa Maareeyaha.

Qodobka 28aad
Maareeyaha Guud ee Hay'adda

1. Iyadoo aan wax loo dhimin xaqa qofka ee ah in uu ka dacwoodo Maxkamadda awoodda u leh, Maareeyaha Guud wuxuu u xilsaaran yahay hawlaha soo socda:

a. Soo-saaridda amarro maamul, si loo ilaaliyo mawduuca lagu xad-gudbay inta lagu guda jiray baaritaanka;

b. U-yeeridda cid kasta oo eedaymo loo soo jeediyey si ay uga jawaabto eedahaas muddo
7 (toddobo) maalmood gudahood ah;

c. Qiimeynta natiijada baarista ee loo soo gudbiyey, si waafaqsan Qodobka 27aad (6) ee xeer-nidaamiyahan;

d. Wuxuu farayaa Xog-dhawre in uu joojiyo ama uu qaado, tallaabooyin uu uga joojinayo Xog-adeegsade isticmaalka xogta, inta laga hubinayo u-hoggaansanaantiisa Sharciga
Dhowrista Xogta;

e. Soo saarista amar lagu farayo Xog-dhawre in uu mag-dhow siiyo qofka xogta leh ee ay gaartay dhibaatada, khasaaraha ama dhaawaca ka dhashay xad-gudubka;

f. Qiimeynta iyo jaangoynta mag-dhowga uu bixinayo Xog-dhawraha ee lagu sheegay Qodobka 37aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha; iyo

g. Soo-saarista ganaaxyada maamul ee ka dhasha u-hoggaansanaan-la'aanta sharciga, si waafaqsan Qodobbada 37aad iyo 38aad ee Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

2. Go'aannada Maareeyaha waxaa rafcaan looga qaadan karaa Maxkamdda awoodda u leh.

Qodobka 29aad
Soo-saarista hageyaal, jiheeyaal iyo habraacyo

Hay'adda Dhowrista Xogta waxay soo saraysaa Hab-raacyo iyo Hageyaal lagu hirgelinayo mowduucyo gaar ah si loo dhaqan-geliyo Sharciga Dhowrista Xogta iyo Xeer-nidaamiyahaan, waxaana lagu soo saarayaa arrimaha ay ka mid ka yihiin: Dhowrista Xogta Cafimaadka, Waxbarashada, Isgaarsiinta, Bankiyada iyo Xogaha kale ee Hay'addu u aragto in ay muhiimad gaar ah leeyihiin.

Qodobka 30aad
Adeegsiga Shuruucda Caalamiga Ah

Wixii laga waayo Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha iyo Xeer-nidaamiyehaan ee khuseeya qodob muhiim ah oo lagu dhawrayo xogta Shakhsiga waxaa loo raacayaaa xeerarka kale ee dalka iyo heshiisyada caalamiga ah oo ay qeybta ka tahay Soomaaliya.

Qodobka 31aad
Wax-ka-beddel iyo Dhaqan-gal

1. Hay`adda Dhowrista xogta iyadoo tixgelinaysa dib-u-habeynta sharciyada iyo siyaasadaheeda waxay wax-ka-beddel xilli kasta ku sameyn kartaa xeer-nidaamiyahan, una gudbineysa Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolojiyadda, Xukuumadda JFS.

2. Xeer-nidaamiyehan wuxuu dhaqan-gelayaa markuu meel-mariyo Golaha Wasiirada, Xukuumadda JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

LIFAAQA 1AAD
KHIDMADAHA DIIWAANGALINTA

Xog-dhowre iyo Xog-adeegsade kasta si loo diiwaangaliyo waa inuu bixiyaa Khidmadda Diiwaangalinta si waafaqsan Qodobka 33 ee Sharciga Dhowrista Xogta.
Khidmadaha waxay noqonayaan sida soo socota:

Nooca (Size)	Faahfaahin (Description)	Khidmadda (Fees)
Yar (Small)	Xog-dhowreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha leh shaqaale u dhexeeya 1–50, dakhliga sanadlaha ugu badnaan yahay $40,000, adeegsada xogta shaqsiga dad gaaraya 200 oo Qofood muddo 6 bilood gudahood	$350
Dhexdhexaad (Medium)	Xog-dhowreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha leh shaqaale u dhexeeya 51–99, dakhliga sanadlaha u dhexeeya $40,001 – $386,996.90, adeegsada xogta shaqsiga dad u dhaxeeya 201 - 1000 oo Qofood muddo 6 bilood gudahood	$1,050

Weyn (Large & Enterprise)	Xog-dhowreyaasha iyo Xog-adeegsadeyaasha leh shaqaale ka badan 99, dakhliga sanadlaha ka badanyahay $386,996.90, adeegsada xogta shaqsiga dad ka badan 1000 oo Qofood muddo 6 bilood gudahood	$2,500
Hay'adaha Dowladda (Public institutions)	Waxaa looga jeedaa Xog-dhowreyaasha iyo Xogadeegsadeyaasha dowladeed kuwaas oo uruuriya ama adeegsada xogta shaqsiga sida: Wasaaradaha, wakaaladaha, hay'adaha adeegyada dadweynaha iyo dawladda hoose	Waa ka reebantahay khidmadda

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/ 544 /01/2026 Taariikh: 11 /01/2026

Ku: Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka **Muqdisho**
Og: Dhamman Xubnaha Golaha Wasiirrada **Muqdisho**
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed **Muqdisho**

UJEEDO: **GO'AAN GOLE EE "ANSIXINTA SIYAASADDA QARAN EE NAAFADA SOOMAALIYEED"**

XRW - BIXIT
18 JAN 2026
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Warqada Summadeedu tahay **WQHI&/XWD/28/2025**, ku taariikhaysan 03/12/2025, kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed;

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.01.26** ee **05/01/2026**, kuna saabsan Ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed "** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda ay u leedahay in ay dadka naafada si buuxda ugu faa'iideysantaan adeegyada bulshada uguna mid noqondaan horumarka Dalka.

Waxaa uu meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.01.26** ee **05/01/2026**, kuna saabsan Ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Nafaada Soomaaliyeed"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Qodobka 2aad
Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuuqul Insaanka loo igmaday inay hirgaliso, meelmarisana Siyaasaddan kor ku xusan.

Qodobka 3aad
Dhaqangal

Siyaasaddan waxaa ay dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-007-2026
TAARIIKH SAXIIX: 31-01-2026
AVV Ahmed Isse Gu...
Hantidhowraha Guud ee JFS

Mudane, Saalax Axmed Jaamac
Ku simaha Ra'iisul Wasaaraha ahna
Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS

2025

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA QOYSKA IYO HORUMARINTA XUQUUQUL INSAANKA

SIYAASADDA QARAN EE NAAFADA SOOMAALIYEED

Waxaa diyaariyay: Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka

SOO KOOBID

Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waa tallaabo istaraatiiji ah oo lagu doonayo in lagu dhiso bulsho dhammeystiran oo iswadata, una siman xuquuqda aasaasiga ah, taasoo awoodsiinaysa dadka naafada ah, sidii ay qeyb uga noqon lahaayeen dhammaan dhinacyada horumarka Qaranka. Siyaasaddan waxaa asaas u ah mabaadi'da sinnaanta, takoor la'aanta iyo si fudud u helidda adeegyada bulshada, waxayna sidoo kale ku tiirsan tahay ballanqaadyada Dastuurka Soomaaliya, sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada iyo waajibaadka caalamiga ah ee ka saaran fulinta Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dadka Naafada ah.

Dadka Naafada Soomaaliyeed waxay wajahaan caqabado joogto ah sida takoorid bulsho, helitaan la'aanta adeegyada muhiimka ah sida waxbarashada, daryeelka caafimaadka, shaqo-abuurka iyo kaabeyaasha la adeegsado. Arrimahan waxaa sii xoojiyay colaado soo noqnoqday iyo musiibooyin dabiici ah oo keenay in naafadu sii ahaadaan qayb si gaar ah loo gacan bidixeeyo. Siyaasaddan waxay si cad u wajaheysaa baahida loo qabo in la jebiyo caqabadahaas, iyadoo mudnaanta siineysa aqbalaadda, xaqsiinta, iyo ka mid noqoshada naafada ee horumarka Qaran.

Siyaasadda aragtideedu waa u damqanaysa dadka naafada ah, una aqoonsan xuquuqdooda isla markaasna ka dhiga ka qayb-galayaal firfircoon nolosha dhaqaale, bulsho, iyo siyaasadeed. Ujeeddooyinka Siyaasadda waxaa kamid ah: ilaalinta iyo kobcinta xuquuqda naafada, iyadoo loo marayo xoojinta hannaanka sharci, kor-u-qaadidda helidda waxbarashada, daryeelka caafimaadka iyo shaqo-abuurka xoojinta ka-mid noqoshada naafada ee hay'adaha Dowladda sida xukuumadda iyo golayaasha go'aan-qaadashada awoodsiinta dhaqaale iyadoo loo marayo tababarro xirfadeed iyo hal-abuurro ganacsi iyo kor-u-qaadidda wacyiga bulshada si loola dagaallamo takoorka naafada uga imaaneyso xagga bulshada loona fahmo xuquuqda naafada.

Si loo xaqiijiyo ujeeddooyinkan, siyaasaddu waxay xoogga saareysaa xoojinta shuruucda la xiriira taabba-gelinta xuquuqda dadka naafada ah iyo dhisidda qaab-dhismeed sharciyeed oo ay hormuud u tahay Hay'adda Naafada Qaranka Soomaaliyeed oo ah hay'adda u xilsaaran arrimaha naafada. Ujeeddadu waa in naafadu si buuxda uga faa'iideystaan adeegyada bulshada, kana mid noqdaan horumarka Dalka. Hawlahan waxaa hirgelinaya Hay'adda Naafada Qaranka, iyadoo warbixin laga siinayo Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqul Insaanka.

Ka-qaybgalka naafada ee siyaasadda waa tiir muhiim ah si ay u helaan matalaad dhab ah oo ku saabsan maamulka iyo go'aan-qaadashada. Barnaamijyada cadaaladda waa in loo qaabeeyaa si siman si ay ugu faa'iideystaan naafada, loona abuuro nidaam caddaaladeed oo ay ku helaan taageero sharci oo xaqiijinaysa xuquuqdooda.

Fulinta siyaasaddan waxay yeelanaysaa dhawr waji, sida ujeeddooyinka waqtiga dhaw, kuwa dhexe iyo kuwa fog, taasoo la jaan-qaadi karta xaaladda bulsho iyo dhaqaale ee Soomaaliya. Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa muhiimadda ay leedahay iskaashiga dhexmara hay'adaha Dowladda, bulshada rayidka ah, shirkadaha gaarka loo leeyahay, saaxiibbada caalamka iyo guud ahaan bulshoweynta Soomaaliyeed, si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka Siyaasaddan.

Dadka Naafada ah iyo ururradooda waxay udub-dhexaad u yihiin qorsheynta hannaanka fulinta iyo qiimeynta si loo xaqiijiyo in codkooda la maqlay, baahiyahoodana la fuliyay.

Si loo dammaanad-qaado in Siyaasaddu ay tahay mid waxtar leh oo ka jawaabaysa baahiyaha dadka naafada, waa in la helaa qaab-dhismeed leh tilmaamaha guusha iyo hannaan isla-xisaabtan oo cad. Warbixinnada joogtada ah, qiimeynta bulshada iyo kormeer in laga wada qeyb-qaadanayo waxay keenayaan horumar joogto ah oo laga gaaro xuquuqda dadka naafada ah. Sidoo kale, dejinta istiraatiijiyadaha maal-gelinta joogtada ah sida qoondada misaaniyadda xukuumadda iyo dhaqaale-aruurinta bulshada oo leh hannaan maaliyadeed oo hufan waxay dammaanad-qaadayaan guusha hirgelinta Siyaasadda.

Siyaasaddani waxay ka dhigantahay geeddi-socodka isbeddelka, si loo helo Soomaaliya ay u dhanyihiin bulshadeedu. Aragtidan hiigsiga leh waxay ku baaqaysaa in dhammaan dhinacyada ay khusayso ay u midoobaan, xooggooda iskugu geeyaan isla markaasna la yimaaddaan dadaallo hal-abuur leh, si loo abuuro Qaran loo dhanyhay oo aan cidina laga tagayn.

H.E. Amb. Khadiija Maxamed Almakhzuumi
Wasiirka, Wasaaradda Qoyska iyo Hormarinta Xuquuqul Insaanka, Xukuumadda JFS

1. SOOYAAL IYO HORDHAC

1.1 Sooyaal

Naafada Soomaaliyeed waxay muddo dheer la daala-dhacaysay xaalado adag oo kahor istaagay in ay si buuxda qeyb uga noqdaan nolosha bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda Dalka. Naafadu waxay ka mid tahay qaybaha ugu nugul bulshada, waxayna in badan wajahaan takoor joogto ah oo ka go'doomiyay bulshada inteeda kale. Nuglaantaasi waxay si toos ah saameyn ugu yeelatay awooddooda ay ku heli lahaayeen adeegyada asaasiga ah sida waxbarashada, daryeelka caafimaadka iyo fursadaha shaqo, kuwaas oo ah tiirarka ugu muhiimsan ee karaamada aadanaha.

A) Caqabadaha iyo Fogeynta

- Fikradaha khaldan ee bulshada ay ka qabto dadka naafada ah ayaa sii xoojiyay takoorka, kuwaasoo sababay in marar badan aysan naafadu helin mudnaanta ay u qalmaan marka la dejinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed ee Dalka. Sidoo kale qoysas badan oo ay u joogaan dad naafo ah ma laha wacyigii iyo dhaqaalihii ay u baahnaayeen si ay u siiyaan taageero ku filan, taasoo keentay sii-jiritaanka faqriga iyo fogeynta ama dhibaatada ay naafadu la daalaa dhacayso. Si gaar ah, dadka naafada ah ee ku nool deegaannada baadiyaha ah, halkaas oo ay weli ku xooggan yihiin dhaqammada iyo caadooyinka xun-xun ee lidka ku ah dadka naafada ah, ayaa wajahaya fogeyn joogto ah. Arrintani waxay sababtay in dadka naafada ahi aysan si muuqata uga qayb-gelin nolol maalmeedka bulshada.

- Caqabadaha ugu waaweyn ee dadka naafada ah la daalaa dhacaan waxaa kamid ah helitaan la'aanta waxbarasho; iyadoo iskuullada badankoodu aysan u diyaarsaneyn jawi ay carruurta naafada ahi ay wax ku baran karaan. Sidoo kale, helitaanka adeegyada caafimaadka iyo kuwa kale ee asaasiga ah ayaa ah kuwo xaddidan, sababo la xiriira in xarumahaasi aysan ahayn kuwo si siman loo heli karo.

B) Saameynta Colaadaha iyo Musiibooyinka Rabbaaniga ah:

- Dagaalladii sokeeye iyo xasillooni darrada muddada dheer ka jiray Dalka ayaa si toos ah u saameeyay dadka naafada ah, iyadoo ay kororтay tirada dadka ku naafooba colaadaha. Isla markaana, burburka kaabayaasha adeegyada bulshada iyo baabi'itaanka

hay'adihii bixin jiray daryeelka bulshada ayaa hoos u dhigay fursadaha lagu heli karo adeegyada soo kabashada iyo qalabka lagu taageero dadka naafada ah.

- Masiibooyinka dabiiciga ah sida abaaraha iyo fatahaadaha ayaa sidoo kale si xad dhaaf ah u saameeyay dadka naafada ah. Inta badan, qorsheyaasha gurmadka deg-degga ah iyo daad-gureynta dadka ay dhibaatadu saameyso ma daboolaan baahiyaha gaarka ah ee dadka naafada ah, taasoo keentay in si aan sinnayn ay u saameeyso bulshada.

C) Dal-daloollada Hay'adeed iyo kuwa Sharci

- Inkastoo Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya uu dammaanad qaaday sinnaanta iyo mamnuucista takoorka, waxaa muddo dheer muuqday baahi weyn oo loo qabo sharciyo gaar ah oo si cad u nidaamiya xuquuqda dadka naafada ah. Iyadoo taas la'aanteed aysan dadka naafada ahi helin hannaan rasmi ah oo ay ku raadsadaan caddaalad, ilaalin iyo taageero sharciyeed.

D) Horumarka laga sameeyay Arrimaha Naafada

- Iyadoo ay jiraan caqabadahan soo-jireenka ah, Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay waayadan dambe ku tallaabsatay horumarro la taaban karo oo ku aaddan wax-ka-qabashada baahiyaha dadka naafada ah:
- **Dhisidda Hay'adda Naafada Qaranka:** Asaasidda Hay'addan waxay ahayd guul horumar leh. Hay'addani waxay u dooddaa xuquuqda dadka naafada ah, sidoo kale waxay ka shaqeysaa sidii loogu dari lahaa siyaasadaha iyo barnaamijyada Qaranka baahiyaha naafada, waxaa kale oo ay isku dubbariddaa dadaallada kor loogu qaadayo helitaanka adeegyada iyo agabka ku habboon baahiyahooda.

- **Horumar Sharci:** Dowladda Soomaaliya waxay soo saartay Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed taas oo ah guul weyn oo ku astaysan geeddisocodka horumarinta xuquuqda dadka naafada. Sharcigan wuxuu dammaanadqaad sharci siinayaa ilaalinta xuquuqda naafada, wuxuuna xaqiijinayaa ka-qeybgalka naafada ee dhammaan qeybaha bulshada, sidoo kale wuxuu waajibinayaa in dhammaan xarumaha adeegga bixiya, kuwa Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahayba ay noqodaan xarumo ay naafadu geli karaan oo ay ka heli karaan adeegyada ay bixiyaan.

- **Dammaanado Dastuuri ah:** Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya iyo Wax-ka-beddeladiisaba waxay xoojinayaan sinnaanta iyo ilaalinta dadka nugul. Qodobbadiisu waxay si cad u dammaanad-qaadayaan xuquuqda dadka nugul oo ay ka

mid yihiin dadka naafada ah, si ay qeyb uga noqdaan nolosha dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed.

E) Caqabadaha Jira:

Waxaa jira caqabado badan iyadoo la sameeyay horumarradaas:

- **Adeegyada Kaabayaasha:** Dhismayaasha guud, nidaamyada gaadiidka iyo isgaarsiinta ayaa weli ah kuwo aysan naafadu adeegsan karin, taasoo caqabad ku ah gudashada hawlmaal-meedkooda iyo helidda adeegyada asaasiga ah toona.
- **Ka-qeyb-gal Dhaqaale:** Fursadaha shaqaaleysiinta dadka naafadu ah waa kuwo aad u yar, sababo la xiriira tababar la'aan dhanka xirfadda ah iyo goobaha shaqada oo aan si siman loo helin. Kuwo badan oo iyaga ka mid ah waxay la noolyihiin faqri, waxayna noloshoodu ku tiirsantahay taageerada qoysaskooda iyo deeqda samafalayaasha.
- **Kor u qaadidda Wacyiga Bulshada:** dhaqamada qaar ee bulsho oo ku aaddan takooridda iyo faquuqa ayaa weli caqabad weyn ku ah is-dhex-galka dadka naafada ah iyo bulshada inteeda kale, gaar ahaan meelaha miyiga ah.
- **Waxbarashada iyo Hormarinta Xirfadaha:** Iskuullo badan ayaan haysan dhaqaalihii ay ku dabooli lahaayeen baahiyaha dadka naafada ah, taasoo keenta in carruur badan oo naafo ahi aysan iskuulladu diiwan-gelin sidaasna ay waxbarashada uga haraan.

Caqabadahan soo-jireenka ah ee weli taagan, waxay daaha ka rogayaan baahida degdegga ah ee loo qabo Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed. Siyaasaddan waxaa lagu duldhisay guulihii hay'adeed iyo sharci ee la gaaray, si looga gudbo caqabadihii aan soo tilmaanay ee naafada ka hortaagnaa ka-qeyb-galka adeegyada bulshada. Siyaasaddani waxay ujeeddadeedu tahay in la abuuro bulsho si dhammeystiran oo siman uga wada qeyb-qaadanaysa horumarka dhaqaale iyo bulsho ee Soomaaliya, si kor loogu qaado xuquuqda iyo karaamada dadka naafada ah.

1.2 Hordhac

Soomaaliya waxey horumar la taaban karo ka samaysay dhinaca sharciyada iyo maamulka ee arrimaha la xiriira dadka naafada ah. Dadaalladaas waxay muujinayaan muhiimadda dhisidda bulsho ka turjumaysa sinnaanta, isla markaana dhammaan qeybaheeda kala gadisan ay si siman uga qayb-qaataan nolosha bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed. In kastoo horumarro laga sameeyay dhinacyada qaarkood, haddana dadka naafada ah ee ku nool Soomaaliya waxay weli

la tacaalayaan caqabado isugu jira kuwo sharci, dhaqan-dhaqaale, adeeg la'aan iyo matalaad xumo.

Siyaasaddan Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waxay si cad u aqoonsan tahay caqabadahaasi, waxayna tilmaamaysaa jihada loo marayo xal u helkooda, iyadoo la adeegsanayo hannaan ku saleysan ka-qeybgelin dhab ah, sinnaanta fursadaha iyo xaqiijinta caddaaladda. Siyaasaddu waxay u taagan tahay ballanqaad Qaran oo dhisaya bulsho u taagan ixtiraamka, karaamada, iyo awoodsiinta dadka naafada ah.

Aragti iyo Farriin:

- **Aragti:** In la dhiso bulsho Soomaaliyeed oo si buuxda u aqbasha xuquuqda, karaamada, iyo kartida dadka naafada ah, una suurtagelisa inay si siman uga qeyb-qaataan dhammaan dhinacyada nolosha.
- **Farriin:** In dadka naafada ah loo suurta geliyo ka-qeybgal buuxa oo ku aaddan maamulka, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada, iyadoo loo marayo siyaasad loo dhanyahay, adeegyo la wada heli karo iyo ololeyaal wacyigelineed si loo abuuro dhaqan is-ixtiraam iyo is-aqbal ku dhisan.

A) Baaxadda Siyaasadda:

- Siyaasaddu waxay daboolaysaa dhammaan dhinacyada horumarka ee saameeya dadka naafada ah, gaar ahaan kuwa la xiriira maamulka, bulshada, iyo dhaqaalaha. Waxay si gaar ah diiradda u saareysaa arrimaha waxbarashada, shaqada, caafimaadka, helitaanka adeegyada asaasiga ah, iyo ka-qeybgalka arrimaha go'aan qaadashada. Siyaasaddu waxay khuseysaa dhammaan hay'adaha Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyadoo xoojinaysa iskaashiga u dhexeeya bulshada, hay'adaha Dowladda, bulshada rayidka ah, iyo saaxiibbada caalamiga ah.

B) Ujeeddooyinka Siyaasadda:

i. **Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqda:** Xoojinta hannaanka sharci si loo ilaaliyo karaamada, loo ciribtiro takoorka, loona xaqiijiyo cadaaladda isla markaasna kor loogu qaado xuquuqda naafada.

ii. **Xoojinta Helidda Adeegyada iyo Ka-qeyb-galka:** Horumarinta helitaanka adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada, shaqada, caafimaadka, iyo tababarrada

xirfadeed si kor loogu qaado ka-qeybgalka dadka naafada ah ee maamulka, hoggaanka, iyo go'aan-qaadashada.

iii. **Dhisidda Bulsho iyo Hannaan loo dhan yahay:** Kor-u-qaadidda iskaashiga u dhexeeya Dowladda, hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo bulshada rayidka ah si loo hirgeliyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda dadka naafada, lana abaabulo ololeyaal wacyigelineed oo wax ka beddela fikirka bulshada, una horseeda dhaqan is-afgarad iyo is-aqbal ku saleysan.

iv. **Xaqiijinta Hirgelinta Siyaasadda:** Diyaarinta habab lagu hirgelinayo, lagu kormeerayo, laguna qiimeynayo siyaasaddan, si loo joogteeyo isla-xisaabtan daahfuran, loona gaaro horumar joogto ah oo la taaban karo.

2. HABRAACA DIYAARINTA SIYAASADDA

Diyaarinta Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waxaa loo maray hannaan dhammaystiran oo laga wada qayb-qaatay, si loo xaqiijiyo in siyaasaddu si dhab ah u xalliso caqabadaha ay la kulmaan dadka naafada ahi, iyadoo la waafajinayo halbeegyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah iyo arrimaha hortabinta u leh Qaranka. Waxaa sidoo kale la adeegsaday cilmi-baaris, wadatashi lala yeeshay daneeyayaasha Siyaasadda iyo xog uruurin si loo diyaariyo siyaasad ku salaysan xaqiiqda kana tarjumaysa baahiyaha gaarka ah ee dadka naafada.

2.1 Cilmi-baaris

- Ujeeddada cilmi-baaristu waxay muhiiim u ahayd in la ogaado sharciyadda, daldaloollada iyo fursadaha jira. Waxaa daraasad lagu sameeyay nidaamka sharci ee Soomaaliya sida Dastuurka, Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed ee Sharci Lr. 29 ee 02/12/2024 iyo Sharci Lr. 134 ee soo baxay 31/12/2018, kaasoo lagu dhisay Hay'adda Naafada Qaranka, waxaana lagu ogaaday ka-go'naanshaha xukuumadda ee horumarinta xuquuqda dadka naafada ah, sidoo kale, waxaa diiradda la saaray meelaha u baahan xoojin sharci. Sidoo kale waxay daraasaddu dul-istaagtay Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Naafada (CRPD) oo ay Soomaaliya qeyb ka tahay iyo Ujeeddooyinka Horumarka Waare ee Qaramada Midoobay (SDGs), si Siyaasaddu ula jaanqaaddo heerarka caalamiga ah ee xuquuqda naafada. sidoo kale waxaa la darsay warbixinnada la xiriira dadka naafada ah taasoo keentay in la ogaado xaaladda dhaqan-dhaqaale ee naafada.

2.2 Wadatashiyada Daneeyayaasha Siyaasadda

- Waxaa wadatashiyo lala yeeshay daneeyayaasha sida dadka naafada ah si loo ogaado xaqiiqda dhabta ah ee ay la noolyihiin, sidoo kale, waxaa wadatashiyada qeybta ka ahaa hay'adaha Dowladda ee ay khuseyso gaar ahaan Wasaaradaha Waxbarashada, Caafimaadka, Hawlaha Guud, Shaqada & arrimaha bulshada iyo Cadaaladda si loo xoojiyo iskaashiga la xiriira arrimaha ka wada dhexeeya ee naafada la xiriira. Waxaa sidoo kale la-tashiyo lala yeeshay bulshada qeybaheeda kala duwan iyo saaxiibbada caalamka, si loo helo khibrada shaqo oo ku aaddan xuquuqda naafada.

2.4 Falanqeyn iyo Is-barbardhig

- Waxaa si gaar ah odorosid loogu sameeyay siyaasado dhawr ah oo la xiriira xuquuqda dadka naafada ah si looga faa'iidaysto meelaha ay ku xooggan yihiin, iyadoo la ilaalinayo xaaladdaha dadka naafada ah iyo awoodda Dowladda, iyadoo la waafajiynayo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Naafada iyo Ujeeddooyinka Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay.
- Habraacyadani waxay qeyb ka qaateen in siyaasaddu noqoto mid si sax ah uga tarjumaysa baahiyaha gaarka ah ee dadka Naafada Soomaaliyeed isla markaasna abuuraysa hindiseyaal lagu xalliyo dhibaatooyinka jira ee ragaadiyay dadka naafada ah Soomaaliyeed. Iyadoo laga faa'iidaysanayo natiijooyinkii wadatashiyada, cilmi-baarista iyo is-barbardhigyada, Siyaasaddu waxay abuuraysaa geeddi-socod lagu horumarinayo nolasha dadka naafada ah taasoo keenaysa lahaanshiiyo, isla-xisaabtan iyo saameyn muddo dheer ah isla markaasna ka dhigaysa siyaasaddu mid la dhaqan-gelin karo isbeddelna horseedda.

3. QEYBAHA SIYAASADDA

3.1. Qaab-dhismeedka Sharci iyo Dhaqan-gelinta Siyaasadda

Siyaasadda Qaran ee Naafada waxaa lagu duldhisay qaab-dhismeed sharci iyo mid maamul oo xooggan, Hay'adda Naafada Qaranka ayaa udub dhexaad u ah isla markaasna mas'uul ka ah dhaqan-gelinta Siyaasaddan. Waxayna warbixin joogto ah ka siinaysaa Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, Qaabdhismeedkani wuxuu dammaanad-qaadayaa istiraatiijiyad hoggaamineed oo iskudubbarida hay'adaha iyo u hoggaansamidda sharciyada Qaran iyo kuwa caalamiga ah, si loo horumariyo is-dhex-galka naafada ee bulshada iyo kor u qaadidda xuquuqdooda.

A) Hannaanka Sharci

I. Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya ayaa asaas u ah Siyaasaddan Qaran ee dadka Naafada Soomaaliyeed:

- Qodobka 27aad ee Wax-ka-beddelka Datuurka ee 2024, wuxuu Dowladda ku waajibinayaa inay ilaaliso kooxaha nugul sida dadka naafada ah isla markaana ay dammaanad-qaaddo in fursadaha bulshada dhexdeeda ah ay dadka naafada ahi u helaan si la mid ah bulshada inteeda kale.
- Qodobka 28aad wuxuu xoojinayaa xaqa waxbarashada, wuxuuna tilmaamayaa in loo sinnaado xaq waxbrashada, goobaha wax lagu bartana laga dhigo kuwo dadka naafada ah u suurta-gelinaya inay wax ku bartaan.
- Qodobka 43aad wuxuu si gaar ah uga hedlayaa helitaanka adeegyada, kaasoo ku waajibinaya xukuumaddu inay xarumaha Dowladda iyo adeegyada ay bixiyaanba ay ahaadaan kuwo ay naafadu adeegsan karaan, kana heli karaan baahiyahooda.
- Qodobbadan Dastuuriga ah waxay Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka awood u siinayaan inay ku garab istaagto Hay'adda Naafada kor u qaadidda is-dhexgalka dadka naafada ah iyo bulshada inteeda kale, isla markaasna loo suurageliyo inay ka faa'iidaystaan adeegyada ay bulshadu hesho.

II. Sharci Lr. 134 ee 31/12/2018, wuxuu dhisay Hay'adda Naafada Qaranka, wuxuuna awood u siiyay Sharcigu matalaadda naafada iyo isku-duwidda hawlaha iyo hindisayaashooda, halka Wasaaradda Qosyku ay tahay hay'adda u xilsaaran diyaarinta xeerarka, xeer-nidaamiyeyaasha iyo siyaasadaha la xiriira Naafada Soomaaliyeed. Sidoo kale, Hay'adda Naafada Qaranka, waxay iskudubbariddaa arrimaha naafada, kala duwan ee labada heer iyo Hay'adaha kale ee Dowladda ee la xiriira arrimaha naafada.

III. Wasaaraddu waxay diyaarisay Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaliyeed-Sharci Lr. 29 ee 02/12/2024 iyo Sharci Lr. 134 ee 31/12/2018, oo ilaalin buuxda iyo dammaanad-qaad siinaya dadka naafada ah. si ay u helaan xuquuqdooda la xiriirta helidda adeegyada caafimaadka, waxbarashada iyo fursadaha shaqaalaysiinta 5% shaqaalaha dowlada iyo shaqaalaha shirkadaha rayidka iyo matalaad siyaasadeed 5% dhamaan golayaasha dowlada heerarkooda kala duwan sida ku cad Sharciga Ilaalinta

Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed. Sidoo kale sharcigani wuxuu xoojinayaa in la meel-mariyo tallaabooyin looga hortagayo takoorka lagula kaca dadka naafada ah, isla markaasna farayaa in xarumaha bixiya adeegyada bulshada kuwa guud iyo kuwa gaarka ahba ay ahaadaan kuwo naafado ka faa'iidaysan karaan isla markaasna la adeegsan karo si siman.

IV. Soomaaliya waxay ku biirtay Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah (UN-CRPD), sida ku cad Sharci Lr. 11 ee soo baxay 20/06/2019, tallaabadaas oo Qaranka ku waajibinaysa in sharciyadeennu la jaan-qaadaan xeerarka caalamiga ah, kana hortagaan takoorka, una fududeeyaan helitaanka adeegyada si siman iyo in dadka naafada ahi ay qeyb ka noqdaan hawlaha bulshada looqabanayo. Sidoo kale, Siyaasaddu waxay la jaanqaadaysaa Ujeeddooyinka Horumarka Waara (SDGs), gaar ahaan kuwa diiradda saaraya dhimidda sinaan la'aanta iyo horumarinta ka wada qeybgalka horumarka.

B) Dhaqan-Galinta Siyaasadda

I. Hay'adda Naafada Qaranka ayaa mas'uulka ka ah fulinta Siyaasaddan, waxa ayna warbixin joogta ah ka siineysaa Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Hormarinta Xuquuqul Insaanka, Hay'addu waxay dejinaysaa Istiraatiijiyadaha iyo hawlaha hortabinta u-leh dadka naafada ah, waxayna hubinaysaa in dhammaan hawlaha xukuumaddu ay ahaadaan kuwo la jaanqaadaya ujeeddooyinka Siyasaaddan. Wasaaraddu waxay diyaarinaysaa oo ay dib-u-eegis ku samaynaysaa dhammaan siyaasadaha

la xiriira dadka naafada ah, waxayna hoggaaminaysaa iskaashiga iyo iskuduwidda arrimaha u dhaxeeya wasaaradaha ee labada heerba, sidoo kale waxay warbixin ka waydiinaysaa Hay'adda Naafada Qaranka hawlaha la xiriira arrimaha dadka naafada ah kuwaas oo fulintooda ay u xilsaarantahay Hay'ada Naafadu si loo helo isla xisaabtan daah-furan.

II. Hay'adda Naafada Qaranku, waxay si gaar ah u dhaqan-gelinaysaa hindisayaasha la xiriira dadka naafada ah, iyadoo ku shaqeynaysa korjoogtaynta Wasiirka Wasaaradda Qoyska. Waxay u qareemaysaa xuquuqda dadka naafada ah, waxay qaban-qaabinaysaa ololeyaasha wacyigelineed ee looga hortagayo faquuqa dadka naafada ah ee kajira bulshada dhexdeeda, waxayna iskaashi la

sameynaysaa dhammaan daneeyaasha arrimaha dadka naafada ah sida saaxiibbada caalamka si ay u helaan dadka naafada ahi taageero farsamo.

III. Ururrada u dhaq-dhaqaaqa arrimaha naafada iyo kuwa ay Madaxda ka yihiin Dadka Naafada ahi waxay qeyb ka yihiin dadaallada xukuumaddu kor ugu qaadayso in si gooni ah loo taageero, si loo xaqiijiyo helidda xuquuqddooda aasaasiga ah ee dadka naafada ah. Hay'adda Naafada Qaranka waxay ka shaqeynaysaa sidii ururradaasi loola shaqeyn lahaa si loo ogaado caqabadaha ay sida gaarka ah ula kulmaan si looga hawlgalo hannaankii lagu yareyn lahaa dhibaatooyinka goonida u ah bulshada inteeda nugul.

IV. Wasaaraddu waxay sidoo kale wadashaqeyn xooggan kala yeelanaysaa hirgelinta Siyaasaddan Hay'adaha Qaramda Midoobay, Ururrada Caalamiga ah ee aan Dowliga ahayn, si loo helo waaya-aragnimo farsamo iyo hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee la xiriira xaqiijinta xuquuqda dadka naafada ah.

V. Hay'addu waxay ka shaqeynaysaa sidii dhammaan sharciyada Dalku ula jaanqaadi lahaayeen Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah, iyadoo la kaashanaysa Hay'adaha kale ee Dowlada ee ku shaqada leh arrimahan si loo xaqiijiyo ka qeyb-galka dadka naafada ah ee arrimaha bulshada iyo in la helo adeegyada ay Dowladu bixiso. Sidoo kale wasaaraddu waxay soo saaraysaa hagayaal la xiriira horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo xarumaha adeegga guud iyo kuwa gaarka ah bixiya si'ay u noqdaan kuwo ay dadka naafad ah adeegsan karaan, si ciddii u hogaansami weyda tilmaamahaas ay umutaysato anshaxmarin iyo
in ay hesho hannaan caddaaladeed oo sharci ah cidii la kulanta tacaddi ku aaddan takoor lagula kacay qof naafa ah.

Xoojinta hannaanka sharci iyo midka maamul oo ay udub-dhexaad u yihiin Wasaaradda Qoyska iyo Hay'adda Naafada Qaranka waxay xaqiijinaysaa in Siyaasaddan loo hirgeliyo si wax-ku-ool ah.

3.2 Xaqiijinta Ka qeybgal dhammeystiran

• Helidda u-dhammaansho iyo ka qeyb-gal buuxa waa labo mabda' oo asaas u ah in la helo fursado isku dheelli tiran iyo ka-qeybgal bulsho dhammeystiran. Iyadoo laga duulayo caqabadaha ku hor gudban helidda adeegyadan sida kuwa kaabayaasha dhaqaalaha iyo marin u helidda dhismayaasha oo aan ahayn kuwo ay adeegsan karaan naafada iyo adeegyada kale ee bulshada sida waxbarashada, shaqada, helidda xogta iyo daryeelka caafimaadka oo ah kuwo aysan naafadu si sahlan uga faa'iidaysan karin, ayaa siyaasaddani si gaar ah diiradda u saareysaa awoodsiinta dadka naafada ah si ay si buuxda ugaga qeybqaataan ugana faa'iidaystaan dhammaan adeegyada kala duwan ee bulshada si la mid ah dadka kale.

A) Kaabayaal Dhismo oo la Adeegsan Karo

• Kaabayaasha dhisme ee la adeegsan karo waa tiir asaas u ah siyaasaddan, wuxuuna awood u siinaya dadka naafada ah inay si buuxda uga qeyb-qaataan arrimaha dhaqaale, horumarka bulshada iyo midka siyaasadeed. Siyaasaddu waxay mudnaanta siinaysaa kaabayaasha dhismo inay noqdaan kuwo ay dadka naafada ahi adeegsan karaan, iyadoo la raacayo tallaabooyinka soo socda:

I. Halbeegyo iyo Xeerar Maamul

• Wasaaradda Hawlaha Guud waa inay soo saartaa halbeegyo iyo xeerar maamul oo hagaya dhismayaasha cusub ee Danta-guud iyo kaabayaasha adeegyada bulshada bixiya, sida albaabbada, jaranjarooyinka, wiishashka meelaha looga baahan yahay, marinnada naafadu adeegsato, boorar ay ku qorantahay farta indhoolayaasha Baraylka dhismayaasha gudahooda, musqulo ay adeegsan karaan, iyadoo lala kaashanayo Hay'adda Naafada Qaranka iyo Wasaaradda Qoyska.

II. Dib-u-habeynta Kaabayaasha Dhisme ee Jira

• Waxaa mudnaanta iyo hortabinta la siinayaa dib-u-qaabeynta xarumaha waxbarashada, caafimaadka iyo dhismayaasha Dawladda, si loo xalliyo caqabadaha naafadu ku qabaan kaabayaashaas, loogana dhigo goobo ay adeegsan karaan.

III. Gaadiidka iyo Socodka

Siyaasaddani waxay hiigsanaysaa mustaqbalka in adeegyada gaadiidka dadweynaha ay yeeshaan astaamo taageeraya dadka naafada ah sida in gaadiidka loo sameeyo qaab ay ku kori karaan naafadu, kuraas gaar ah oo ay fariistaan, qalab cod iyo muuqaalba bixinaya oo dadka naafada ahi adeegsan karaan. Sidoo kale in waddooyinka dadku ku lugeeyaan loo qaabeeyo hab u sahlaya iney dadka naafada ahi adeegsadaan.

IV. Ka-qebgalka iyo iskaashiga bulshada

Hay'adaha iyo shaqsiyaadka sameeya arrimaha Naqshadeeynta, injineerrada dhismaha iyo shirkadaha wax dhisa waa inay qeyb ka noqdaan fulinta Hagayaasha Kaabayaasha Dhismaha ee lawada adeegsan karo, iyadoo lagala tashanayo Wasaaradda Qoyska iyo Xuquul Insaanka iyo Hay'adda Naafada Qaranka ee u idman arrimaha dadka naafada ah.

B) Isgaarsiin lawada Adeegsan karo

Hirgalinta isgaarsiin lawada adeegsan karo waxay dadka naafada ah u suurtagalinaysaa in si siman ay uwada helaan xogaha iyo macluumaadka ay u wada baahanyihiin, taasoo xaqiijinaysa in dadka naafada ahi ay si dhammeystiran qeyb uga ahaadaan nolosha bulshada.

Siyaasaddani waxay xoojinaysaa ballaarinta helidda qalab teknooloji oo caawinaya naafada sida qalabka wax akhriya, qalabka farta (Braille), sameecadaha maqalka, nidaamyada codka qoraalka u roga. Waa in Websiteyada xukuumadda iyo xiriirka guud ay ahaadaan kuwo laga wada faa'iidaysan karo. Hay'adaha isgaarsiinta bixiyo iyo bulshadaba waa in karaankooda kor loo qaadaa si ay qeyb uga noqdaan helidda adeeg isgaarsiineed oo la wada adeegsan karo lagana faa'iidaysan karo. Teknoolojiyada waa in laga faa'iidaystaa sida barnaamijyada moobilka iyo xalalka ku shaqeeya AI-da waxay xoojinayaa helitaanka isgaarsiin loo dhan yahay.

C) Istiraatiijiyadaha Dijitaalka ah ee loo dhanyahay

- Hirgelinta dijitaal loo dhan yahay oo la wada adeegsan karo, waxay ka saacidaysaa naafada inay helaan waxbarasho, shaqo iyo adeegyada guud. Qalab teknoolojiyadeed oo la heli karo iyo adeeg internet ah oo ay naafadu isticmaali karto ayaa ah kuwo mudnaanta kowaad leh.

- Waa in la sameeyo barnaamijyo tababar si kor loogu qaado aqoonta naafada ee la xiriirta dijitaalka. Qalabka teknoolojiyadeed ee wax caawiya sida qalabka tooska wax u tarjuma, kuwa wax haga ayaa si weyn uga qeyb noqonaya helitaanka dijitaal loo dhan yahay.

- Siyaasadda Naafada Qaranku waxay abuuraysaa jawi ay dadka naafada ahi ugu dhex maraan bulshooyinkooda si badbaado iyo madaxbannaani leh, waxayna xoojinaysaa helidda cadaalad iyo wada noolaansho bulsho, iyo hubinta in dadka naafada ahi ay awood u yeeshaan in ay ku noolaadaan nolol buuxda oo ay qayb ka noqdaan horumarinta Qaranka.

3.3 Awoodsiin Dhaqaale

• Awoodsiinta dhaqaale waa in loo qaabeeyaa hab yaraynaya ku tiirsanaanta naafada ay ku tiirsantahay dadka kale, isla markaasna xoojinaya madaxbannaanidooda iyo inay noqdaan kuwo ku filan nolashooda caadiga ah, kana qeby-qaata horumarka Dalka. Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa abuurista fursado shaqaaleysiin, horumarin xirfadeed iyo fursado ganacsi, iyadoo abbaaraysa yareynta caqabadaha joogtada ah ee naafada ka xaddidaya inay qeyb ka ahaadaan dhaqaalaha Dalka.

A) Horumarin Xirfadeed

- Xarumaha takhasusiga ah ee tababarka xirfadeed ee naafada waa in lagu diyaariyaa qalab iyo teknoolojiyada lagama maarmaanka u ah daboolidda baahiyaha kala duwan ee naafada, sida barnaamijyo saacidaya naafada aragga la', kuwa maqalka la’ ama qalab aan u baahnayn in gacmaha lagu adeegsado oo loogu talagalay naafada dhaqdhaqaaqoodu xaddidan yahay. Xarumahan tababar waa inay bixiyaan tababarro kala duwan sida faryaamada, harqaanka, wax beerista, teknoolojiyada iyo isgaarsiinta taasoo u suura-gelinaysa naafada inay bartaan qeybo badan oo xirfado ah ayna ka heli karaan kuwo ku habboon awoodda iyo rabitaanka naafada.

- Barnaamijyada tababar waxay xoogga saarayaan kuwo baahida badan loo qabo sida tamarta, teknoolojiyada iyo hal-abuurrada farshaxanka kuwaasoo abuuraya fursado shaqo oo dabacsan guryahana looga soo shaqeyn karo oo aan u baahnayn in goobta shaqada la xaadiro. Iskaashiga lala yeelanayo shirkadaha gaarka loo leeyahay in

ururrada aan Dowliga ahayn waxay dammaanadqaadayaan in barnaamijyadan ay xiriir la leeyihiin suuqyada shaqada. Sidoo kale tababarradan waxaa la soconaya tababarrada la xiriira xirfadaha noloshada sida xirfadda xiriirka, maareynta waqtiga, wada-shaqeynta kooxaha iyo ciribtirka akhris-qoraal la'aanta, waana in macallimiinta bixinaysa ay u diyaarsanyihiin waxbaridda dadka naafada ah.

B) Hababka Shaqo ee loo Dhanyahay

- Siyaasaddu waxay soo jeedinaysaa hirgelinta hababka shaqo ee loo dhanyahay sida inay waajib tahay in la ilaaliyo qoondada naafada ee shaqo kasta oo Dowladeed ama gaar loo leeyahay si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay matalaad ku yeeshaan dadaallada shaqo-bixinta. Waxay Wasaaradda iyo Hay'adda Naafadaba sameynayaan kormeerro joogta ah si loo hubiyo in qoondada naafada la ilaaliyay, shirkadaha ama hay'adaha ilaaliyana waxay heli doonaan dhiirrigelin iyo in loo qiro garab istaaggooda naafada.

- Loo-shaqeeyayaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay hirgeliyaan hababka shaqaaleysiinta loo dhanyahay, iyagoo helaya haddii ay hirgeliyaan tixgalin gaar ah sida abaalmarinno maaddi ah iyo macnawi ah. Waxay Hay'adda Naafada qabaneysaa ololayaal Qaran oo kor loogu qaadayo khibradaha loo-shaqeeyayaasha ee la xiriira faa'iidooyinka ay leeyihiin shaqaaleysiinta dadka naafada ah sida hal-abuurka loo-shaqeeyaha oo kobca iyo goobta shaqada oo kala duwanaan waxtar leh yeelata.

C) Deegaan Shaqo oo ku habboon Naafada

- Waxaa la dhaqan-gelinayaa heerarka deegaanka shaqo ee naafada ku habboon, taasoo waajibinaysa in la helo waddooyinka naafada, wiishash marka ay lagamamaarmaan tahay iyo musqulo ay adeegsan karaan naafado. Sidoo kala shuruudo shaqo oo dabacsan ayaa loo diyaarinayaa naafada sida inay guryahooda kasoo shaqeyn karaan, iyo in loo oggolaado inay waqti kooban shaqeeyaan si loo ilaaliyo baahiyaha kala duwan ee naafada. Deeqaha loogu talagalay naafada waxay kaalmaynayaan shaqo-bixiyayaasha si ay u daboolaan kharashaadka hagaajinta goobta shaqada sida rakibidda ama sameynta qalabka naafada iyo qaabeynta xafiisyada si ay u noqodaan kuwo ay ku shaqeyn karaan.

D) Ganacsiga iyo Ururrada Bulshada

- Waa in la siiyo naafada taageero dhaqaale iyadoo loo marayo barnaamijyada deeqaha iyo maalgelinta yaryar ee loogu talagalay naafada iyo in la siiyo deymo (qardul-xasan). Iskaashiga lala yeelanayo bankiyada shirkadaha lacagta waxay dammaanad-qaadaysaa deyn-bixin dhammeystiran iyo inaan caqabadaha naafada ka haysta helidda raasamaal la yareeyo. Barnaamijyada dhisidda karaanka waxaa ka mid noqonaya kulamo-shaqo oo lagu baranayo ganacsiga sida qorsheynta, suuq-geynta, maareynta maaliyadda iyo ballaarinta hawlaha ganacsiga. Waa in la hirgeliyo barnaamijiyo hagid ah oo kulminaya ganacsatada naafada ah iyo kuwa kale ee leh khibrad ganacsi oo dheeraad ah, si ay tilmaamo iyo hagitaanno u siiyaan uguna tilmaaman meelaha fursada badani ay ka jiraan.

- Xukuumaddu waxay dhiirrigelinaysaa hay'adaha bulshada ee shaqaaleysiiya dadka naafada ah ama bixiya adeegga naafada, iyadoo dhiirrigelinta ay heli doonaan kuwa mudnaanta siiya adeegyada saameynta togan ku leh bulshada. Dadaallada lagu abuurayo suuq loo dhanyahay waxaa ka mid ah, qabanqaabinta bandhigyada ganacsi, kulammada xiriirka ganacsatada, fagaarayaasha ganacsiga danabaysan, iyadoo si gaar ah fursadaha loo siinayo shirkadaha adeegyada naafada bixiyo iyo kuwa shaqaaleysiiya, waxaana arrintaas lagala kaashanayaa rugta ganacsiga.

E) Tallaabooyinka Dheeraadka ah ee Awoodsiinta Dhaqaale

- Ka-qaybgalka dadka naafada ah ee dhaqaalaha aan rasmiga ahayn waa arrin muhiim ah oo u baahan in la aqoonsado lagana dhigo mid rasmi ah. Si loo xoojiyo awooddooda dhaqaale, waxaa muhiim ah in la siiyo tababarro gaar ah iyo agab taageera oo u fududeynaya inay ku horumariyaan xirfadohooda, sida farsamada gacanta, beeraha, iyo ganacsiyada yaryar. Intaa waxaa dheer, barnaamijyo gaar ah oo lagu taageerayo shaqaaleysiinta ayaa lagu xiri doonaa dadka naafada ah shaqo-bixiyeyaasha, si loo hubiyo inay helaan shaqooyin ku habboon awoodahooda iyo baahidooda.

- Hay’addu waxay hirgelinaysaa shabakado ay ku mideysan yihiin dadka naafada ah ee shaqeeya, si ay ugu wadaagaan waayo-aragnimo iyo talooyin ku saabsan shaqada. Sidoo kale, waxay sameynaysaa nidaamyo kormeer oo loo adeegsanayo dabagalka xaaladda shaqaaleysiinta iyo qiimeynta waxtarka barnaamijyada awoodsiinta dhaqaale. Wada-

tashiyo joogto ah oo lagu ogaanayo caqabadaha cusub ee soo baxa ayay qabanaysaa si loo xalliyo loona horumariyo ka-qaybgalka dadka naafada ah ee goobaha shaqada.

- Tallaabooyinkan aan soo xusnay waxay ujeedadoodu tahay in la abuuro bulsho ay dadka naafada ah ku gaaraan madaxbannaani dhaqaale, kagana qaybqaataan kobaca dhaqaalaha ee Dalka, isla markaana helaan fursado siman oo shaqo iyo ganacsi. Markii caqabadaha laga gudbo lana xoojiyo ka-qeybgalka naafada ee arrimaha bulshada, Soomaaliya waxay fursad u heli kartaa inay kobciso awoodda dadkeeda oo dhan, taasoo horseedi karta horumar waara iyo midnimo bulsho oo xoog badan.

3.4 Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada

- Caafimaadka iyo taageerada bulshada waa muhiimadda koowaad ee nolosha dadka naafada ah. Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waxay xoogga saartaa in dadka naafada ah ay helaan daryeel caafimaad, qalab ka kaalmeynaya maareynta nolol maalmeedkooda iyo taageero bulsho oo adag, si loo daboolo baahiyahooda gaarka ah, iyadoo la tix-gelinayo duruufaha dalkeenna oo ka soo kabanaya colaado muddo dheer soo ragaadiyay.

A) Adeegyo Daryeel Caafimaad oo loo Dhanyahay

- Tababar gaar ah ayay Hay'addu bixineysaa iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Caafimaadka u diyaarinaysaa bixiyeyaasha adeegga caafimaadka si ay u fahmaan una daboolaan baahiyaha dadka naafada ah. Barnaamijyadan heerka Qaran ah ayaa diiradda saaraya sidii shaqaalaha caafimaadka loogu tababari lahaa wada-xiriirka ixtiraamka ku dhisan, bixinta adeegyo caafimaad oo loo dhan yahay, iyo fahamka baahiyaha gaarka ah ee dadka qaba naafo jireed, dareen, ama mid maskaxeed. Sidoo kale, tababarradan waxaa ku jiraya mowduucyo ka hadlaya dhaqanka, si loo yareeyo cunsuriyadda iyo qalad-fahamka ku saabsan dadka naafada ah ee bulshada Soomaaliyeed.

- Waxaa la xoojin doonaa adeegyada takhasusiga ah iyadoo laga abuuraya xarumaha caafimaadka Dowladda ee hadda jira qeybo gaar ah oo naafada loogu talagalay. qeybahani waxay bixinayaan daaweynta caadiga iyo midda maskaxeed ee naafada, waxaa sidoo kale la abuurayaa barnaamijyo lagu taageerayo naafada.

- Siyaasaddu waxay mudnaanta siinaysaa in xarumaha caafimaad ay noqdaan kuwo ay naafadu heli karto si fududna uga faa'iidaysan karto, iyadoo loo sameynayo waddooyin naafadu adeegsan karto, wiishash markii ay lagamamaarmaan noqoto, iyo musqulo ay isticmaali karaan naafada qeybaheeda kala duwan, kuwa indhaha, gacmaha ama lugaha naafada ka ah. Sidoo kale waa in xarumahaas laga helaa turjumaannada naafada, sida luqadda suul-dhabaaleynta iyo Baraaylka si naafadu uga faa'iidaysato adeegga daryeelka caafimaad.

B) Agabyada Caafimaadka iyo Qalabka wax Caawiya

- Si loo dammaanad-qaado helidda kharashka qalabka naafada kaalmeeya, xukuumaddu waxay taageero dhaqaale ku bixinaysaa helidda qalabka asaasiga ah sida kuraasta naafada lagu riixo, samaacadaha dadka maqalka la', xubnaha sanaaciga ah, ulaha dadka araga la' iyo qalabka taageera ama toosiya xubnaha jirka si gaar ah lafaha, kala-goysyada iyo muruqaha jirka loona yaqaanno (Orthotic braces). Waxayna Hay'adda Naafada sameyn doontaa xarumaha laga helo qalabkaas iyadoo kaashaneysa Wasaaradda Qoyska, si loo xaqiijiyo inay si siman dadka naafada ah u gaartay.

- Dawladdu waxay dhiirrigelinaysaa wax-soosaarka gudaha ee qalabkan si qiima macquul ah loogu helo iyadoo waliba laga sameynayo qalab tayo leh. Iskaashi lala sameeyo Jaamacadaha iyo Xarumaha Cilmi-baarista ayaa qeyb ka noqon doona hal-abuurro lagu xallinayo caqabada naafada ka haysta isku-socodka iyo wada xiriirka. Hay'addu waxay sameynaysaa ololayaal wacygi-gelineed oo ay ka faa'iidaysanayaan naafada iyo qoysaskooda si loo baro adeegsiga qalabka kaalmeeya naafada, sidoo kale waxaa adeeg-bixiyayaasha caafimaadka lagu tababarayaa qiimaynta baahiyaha naafada iyo inay kula taliyaan hadba qalabka ku habboon.

C) Barnaamijyada Gargaarka Bulshada (Social Safety Nets)

- Barnaamijyada hawlgabka iyo kaalmada dhaqaale ee loogu talagalay dadka naafada ah ayaa la ballaarinayaa si ay u gaaraan dad badan, iyadoo la tixgelinayo kharashaadka nolosha. Kaalmada dhaqaale ee ku saleysan baahiyaha waxay daboolaysaa kharashaadka adeegyada muhiimka u ah naafada sida hoyga, gaadi-idka iyo waxbarashada. Sidoo kale, daryeel-bixiyeyaasha taageera dadka naafada ah ayaa lagu caawin doonaa dhaqaale iyo tababarro gaar ah si loo fududeeyo hawlahooda.

- Tallaabooyinka taageero ee xaaladaha musiibooyinka rabbaaniga ah waa inay qeyb ka ahaadaan naafadu. Qorshayaasha xaaladaha degdegga ah waxay ka qeyb-qaadanayaan daadgureynta iyo adeegyada caafimaad ee xaaladaha degdegga ah, waxaana arrintan lala kaashanayaa ururrada bani'aadannimada ka shaqeeya si naafadu ay uga faa'iidaysato dadaallada gargaarka ee xaaladaha degdegga ah.

- Waxaa la dhiirrigelinayaa barnaamiyada gargaarka bulshada ee leh shaqaaleysiin loo dhan yahay oo ay naafadu qeyb ka yihiin, iyagoo si gaar ah uga faa'iidaysan doona barnaamijyada gargaarka lacageed ee ku shardiyaysan tababarrada xirfadeed ama ka qeybgalka adeegyada bushladeed. Barnaamijyadan waxay awoodsiinayaan dadka naafada ah iyagoo siinaya naafada amni dhaqaale, horumarin xirfadeed iyo ka qeybgal bulshadeed.

- Ballaarinta adeegyada daryeelkan caafimaad, horumarinta iyo fududeynta helitaanka qalabka naafada kaalmeeya, iyo xoojinta barnaamijyada gargaarka bulshada, waxay Soomaaliya u suuragelinayaan inay nidaam dhameystiran oo taageeraya caafimaadka iyo adkeysiga dhaqaale ee dadka naafada ah. Tallaabooyinkan waxay xoojinaysaa tayada nolasha naafada, hoosna u dhigaysaa nuglaantooda waxayna dammaanad-qaadayaan inuusan qofna ka harin geeddisocodka horumarka Dalka.

3.5 Wacyigelin iyo Waxbarid

- Waxbarashada iyo wacyigelinta waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah Siyaasaddan, waxayna lagama-maarmaan u yihiin ciribtirka cunsuriyadda, awoodsiinta dadka naafada ah, iyo dhisidda bulsho loo wada dhan yahay. Dadaalladan waxay diiradda saarayaan horumarinta fursadaha waxbarasho iyo kobcinta fahamka bulshada, si loo xaqiijiyo in xuquuqda iyo ka-qeybgalka dadka naafada ah la ixtiraamo.

A) Qaab-dhismeed Waxbarasho oo loo Dhanyahay

- Hababka waxbarashada ee loo dhan yahay ayaa mudnaan siinaya taageerada gaarka ah ee ardayda naafada ah. Qorsheyaal waxbarasho oo gaar ah ayay Wasaaradda Waxbarashadu sameynaysaa iyadoo la kaashanaysa Hay'addda Naafada Qaranka, si wax looga qabto baahiyaha gaarka ah ardayda naafada ah, iyadoo wax laga beddelayo

hababka waxbaridda iyo xeeladaha qiimeynta. Waxaa la bixin doonaa qalabka kaalmeeya naafada, sida buugaagta Braille-ka, agabka maqalka, agabka taabashada ku shaqeeya, iyo agabka dijitaalka ah ee ku habboon tiknoolajiyada naafada. Tilmaamaha manhajka dabacsan ee loogu talagalay naafada ayaa hagaya dariiqooyin waxbarasho oo kala duwan, taasoo xaqiijinaysa guul waxbarasho oo loo dhanyahay.

- Tababarka macallimiinta iyo dhisidda karaankooda waa asaaska hirgelinta waxbarashada loo wada dhan yahay, sidaas darteed waxaa macallimiinta iyo maamulayaasha la siinayaa tababar diiradda saaraya kobcinta iyo kor u qaadidda wacyiga naafada, istaraatiijiyadaha waxbariddooda, iyo hab-raacyo loogu talagalay ardayda naafada ah. Barnaamijyo shahaadooyin takhasus ah bixiya ayay macallimiintu ka baranayaan xirfado kala duwan sida luqadda suuldhabaaleynta (tilmaamaha), Braille-ka, iyo adeegsiga tiknoolojiyada naafada taageerta.

- Siyaasaddu waxay dhiirrigelintaysaa abuuridda deegaan waxbarasho oo loo dhan yahay sida in dugsiyada lagu qalabeeyo jaranjarooyin gaar ah, waddooyin naafadu adeegsato, iyo musqulo ku habboon dadka naafada ah. Siyaasaddu Waxay higsanaysaa in fasallada lagu xoojiyo qalab naafada taageera sida nidaamyada maqalka, software-ka hadalka u beddela qoraal, iyo kuraasta loogu talagalay naafada. Fursadaha waxbarashada sare ayaa la ballaarin doonaa iyadoo la siinayo ardayda naafada ah deeqo waxbarasho iyo kaalmo dhaqaale.

B) Ololayaal Wacyigelineed

- Ololayaasha Qaran ayaa lagu wacyigelinayaa bulshada iyadoo ay hoggaamin doonta Hay’adda Naafada Qaranka si loola dagaallamo fikradaha khaldan ee ku saabsan naafada, iyadoo la muujinayo in naafo-nimadu aysan ceeb ahayn. Ololahani wuxuu isticmaalayaa ereyo aan xanaf lahayn si loo dhiirrigeliyo isixtiraamka iyo is-aqbalidda. Culimada iyo hoggaamiyeyaasha kale ee bulshada ayaa door muhiim ah ka qaadanaya, iyagoo farriimaha ka-mid-noqoshada bulshada ee naafada ku daraya khudbadaha ay jeedinayaan iyo munaasabadaha ay qabanayaan, si ay saameyn togan ugu yeeshaan aragtida bulshada ee ku aaddan naafada. Sidoo kale, odayaasha dhaqanka ayaa loo tababarayaa inay u doodaan xuquuqda dadka naafada ah oo ay qayb ka noqdaan go'aamada heer degaan.

- Warbaahinta ayaa la adeegsanayaa si loo muujiyo guulaha ay gaareen dadka naafada ah, iyadoo loo marayo filimaan dokumentari ah, warbixinno warbaahineed, iyo nuxur baraha bulshada lagu baahiyo. Ololayaasha wacyigelinta ayaa xoogga saaraya soo-bandhigidda tusaalooyin dad naafo ah oo guuleystay, si loo dhiirrigeliyo bulshada loona beddelo aragtida khaldan ee laga qabo naafada. Sidoo kale, madadaalada loo wada dhanyahay, sida filimmada iyo tiyaatarka, ayaa soo bandhigaya dadka naafada ah, iyagoo ku jira doorar wanaagsan. Dugsiyada ayaa qabanqaabinaya barnaamijyo wacyigelineed sida maalmo gaar ah oo lagu barayo ardayda muhiimadda naxariista iyo ka-qeyb-galka naafada ee arrimaha bulshada.

C) Ka-qeyb-gelin Bulsho

- Hal-abuurrada iyo hindisayaasha kor-u-qaadidda aqoonta waalidiinta waxay agaasimayaan kulan-hawleedyo iyo kooxo taageero si qoysaska looga kaalmeeyo fahmanka iyo garab istaagga carruurta naafada ah. Barnaamijyada noocan ah waxay daweynayaan afkaarta khaldan ee laga qabo naafada, waxayna kobcinayaan aragtiyada wanaagsan ee ku aaddan naafada. Taageerada shacabka waxay u suuragelinaysaa ururrada bulshada iyo ururrada dadka naafada ah inay hoggaamiyaan hawlaha wacyigelinta bulshada ee heer deegaan.

D) Adeegsiga Teknoolojiyada ee Wacyigelinta iyo Waxbaridda

- Tiknoolojiyada casriga ah ayaa ka caawinaysa ardayda naafada ah inay wax ku bartaan online-ka iyadoo la adeegsanayo barnaamijyo loo fududeeyay naafada. Barnaamiyada moobilka iyo qalabka dijitalka ah ayaa waxbarashada ka dhigaya mid xiiso leh oo firfircoon. Sidoo kale, baraha bulshada ayaa loo adeegsanayaa in lagu faafiyo wacyigelin, loogana sheekeysto guulaha naafada, laguna qabto aqoon-is-weydaarsiyo. Tiknoolojiyadu waxay waxbarashada iyo wacyigelinta gaarsiinaysaa meelo fog fog.

- Hirgelinta qaab-dhismeedka waxbarashada loo wada dhan yahay iyo ololayaasha wacyigelinta ayaa horseedaya bulsho fahamsan, naxariista, oo cid kasta ay ka qaybqaadato. Dugsiyada ayaa loo diyaarinayaa inay taageeraan ardayda naafada ah, halka warbaahinta iyo wada-shaqaynta bulshadu ay beddelayso aragtida bulshada ee ku aaddan naafada. Dadaalladan waxay xaqiijinayaan in qof walba, iyadoon loo eegin awoodda uu leeyahay, uu fursad u helo inuu wax barto, horumaro, oo uu ka qaybqaato horumarka Dalka.

3.6 Matalaad iyo Ka-qeyb-gal Siyaasadeed

Ka-qaybgalka siyaasadda iyo matalaadda ayaa lama huraan u ah xaqiijinta in dadka naafada ahi ay cod ku yeeshaan maamulka iyo siyaasad-dejinta. Siyaasadda Naafada Qaranku waxey qeexaysaa tillaabooyin dhammaystiran si kor loogu qaado ka mid ahaanshahooda hannaanka siyaasadda, go'aan-qaadashada, iyo doorarka hoggaamineed ee Dalka.

A) Matalaad Siyaasadeed

- Qoondooyinka loogu talo-galay dadka naafada ah waxaa lagu qeexay Qodobka 7aad faqraddiisa 3aad ee Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyed, Sharci Lr. 29 ee soo baxay 02/12/2024, kaasoo dadka naafada ah u oggolaanaya 5% (boqolkiiba shan) dhammaan goleyaasha Dawladda heer federaal iyo heer Dowlad goboleed, Gobolka Banaadir goleyaasha dawladaha hoose, Agaasimeyaasha Wasaaradaha iyo Guddiyada Madaxabannaan, Sidoo kale, qoondoyinkan ayaa lagu dabaqayaa xilalka fulinta iyo latalinta ee wasaaradaha iyo hay'adaha Dowladda, si ay uga qeyb-qaataan go'aan-qaadashada. Nidaamyada kormeerka iyo warbixinta ayaa loo adeegsanayaa hubinta in qoondoyinkan in si buuxda loo fuliyo.

- Barnaamijyada horumarinta hoggaaminta ayaa loo sameynayaa si dadka naafada ah loogu tababaro xirfadaha fagaare ka-hadalka, falanqaynta siyaasadda, wadaxaajoodka, iyo qorsheynta istiraatijiyadeed. Iskaashiyo lala yeelanayo jaamacadaha, ururrada aan dowliga ahayn (NGOs), iyo hay’adaha caalamiga ah ayaa lagu siinayaa naafada deeqo waxbarasho iyo barnaamijyo latalin, si loo soo saaro jiil cusub oo hoggaamiyayaal ah oo ka tirsan dadka naafada ah. Soobandhigidda sheekooyinka guusha hoggaamiyeyaashan waxay burburinaysaa fikradaha khaldan isla markaana dhiirrigelinaysaa fikradaha togan.

- Xisbiyada siyaasadeed ayaa lagu dhiirrigelinayaa inay dadka naafada ah ku soo daraan liisaska musharrixiinta iyo jagooyinka hoggaanka. Abaalmarinno maaddi iyo macnawi ah ayaa la siinayaa xisbiyada si firfircoon u horumariya siyaasado iyo qorshayaal loo wada dhan yahay, si loo hubiyo in aragtida iyo baahiyaha dadka naafada ah lagu daro ajendayaasha siyaasadeed.

B) Codbixin la Wada Heli Karo

- Goobaha codbixinta waa in loo diyaariyaa si ay dadka naafada ah u codeyn karaan si madaxbannaan. Goobahaas waa in lagu rakibaa jaranjarooyin, waddooyinka naafada, iyo qalab codbixin oo ku habboon baahiyahooda. Sidoo kale, qalabka sida muraayadaha wax weyneeya iyo warqadaha Braille-ka waa in laga helaa intii suuragal ah, sidoo kale waa in shaqaalaha doorashada loo tababaraa inay si ixtiraam leh u caawiyaan dadka naafada ah inta ay codeynayaan.

- Habraacyada codbixinta waa inay ku jiraan habab kale sida in lagu soo codeeyo boosto, sanduuqyada wareega si dadka naafada ah ee aan tagi karin goobta codbixinta loogu suurageliyo inay codeeyaan. Sidoo kale waxay Siyaasaddu hiigsanaysaa in la adeegsado qalabka codeynta danabaysan ee la jaanqaadaya teknoolojiyada naafada kaalmeysa sida shaashadda aragga qoraalka weyneeysa iwm.

- Ololayaasha wacyigelinta codbixiyayaasha waxay xoogga saarayaan in naafada la baro xuquuqdooda doorashada iyo hannaanka codbixinta. Ololayaashan waxaa loo adeegsanayaa qalab u suuragelinaya naafada inay qeyb ka noqdaan codbixinta sida warqadaha farta waaweyn lagu qoray, qalabka codka bixiya iyo muuqaallo luqadda tilmaamanta ku baxaya, lagu fahmayo.

C) Madallada U-qareemidda

- Xoojinta Ururrada Dadka Naafada ah waa lama huraan si loo helo siyaasado waxku-ool ah. Taageerada dhaqaale iyo farsamo ee ay helayaan ururrada waxay awood u siinaysaa inay si wanaagsan u difaacaan xuquuqda dadka naafada ah oo ay saameyn ku yeeshaan go'aannada siyaasadeed. Sidoo kale, Hay'adda Naafada Qaranka waxay hirgelinaysaa nidaamyo wadatashi oo rasmi ah si loo xaqiijiyo in ururradani ay qayb ka noqdaan diyaarinta iyo dib-u-eegista siyaasadaha la xiriira dadka naafada ah.

- Kor-u-qaadista ka-qaybgalka siyaasadeed iyo metelaadda dadka naafada ah waxay Soomaaliya u suurtagelinaysaa inay dadkaas ka dhigto kuwa door muuqda ku leh dejinta siyaasadaha saameeya noloshooda. Tallaabooyinkan waxay horseedayaan helitaanka bulsho loo wada dhan yahay oo dimoqraadi ah, halkaas oo maamulka uu ka tarjumayo codadka iyo baahiyaha kala duwan ee muwaadiniinta oo dhan. Dadaalladan, dadka

naafada ah waxay awood u siinayaan inay si buuxda uga qeyb-qaataan horumarinta Dalka.

3.7 Barnaamijyada Cadaaladda

Barnaamijyada caddaaladda waa inay noqdaan kuwo dadka naafada ah u suuragelinaya inay helaan taageero sharci, ilaashadaan xuquuqdooda, oo si siman uga qaybqaataan nidaamka garsoorka. Siyaasadda Qaran ee Naafada waxay diiradda saaraysaa in la hirgeliyo tallaabooyin loo wada dhanyahay, si loo abuuro nidaam sharci oo cadaalad iyo sinnaansho ku dhisan, kaasoo u suurtagelinaya dadka naafada ah inay si madaxbannaan ula macaamilaan hay'adaha garsoorka oo ay xaqooda raadsadaan.

A) Adeegyo Cadaaladeed oo la Wada Heli Karo

- Hay'adda Naafada Qaranka waxay Wasaaradda Cadaaladda kala kaashanaysaa sidii loo hirgelin lahaa barnaamijyo kaalmo-sharciyeed ah si lacag la'aan ah ama la kafaalo qaaday u siiya dadka naafada ah, iyadoon loo eegeyn awooddooda dhaqaale. Waxaa la hirgelinayaa adeegyada gaarka ah ee la xiriira takoorka, xuquuqda shaqada iyo khilaafaadka hantida. Si kor loogu qaado wacyiga xirfadleyda sharci iyo saraakiisha sharciga fuliya waa in la siiyaa tababar la xiriira baahiyaha dadka naafada ah. Sidoo kale Xarumaha Sharci ee Jaamacadaha iyo kuwa hay'adaha aan dawliga ahayn waxay bixinayaan adeegyada talabixinta iyo matalaadda naafada ee maxkamadaha hortooda.

B) Wacyigelinta Xuquuqda Sharci

- Hay'addu waxay qabanqaabinaysaa aqoon-is-weydaarsiyo iyo ololayaal wacyigelineed si dadka naafada ah iyo qoysaskoodu u bartaan xuquuqdooda sharci, oo ay ku jiraan helitaanka adeegyada bulshada, iyo xuquuqda dhaxalka iyo hantida. Dadaalladan ayaa si gaar ah diiradda u saaraya bulshada miyiga iyo kuwa aan xogta wanaagsan helin. Sidoo kale, agab wacyigelin oo ku habboon dadka naafada ah, sida farta braille-ka, qoraallada waaweyn, iyo kuwa maqalka ah, waa in si ballaaran loo baahiyaa. Barnaamijyada dijitaalka ah ayaa sidoo kale

  loo adeegsanayaa sidii macluumaadka loo gaarsiin lahaa dhammaan bulshooyinka, halka dugsiyadu manhajkooda lagu darayo waxbarashada xuquuqda sharci ee naafada si loo dhiso bulsho ku taagan is-ixtiraamta loo wada dhanyahay.

C) Hannaan Garsoor oo la Heli Karo

- Xarumaha sharciga sida maxkamadaha, saldhigyada booliska iyo xafiisyada qareennada iyo nootaayooyinka waa in loo diyaariyaa qaab u suuraglinaya naafada inay ka faa'iidaystan, waana inay yeeshaan marinnada naafada iyo musqulo ku habboon. Maxkamadaha iyo goobaha nasashada waa in la dhigaa kuraas munaasab ku ah naafada, sidoo kale waa inay maxkamadaha ku diyaarsan yihiin turjumaan luqadda tilmaanta iyo qalabka teknoolojiyada naafada saacida si ay uga qeyb-qaataan habraacyada sharci ee maxkamadaha.

- Baahinta barnaamijyada cadaaladda waxay xaqiijinaysaa in dadka naafada ahi ay si siman u helaan adeegyada sharci, taasoo u suuragelinaysa inay si buuxda u helaan xuquuqdooda. Xallinta caqabadaha ku jira nidaamka garsoorka, iyo kor-uqaadista wacyiga xuquuqda sharciga ah, waxay Siyaasaddan ka dhigaysaa mid dhiirrigelisa helitaanka bulsho loo wada dhan yahay oo caddaalad ah. Tallaabooyinkan waxay sare u qaadayaan kalsoonida shacabka ee hay'adaha sharciga Soomaaliya, iyo hubinta in dhammaan muwaadiniinta loola dhaqmo si sharaf leh, cadaalad ah, oo ixtiraam uu ku jiro.

4. Istiraatiijiyadaha Hirgelinta Siyaasadda iyo Ka-qeyb-galka Daneeyeyaasha

Hirgelinta Siyaasadda waxay ku xiran tahay in si wadajir ah, xilliyaysan oo loo dhanyahay looga wada shaqeeyo. Istaraatiijiyadani waxay hubinaysaa in siyaasaddu ay si wax-kuool ah u wajahdo baahiyaha dadka naafada ah, iyadoo adkeynaysa joogtaynta, isla xisaabtanka, iyo horumarka joogtada ah ee hawlaha siyaasadda.

4.1 Istiraatiijiyadda Hirgelinta

i. Istaraatiijiyadda hirgelinta waxay diiradda saareysaa wada-shaqeyn dhinacyo badan leh, oo ay hirgelinayso Hay'adda Naafada Qaranka si kaalin mug leh ka qaadanayaan hay'adaha Dawladda, ururrada bulshada rayidka ah, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha caalamiga ahba.

ii. Dowladdu waxay mas'uul ka tahay dejinta Siyaasadda, bixinta maal-gelinta iyo isku-dubbaridka howlaha. Bulshada rayidka ah waxay hormuud u noqonaysaa u doodidda xuquuqda, ololeyaasha wacyigelinta iyo hirgelinta barnaamijyo ku siman heerkooda. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay ka shaqeynayaan shaqoabuurka, horumarinta

tiknoolojiyada iyo hagaajinta kaabayaasha nolosha, halka ay hay'adaha caalamiga ahi ku bixin doonaan khibrado farsamo.

iii. Siyaasadda waxaa loo hirgelinayaa si marxalado iyo wajiyo dhawr ah oo is-xigxiga si loo beekhaamiyo cududda iyo karaanka hay'adaha ku hawlan fulinteeda:

- Ujeeddooyinka Muddada Dhaw, waxay xoogga saarayaan hirgelinta waxyaabaha mudnaanta kowaad leh ee baahiyaha asaasiga ah sida dhisidda iyo dib-uhabeynta kaabayaasho dhismo, ololayaasha wacyigelineed iyo dhisidda karaanka ee haya'daha qeybta ka ah fulinta Siyaasaddan.

- Ujeeddooyinka Muddada Dhexe, waxay xoogga saarayaan hirgelinta tababarka xirfadeed, waxbarasho loo dhanyahay iyo shabakadaha taageerada buslshada.

- Ujeeddooyinka Muddada Dheer wuxuu hadafkoodu yahay in si buuxda loo dhaqan-geliyo dhammaan heerarka caalamiga ah ee xuquqda naafada Soomaaliyeed iyo abuurista bulsho u siman adeegyadeeda.

4.2 Ka-qeyb-galka Daneeyayaasha Siyaasadda

- Inay naafadu qeyb ka noqoto hirgelinta Siyaasadda waa udub-dhexaadka guusha Siyaaaddan, waana in naafadu qeyb ka ahaataa qorshayaasha hirgelinta, go'aanqaadashada iyo qiimeynta Siyaasadda, si naafadu u hubiso in waayoaragnimadooda nololeed ay hoggaamiso hirgelinta Siyaasadda. Waxaan rajo wayn laga qabaa in codkooda la maqlo oo aragtiyadoodana lagu daro dhammaan heerarka hirgelinta, metelaadda ay ku leeyihiin golayaasha siyaasadda, latalinta, guddiyada hagidda, iyo hay'adaha maamulka.

- Iskaashiga lala yeelanayo dhinacyada muhiimka ah, gaar ahaan wasaaradaha Dowladda, ayaa lagama-maarmaan u ah dhisidda qaab-dhismeed mideysan oo lagu xaqiijinayo ka-mid noqoshada bulshada ee naafada.
    - **Wasaaradda Caafimaadka** waxay kaalin mug leh ka qaadaneysaa dadaallada lagu hubinayo hirgelinta adeegyo caafimaad ee loo dhanyahay oo dadka naafada ah qeyb ka yihiin.

- **Wasaaradda Waxbarashada** waxay diiradda saaraysaa abuuridda waxbarasho oo ay naafadu ka faa'iidaysan karaan oo heer walba leh.
- **Wasaaradda Shaqada** waxay horumarinaysaa barnaamijyo lagu dhiirrigelinayo shaqo-abuurka dadka naafada ah.
- **Wasaaradda Howlaha Guud** waxay dejinaysaa halbeegyada heerarka lagama-maarmaanka u ah helitaanka kaabayaasha dhismo ay naafadu adeegsan karto.
- **Wasaaradda Warfaafinta** waxay door muhiim ah ka qaadanaysaa hirgelinta Siyaasaddan iyo Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed, iyadoo ku wacyigelinaysa bulshada si loo xoojiyo aragtida wanaagsan ee ku saabsan dadka naafada ah.
- **Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka** waxay mas'uul ka noqonaysaa barnaamijyada caddaaladda, iyadoo hubinaysa in xuquuqda dadka naafada ah lagu ilaaliyo sharciga, nidaamyada garsoorkana la waafajiyo baahiyahooda, iyadoo sidoo kale la dabaqayo tallaabooyinka kahortagaya takoorka.

Habkan wadajirka ah wuxuu xaqiijinayaa in baahiyaha dadka naafada ah laga tix-geliyo dhammaan heerarka qorsheynta iyo hirgelintaba.

- Hay'adda Naafada Qaranka waxay ka shaqeynaysaa kor-u-qaadidda xuquuqda dadka naafada ah iyo u doodidda ama u qareemidda xuquuqdooda, la-shaqeynta Hay'adaha Dowladda iyo Ururrada Bulshada, si ay u fuliyaan ololayaasha wacyigelinta, isla markaana u fududeyso hirgelinta barnaamijyada Siyaasadda.

- Iskaashiga Dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay wuxuu caawinayaa in la xalliyo caqabadaha dhaqaale iyo kuwa aqooneed. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay shaqaaleysiiyaan dadka naafada ah, bixiyaanna tababarro xirfadeed, isla markaasna horumariyaan qalab kaalmo naafo oo la awoodi karo iyo kaabayaal dhismo loo heli karo. Bulshada ayaa si firfircoon uga qaybqaadan doonta, iyadoo la adeegsanayo culimada diinta iyo odayaasha dhaqanka, si loo dhiirrigeliyo ka-qeyb-galka naafada ee arrimaha bulshada.

5. Kormeerka iyo Qiimeynta

Si loo xaqiijiyo in siyaasaddan loo fuliyay si hufan iyo in xal waara loo helo caqabadaha jira ee ay qabaan dadka naafada ah, Hay'adda Naafada Qaranka waxay hubinaysaa in dhaqaalihii loogu talo-galay adeegyada naafada si sax ah loo dhaqan-geliyay, iyadoo Wasaaradda la siinayo

Warbixin joogta ah, Hababkani wuxuu dejinayaan tilmaamo cad iyo nidaamyo kormeer oo xooggan, sidoo kale, waxa ay suurta-gelinaysaa in siyaasaddan si buuxda uga jawaabayso baahiyaha dadka naafada ah, iyadoo sidoo kale la waafajinayo ballanqaadyada Qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

5.1 Dejinta Tilmaamayaasha Qiimeynta Horumarka

Wasaaradda Qoyska iyadoo taageeraysa Hay'adda Naafada Qaranka ee u xilsaaran fulinta shaqadan, waxay dejinaysaa tilmaamo dhammeystiran si loo qiimeeyo horumarka qeybaha kala duwan ee Siyasaadda:

1. **Waxbarashada:** Tilmaamayaashu waxay la soconayaan hadba inta iskuulladu ay ka fuliyeen hannaanka waxbarashada loo dhanyahay, qalabka iyo kaabayaasha naafadu u baahantahay iyo sidoo kale diiwaangelinta, kuwa ka hara waxbarashada iyo qalinjabinta ardayda naafada ah ee dhammaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.

2. **Daryeelka Caafimaad:** waxaa la qiimeyn doonaa sida naafadu ay ku heli karto xarumo caafimaad, sida loo diyaariyay marinnada gaadiidka naafadu isticmaalaan, wiishashka hadba meelaha looga maarmi waayo, qeybinta adeegyada caawiyo naafada. waxaa kale oo la eegayaa sida loo diyaariyay xarumo takhasusi ah oo bixiya adeeg caafimaad sida barnaamijyada taageerada maskaxeed.

3. **Shaqaaleysiinta:** Hay'addu waxay diiwaangelineysaa dadka naafada ah ee ka shaqeeya hay'adaha Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Waxaa tixraac iyo diiwaangelin loo sameynayaa si loo qiimeeyo waxtarkooda tababarrada xirfadeed iyo barnaamijyada shaqaaleysiinta.

4. **Ilaalinta Bulshada:** Hay'addu waxay qiimeynayaa sida naafadu u helaan lacagta hawlgabka, barnaamijyada kaalmada dhaqaale, iyo nidaamyada gargaarka degdegga ah. Sidoo kale, waxaa la qiimeyn doonaa saameynta ay hababkaas ilaalinta ah ku leeyihiin yareynta nuglaanta dhaqaale.

5. **Marin-u-helidda dadka Naafada ah:** waxaa la qiimeyn doonaa hadba inta dhismayaasha Dowladda, nidaamyada gaadiidka, iyo aaladaha dijitaalka ah ay u buuxiyaan heerarka loo asteeyay marin-u-helidda dadka naafada ah. Sidoo kale waxaa la qiimeynayaa horumarka laga sameeyay dib-u-habeynta kaabayaasha jira.

Xogta ayaa loo kala saari doonaa iyadoo lagu saleynayo nooca naafanimada, jinsiga, da'da, goobta juqraafiyeed, iyo heerka dhaqan-dhaqaale, si loo ogaado kala duwanaanshaha jira loona

xalliyo farqiga sinnaanta. Xog ururinta muddada dheer waxay sahlaysa la socodka saamaynta mustaqbalka fog, halka ku darista xogtan ee nidaamyada Qaranka, sida Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee 2025-2029 iyo Ujeeddooyinka Horumarka Waara (SDGs), ay xaqiijin doonto qorsheyn dhameystiran iyo isku-dubarid sax ah.

5.2 Abuurista Habab Isla-xisaabtan iyo Warbixineed

- Qaab-hawleedka isla-xisaabtanka ayaa wuxuu caddeynayaa waajibaadka wasaaradaha, hay'adaha Dawladda iyo daneeyayaasha, si loo xaqiijiyo islaxisaabtanka marxalad kasta oo la fulinayo. Hay'adda Naafada Qaranka oo kaashanaya guddi hawleedka wasaaradaha, hay'adaha Dawladda iyo Wasaaradda Qoyska, waxay kormeeraysaa horumarka iyo fulinta u hoggaansanaanta Siyaasadda. Guddi-hawleedka wuxuu Hay'adda Naafada u soo gudbin doonaa warbixinno horumarineed oo waqtiyaysan oo si faahfaahsan u qeexaya guulaha, caqabadaha iyo isticmaalka kheyraadka, waxayna Hay'addu ka diyaarinaysaa warbixin dhammeystiran oo si daahfuran dadka loola wadaagi karo, iyadoo warbixin joogta ah ka siineysa Wasiirka Wasaaradda Qoyska.

- Habraacyo jawaab-celin ah iyo qiimeyn bulsho ayey Hay'adda Naafada sameynaysaa sida khadad taleefan (hotlines), barnaamijyo moobil oo leh astaamo u fududeynaya isticmaalka dadka naafada ah iyo warbixinno bulshadu udubdhexaad u tahay oo ay soo gudbinayaan ururrada naafada, iyadoo la kaashaneysa Wasaaradda Qoyska.

- Si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta, waxaa la dhiirrigelinayaa cidda si heer sare ah u fulisay Siyaasadda oo qaadda taallaabooyin naafadu qeyb ka tahay, halka ciddii jabisa shuruucda naafada taageeraysa ama fulin wayda heerarka loo xaddiday adeegyada si naafadu uga faa'iidaysato in la marsiin doono ciqaabta ku habboon si waafaqsan sharciga.

5.3 Wacyi galinta dadweynaha iyo Hufnaanta

- Hay'adda Naafada Qaranka waxay soo saareysaa warbixin-sannadeed ku saabsan hirgelinta Siyaasadda Qaran ee Naafada, taasoo muujineysa horumarka, caqabadaha iyo mudnaanta mustaqbalka. Warbixinta waxaa lagu daabacayaa qaabab la wada fahmi karo, sida farta Braille-ka, cajalado maqal ah iyo muuqaallo ku baxaya luqadda tilmaanta ee dadka maqalka la', si looga wada faa'iidaysto. Ololayaasha warbaahintu waxay dadka

kula socodsiinayaan horumarka siyaasadda waxayna u dabaaldegayaan sheekooyinka guusha ee naafada si kor loogu qaado wacyiga bulshada ee ku aaddan naafada.

- Dejinta nidaamyo kormeer, qiimeyn iyo isla-xisaabtan oo dhammeystiran waxay xaqiijinayaan in Siyaasaddu ku guulaysato ujeeddooyinkeeda isla markaasna ay xaqiijiso baahiyaha isbedbeddalaya ee naafada. Soomaaliya waxay dhisi kartaa kalsooni, waxay kobcin kartaa dahfurnaan haddii ay qeexdo tilmaamo cad oo lagu qiimeeyo fulinta siyaasadda iyo nidaamyo kormeer iyo isla-xisaabtan oo lagula socoda hirgelinta siyaasadda. Tallaabooyinkan waxay qeyb ka noqonayaan helidda bulsho loo wada dhanyahay dadkeedu u simanyihiin adeegyada.

6. Maalgelin iyo Qoondeyn Dhaqaale

Waxaa lagama maarmaan ah in loo qoondeeyo Siyaasadda Naafada Qaranka Soomaaliya dhaqaale kufilan fulinteeda. Arrinkan ayaa looga jeedaa in la xaqiijiyo hirgalinta siyaasadan iyadoo la taaba-galinayo dhammaan baahiyaha gaarka ah ee uu tilmaamayo sharciga Naafada ee ku aaddan dadka naafada ah.

6.1 Xaqiijinta Qoondaynta Miisaaniyad ku filan

- Miisaaniyadda Qaranka waa in lagu daraa qoondada Sanduuqa Horumarinta Arrimaha naafada sida ku cad Qodobka 10aad faqraddiisa 2aad ee Sharci Lr. 29 ee soo baxay 02/12/2024, kaasoo loogu talo-galay sanduuqaas in loo isticmaalo horumarinta barnaamijyada waxbarashada, daryeelka caafimaadka, shaqaaleysiinta iyo ka-qeyb-galka naafada ee adeegyada bulshada. Sidoo kale, Hay'adaha kala duwan ee qeybta ka ah fulinta Siyaasaddan waxay miisaaniyadahooda ku darayaan qeyb ay ugu talagalayaan hirgelinta siyaasaddan. Si lacagahaas loogu bixiyo xaaladaha deg-degga ah sida xilliyada musiibooyinka, colaadaha iyo dhibaatooyinka dhaqaale ay jiraan.

6.2 Abaabulka Kheyraadka Maxalliga ah

- Bulshada Soomaaliyeed waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay qeyb ka noqdaan barnaamijyada naafada iyagoo noqonaya shaqaale samafal, deeq-bixiyeyaal iyo inay qeyb ka noqdaan dadaallada iyo hal-abuurrada kheyraad wadaagga ah. Maalgelinta bulshadeed ee lagu taageerayo naafada waxaa lagu hawlgelinayaa mashaariicda yar-yar ee naafada. sidoo kale waxaa la abaabulayaa qurbajoogta Soomaaliyeed oo qeyb ka noqonaya ololayaasha lacag-ururuinta lagu maalgelinayo naafada.

6.3 Gunaanad

Siyaasadda Qaranka ee Naafada waa tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhisidda bulsho loo wada dhan yahay, halkaas oo qof kasta, iyadoon loo eegin awooddiisa, uu fursad u heli karo inuu ka qeyb-qaato horumarka Qaranka. Siyaasaddan waxay xaqiijineysaa ilaalinta xuquuqda, karaammada, iyo ka-qaybgalka dadka naafada ah horumarka Dalka, iyadoo xoogga la saarayo meelaha muhiimka ah sida helitaanka adeegyada, caafimaadka, waxbarashada, ka-qaybgalka siyaasadda, iyo caddaaladda. Waxay sidoo kale la jaanqaadaysaa heerarka iyo dadaallada caalamiga ah ee kor loogu qaadayo kaqeyb-galka dadka naafada ah ee adeegyada iyo horumarka bulshada.

Guusha siyaasaddani waxay ku xirantahay wada-shaqeynta dhammaan daneeyayaasha, sida hay'adaha Dowladda, ururrada bulshada rayidka ah, Rugta-ganacsiga , hay'adaha caalamiga ah, iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay. Dawladdu waxay ballanqaadaysaa ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah, ka-hortagga takoorka iyo bixinta adeegyada loo baahan yahay si loo xaqiijiyo dhisidda barnaamijyo horumarineed oo ay naafadu qeyb ka tahay. Hay'adaha bulshada iyo ururrada dadka naafada ah ayaa door muhiim ah ka qaadanaya wacyigelinta, kormeerka, iyo dhiirrigelinta ka-qayb-galka. Ganacsatada iyo deeq-bixiyeyaasha Soomaaliyeed waxay udub-dhexaad u yihiin barnaamijyada iyo dadaallada lagu hirgelinayo Siyaasaddan.

Bulshada Soomaaliyeed waa inay ka hortagto takoorka, taageertana dadka naafada ah, oo door muuqda ayka qaadato dhismaha bulsho ku saleysan sinnaan iyo wadajir. Siyaasaddan waxay ujeeddadeedu tahay in bulshada Soomaaliyeed noqoto mid qof kasta u oggolaanaysa fursad uu ku horumaro oo uu door ugu yeesho horumarka Qarankiisa.